# ARAGTIDA NICMADAHA NACLADAYSAN

*W/Q. Dr Sadiq Enow*

# Casharkii 1-aad

Dhallinyaro, nicmadaha nacladaysan waa cashar taxane ah oo inoo bidhaaminaya aragti cusub oo la xiriira aqoonta dhaqaalaha, taas oo aadamigu uu ku baraarugay muddada dhwor iyo labaatankii sano ee ugu danbeeyey.

Aragtidu waxay sheegeysaa in dhaqaaluhu yahay nicmad iyo naclad wada-socda, waxay sheegeysaa barwaaqo iyo inkaar wada-socda, waxay sheegeysaa baraare iyo habaar wada socda.

Sida fahamka aadamiga ku xooggan, arimahaasi maahan kuwo is-qaadan kara ama laysu soo dhoweeyo.

Laakiin aragtida ah nicmadaha nacladaysan waxay inoo tilmaamaysaa in ay labadan arin ay yihiin kuwo isku-laran oo aan kala maqnayn.

Bal marka hore aynu si guud u qeexno ereyada ah nicmad iyo naclad. Ereyga ah nicmad wuxuu tilmaamayaa saddex xagal oo kala ah axadka nicmadda bixiyay, axadka nicmadda heley iyo nicmadda qudheeda.

Axadka bixiyay waxay nicmaddu u tahay astaan inoo muujinaysa faxnaanta awooddiisa iyo ka war-qabka ay xannaanada weheliso oo uu ku bixinayo nicmadaha kuna siinayo ciddii uu la doono.

Unug walba oo jirka aadamiga ah iyo deeqda uu ka helayo dibadda iyo gudaha ayaa waxay tahay nicmad aanan xisaab looga daba-tegi karin.

Axadka nicmadda heley ayaa isna wuxuu yahay aadamiga dhulka ku matalaya abuur midkiisa ugu mudan, ugu qallafsan, uguna ammakaak badan.

Nacmadda ayaa iyana waxay tahay wax-walba oo labadaas u dhexeeya, kuwaas oo u jooga adeegsiga aadamiga.

Dhan-walba oo la eego waa ay ka muuqataa iyada oo aanan loo dareen qabin in ay nicmad tahay.

Maxaa-yeeley waa la caadaystay oo waxay inoogu muuqataa in aanu xaq u yeelanay.

Joogteynteeda waxay markhaati u tahay in ay ka imanayso axad deeq iyo dul-qaad isku darsaday.

Quraanku wuxuu inoo qeexey, nicmadaha laynoo hibeeyey mid kamid ah oo keliya in ayan jirin cid tirakoobi kartaa.

A. Yaa tira-koobi kara hawada qofku qaato iyo curiyayaasha raashinka uu cunayo?
B. Yaa tira-koobi kara ogaallada uu caqliga inoo fasirayo iyo unugyada dhiigga ku qul-qulaya xidaddadeena?

C. Yaa tira-koobi kara cajiladaha aragga oo joogtada u keydinaya sawir-kasta oo inoo muuqda?
D. Yaa tira-koobi kara xarfaha ay duubayaan cajiladaha maqalka ee aanu dhegeysanayno?
E. Yaa tira-koobi kara hor u-marka aqooneed iyo sahanka ogaallada uunka mug-yarta iyo mug-waynta?
F. Yaa tira-koobi kara hantida keydka ah ee ku aasan dhulka iyo badaha hoostooda?
G. Yaa tira-koobi kara dhibcaha roobka iyo xisaabxilliyeedka ay ku da'ayaan?
H. Yaa tira-koobi kara iniinaha elektroonnada dhalinaya tamarta joogtada ah ee qorraxda ka imanaysa iyo ilayska dayaxa iyo xiddigaha oo aanu adeegsanayno?
I. Yaa tira-koobi kara awoowayaasha aanu dhabarkooda ku soo rog-rogmanay iyo ayeeyayaalka aanu ilma-galeenkooda ku

soo hayaannay si aanu uga mid noqonno dadka maanta camiray nolosha?

Nicmadda nabadgelyada iyo xasilloonida ayaa intaba u hooyo ah, taas oo haddii la waayo ayan jireen indho seexda iyo hunguri ay luqmad marto. Nicmad dhamaanteed waxaa lagu soo ururin-karaa laba arimood oo kala ah nicmad nolol (caafimaad qofeed iyo mid bulshadeed) iyo nicmad hanti (luqmad la quuto iyo nabadgelyo lagu hoydo). Waxaa xusid mudan in ayan weli dhicin in uu qof ku dhiirrado iskudeyga ah tira-koobka nicmadaha loo hibeeyey aadamiga, mana dhici-doonto in uu qof u joogsado arinkaas. Sidaa darteed nicmaddu maahan mid ku timaadda howl uu aadamigu qabtay iyo kartidiisa, bal waxay tahay hibo xagga eebe laga helo, taas oo doorashadiisa lagu dhaxlo. Nicmadahaas oo si hufan loogu qaybiyay basharka ayaa reerkii si togan aanan u adeegsan waxay ku noqotaa nacalad iyo inkaar.

Aadamiga qarnigan 21-aad nool waxay wax-badan ka fahmeen nolosha. Waxay nasiib u yeesheen in ay helaan ogaallo ayan helin iyo aragtiyo ayan fahmin dadkii ka horeeyey. Ogaalladaas la heley kuwoodii ugu danbeeyey waxaa kamid ah aragtidan ay aqoon-yahannadu ku magacaabeen nicmadaha nacaladaysan. Waa aragti tilmaamaysa in ay jirto naclado la socda nicmadahaas faxan, kuwaas oo u baahan in laga ilaashado. Aqoon-yahannada dhaqaale-baradka adduunka, si muga wayn ayay uga digayaan nacladahan inaanan lagu kadsoomin. Sidaa darteed, iyagu olole xoog badan ayay dunida ka wadaan oo aadamigu ay ku fahamsiinayaan luggooyada basharka ugu sugan nicmadaha nacladaysan.

# Casharkii 2-aad

Dhallinyaro, ereyga ah naclad (Lacnad) ayaa isna wuxuu yahay erey taban (negative) oo ah mid ka-soo hor-jeeda ereyga ah nicmad. Nacladdu waxay tilmaamaysaa khayrka iyo barakada oo suula.

Aqoonyahannada qaarkood waxay ereyga nacladda ku sheegaan in uu yahay, hakad iyo joogsi ku yimaada waxkasta oo nicmaddu ay wadatay.

Laakiin fasir intaas ka xeel-dheer ayaa jira oo wuxuu yahay, wax kasta oo nicmadda ka-soo hor-jeedka ah ayaa naclad ah.

Nacladdu waxay ku degataa ama qof ama bulsho ama degaan. Ereygan oo ay bacawnimada weheliso waxaa lagu xusay kutubta samaawiga ah (Towraad, Injiil iyo Qur’aan).

Diimuhu waxay inoo sheegayaan ereyga macnihiisu in uu yahay caro eebe oo soo degata. Sidaas si lamid ah ayaa ereygan waxaa laga helaa dhaqamada dadyowga rumeysan diimaha kale oo ay kamid yihiin Hinduuga iyo Buudaha.

In-kasta oo ay taasi tahay macnaheeda guud, misana nacladdu siyaabo kale ayaa loo adeegsadaa oo dhamaantood ay yihiin arin khayrka iyo guusha ka fogeeneysa qofka ama bulshada.

Haddii uu dhaqaaluhu yahay nicmad wuxuu doonayaa garaad lagu ilaashado, haddii awlaaddu ay yihiin nicmad wuaxay doonayaan anshax lagu ilaashado, haddii dhulku uu yahay nicmad wuxuu doonayaa itaal lagu ilaashado, haddii diintu ay tahay nicmad waxay doonaysaa dhowrsanaan lagu ilaashado, haddii bulshadu ay tahay nicmad waxay doonaysaa jacayl lagu

ilaashado, haddii caafimaadku uu yahay nicmad wuxuu doonayaa aqoon lagu ilaashado.

Nacladdu waxay tahay in laga arradnaado tilmaamahaas kuu ilaalinaya nicmadaha la naawilayo oo aanan ahayn mid hayb ahaan dadka ula joogta. Nicmaduhu qoomlii ilaashadana waa ay la joogaysaa, qoomkii ku cayaarana naclad ayay ku noqonaysaa.

Haddaanu intaas kaga harno qeexiddii labada erey ee is-diidan (Nicmad & Naclad), waxaanu xusaynaa in isla-markaas ay yihiin laba erey oo aanan kala harin. Sidaa darteed ayaa aqoon-yahannada casriga ah ay erey-bixintooda isu raaciyeen. Labadan erey oo midna yahay nicmada iyo khayr (Resource), midka kalena uu yahay naclad iyo inkaar (Curce), markii lays-raacsho waxay isku-noqonayaan erey-bixin

aqooneed. Afka ingiriiska waxay ku noqonayaa (Resource Curse).

Afka carabiga waxay ku noqonayaan (الموارد لعنة). Erey-bixintan waxay tahay mid lagu eego hannaanka dhaqaalaha ee ummadaha aadamiga ah. Waxaa lagu falanqeeyaa nicmadaha qaybtooda la xiriira hantida ma-guurtada ah, wanaageeda iyo xumaanteeda, berya-samaadkeeda iyo bur-burkeeda.

Wixii ka horeeyey dabayaaqadii qarnigii tegey, aragtida nicmadaha nacladaysan maahayn kuwo aadamigu uu ku baraarugsanaa. Marka heer qof laga tago, nacaladdan ayaa sida qaalibka ah waxay ku dhacdaa bulshooyinka nugul ee dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaan danbeeya, laakiin mar-qura ku hodama kheyraadka dabiiciga ah.

Waxaa hubaal ah in-badan oo kamid ah ummadaha ugu hodansan dunida in dalalkoodu ay ka aradan yihiin hantida dabiiciga ah oo ay hodanka ku yihiin ummadaha taagtadaran ee ku fashilmay in ay ka faa'iideystaan nicmadaha ay dhaxleen. Dowladahan haysta hantida maguurtada ah waxay ku caan-baxeen musuqmaasuq, dib u-dhac dhanka wax soo-saarka, amaah badan oo ay qaataan, xasillooni la'aab siyaasadeed, colaado sokeeye iyo dib u-dhac nololeed. Arimahaas ayaa waxay bulshada ku riixaan hannaan siyaasadeed oo ay gunnimo ka dhaxlaan.

Nicmadaha nacladaysan, waxay badanaa horseeddaa hab-raac nololeed iyo manhaj dhaqankeedu uu dadka ku ridayo waaddada fadhiidka, musuq-maasuqa iyo saboolnimada.

Waxaa jiray erey bixin lamid ah nicmadaha nacladaysan, kaas oo ereygan kaga horeeyey fagaaraha aqoonta dhaqaale. Erey-bixintan hore waxay ahayd Cudurka Holandeeska (Dutch Disease).

Cudurku wuxuu tilmaamayaa sabab kamid ah cawaaqib xumida dhaqaale oo ku timaadda bulshooyinka in ay kamid tahay nicmadda oo ku badata. Raadka taban (negative) oo hantida dabiiciga ah ay ku yeelato nolosha dadka ayuu cudurku soo bandhigayaa. Sida ka muuqata magaca dalka cudurkan loo nisbeeyey (Holland), cudurku waa tijaabo taban oo ku dhacday dalkaas. Sanadikii 1959-kii ayaa waxaa laga heley shidaal.

Bilowga Sanadihii 1970aadkii ayay la soo baxeen shidaalkii, markaa oo si xooggan uu u kobcay barwaaqa-soorankii dadkeeda. Sababtu waxay ahayd, iyaga oo heley keyd gaas badan oo

ceegaaga xeebaha uu dalkaasi ku leeyahay badda waqooyiga (North Sea).

Baddan ayaa waxay kamid tahay bad-waynta Atlantikada oo waxay u dhexeysaa jasiiradda Ingiriiska iyo dalka Holland.

# Casharkii 3-aad

Maqaal lagu soo daabacay wargeyska The Economic Journal, bishii disember 1982-kii, ayaa markii ugu horeysey uu dibadda u soo baxay erey-bixinta cudarka Hollandeeska.

Maqaalka waxaa qoray labada dhaqaal-yahan oo la-kala yiraahdo W. Max Corden oo u dhashay Australian iyo J. Peter Neary oo u dhashay dalka Ireland. Labadan aqoon-yahan waxay kamid yihiin ruug-caddaaga looga danbeeyo aqoonta dhaqaalaha dunida. W. Max Corden wuxuu ku takhasusay difaaca ganacsiga adduunka (International Trade Protection), isla-markaas wuxuu wax badan ka shaqeeyey hannaanka cumladda adduunka (International Monetary System). J. Peter Neary ayaa isna ku takhasusay ganacsiga adduunka (International Trade) iyo siyaasadda dhaqaalaha (Political Economy).

Wuxuu macallin ka uayah jaamacadda Oxford.

Maqaalkaas wuxuu ahaa midkii ugu horeeyey oo soo hadal-qaaday dib u-dhaca ku yimid dhaqaalaha dalka Holland, kadib markii ay heleen gaaska dabiiciga ah. Labada aqoon-yahan maqaalkaas ay sida wada-jirka ah u soo saareen, waxay si tifaf-tiran uga war-bixiyeen, cudurka Hollandeeska iyo khatarta uu ku yahay dhaqaalaha ummadaha adduunka. Intaas kuma ekaan ee waxay qeexeen wuxuu cudurkan yahay iyo sida uu ku yimaado.

Waxaa kale oo ay ka war-bixiyeen sida looga hor-tegi karo, iyaga oo takhaatiirtii cudurka ka dhigay xubnaha siyaasadda u haya bulshada. Sidaa darteed, maantaas wixii ka danbeeyey, muddo 30 sano ah ayuu ereyga ah cudurka Hollandeeska wuxuu ku qornaa safxadadaha qaamuusyada marjica u ah aqoonta dhaqaalaha.

Cudurkan maahan mid ku eg dalka Holland oo keliya. Bal wuxuu ku dhacaa waddan walba oo intuu ku hodmo shidaalka ay hoos u dhacdo badeecadihii kale oo uu dunida u dhoofinayay.

Arintaasi waxay u muuqaal eg-tahay nin kamid ah cayaartoy kubadda cagta ah oo cayaarta gudaheedii doonaya in keligiis uu kubadda qaato oo goolka dhaliyo oo kooxdu sidaas ay guul ku gaadho. Haddii ayan kooxdu iskaashan waa ay suuragal noqon-meyso in kooxdu guuleysato.

Sidaas si lamid ah, ganacsiga dalku uu dibadda u dhoofinayo haddii uusan ahayn mid kala duwan, waxaa curyaamaya dhaqaalihii gudaha, cilladdii cudurka sababi-lahaydna halkaas ka raacaysaa.

Waayo wax badan oo kale oo dalka wax u noqon lahaa ayaa bur-buraya. Waxaa iyana jirta seyladaha dunida oo aanan ahayn mid ay dowlad keliya u taliso. Waxaa suuragal ah,

badeecaddii keliga ahayd oo dowladdu ay dibadda u iibgeysey in si heer caalami ah sicirkeedii uu hoos ugu dhacdo. Waxaa halkaas ka imanaya fal-celis dhaqaale-xumi ah oo ku dhacaya dalkii halka badeecad soo dhoofsanayay.

In-kasta magacaabiddii cudurkan ay ahayd dhacdo si gaar ah xiriir ula leheyd badeecadda shidaalka, misana maahan mid shidaalka keliya ka hadlaya. Badeecad kasta oo shiiqisa soo-saarka badeecadaha kale ee dhaqaalaha dal uu hodan ku yahay, waxaa ku dhacaya cudurkan.

Dhaqaal-yahannadu waxay xusaan dhacdooyin taariikhiga ah oo tilmaamaya ummado uu dhaqaalahoodu ku dhacay cudurkaan. Waxaa kamid ah dalka Asbaaniya. Qarnigii 16-aad markii ay u qaxeen qaaraddii cusbeyd ee Mareekanka, dahabkii badnaa oo ay ka soo

bilililiqeysteen ayaa wuxuu shiiqiyay kobicii dhaqaalahooda.

Waxaa kale oo cudurkan uu ku dhacay dalka Ausralia oo bartamihii qarnigii 19-aad laga heley degaano uu dahabku ku badan yahay. Markaas ayaa dahabkii wuxuu noqday dhaqaalaha keliya oo dalku xoogga saaro, badeecadihii kalena laga caajisay.

Waxaa dhaawaca keenaya hor u-makaa ka dhalanaya lacagaha adag oo tirada badan, taas oo ay keentey sare u kac ku yimid qiimaha kheyraadka dabiiciga ah, kaalmada shisheeye, iyo maalgashiga shisheeye ee tooska ah. Arimahaasi waxay xoojinayaan hannaanka kobcinta halka badeecad. Ganacsiga dhoofinta badeecadda culus ee keliga ah (Single Major Commodity) oo la xoojiyo, waxaa kale oo ah xumeeneysaa qaybintii khayraadka dalka. Bulshadii isku-si wax u gaari-maayayaan. Waxay

khayraadkii iyo dowladnimadiiba gacanta u gelineysaa koox tira-yar, bulshada inteedii badnayd waxay noqonayaan kuwo dayacan. Bulshada caynkaas ah waxay noqonaysaa kooxdaas yar ee hodanka ah iyo dadka intiisii badnaa oo sabool ah. Waxaa halkaas ka baxaya fursadihii ay ku abuurmi-lahaayeen dabaqaddii dhexe oo dalka ka shaqayn lahayd.

Oonta dhaqaaluhu waxay qabtaa aragti la yiraahdo hoos u-dhaca cumladda (Currency Depreciation) iyo kor u-kaca cumladda (Currency Appreciation). Aragtidu waxay ka hadlaysaa luminta qiimaha lacagta dalka ama xoojinteeda, iyada oo laga cabbir qaadanayo mid ama in ka badan lacagaha culus ee latixraaco. Tusaale-dhig waxaanu u soo qaadanaynaa sida ay isu shiiqinayaan laba kamid ah lacagaha adduunka ugu culus oo dadkoodu ay ugu ilaalo badan yihiin. Sanadkii 2008-dii, qiimaha 1,47 euro wuxuu ahaa 1 dollar. Sanadkii

2012-kii, qiimaha 1,29 euro wuxuu ahaa 1 dollar. Sanadkii 2015-kii, qiimaha 1, 11 dollar wuxuu ahaa 1 euro.

Shaxdan waxaa ka muuqata in cumladda euro ay soo cuslaanaysay marka la barbar-dhigo dollarka. Waxaa halkaas ka muuqda kor u-kaca sanadahaas uu dollarku sameeyey. Taasi waxay saamayn ku yeelanaysaa ganacsigii dibadda. Haddii uu kobocaas si degdeg badan uu u dhaco, dhaawacu wuxuu ku soo noqonayaa gudaha oo cudurkii Hollandeeska ayaa burburinaya mu’asasaadkii dowladdu ku taagnayd.

# Casharkii 4-aad

Dhallinyaro, waddanka Holland marka uu dhaqaalaheedu cudurka ku dhacayay, dalku wuxuu kamid ahaa welina kamid yahay waddamada dhaqaalahoodu uu ku xiran yahay wax soo-saarka wershadaha.

Goortii ay heleen saliidda shidaalka, waddanku wuxuu markaas noqday mid si lama-filaan ah hor u-mar muuqda ku gaarey oo dalku uu dhaqaale badan ku heley. Markaas bulshadii reer Holland waxay la muraaqoodeen farxad iyo rayn-rayn, iyaga oo markaas filanayay in ay si deg-deg ah u hodmaan.

Waayo, iyada oo wershadihii ay u shaqaynayaan ayaa shidaalna u soo kordhay. Laakiin waxaa dhacday arin middaas ka-soo hor-jeedkeeda ah, oo shidaalkii ay heleen ayaa ku noqday nicmad uu nabar la socday.

Inteynaan ka faalloon qaabka reer Holland uu nabarku u gaaray, aynu isla-eegno xoogga lacagaha dowladaha adduunku isticmaalo ay ku qiimeysan yihiin, kaas oo ah wax soo-saarka dowlad walba. Sidaa darteed dowladaha uu wax soo-saarkoodu hooseeyo, waxaa yar qiimaha lacagtooda sida shilinka Soomaaliga. Kuwa wax soo-saarkooda uu xooggan yahay, iyagu lacagtoodu waa qiimo culus tahay sida dollarka Marekanka oo kale.

Waxaa hubaal ah lacagtaas qiimaha culus wax wayn ayay ka goysaa waddamada ay lacagtoodu raqiiska tahay. Mar haddii ay lacagtaadu hooseyso waxaa raqiis noqonaya wax kasta oo aad haysato oo aad doonayso inaad u iib-geyso seyladaha caalamka. Cidda lacagteedu culus-tahay waxay awooddaa in ay raqiis ku soo iibsato wax waddamada nugu qaali ku ah.

Shidaalka oo ah hantida loogu baahi badan yahay seyladaha adduunka, ayaa waxaa si aad ah u doonaya waddamada siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan qaangaarka noqday.

Iyagu lacagta ay ku bixinayaan shidaalka waa lacag adag (Hurd Currency).

Lacagta adagna waxay ka helaan wax soo-saarkooda xooggan. Dad-waynihii Holland shidaalkii ay dalka ka heleen wuxuu u dhalay in ay lacag culus oo joogto ah u soo xerooto oo bangiyadu u buuxsamaan.

Si deg-deg badan ayay mar-qura cumladdii dalka Holland (Guilder) waxay ku noqotay mid ka culus lacagihii kale ee dowladaha dunida oo ganacsigu ay is-dhaafsanayeen sida dollarkii Mareekanka ($), pound-k Ingiriiska (£), maarkaha Jarmalka (D-Mark) iyo frankaha Faransiiska (FF).

Iyada oo lala xiriirinayo wax soo-saarkii Holland oo kobcay, ayaa arintaasi waxay dhalisay in dalka Holland wixii uu dhoofinayay uu ka qaalisanaado wixii ay waddamada kale u soo dhoofinayeen Holland.

Suuqii dunida ayay xoog ku yeesheen oo waxay ka xoog bateen shirkadihii dowladaha Yurub ee ganacsiga kula tar-tamayay. Waxaa u kordhay dakhligii dad-waynaha.

Dowladda waxaa u kordhay cashuurtii u soo xeroonaysay. Markaad dhan ka eegto waa nicmad wanaagsan oo dadku markuu lacag helo waxay iibsanayaan wixii agab ah oo nolosha ay ugu baahan yihiin.

Waxay noqonayaan dad ku dhaqaaqa caqliyadda ah in si xooggan loo adeegto.

Caqliyaddaas ayaa waxay tahay mid ay riixeyso damaca ah waan doonayaa iyo waan heli-karaa.

Waxaa xusid mudan, reer Holland lacagtaas culus oo ay dibadda wax-walba ay raqiis kaga soo iibsadeen, gudaha dalka Holland in ay ka tahay lacag caadi ah. Waayo gudaha wax walba oo dalka yaal kor ayay isula kaceen.

Is-beddelka dhaqaale ee dalka ku dhacay meesha uu ka yimid waa xoogga ay ku yeesheen xiriirkii ganacsi ee dibadda.

Wixii ay dibadda u dhoofinayeen oo lacag badan oo culus ay ku helayaan iyo wixii ay soo dhoofsanayeen oo raqiis ugu imanaya.

Berya-samaadka iyo hantida badan oo ay Holland wakhtigaas heshey waxaa weheliyay cudur dhaqaale oo aanan muuqan, kaas oo goor danbe kallifay in uu dalku la curyaamo.

Cudurkaasi waa midka ay dhaqaal-yahannadu ku magacaabeen cudurka Hollandeeska (Dutch Disease).

Waxay ahayd xilli aqoon-yahannada dhaqaalaha ayan weli ku baraarugin in ay jirto naclado la socda nicmadaha sida deg-degta ah loogu hodmo. Naclad ayan filayn oo ayan ka gaashaaman ayaa waxay ahayd, in si qunyar-socod ah uu u baaba'ay wax soo-saarkoodii wershadaha.

Waayo wax-kasta oo ay soo saari jireen, iyadii oo raqiis ah ayaa dibadda laga helayaa oo cumladda adag ayaa lagu soo iibsanayaa. Sidaa darteed xataa gudihii ayuu ku qiima-beeley. Waxaa xigay in wershadihii dalka ay tabar yareeyaan. Shidaalka ayaa wuxuu noqday shaqada u furan dadkii muruq-maalka ahaa, halkaas oo ay ka helayaan mushar fiican.

Hantiilayaalkii meesha keliya oo ay maal-gashtaan wuxuu noqday shidaalka. Beeralaydii iyo kalluumeysatadii waxay isaga-tageen xirfaddoodii.

Daqaalihii dalka wuxuu noqday mid si xooggan ugu xirmay soo-saarka shidaalka oo keliya.

Fagaaraha shidaalku ma ahayn mid shaqo siin-kartay dadka reer Holland dhamaantood. Codsiyada tirada badan oo shaqa-doonka ah, waxay sabab u noqotay in uu halkaas ka abuurmo laaluush iyo eex.

Musuqaas bilowday wuxuu noqday nabar hor leh oo gaaray dowladdii iyo dadkeedii. Dalkii wuxuu noqday mid ku hafanaya shaqo la’aan iyo wax soo-saarkii oo joogsaday.

Iyada oo xaaladdu ay sidaas tahay ayaa shidaalkii la qodanayay uu yaraaday.

Markaas ayaa dhaawacyadii uu cudurku lahaa ay ku soo baxeen. Waxaa dhaawacyadaas kamid ahaa miisaaniyaddii maaliyadeed oo yaraatay, shaqo la'aantii oo korortay, wax soo-saarkii oo fagaaraha ka baxay, musuqii oo kordhay, ugu danbayn sicir-barar dhaqaale ayaa bulshadii heley.

# Casharkii 5-aad

Dhallinyaro, dadka reer Holland, xad-gudubyada uu ku reebey cudurkii Hollandeeska waxay kaga jawaabeen sil-silad siyaasadeed oo ah tallaabooyin xakamaysan. Si loo dhayo nabarradii cudurkaas, siyaasiyiintii dalka ma oggolaan in ay u kufaan duni bahalowday oo dhalasho iyo diin iyo aadaminimo laysugu hiiliyo ay ka dhamaatay. Iyaga oo ku qanacsan in xalku gudahooda yaallo oo aan dibad laga doonin, ayaa waxay qaateen siyaasad ay ugu tala-galeen in ay ku dhiirigeliyaan dadkooda si ay ugu soo laabtaan suuqa shaqada rasmiga ah. Khibradda laga dhaxlay barnaamijka siyaasad-dhaqaaleed oo ay qaateen, ayaa duruusteeda lagu dhigtaa jaamacadaha dunida ee waawayn.

Goortii uu guuleystey mashruucii ay isku badbaadinayeen, ataa waxaa baxday ooraahda ah: cudurkii hollandeeska, waxaa lagu

daaweeyey daawo ay holland keentey. Sida waaqica ah, Holland dowlad iyo dadba waxay mudan yihiin in lagu qadariyo habsamida ay uga weecdeen gudcurka uu cudurku ku riixayay, si ay dadkooda u gaarsiyaan dhul nabad ah iyo baraaraha ay caruurtooda u naawilayeen.

Waxaa hubaal ah in ay jiraan dowlado tira yar oo ka badbaaday cudurrada nolosha oo iyagu gaaray nolol barwaaqo-sooran ah. Hoggaan leh hiraal xikmadaysan iyo doonitaan ay daacad weheliso ayay ku ilaaliyeen maslaxadda dad-waynahooda. Qaar kale oo kamid ah dowladaha adduunka waxay la il-daran yihiin koboc yari iyaga oo dakhligooda dowladeed uu aad u kordhayo. Waxaa u sabab ah sunta lagu darsaday kharashaadka soo gelaya maamullada hoggaanka u haya.

Reer Holland markii uu cudurka ku soo baxay waxay markii ugu horeysey ku fekereen in ay

diraaseeyaan, si ay kula diriraan tallaabooyinka ku haboon. Iyagu waxay ogaadeen halka ay cilladdu uga timid. Waxay noqotay is dheelli-tir la'aanta (Non-homothetic) nolosha bulshada. Taasi waxay ka timid dakhliga xooggan ee qul-qulka kaga soo galay dalka dhoofinta saliidda.

Waxaa qul-qulkaasi uu sababay in bulshada dhexdeeda ay abuurmaan tiro maal-qabeenno ah oo balaayiin lacag ah haysta iyo tiro intaas ka badan oo iyaguna malaayiin lacag ah haysta. Tallaabadii ugu horeysey oo ay qaadaan waxay ahayd in ay ka hor-tagaan khayaanada ay lacagtooda ku samaysay dhaqaalihii dalka.

Dowladda Holland waxay la timid siyaasad dhaqaale oo lcagteedii ka dhigta mid wax ku'ool ah oo looga hortegi karo dhaawacyadii uu cudurku reebey.

Tusaale-dhig, waxay diyaariyeen lacago badan oo loogu tala-galay si dib loo yagleelo qaabka hannaankii dhaqaale ee dhisnaa ka-hor intaanan saliidda la helin. Waxay yeeleen, dhaqaalihii faa'iidada ahaa ee gudaha laga helayay ayaa waxaa lagu bixiyay in la xoojiyo dhoofinta wax soo-saarka dalka oo sii tabar-yaraynayay. Waxaa sidaas loo yeelayay in la abuuro sanduuq lacageed oo lagu ilaaliyo madax-bannaanida dalka (Sovereign Wealth Funds).

Ujeeddada laga leeyahay waxay ahayd in la hakiyo dhaawaca ay geysanaysay lacagta qul-qulka ah, si loo xasiliyo kuleylka ay ku rideyso dhaqaalaha dalka, kaas oo intuu lacagtii kar-kariyo kor u qaadaya. Wixii lacag dheeri ahaa, dowladdu waxay gelisey waxbarashada iyo hagaajinta dhisma-hoosaadka ee si togan u caawini-doona koboca dhaqaalaha dalka.

Tallaabo kale oo la qaaday waxay ahayd in lala diriro loofarnimada. Sida caadadu tahay, qofku markii uu lacagaysto, in-kasta oo baahidiisii qof ahaaneed ayan is-beddelin, misana wuxuu doonayaa nolol raaxo badan oo kharaj siyaado ah ku baxa.

Haddii uu guri degganaa wuxuu rabaa in uu dego qasri.

Haddii uu gaadiid lahaa wuxuu doonayaa in uu ku socda baabuurta midkooda ugu qaalisan. Lebiskiisii wuxuu gelinayaa kharaj dheeri ah, fadhigiisii wuxuu gelinayaa kharaj dheeri ah, raashinkiisii wuxuu gelinayaa kharaj dheeri ah.

Dersiga halkaas ay reer Holland ka qaateen wuxuu yahay in aadamiga mar-kasta oo ay wax u kordhaan oo doonayo siyaado.

Aragtida dhaqaale oo caynkaas ah waxay abuuraysaa bulsho aanan isu dheeli-tireyn, taas

soo ku biya-shubanaysa maamul xumi iyo damac waalan.

Goortii cilladdii la fahmay waxaa su'aal leyska weydiiyay qaabkii loo wajihi lahaa wax ka qabadeeda. Si ay u hubiyaan waddada saxa ah oo ay ugu tegayaan waxa ka-qabadkeeda, waxay noqotay arin qallafsan.

Sababtu waxay tahay daawada waa siyaasad, daawooyinka siyaasaduhuna maahan wax sahlan in si cad loo qeexo. Dhaqaal-yahannadii loo xulay xalka cudurkan, meesha ay judhii horeba abbaareen waxay ahayd, dakhliga dalku leeyahay in uu si cadaalad ah u gaaro bulshada.

Arintaasi wax badan ayay hoos u dhigtay diinaamikadii cudurka. Tallaabada labaad waxay ahayd cashuurtii oo lagu kordhiyay maalqabeennada doonayay nolosha raaxada leh. Waxaa kor loo dhigay cashuurta laga

qaadayo agabka qaaliga ah oo dibadda ay ka keensanayeen.

Waxaa kale oo la xoojiyay in la kiciyo wershadihii dalka iyo wax soo-saarkoodii.

Waxay dejisteen qorshe cad oo aanan ku ekeyn hadal iyo waraaqo, bal ay la socoto fulin iyo isla-xisaabtan.

# Casharkii 6-aad

Dhallinyaro, dadka reer Holland, maadaama ay u muuqatay, saliiddii ay ku hodmeen in ay tahay mid ay weheliso cudur nabarro xun wata, dib ayay isugu-laabteen. Marka laga yimaado lacagaha badan oo ay ku bixiyeen in ay yareeyaan qiimaha lacagtooda, waxay si cilmi ku dhisan u adeegsadeen aragtida ah dhaqaalaha kala ayniga ah (Diversification Economy).

Arintan waxay kamid ahayd saldhigyadii siyaasadda dhaqaale ee istraatejiyadda hagaagsan oo reerku ay kaga badbaadeen cudurkii Hollandeeska.

Dowladdu, wax soo-saarkii dalka waxay afka u saartey saddex kaabadood oo xooggan. Waxay kala ahaayeen beeraha, wershadaha iyo adeegga.

Haddaanu ku hor-marno eegmada beeraha, bal marka hore aynu qiimeyno yaraanta dhulka ay dadkaasi ku nool yihiin.

Bedka dhulka Holland wuxuu dhan yahay 5,488 km2. Isku cel-celis markii cufka dadka loo qaybiyo dhulka hal km2. waxaa ku soo aadaya 1,200 oo qof. Haddaanu u babar-dhigno bedka dhulka Soomaaliya oo ah 637,657 km2, waxaanu heleynaa in uu 6 jibbaar ka yar-yahay.

Taas macnaheedu wuxuu yahay, maamul-goboleedyada 6-da ah oo Soomaaliya ka dhisan, mid kamid ah ayuu qiyaastii le’eg-yahay.

Haddii cufka dadka ee dhulka laysu eego dhulka Soomaaliya waa 15 qof/ 1 km2. Halka cufka dadka reer Holland ee dhulkooda uu noqonayo 1,200 oo qof/ 1 km2.

Casharka laga baranayo wuxuu yahay, bulshadu markii ay sabool noqoto, siyaasadda haboon maahan in hoggaamadoodu ay dibadda dhaqaale ka raadiyaan, mana ahan in ay u tuugsi-tagaan dowlado iyo shirkado iyaguba dan ka leh degaanka.

Bal waxay tahay in hoggaanku uu la yimaaddo siyaasad togan oo ku wajahan koboca aqooneed ee dadka iyo xoojinta kaabadaha dhaqaale ee dalka. Dowladda Holland dhulka sidaas u ciriiryoon oo cimiladiisu ay qallafsan tahay ayay xaqli iyo niyad daacad ah gelisey si ay dhaqaale caafimaad qaba oo dhanka beeraha ah uga helaan.

Waxay ku tallaabsatay aragti ay diiradda ku saarayso hab cusub oo lagu raadinayo wax soo saar sare oo dhanka beeraha ah, kaas oo kharajka gelaya uu yar-yahay maxsuulkuna uu badan-yahay.

Natiijada ay ka gaareen haddaanu tusaale ka soo qaadanno, dowladaha adduunka u hor-marsan, celceliska beerta baradhada ah, halkii hektar waxay ka gurtaan 9 tan oo baradho ah.

Beeralayda Holland, waa dadka keliya oo halkii hiktar oo dhul-beeraad ah ka gurta 20 ton oo baradho ah. Tusaale kale ayaa wuxuu yahay, waddamada maal-gashiga ku sameeya raashinka laga ganacsado (Food –stuffs Industry) ee dunida, dalka Holland waxay Yurub ka tahay dalka I-aad.

Markii adduunka loo eego waxay ka tahay dalka II-aad oo Mareekan oo keliya ayaa ka horeeya.

Sidaa darteed dalkan waxaa lagu magacaabaa jardiinadii dunida. Sanadkii 2017-kii, dowladda Holland waxay sheegtey, dhaqaalaha ay ka heshey raashinka ay dhoofisay wuxuu ahaa 92 bilyan US.$.

Dhanka wershadaha iyo hal-abuurka farsamada, qudhoodu kama ayan harin. Dalku wuxuu maal-gashi xooggan iyo cilmi-baaris aqooneed ku sameeyey wershadihiisii.

Marka laga yimaado wershadaha cuntada ee waawayn, dalku wuxuu leeyahay wershado kuwaas oo ay kamid yihiin wershadaha tamarta dhaliya sida gaaska, hawada iyo nukliyeerka.

Wershadaha kiimikada oo 19 ah.

Waxay isugu jiraan kuwo dalka laga leeyahay iyo kuwo maal-gashi shisheeye ku shaqeeya. Wershadahaas kuwooda ugu waawayn waxay yihiin Royal Dutch Shell oo ku howlan kiimikada shidaalka.

DSM oo ku howlan raashinka iyo daawada. AkzoNobel oo ah wershado sameeya ranjiga tayada leh. BASF waa shirkad samaysa waxyaabaha kiimikada ah. In-kasta oo ay tahay

shirkad Jarmal ah misana maal-gelin ayay ku leeyihiin oo waxay kamid tahay shirkadaha ku leh dalka Holland wershadaha ugu waawayn.

Hantida dabiiciga ah oo qiimiga leh oo shidaalka u labeeya waxay u arkeen degaanka uu dalkoodu kaga yaal joqraafiga qaaradda Yurub, taas oo ay ku guddoonsadeen in ay adeeg ahaan uga faa'iideystaan. Dalku wuxuu dhacaa bartamaha-galbeed ee qaaradda Yurub.

Wuxuu ku sii jeedaa bad-waynta Atlantikada.

Sidaa darteed dowladdu waxay xoogga saartay howlaha adeegga. Waxay maal-gelisey dekadda Rotterdam oo ah dekadda ugu wayn Yurubta galbeed. Waxay gaarsiisey, sanadkii 2018-kii, in dekaddaasi ay u adeegto maraakiib tiradoodu gaarayso 29,476 oo markab. Isla-sanadkaas dakhliga ay dowladda Holland ka heshey dekaddan wuxuu ahaa 707,2 bilyan US.$. Waxaa

u dhisan gegida dayuuradaha ee magaalada Amsterdam (Schiphol Airport), kaas oo ah midka 3-aad ee qaaradda Yurub ugu wayn. Sanadkii 2016-kii, gegidaas waxay u adeegtey dad socdaal ah oo tiradoodu ay dhan-tahay 63,625,664 oo qof. Isla-sanadkaas, dakhliga ay dowladda Holland ka heshey adeegaas wuxuu dhamaa 27,3 bilyan US.$.

# Casharkii 7-aad

Dhallinyaro, cudurka Hollandeeska iyo daawada lagu dabiibey waxaa laga fahmay model dhaqaale, kaas oo inoo fasiraya faham hannaan dhaqaale oo uu dal ku joogsado kagana fogaado saboolnimada. Modelku wuxuu yahay, hantida uu dal leeyahay in ay tahay badeecad ganacsi-gal ah (Tradable Commodities) iyo badeecad aanan ganacsi-gal ahayn (Non-Tradable Commodity). Waxaa xusid mudan, labada hannaan waxaa waalid u ah hanti-dadeed (Human Resource), taas oo la helo goortii dadka wax la-baro.

Badeecadda ganacsi-galka ah waa badeecad dal ka soo baxda oo loo iib-geeyo waddan aanan ahayn waddankii soo saaray, seyladaha caalamkuna ay u baahi-qabaan. Sida qaalibka ah badeecadda ganacsigalka ah waxaa kamid ah khayraadka dabiiciga ah iyo agabka ay wershaduhu soo saaraan.

Badeecadda aanan ganacsi-galka ahayn waa ganacsiga fadhiya oo aanan la dhoofin-karin. Waxaa kamid ah adeegga wax-barashada, adeegga caafimaadka iyo adeegga dalxiiska iyo adeegyada kale.

Maanta labadaas jaad oo ganacsi ayaa caalamkan casriga ah ka socda, kuwaas oo faa'iido keliya aanan wadan. Bal waxay xiriir iyo isu-soo dhoweyn ka dhex abuuraysaa bulshooyinka aadamiga iyo shakhsiyaadkooda. Haddaba aynu dib u raacno taariikhda ganacsiga adduunka, si aanu u fahamno xididdadiisa iyo meesha uu ku biyo-shubanayo.

Taariikhda bedeecad is-dhaafsiga aadamiga waa mid goor hore bilaabatay. Dhaqdhaqaaqa ganacsiga adduunka weligiis wuxuu ahaa howl la xiriirta in si ikhtiyaar ah lagu kala beddesho agab ama howl adeeg ah, taas oo midba ninka haysta maahee kan kale uu danaynayo.

Dadku bilowgii awood uma ayan lahayn in ay degaano ka fog ka ganacsadaan. Sidaa darteed, ganacsigu wuxuu ahaa mid ku-eg degaan. Reer walba oo meel ku dhaqan dhexdooda ayay isdhaafsan jireen waxay danaynayaan.

Badeecadda ugu wayn oo laga ganacsan jiray wuxuu ahaa raashin la cuno iyo dhar lagu lebisto. Dadka degaanka ugu hantida badan keliya ayaa awood u lahaa in ay ka qayb-galaan dhaqdhaqaaqan.

Dabadeed waxaa bilawday in ganacsigii uu si qun-yar socod ah u fogaado oo ganacsatadii degmo waliba ay xiiso u qaadaan in ay la xiriiraan ganacsato degaamo kale oo ka dheer. Arintaasi markii ay fogaatay waxaa abuurmay waddooyin istraateeji ah oo ganacsigu uu ku socdaalo.

Waddada ugu muhinsanayd oo taariikhdu ay xustay waxay ahayd waddadii xariirta.

Waddooyinkan ayaa waxay noqdeen kuwo xiriirsha degaanadii ay ka curteen il-baxnimada aadamiga.

Waxaa kamid ahaa Faraacinadii (Masar), Dhulkii Udugga (Soomaaliya), Mesobotaanigii (Ciraaq), Roomankii (Talyaaniga), Hindidii (Hindiya), Reer Han (Shiinaha), Beershiyaankii (Iiraan), Islaamkii (Khaliijka Carabta), Manden (Maali), Ashanti (Gaana), iyo kuwo kale.

Waxaa abuurmay fagaarayaal guud oo lagu kala beddesho alaabaha laga ganacsanayo, kuwaas oo noqday degmooyin iyo saylado u tilmaaman howshan. Halkaas waxay noqotay meel uu qofku ka heli-karo alaabo badan oo uu kala doorto.

Qarniyadii dhexe ganacsatadii reer Yurub ayaa waxay noqdeen kuwa ugu fir-fircoon dunida. Waxay sabab u noqdeen in ay u soo socdaalaan

dacalladii dunida, iyaga oo sahan ah. Waxay gaareen qaaradaha shanta ah.

Markaas ayaa waxaa si xooggan isugu furmay ganacsigii dunida. Agabka laga ganacsado, marba mid-baa wuxuu shiiqin jiray kuwa kale oo wuxuu noqon jiray midka ugu qiimiga badan oo sayladaha dunida laga dalbado.

Alaabta heer caalami ku qiimeysnaa ee taariikhda ganacsiga soo maray waxaa kamid ahaa maydiga, xariirta, cusbada, cudbiga iyo xubnaha duur-joogta (fool-maroodi iyo haragshabeel).

Waxaa goor danbe ku soo biiray ganacsigii biddoodka (Slaves) oo ah dadka laga ganacsado, gaar ahaan kuwa haragga madow oo ku dhaqan qaaradda Afrika. Ganacsiga caynkan ah wuxuu bilowday qarnigii 16aad, wuxuu socday tan iyo

qarnigii 19-aad. Dadkan ayaa waxaa laga qaadi jiray galbeedka iyo bartamaha qaaradda Afrika.

Waxaa laga tallaabin jiray bad-waynta Atlantikada, iyada oo loo iib-geynayay qaaraddii cusbayd ee Ameerika. Ujeedadu waxay ahayd in xooggooda loo adeegsado beero-falidda.

Goortii la hindisay lacagta wax lagu kala beddesho, waxaa fududaaday ganacsigii. Sida la ogsoon yahay lacagtu agab ahaan wax qiimo ah ma-lahan oo waa bir ama xaashi. Qiimaha ay dadku dul saareen lacagta, kuma xirna qiimaha ahaanshaheeda.

Bal qiimaha ay leedahay waxay ku kasbatay heshiiska loogu oggolaaday in ay xiriiriye u noqoto wax is-dhaafsiga. Iyadu waxay u oggolaaneysaa dadka in ay si aan toos ahayn uga ganacsadaan alaabada iyo adeegyada.

Waxaa kale oo ay lacagtu oggolaanaysaa fahamka qiimaha badeecada, iyada oo isla-markaas bixinaysa hannaan lagu keydiyo qiimaha alaabta waa-wayn oo ayan suuragal ahayn in hab is-dhaafsi ah loogu adeegto. Sidaas ayay lacagtu u fududeysey noloshii ganacsiga.

# Casharkii 8-aad

Dhallinyaro, haddaanu intaas kaga harno taariikhda ganacsiga, aynu si guud u yara eegno faa'iidada uu ganacsigu u leeyahay ummadaha adduunka. Haddii waayihii hore ganacsiga loo yiqiin mid ku eg isdhaafsi agab ama adeeg, noloshan casriga ah badeecad is-dhaafsiga waxaa raacsan in ganacsigu yahay mid ka qari wayn intaas.

Waayo waxaa la ogaaday shirkad waliba midda ka wayn in ay tahay mid ereyga ganacsiga uga macna dhow. Guud ahaan ganacsigu faa'iidooyin badan ayuu u leeyahay nolosha aadamiga. Wuxuu adkeeyaa hor u-marinta iyo koboca bulshada, isaga oo isla-markaas xoojinaya hantida sida gaarka ah loo leeyahay iyo awoodda loolanka lagu tartamayo wax soo-saarka.

Ganacsigu wuxuu waasiciyaa kala duwanaanshaha badeecadaha iyo xiriirka wax is-dhaafsi ee ummadaha dhex-mara. Wuxuu dhiiri-gelin ku sameeyaa hal-abuurka, tayaynta shaqada iyo badeecadda, wuxuu adkeeyaa nabadgelyada iyo xiriirka ka dhexeeya dowladaha adduunka. Intaasi dabadeed, ganacsigu wuxuu door muhim ah ka qaataa dakhliga dad-waynaha iyo xasilloonida siyaasadeed ee dowlad walba. Ganacsigu wuxuu leeyahay nafac-wadaag iyo fursado shaqa-abuur.

Iyada oo la raadinayo faa'iidooyinka tirada-badan oo laga helayo ganacsiga ka dhexeeya dowladaha dunida, ayaa dowlad ka maaranta dowladaha kale ayan jirin. Bal dowladuhu waxay ku tartamayaan in ay xiriir ganacsi la yeeshaan tirada ugu badan oo dowlado ah.

Waxaa jirta ooraah ay Jabaanku oran jireen, taas oo ah: dowlad walba oo dunida ku taal waa in laga helaa agab lagu sameeyey Jabaan. Shiinaha ayaa iyaguna waxay lahaayeen ooraah ay oranayeen: aqal walba oo dunida ku yaal waa in laga helaa agab lagu sameeyey Shiino.

Xilligan casriga ah noloshii waa isu-furantay oo dadyowga ku kala nool qaaradaha kala duwan si fudud ayay u kala ganacsadaan. Arintaas waxaa sahlay aqoonta teknolojiyada casriga. Waa aqoon fududeysey wax soo-saarkii, xiriirkii iyo gaadiidkii dunida.

Waxaa jira xiriir xooggan oo ka dhexeeya aqoonta teknolojiyada iyo jaan-tuska astaamaha ganacsiga, astaamaha wax soo saarka, iyo astaamaha awoodda hor u-marineed ee wershadaha.

Waxaa la oran-karaa teknolojiyada waa qodob muhim ah oo xoojinaya nolosha ganacsiga casriga. Sidaa darteed aqoon-yahannada dhaqaale-baradka ah, waxay ganacsiga u adeegsadaan erey-bixin casri ah oo wuxuu yahay TCF (Technology Contribution Factor). Bulsho waliba oo aqoontaas ku hor-martay waxay noqotay mid kaga horeysa ganacsiga bulshooyinka kale oo aqoontan ku liita.

Marka la eego taariikhda fog, haddii dunidu ay soo martay xilli uu maydigu hor-mood u ahaa badeecagaha ganacsiga dunida, iyo xilli ay cusbadu hor-mood u ahayd hantida laga ganacsan jiray, kuwaas oo sabab u noqon jiray colaado xooggan, maanta tamarta ayaa waxay tahay agabka ugu qiimiga badan oo laga ganacsado.

Gaar ahaan gaaska iyo shidaalka. Xilliyadii ka horeeyey kacaankii warshadaha ee ka hana-

qaaday qaaradda Yurub, raashinka ayuu ahaa badeecadda ugu xooggan oo ay ka ganacsan jireen dadka adduunka ku noolaa. Waxaa xusid mudan, qarnigii 15-aad in cusbadu ay ahayd badeecadda ugu badnyd, uguna qiimiga badnayd ee ganacsatada Yurub ay soo dhoofsan jireen. Goor dabe, galleyda iyo qamadiga ayaa noqday badeecadaha xukuma seyladaha laysku dhaafsado ganacsiga.

Wixii xilligaas ka danbeeyey saliidda ceyriin iyo kiimikadeeda ayaa waxay si qun-yar socod ah u soo buuxinayeen sayladaha ganacsiga adduunka.

Sida aqoonta fiisikada lagu barto, tamartu waa ay ayniyo badan tahay oo waxaa kamid ah mid ka dhalata dhaqaaqa (Kinetic Energy), mid ka dhalata hoobashada (Gravitational Energy), mid

ka dhalata shucaaca (Radiation Energy), mid ka dhalata laastikada (Elastic Energy), mid ka dhalata kulaylka (Thermal Energy), mid ka dhalata jacda bir-qabatada (Magnetic Energy) mid ka dhalata kiimikada (Chemical Energy) iyo mid ka dhalata noolaha jirkiisa (Biological Energy).

Tamarta ugu qiimiga badan, ugu fudud uguna sahlan gaadiideynteeda waa saliidda dabiiciga ah (gaaska iyo shidaalka), taas oo qiimo gaar ah yeelatay goortii aqoon loo yeeshey in loo beddelo tamar wax dhaqaajisa.

Sidaa darteed saliiddu waxay maanta noqotay badeecadda ugu fir-fircoon dunida oo dunida ka shaqaysa. Arintaasi maahan wax lala yaabo marka la eego waxyaabaha ay xiriirka la leedahay oo dhaqaalaha ah xoojiya.

Howlaha milgaha culus oo saliiddu ay wadato waxaa kamid ah sahanka shaqooyinka culus ee lagu sahminayo balliyada shidaalka, qodisteedii iyo soo-saarkeedii, nadiifinteeda iyo kala-shaandhaynteeda, gaadiideynteeda iyo gaarsiinta meelihii looga baahnaa, saliiddii batroolka oo shidaal ahaan loo adeegsado (gawaarida, dayuuradaha, iyo maraakiibta), waxaas oo dhan waxay isku noqonayaan qayb yar oo kamid ah waxyaabaha shidaalka looga faa'iideysto. Batroolku wuxuu qayb ka yahay dhismaha agab badan ee elektoonnada ku shaqeeya, agab badan oo biraha laga sameeyo, agabka kiimikada ah oo laysku qurxiyo (Cosmetics) iyo ayniyo dhar ah oo iyana qurux loo qaato oo ay kamid yihiin dhalooyinka caagga ah (Acrylic), dharka nayloonka ah (Nylon), dharka jirka ku dheggan (Spandex) iyo agab kale oo badan.

# Casharkii 9-aad

Dhallinyaro, haddaanu dib ugu laabanno cudurkii Hollandeeska, dalku wuxuu uga badbaaday tallaabooyin xikmadaysan oo dowladda Holland ay qaadatay. Dhaqaalihii xanuunsanaa wuxuu heley caafimaad uu ku shaqeeyo. Maanta dhaqaalaha dalka Holland wuxuu kamid yahay kuwa ugu xasilloon uguna hagaagsan waddamada Yurub. Shaqa-la'aantu waa 3.3%. Dakhliga guud ee dalka sanadkii 2018-kii wuxuu ahaa 826.2 bilyan US.$.

Dhaqaalahaas culus wax ka-badan 70 %-kii wuxuu ka yimaadaa adeegga oo ah dekadaha oo Rutterdam ay ugu wayntahay, garoomada dayuuradaha oo garoonka Amsterdam uu ugu wayn-yahay iyo dalxiiska. Xisaabta ay dowladdu soo ban-dhigtay howlaha la xiriira adeegga waxay ka heshey lacag gaareysa 73.1 % oo dakhligii dalka kamid ah.

Howlaha la xiriira wax soo-saarka wershadaha waxay ka heshey lacag gaaraysa 24,6 % oo dakhligii dalka ah. Howlaha la xiriira beeraha waxay ka heshey 2.3 % oo dakhligii dalka ah.

Waxaa xusid mudan dekadaha iyo garoomada Soomaaliya oo maamullada dhisan ay gacanta u gelinayaan shirkadaha shisheeyaha ah, in ay yihiin hanti ma-guurto ah oo ay haboon tahay in la ilaashado. Hantida ay Holland kaga badbaaday cudurkii dhaqaale-xumida ahaa, dawada ugu qiimiga badan oo ay kaga hor-tageen, illaa maantana iyo mustaqbalkaba ay dugsanayaan waa dhaqaalaha ay ka hesho adeegyada ay ku bixiso dhisma-hoosaadka.

Wixii ka danbeeyey sanadkii 1977-kii, oo ah markii ay caddaatay in dhaqaalihii Holland uu ka caafimaaday cudurkii, magacii ahaa cudurkii Hollandeeska wuxuu noqday mid si faxan loogu xuso maxfallada aqoonta dhaqaalaha. Waxaa

kale oo si qeexan loogu xusay maxfalladaas, is-diidka iska-soo horjeeda ee ah helitaanka khayraadka dabiiciga ah iyo bur-burka dhaqaale ee weheliya.

Waxaa jira qoraallo iyo muxaadarooyin badan oo dhaqaal-yahannada dunida ugu waa-wayn ay ka dhigeen cudurkan. Buugaagta mowduucan laga qoray kuwooda qiimaha badan waxaa kamid ah buug ay isla-qoreen laba aqoon-yahan, kaas oo lagu magacaabo Maxay Ummaduhu u Fashilmaan (Why the Nations Fail).

Labada aqoon-yahan oo qoray waxay kala yihiin Kamer Daron Ocem-oglu, waa dhaqaalyahan asalkiisu yahay Turki oo macallin ka ah machadka MIT (Massachusetts Institute of Technology) ee magaalada Massechuserrs. Aqoon-yahanka kale waxaa la yiraahdaa James Alan Robenson. Waa dhaqaal-yahan u dhashay dalka Ingiriiska.

Isagu wuxuu macallin ka soo noqday jaamicado dhowr ah oo ay kamid yihiin University of Chicago, Harvard University iyo University of Malborne.

Buugga waxaa loo adeegsaday aqoonta dhaqaalaha iyo hor-u-marintiisa, taariikhda dhaqaalaha, sababta uu u kala duwanyahay dhaqaalaha ummudaha, maxay tahay sababta ay ummadaha qaarkood ugu guuleystaan dhaqaalaha qaar kalena ugu fashilmaan.

Shan iyo toban-ka cutub oo buuggu uu ka kooban yahay, labada aqoon-yahan waxay kaga faalloonayaan qodobbada saldhigga u ah guusha iyo guul-darrida siyaasad- dhaqaaleed ee ummadaha aadamiga ah ay la kulmaan.

Iyagu waxay buuggooda kaga doodayaan in fasiraadda hadda jirta ee la xiriirta muuqaallada bulshooyinka kala duwan ee ama barwaaqada

ah ama saboolnimada ah ay salka ku hayso arimo dhowr ah oo ay kamid yihiin degaanka, cimilada, dhaqanka ama diinta.

Jahliga hoggaamiyeyaasha siyaasaddu ay arinkaas kaga sugan yihiin ayaa waxay ku tilmaamen arin ay tahay ama ayan ogaal u lahayn, haddii ay ogaalkeeda leeyihiinna lagu ceebeyn karo.

Meelaha tusaalaha wacan ay ka soo qaadanayaan guusha iyo guul-darrida siyaasadda dhaqaale waxaa kamid ah dowlado laba ah oo ay ahayd in ay mid qura ahaadaan. Waayo dadkoodii ayaa mid ah, dhaqankoodii ayaa isna mid ah. Waa labada dowladood ee Kuuriyada koonfureed iyo Kooruyada waqooyi. Labadaas dal oo kala go'ay sanadkii 1953-kii, ayaa maanta midna ay kamid tahay dowladaha horseedka ka ah dhaqaalaha dunida, midna ay waddamada ugu saboolsan dunida.

Waxaa kale oo ay tusaale u soo qaateen magaalo mid ahayd, taas oo iyana sanadkii 1953-kii ay xuduud dhex-martay. In-kasta oo ay laba dowladood kala noqotay, misana dadkeedii waa dad mid ah oo isku dhaqan ah.

Magaaladaasi ayaa waxay tahay Nogales qaybteeda dhacda dalka (gobolka Sonora) Meksiko iyo Nogales qaybteeda dhacda (Arizona) Ameerika. Dadkaasi waxay cunaan cunno isku-mid ah, waxay dhegeystaan heeso isku-mid ah. Laakiin waxay ku kala tageen heerka dhaqaale ee nolosha.

Labada magaalo midda dhacda xuduudda Mareekanka, dadka ku dhaqan waxay haysataa hannaan caafimaad iyo dugsiyo ay caruurta u dhigtaan illaa dugsi sare. Waxay haystaan nolol nabadgelyo leh.

Waxay haystaan dhismo-hoosaad wanaagsan iyo hannaan qashin-fogeyn ah. Magaalada qaybteeda dhacda xuduudda Meksiko, dadka ku dhaqan waxay arradan yihiin arimahaas aanu soo sheegney.

Sidaa darteed, xataa waa ay ka cimri yar-yihiin walaalahooda waqooyiga ka deggan. Waxay u le'daan cudurrada faafa.

# Casharkii 10-aad

Dhallinyaro, ahmiyadda uu u leeyahay caafimaadka dhaqaalaha ummadaha darteed, ayaa cudurkan wuxuu noqday qodob milga culus oo dhinacyada uu leeyahay laga diraaseeyo. Isla-markaas cilmi-baaris lagu hayo ka socda jaamacadaha dunida.

Sida uu dowladaha adduunka u taabanayo ayaa la falnqeeyaa oo qoraallo cuddoon laga diyaariyaa. Iyada oo la eegayo qaabka uu cudurku u dhaawaco ummado dhaqaalahoodu berya-samaad ku jiro iyo qaabka uu tafaha u haysto kuwo soo koraya, ayaa si looga digtoonaado khatarihiisa waxaa la bandhigaa xog badan oo la xiriirta calaamadaha uu leeyahay.

Ummadaha uu ku yar-yahay fahamka cudurkan, wuxuu ku noqdaa krooniko, markaas ayuu isu-

beddelaa baur-bur iyo inkaar. Halkaas ayaa waxaa ka dhasha nicmadaha nacladaysan.

Ma-yara culimada ku takhasusay dhaqaalaha, kuwaas oo sahanka ku haya cudurka Holandeeska iyo nicmadaha nacladaysan. Laba aqoon-yahan oo u dhashay dalka Jabaan ayaa waxay kamid yihiin dhaqaalyahannada u sahan-tegey muuqaallada cudurkan uu ku ridey qaar kamid ah dowladaha dhaca koonfurbari ee qaaradda Aasiya.

Labada dhaqaal-yahan waxaa la kala yiraahdaa Saukvisan Khinsamone iyo Hiroyuki Taguch. Iyagu waxay doorteen in ay cabbiraan caafimaadka uu qabo hannaanka dhaqaale ee u dhisan dowladaha ku bahoobay jamciyadda koonfur-bari Aasiya ASEAN (Association of South-east Asian Nations). Waddamadaas oo ah kuwo door aanan la dhayalsan ka cayaara fir-fircoonida nolosha dhaqaalaha dunida ayaa

waxay yihiin kow iyo toban dal oo is-bahaystay. Iyagu waxay yihiin Thailand, Burunai, Filibiin, Malesiya, Myanmar, Indoneesiya, Singaboor, Vietnam, Laos, Kamboojiya iyo East Timor.

Waddamadaas ayaa wadar-ahaantooda, dhowrkii tobaneeye sano ee la soo dhaafay, dhaqaalahoodu wuxuu ahaa mid kor u socday. Cel-celis wuxuu kordhayay 5,6 % muddadii u dhexeysey 1990-kii illaa iyo 2016-kii. Iyagu waa ay ku kala duwanaayeen xoogga dhaqaalaha iyo faa'iidada. Burunai iyo Sigaboor ayaa ahaa kuwo heerkoodu sareeyo.

Malesiya iyo Thailand ayaa ahaa kuwo heerkoodu dhexeeye. Indoniisiya iyo Kamboojiya ayaa iyana ahaa kuwo heerkoodu hooseeyo. Farqiga u dhexeeya dhaqaalaha waddamadan kow iyo tobanka ah wuxuu salka ku hayaa laba arimood. Hantida ma-guurtada ah

oo dalwalba uu leeyahay iyo hal-abuurka farsamada wershadaha.

Labada dhaqaal-yahan waxay tusaale u soo qaateen waddamada ah Laos, Vietnaam, Indoneesiya, Myanmar iyo Malesia. Markii la eego hannaankooda dhaqaale muddadii u dhexeysey 1980-kii illaa iyo 2015-kii, waxaa la helayaa in qayb dowladahaas kamid ah ay xoojiyeen dhaqaalaga ku dhisan wax soosaarka wershadaha. Halka qaybta kale oo dowladahan ah ay dhaqaalahoodu ku xoojinayeen ka faa'iideysiga khayraadka dabiiciga ah.

Indoneesiya oo bilowgii sanadihii 1980-aadkii dhoofsan jirtay shidaal badan, si xooggan ayay u yaraysay oo wexey xoogga saartay wershadaha. Waxaa lamid ah Malesiya oo iyadana yaraysay khayraadkii dabiiciga ahaa oo ay dalka kala soo bixi jirtay.

Labadaas dal waxay maal-gashi badan ku sameeyeen wershadihii, iyaga oo dhiiri-geliyay wax soo-saarkii dhanka wershada ah. Natiijadii waxay noqotay in dhaqaalahoodu uu noqdo mid ka caafimaad badan dowladihii dhaqaalahooda ku xiray khayraadka dabiiciga ah.

Maqaallo ay aqoon-yahannadu ka qoreen dhaqaalaha waddamadan, waxay ku sheegeen, marka laga reebo Singaboor iyo Burunai, dowladaha is-bahaysiga in dhaqaalahoodu yahay heer-dhexaad. Arintaasina waxay waafaqsan tahay xogta uu Bangiga adduunka ka hayo dhaqaalaha waddamadaas.

Labada dal ee kala ah Laos iyo Myanmar ayaa waxay yihiin kuwa ugu dhaqaale liita is-bahaysiga. Dalka Laos wuxuu leeyahay dhaqaale si xawli ah u koray iyadoo ay dawladdu dhiiri-gelisay baahinta iyo kobcinta shirkadaha gaarka loo leeyahay. Dalku wuxuu noqday ciyaartooy

gobol oo ka qayb-qaata curinta tamarta biyaha laga dhaliyo.

Dalka Myanmar ayaa isna wuxuu ku socdaa in uu noqdo xoog dhaqaale ee degaanka, khayraadka uu leeyahay iyo fur-furaanshaha dhaqaale darteed.

Qoraalka ay aqoon-yahannadu ka sameeyeen waddamadan, waxay ku xuseen talo ay siinayaan labadaas dal ee dhaqaalahoodu uu soo kobcay.

Waxay u sheegeen in ay ka digtoonaadaan qulqulka lacagaha uu cudurku la socdo. Wax badan ayay aqoon-yahannadu ka hadleen cudurkaas iyo qorshayaalka lagaga badbaadayo.

Arintaasi waxaa laga dhaxlay casharro canaawiin waawayn ku qoran oo ay ku liibaaneen dowladihii inta fahmay dhaqan-geliyay si ay uga hor-tagaan dakharrada cudurka.

Waxaa tusaale loo soo qaadan karaa waddamada Australia, Kanada, Ruusiya iyo Norway oo kamid ah dowladaha dhaqaalaha xasilloon ka sameeyey khayraadka dabiiciga ah, cudurkiina uusan taaban.

# Casharkii 11-aad

Dhallinyaro ogaada dhaqaalaha dunida waa mid sidii shabakaddii isugu xiran. Ummadaha ku guuleysta dhismaha dhaqaalaha adag ee xasilloon waxaa guusha u keeney aqoon ay weheliso khibrad iyo talo siyaasadeed oo ay u golo-fariisteen dadkooda waayeelka ah.

Sidaa darteed, guusha ay ummaduhu ku naaloodaan iyo hab-raaca ay qaateen wuxuu inoo yahay cashar aynu ku fahamno qaabkii looga tallaabsan lahaa dabinnada nolosha ee nagu-riixaya boholaha cawaaqibtooda aanan la mahadin.

Afarta dowladood oo aanu soo xusnay (Australia, Kanada, Ruusiya iyo Norway) waxay mudan yihiin in laga tusaale qaato, qaabkii ay dowladohoodu u badbaadiyeen dhaqaalahooda, xilli uu cudurku albaabada u soo

garaacay, adduunkuna uu galay sicir-barar dhaqaale.

Aqoonta laga diyaariyay qaabka ay uga badbaadeen, waa mid buugaag badan lagu xardhay. Laakiin qoraalkayagu waa guud-mar kooban. Haddii aanu ku hor-marno Australia, waa dal lagu naanayso dalkii nasiibka wacnaa.

Laakiin dalku taariikhdiisa oo dhan maahayn mid nasiib wacan oo xilliyo adag ayaa soo maray. Labaatankii sano ee la soo dhaafay Australia dhaqaalaheeda wuxuu ahaa mid si xooggan ugu xirmay ka-faa'iideysiga kobocii xoogganaa ee dhaqaalaha oo dalka Shiinuhu uu gaaray muddadii u dhexeysey sanadihii 2000 - 2010. Muddadaas, qiyaas ahaan rubuc ka mid ah wax-dhoofinta Australia waxay aadaysay dalka Shiinaha.

Waxay dalkaas u dhoofin jireen agab ceyriin oo fara badan oo ay kamid yihiin macdanta birta ah iyo dhuxul-dhagaxa.

Dhaqaal-yahanka la yiraahdo Max Warner Corden, wuxuu odey ka yahay kuliyadda dhaqaalaha ee jaamacadda (Melbourne University).

Waraaq uu ka diyaariyay mowduucan wuxuu ku sheegey, muddadii lixda sano ahayd (2005 - 2011), dhoofinta macdanta dalka Australia waxay korortay qiyaas ahaan 85 %. Arintaasi waxay sababtay in dakhligii dalku uu kordho 41 %.

Dhoofintaas macdanta waxaa 100 % ku noolaaday qiimihii macdanta iyo dhuxusha uu dalku lahaa, kuwaas oo aanan markii hore si wanaagsan looga faa'iideysan jirin. Baahida dheeriga ah oo xilligaas Shiinuhu ay u qabeen

macdantan ayaa Australia ay ku heshey kororkaas dhaqaale oo faa'iidada badan. Ganacsigaas ayaa muddo toban sano ah wuxuu ku socdey kala faa'iideysi labada dhinac ah.

Hanti badan ayaa Australia ka soo gashay macdantii iyo dhuxushii badnayd oo ay Shiinaha u dhoofinayeen.

Lacagta badan oo ka soo laabanaysay ganacsigaas waxaa ku hdomay dowladdii Australia iyo dadkeedii. Waxaa koboc wanaagsan muujiyay dhaqaalihii dalka. Laakiin sawirkaas farxadda badan ma noqon mid sii socda.

Hannaankii dhaqaale ee dalka ayuu wuxuu ku keeney waxa ay dhaqaal-yahannadu u yaqaaniin dhaqaale laba-xawaareynaya (Two-Speed Economy).

Macnaheedu waxay tahay, badeecadihii uu dalku dhoofinayay ee xoojinayay dhaqaalaha oo aanan jaanta la-helin wax soo-saarkii kale. Prof. Max Warner Corden, wuxuu qoraalkiisa ku sheegey, arintan in ayan dhaqaalihii Australia ka yeelin mid labaxawaarenaya, bal ay ka yeeshey mid saddex-xawaareynaya. Wax soo-saarkii dalka ayuu ku tilmaamay qayb si xad-dhaaf ah u xawaareeneysa (badeecadda macdanta), qayb xawaare dhexe ku socota (badeecadihii kale) iyo qayb fadhiid noqotay (badeecadihii aanan ganacsi-galka ahayn). Dhaawaca ay godantooyadu soo gaarsiisay dhaqaalihii dalka, halkaas ayay ka muuqatay.

Iyada oo xaaladdu ay caynkaas tahay, ayaa goor danbe hakad ku yimid ganacsigii macdanta iyo dhuxusha, kadib markii ay is-dhintay baahidii uu Shiinuhu u qabay badeecaddan uga imanaysay

dalka Australia. Xaaladdii waa ay sii xumaatay. Hantidii badnayd oo macdanta ka soo geli-jirtay waxay raad ku yeelatay sarrifkii dollar-ka Australia oo ka saad-caleeyey lacagihii kale oo ganacsigu ka dhexeeyey.

Sidaa darteed cabsi hor leh ayaa dhankaas kaga soo korortay reer Australia. Dowladdii iyo aqoon-yahankeedii, markii ay si wanaagsan isula qeexeen in dhaqaalahoodu xanuunsan yahay, dalku wuxuu qaaday tallaabooyin wacan oo ay looga hor-tegayo cudurka Hollandeeska, kuna badbaadinayaan caafimaadka dhaqaalahooda. Iyada oo laga faa'iideysanayo khibraddii dalka Holland, tallaabooyinka ay dowladdu qaaday waxaa kamid ahaa in lala dagaalamo cayilka ku yimid lacagtooda si loo ilaasho wax soo-saarkii dalka gudihiisa ahaa. Waxaa kale oo kamid ahaa in la adkeeyo hannaankii maaliyadda (Financial System) iyo daah furnaantiisa.

Tallaabo kale oo dowladda Australia ay qaaday ayaa waxay ahayd in ay aqoon-yahanno shisheeye la kaashatay qaabkii loo yarayn lahaa musuqa ka jira suuqa dhaqaalaha ee dalka. Iyada oo la xoojinayo arinkaas, dowladdu waxay marti-gelisey shir-wayne caalami ah oo lagu magacaabo Is-weydaarsiga Daah-furnaanta Wershadaha (Extractive Industries Transparency), kaas oo dalka ka dhacay bishii mey 2013-kii.

Dowladda Australia, waxaa kale oo ay adeegsatay aragtida dhaqaale ee ah (Sovereign Wealth Funds), taas oo yareeneysa wax soo-saarkii khayraadka dabiiciga ahaa si kayd loo reebo facaha danbe.

Xataa lacagihii la heley ayaa facahaas danbe loo maal-geliyay si ay faa'iidada u yeeshaan. In-kasta oo cabsi badan ay soo food-saartay dhaqaalaha Australia, culimo badan oo aqoon-

yahanno dhaqaale ahna ay ka digeen hoos u dhaca ku iman-karay dhaqaalaha Australia, misana dalku weli wuxuu haystaa hannaan dhaqaale oo adag.

Xiisadda dhaqaale ee sanooyinkan ka taagan dunida, weli Australia waxay kaga jirtaa ummadaha uu dhaqaalahoodu xasilloon yahay. Nidaamkeeda xisaabaadka iyo daahfurnaantu wuxuu ka wanaagsan yahay dalka Mareekanka iyo wadamo badan oo Yurub ah.

# Casharkii 12-aad

Dhallinyaro, in-kata oo waddamo badan uu gaaray cudurkan, misana dowladaha sida cilmiyeysan uga badbaaday maja-xaabintiisii waxaa kamid ah dalka Kanada. Dalkan ayaa wuxuu kamid yahay waddamada ku hodmay caadada wax soo-saarka wershadeed, isla-markaas waxaa dhaqaalihiisii faa'iido dheeri ah u noqday kheyraadka dabiiciga ah (gaaska, batroolka iyo macdanta).

In-kasta oo Kanadeesku ay goor hore bilaabeen sahanka saliidda dalkooda ku jirta, misana wixii ka danbeeyey sanadkii 2000 ayay si xooggan u heleen ceelasha laga qodey gobolka Alberta ee dhaca koonfur-galbeed ee dalka.

Sanadkii 2015-kii, gobolku wuxuu soo saaray 79 % saliidda dalka ka soo baxday. Gobolku wuxuu Kanada ka yeeley in uu noqodo dalka afaraad ee

dowladaha dunida ugu badan ee soo saara gaaska dabiiciga ah. Dalkaas ayaa hadda wuxuu maalintii soo saaraa 3,9 melyan barmiil oo saliid ah.

Xoogga lacagaha faa'iidada ah oo ay saliiddu soo gelisay dalka waxaa u dheer, sicirka saliidda oo kor u socday sanooyinkii ugu horeeyey oo dalku uu la soo baxay saliidda xooggan.

Gobolka Teksas (Texas) ee dalka Mareekanka waa gobol haysta awoodda tamarta shidaalka dunida, hadday tahay in mustaqbalka dhow uu u sharaxan yahay in uu Ameerika ka haqab-tiro shidaalka dibadda, iyo hadday tahay shirkadaha ugu waawayn dunida ee shidaalka oo xarun u ah.

Gobolkan oo la malaynayo in uu leeyahay shidaal ka badan midka Sacuudiga ku jira, ayaa dallaaleydiisa seyladaha shidaalka, sanadkii 1998-kii, cel-celis ahaan sicirka qiimaha saliidda

cayriin waxay ku kala iibsanayeen qiima dhan halkii bermiil oo batrool $ 16.74 US. $. Afar iyo toban sano dabadeed (sanadkii 2012-kii) isla-suuqaas sicirka qiimuhu wuxuu gaaray 90,72 US.$. Arintaasi waxay isku-xilli dhaceen goor uu dollar-kii Kanada kor u kacay.
Sanadkii 1998-kii halka dollar oo Kanadeeska ah waxaa lagu sarifayay 0,63 US.$. Sanadkii 2007-dii, halka dollar oo Kanadeeska ah ayaa wuxuu la qiimi ahaa 1,10 US.$. ah. Arintaasi waxay dollar-kii Kanada ka yeeshey mid kor u-kaca 55 % muddo 14 sano ah.

Waxaa halkaas ka muuqata qul-qulka lacagaha culus oo ku soo rogmanayay dalka Kanada. Arintani maahan mid si kedis ah ku dhacday, bal waxay ahayd mid ka timid kororkii qiimaha saliidda, taas oo dollarkii Kanada ka dhigtey mid qiimihiisu ku xiran yahay hodantooyada saliidda dalku heley.

Markaas oo kororka khayraadka isku-xiran ee galbeedka Kanada uu raacay mahad-celinta deg degga ah ee dollarka Kanada uu ku ceyshey.

Xoolahaas u kordhay darteed, noloshii dhaqaale ee Kanada, waxaa markiiba ka soo muuqday barwaaqo-sooran uu weheliyo ifafaalaha cudurkii Hollandeeska.

Meesha ugu horeysey oo laga ogaaday arintaas wuxuu ahaa dalka Mareekanka oo qaar kamid ah bangiyadoodii ay sheegeen in dhaqaalaha Kanada uu soo gaaray cilladihii cudurka.

Xilligaas waxaa hoos u-dhac uu ku yimid cabirka qaybta wax soo saarka, oo badanaa ku yaal gobollada Ontaario iyo Quebec. Arintaasi waxay si wanaagsan uga muuqatay jaan-tus dhaqaale oo laga sameeyey qiimaha dhoofinta saliidda ceyriin ee dalka, muddadii u dhexeysey 2001 – 1007. Qiimahaas ayaa wuxuu kordhay 16 bilyan

US.$. illaa iyo 41,8 bilyan US.$. Muddo lix sano oo keliya ah marka ay saliiddu kordhinaysay dhaqaalaha dalka wax ku dhow saddex-jibbaar, waxaa dhinac socday in uu hoos u-dhacay dakhliga ka soo xeroodey dhoofinta gawaarida oo kamid ahaa wax soo-saarka uu ku dhisnaa dhaqaalaha dalka. Dakhligaas ayaa muddadaas aanu xusnay wuxuu hoos u dhacay 41 bilyan US.$. illaa 32,6 bilyan US.$.

Dalka Kanada, in-kasta oo uu yahay waddan lagu xasdo hor u-marka iyo barwaaqo-sooranka dhaqaalihiisa, misana cilladahaas ayaa waxay muujiyeen debecsanaan ku timid hor u-markii uu ku socday. Waxaa ku soo baxay xannibaadyo asaasi ah oo ay tahay inay wax ka qabtaan si ay u sii wadaan soo jiidashada maal-gashiga shisheeye ee tooska ah.

Kuwaas oo ku tartama in ay helaan seylado caalami ah oo hufan oo ay maal-gashtaan. Xilligaas hore, hadal-haynta cudurka dhaqaalaha ee Kanada wuxuu noqday mid siyaasadda dhex-carara. Qadiyaddu waxay noqotay bataati bisil oo macaan, kaas oo dhexyaal labada xisbi ee Muxaafadka iyo Liberaalka ee ku tartama hoggaanka dalka.

Waxaa hubaal ah in siyaasaddu ayan dhisin hannaan dowladnimo, haddii ayan helin mu'asasaad sharciyadeed iyo kuwo maamul oo gar-wadeen u noqda. Ifafaalihii cudur-dhaqaaleedka ee soo if-baxay, wuxuu galay dood siyaasadeed. Sanadkii 2012-kii, ninka la yiraahdo Mark Carney oo ah odeyga Bangiga Kanada, ayaa wuxuu inkiray in dhaqaalaha Kanada uu ku sugan yahay caafimaad-qab. Wuxuu difaacayay shirkadaha waawayn ee shidaalka iyo hantiilayaasha hodanka ah ee raasu-maalka ku leh, faa'iidadana ku qaba.

Isaga oo diiddan in dhaqaaluhu jiran yahay, ayuu wuxuu dhiiri-geliyay intii lagu mashquuli-lahaa cudurro suuragal ah in ay yimaadaan, dalku haka faa'iideysto fursadaha uu ku ballaarinayo soo-saarka saliidda.

Mark Carney, marka uu sidaas u hadlayo, faa'iido badan oo saliidda laga helayay ayaa dalka soo geleysey, laakiin dhanka kale waxaa kordhayay shaqao-la'aanta. Taas oo dhaawaceedii uu soo if-baxay dhowr sano dabadeed. Goor danbe cudurkii si fiican ayuu uga soo muuqday dhaqaalihii dalka.

Cilladihiisii waxay ka soo if-baxeen wax soo-saarkii wershadaha ee dalka. Muddadii u dhexeysey 1980-kii illaa iyo 2000, wax soo-saarka wershadaha wuxuu dhaqaalaha dalka ka ahaa 17 %.

Laakiin sanadkii 2207-dii waxay hoos u dhacday 12 %. Hoos u-dhacaas ayay ku socotay, illaa sanadkii 2012-kii ay gaadhay 30 %. Intaa waxaa sii dheer, intii u dhaxeysay 1998 iyo 2006 saamiga shaqada wax soo saarka ee Kanada waxay hoos u dhacay 16 %.

# Casharkii 13-aad

Dhallinyaro, waxaa xusid mudan, goortii ay xisbiyadii Kanada ay siyaasadeeyeen dhaawaca dhaqaale ee dalka ku dhacay, aqoon-yahannadii ayaa waxay qalinka u qaateen in ay sahmiyaan qeexidda cudurka haysta hannaankooda dhaqaale. Meel cidla ah kama curan ishaarooyinka ka yimid mu'asasaadka maaliyadeed ee Mareekanka oo tilmaamayay cudurka soo gaaray dhaqaalaha Kanada.

Waxaa la ogsoonyahay, Kanada iyo Mareekan in ay is-dhaafsadaan ganacsiga ugu xoogga badan oo dhex-mara laba dowladood oo madax-bannaan. Sannadkii 2010, labada waddan waxay is-weydaarsadeen badeecado dhan 481,5 bilyan US.$. Sanadkaas gudihiisa, cel-celis waxaa maalin-walba ka tallaabay xuduudda u dhexeysa labada dal badeecad qiimaheedu yahay 1,3 bilyan US.$. Isla sanadkaas, Kanada waxay ahayd

dalka ugu weyn ee maalgashiga tooska ah FDI (Foreign Direct Investment) ay wershadeheedu ka heleen Mareekanka, kaas oo dhamaa 296 bilyan US.$. 296.

Waxaa halkaas ka muuqata in Kanada uu kala dhexeeyo dalka Mareekanka xiriir xasilloon oo horey loo qorsheeyey in ay wada-socdaan muddo dheer oo mustaqbalka ah. Arintaasi waxay Kanada ku dhalisay kalsooni xooggan oo ay ku qabto xuduuddeeda koonfureed.

Iyada oo ay sidaas tahay ayaa misana sanooyinkan danbe, labada dowladeed ay sii xoojiyeen xiriirkooda, gaar ahaan xilliyadii uu bilowday burburka dhaqaalaha dunida. Xiriirkaas xooggan oo ka dhexeeya dartiis ayaa qaar kamid ah bangiyada Mareekanka waxay dareemeen in dhaqaalihii Kanada uu xanuunsan yahay.

Bangiga lagu magacaabo (Bank of America) ayaa kamid ahaa mu'asasaadka maaliyadeed ee ka hadlay cudurka soo gaaray maaliyadda Kanada.

Bangigu wuxuu soo saaray caddaymo uu ku muujinayo xanuunka haya dhaqaalaha dalkaas.

War-bixin cusub oo Bangigu uu soo saaray bishii sebtember 2014-kii ayaa lagu sheegey, kor uqaadista soo-saaridda saliidda iyo gaaska ee dalka Kanada, in uu wax-yeello u geystay qaybaha kale ee ku tiirsan wax-dhoofinta dhaqaalahooda.

Bilowga sanadihii 2010-neeyadii, dhaawacayada kala duwan ee soo gaaray hannaankii dhaqaale ee dalka Kanada waxay ahaayeen ishaarooyin quus ka dhigayay awoodda uu dalku ku haysan karay heerka uu ka joogay dhaqaalaha caalamka. Shaqaalihii dalka oo bilaabay in ay ku yaraadaan fagaarihii wax soo-saarka, iyaga oo

isla-markaas u iishay fagaarihii shaqooyinka shidaalka.

Arintaasi waxay kamid ahayd muuqaallada xambaarsan nabarrada, kuwaas oo ay soo kordhisay saliiddii Kanada laga heley. Dabadeed waxaa dhacday in uu is-dhimo wax dhoofintii dalka ee wershadaha. Haddii sanadkii 2000, dalka Kanada dhaqaalihiisu 45 % uu ahaa mid ka imanayay agabka farsamada iyo teknolojiyada ee uu dibadda dhoofiyo (baabuur, agabka korontada iyo teknolojiyada), sanadkii 2012-kii dhaqaalaha dalka uga soo noqday agabkii uu dhoofiyay waxay ahayd 30 % oo qura.

Iyada oo ay arimahaasi jiraan, ayaa waxaa muran siyaasadeed la geliyay in dhaqaalaha Kanada uu noqday mid xanuunsan. Muranku wuxuu ahaa mid ay saldhig u ahayd siyaasadda muxaafidka iyo liberaalka ay ku kala jiidanayeen codadka dad-waynaha. Laakiin aqoon-yahannada

dhaqaalaha intooda badan waxay soo bandhgayeen sababihii cudurka in uu soo gaaray dalkooda.

Khibradda Kanada ee dhaqaalaha ku dhisan hanti-goosiga waa mid lamid ah khibradda dalka Holland. Xaqiiqooyinka yiil fagaarayaasha dhaqaalaha ee Kanada, bilowgii kun-sanadeedka cusub, wuxuu lamid ahaa midkii yiil fagaaraha Holland.

Sidaa darteed ayaa dhawaaqa tilmaamayay in cudurku uu soo gaaray Kanada, ishaarooyinkiisii hore waxay ka yimaadeen dalka Mareekanka.

Hoggaankii Kanada markii uu ku qancay in dhaqaalaha dalka uu xanuun ku jiro, dowladda dhexe iyo maamullada gobollada waxay qaadeen tillaabooyin tartan ah oo xoog leh. Middeeda ugu horeysey waxay ahayd, iyaga oo adeegsanaya kabitaannada maalgashiga iyo

dhibcaha canshuurta, in ay xoojiyaan shirkadaha ku howlan wax soo-saarka.

Gaar ahaan in lay xoojiy hor u-marinta aqoonta teknoolojiyadda. Dawladdu waxay dhiirri-gelisey hal-abuurka iyo in shirkaduhu ay xoogga saaraan sidii ay ugu guuleysan lahaayeen xoojinta loolanka awoodda wax soo-saarka. Tani waxay macnaheedu noqonaysaa in badeecaddoodu ay kaalin wanaagsan ka gasho seyladaha dunida.

Waxaa kale oo dowladda Kanada ay ku dadaashay in ay suuq cusub u hesho wax soo-saarkeeda. Sidaa darteed waxay heshiisyo ganacsi oo cusub la gashay dalka Shiinaha. Heshiiska ganacsi ee Kanada iyo Shiinuhu wuxuu bilowday sanadkii 1970-kii, markaas oo dowladda Shiinuhu ay bilowday fur-furaansho dhaqaale. Sanooyinkan danbe si xawaare leh ayuu u xoogoobay, illaa uu gaaray in Shiinuhu uu

noqdo qaybta saddexaad seyladaha ay Kanada wax isu-dhoofiyaan.

Mareekanka iyo Midowga Yurub oo keliya ayaa ka horeeya. Sanadkii 2016-kii, badeecadda ay is-dhaafsadeen labada daöl (Kanada iyo Dhiinaha) qiimaheedu wuxuu ahaa 63,952 bilyan US.$. Waxaa xusid mudan, Soomaaliya tan iyo madaxbannaanideedii (1960-kii) ma jirin dowlad ku hambaastay siyaasadda ah in ay badeecaddeeda ay kula loolanto seyladaha dunida. Muuska oo keliya ayaa wuxuu gaaray dowladaha Khaliijka Carabta, bilowgii 1970-aadkii.

Markaas oo ay inta shidaal heleen ay u baahdeen khudaar ay soo iibsadaan. Markaasna ma jirin cid suuqaas Soomaalida kula tartamaysay.

# Casharkii 14-aad

Sida aanu soo sheegney, waddanka Ruushka ayaa kamid ah dalalka uu gaaray cudurka Hollandeeska oo tusaalaha u noqday waddadii looga badbaadi lahaa dhaawacyadiisa. Waxaa xusid mudan, qarnigii tegey muddadii uu socday dagaalkii qaboobaa, Ruushku wuxuu ka talinayay qayb wayn oo dunida kamid ah. Loolanka uu kula jiray xoogagga reer galbeedka, ayaa waxaa kaga bixi jiray kharaj badan. Laakiin markii uu loolankii tooska ahaa uu ka baxay, hanti iyo xoog badan oo u baaqday ayuu ku wajahay in uu kula soo baxo khayraadkiisa. Markaas ayuu ku guuleystey in uu kamid noqdo dowladaha hor-moodka ka ah seyladaha lagu kala iibsado khayraadka dabiiciga ah.

Laga soo bilaabo sanadkii 1999-kii ilaa xilligii ay dunida ka dhacday xiisadda dhaqaale ee ahayd 2008-dii, xaaladda dhaqaale ee waddanka

Ruushka waxay ahayd mid soo-jiidasho leh. Cel-celiska kobaca dakhliga dalka wuxuu ahaa mid sanad walba kordhayay qiyaastii 7 % oo faa'iido ah. Arintaasi waxay kobcisay hor u-markii nolosha dadka Ruushka ah. Waxaa kordhay tiradii shaqaalaha, waxaa furmay shaqooyin cusub. Arintaasi waxay salka ku haysay ka faa'iideysiga khayraadka dabiiciga ah. Maanta, waddanku wuxuu ka mid yahay kuwa ugu waaweyn soo-saarka kheyraadka dabiiciga.

Waxaa dalkan lagu tiriyaa inuu heysto keydka gaaska dabiiciga ah ee ugu weyn iyo soo-saariddiisa. Wuxuu heystaa keydka dhuxul-dhagaxa ee labaad ee dunida. Isla-markaas wuxuu kamid yahay toddobada dal ee ugu xooggan keydka batroolka ee dhulkooda ku jira. Sannadkii 2005-tii, Ruushka wuxuu ahaa soo-saaraha ugu weyn adduunka iyo iib-geeyaha gaaska dabiiciga ah. Wuxuu kaloo ahaa soo-saaraha labaad ee ugu weyn iyo iib-geeyaha

saliidda cayriin ee batroolka laga sifeeyo. Sanadkii 1999-kii dhaqaalaha Ruushka waxaa si xooggan uga qayb-qaatay kororka soo-saarka shidaalka. Badeecadda saliidda ceyriin iyo gaaska ayaa wadar-ahaan waxay ka ahaayeen dakhligii dowladda qiyaas 60 %. Taasi waxay u dhigantaa 25 % wax soo-saarkii guud ee waddanka.

Waddamada ku hor-maray il-baxnimada casriga oo dhaqaalaha culus yeeshey, waaya-aragnimada laga dhaxlay hannaankooda dhaqaale waxaa kamid ah caqabadaha ku soo kordha noloshooda marka ay helaan khayraadka dabiiciga oo aanan shaqada uga baahnayn. Fikradda ah in ay jiri karto cudur la socda hantidan badan oo bilaashka lagu heley iyo qul-qulka lacagaheeda, ayaa waxay tahay suuragalka kobocxumida ku lammaanan ee nabarradeedu uu ka qarsoon-yahay siyaasiyiinta. Dhaqaal-yahannada waawayn ee

dunida, waxay fahmeen dhawacaas in uu yahay mid la socda dabeecadda ay leeyihiin dabaylaha barwaaqo-sooranka deg-degta badan. Is-beddelka ay dabaylahaasi wataan, ayaa waxay tahay in lagu fashilmo cadaaladdii wax soo-saarka iyo cadaaladdii wax qaybinta.

Dhaqaal-yhannada adduunka, haddii ay yihiin kuwo si gaar ah u matalaya dowladdooda iyo haddii ay yihiin kuwo si guud matalaya caalamka, waxay ku howlan yihiin in ay xasiliyaan hannaanka dhaqaalaha. Waxay qaataan sahamo ay waajibaadkoodu yihiin in ay bidhaamiyaan cudurrada dhalinayay khal-khalka nadaamka dhaqaalaha. Cilmi-baarayaal dhaqaale oo u dhashay dalka Ruushka ayaa waxay raad-raac ku hayeen dhaqaalaha dalkaas tan iyo markii ay la soo baxeen khayraadka dabiiciga ah. Khuburadaas muddada ay sahanka ahaayeen waxay ahayd 1997-kii illaa 2007-dii.

Ugu danbayn, sanadkaas danbe ayaa waxay soo bandhigeen in cilladihii cudurka uu ku bilowday. Laakiin waxaa jirtay in wax soo-saarka dalkuna uu kor u socday, taas oo la oran-karay waa muuqaal ka soo horjeeda aragtida cudurka Hollandeeska.

Haddaba, in-kasta oo xilligaas ay muuqdeen astaamihii cudurka, misana kobaca xoogan ee wax soosaarka warshadaha Ruushka waxaa lagu fasiray in ay sabab u ahayd qodobo dhowr ah. Waxaa kamid ah geeddi-socod cusub oo Ruushku uu kaga soo kabanayay dib u-dhicii ku yimid wax soo-saarkiisa sanadihii 1990-aadkii, kadib markii uu nadaamkii hanti-wadaagga ahaa isu-beddeley hanti-goosi. Markaas ayaa wax soo-saarkii wershadaha ay si deg-deg badan u kobceen, in-kasta oo shaqaalihii ay is-dhimeen.

Qodob kale wuxuu yahay badeecadaha Ruushka oo aanan horey u oollin seyladaha caalamka,

sidaa darteed ma-jirin cid horey u tiqiin oo tartan kula jiray. Arintaasi waxay sababtay, badeecadda uu Ruushku u dhoofinayo dibadda in ay si xooggan u kororto. Laba meelba Ruushku wuxuu ka heley fursad ganacsi, waxay kala ahaayeen seyladaha Yurub oo uu ku cusbaa iyo seyladaha dowladihii ay isla ahaayeen Midowga Soofyeeti, kuwaas oo aanan ahayn kuwo wershado leh. Si gaar ah seyladaha waddamadan danbe ayaa waxay ahaayeen kuwo xilligaas aanan lagula tartami karin Ruushka. Waxaa intaas weheliya, seyladihii Shiinaha oo dalabkooda badeecadda Ruushku uu kordhay.

# Casharkii 16-aad

Dhallinyaro, isla-sanadkii 2005-tii, oo hay'adda S&P ay soo bandhigtay natiijada sahankeedii ee digniinta ahayd, waxaa dhacday in bangiga adduunka (World Bank) uu isna faafiyay xog la xiriirta cayilka ku yimid lacagtii Ruushka (Ruble) iyo hakadka uu u geystey wax soo-saarkii kale. Arinkaas ayay ku sheegeen in ay ka soo gudubtay heerkii caadiga ahaa.

Haddeerse ay soo gaadhay in ay ka muuqdaan astaamaha la jaanqaada cudurka hollandeeska. Hay'ad kale oo la yiraahdo LATSIS oo laga leeyahay dalka Swiss (Switzerlnd) ayaa iyana ku soo biirtay sahankii lagu hayay caafimaadka dhaqaalaha Ruushka. Sanadkii 2005-tii ayaa hay'addu waxay iyana istaagtay meel ka shisheysa natiijooyinkii ka horeeyey ee laga soo-saaray sahamadii kala duwanaa.

Iyadu waxay sheegtey in dhaqaalaha Ruushku uu goor hore noqday mid ay ka muuqato dhamaan cilladihii uu lahaa cudurka Hollandeeska.

Xilliga ay sahamadaasi dhacayaan, dakhliga dowladda Ruushka weli kor ayuu u socday. Dabaylahaas soo gelinayay dakhliga badan ee dalka ku soo qul-qulayay waxaa u sabab ahaa dhoofinta badan ee (Petrodollarka). Waxaa kale oo jiray in dowladaha reer galbeedka oo ku dhaqmayay hannaanka dhaqaale ee hanti-goosiga in nadaamkoodii uu ku yimid khalal xooggan. Sidaa darteed dabaylo xasillooni-darri ah ayaa dunida ka taagnaa, kuwaas oo ka imanayay galbeedka. Arin mucjiso ah ayaa waxay tahay dhaqaalaha ku dhisan hannaanka hanti-wadaagga ah oo uu Ruushku horseedka ka ahaa, in uu dunida ka shaqeynayay muddo 70 sano ah.

Laga soo bilaabo dabayaaqadii 1917-kii markii kacdoonkii bolshevigga ahaa ay qaysarkiii Ruushka kala wareegeen hoggaankii dalka. Nadaamkaas wuxuu soo af-jarmay 1989-kii, markii uu hoggaamiyihii ahaa Mekhail Gorbachev uu ku dhawaaqay barnaamijkiisii siyaasadeed oo la magac-baxay Brestroyka, taas oo macnaheedu ahaa dib u-dhis.

Nadaamka dhaqaale ee hanti-goosiga casriga ah ayaa isna wuxuu ku cimriyay dhulka oogadiisa muddo 70 sano ku dhow, taas oo lamid ah muddada uu cimriyay nadaamkii hanti-wadaagga ahaa. Nadaamkan hanti-goosiga ayaa isna waxaa hir-gelintiisa ay bilaabatay muddadii u dhexeysey labadii dagaal-weyne ee dunida ka dhacay qarnigii la soo dhaafay.

Dowladihii xulufada ahaa ayaa horseedayaal ka noqday, iyaga oo goor danbe dhisay hay'adda lacagta dunida IMF iyo bangiga adduunka. Sanadkii 2008-dii, ayaa mixnaddii ugu cuslayd ay ku timid nadaamka hanti-goosiga caalamiga ah, markaas oo dhibaatadu ay ka soo bilaabatay dalka Mareekanka. Dabadeed waxay u soo gudubtay waddamo Yurub iyo Aasiya ah. Goor danbe waxay soo gaadhay waddamada Khaliijka Carabta iyo dowladaha soo koraya.

Dhaawaca xooggan ee soo gaaray shirkadihii waawaynaa ee laf-dhabarta u ahaa hannaanka hanti-goosiga ah, tan iyo maanta waa ay ka soo kaban la'-yihiin.

Markaad eegto hannaanka dhaqaale ee islaamka, waa aqoon cusub oo lagu baraarugay 30-kii sano ee ugu danbeeyey. Markii ay diinta Islaamku soo if-baxday oo nadaamkii Madiina ka dhismay uu curtay, 70 sano dabadeed

hannaankii dhaqaalaha ee Islaamka wuxuu marayay heerkii ugu sareeyey. Waxaa markaas xilka khilaafada islaamka qabtay amiir la oranjiray Cumar ibnu Cabdicasiis.

Muddo ku dhow 800 oo sano oo wakhtigaas ka danbeysey, hannaankan wuxuu ka shaqaynayay imaaradihii Islaamka ahaa ee daafaha dunida ka curtay. Meesha hannaanka labada nadaam ee hore 70 sano loogu tegey ceebtooda, hannaanka nadaamka islaamiga ah, 70 sano dabadeed ayuu si buuxda ugu caga-dhigtay dhulka oogadiisa.

Dhaqaalaha Ruushka markii uu ka soo gudbey hannaankii hanti-wadaagga, ayaa wuxuu isubeddeley mid ku shaqeeya hannaankii hantigoosiga. Waxay ahayd xilli uu hannaankan marayay marxalad adag.

Xaaladda uu dhaqaalaha dunidu ku sugnaa waxay ahayd mid raad ku lahayd wal-walka ay

culimada Ruushku qabeen. Siyaasaddii dhaqaalaha ee Ruushka waxaa la geliyay dood badan. Iyada oo ay soo korortay cabsida dhaqaal-yahannada Ruushka ay ka qabaan cudurkii, ayaa waxaa si muuqda u soo banbaxay xanuunkiisii.

Muddadii ahayd labada sano (2006 - 2007), dalka Ruushka waxaa ka dhacay in uu sicir-barar xooggan ku yimaado qaar kamid ah badeecadihii ay dadku iibsanayeen. Raashinka ayaa wuxuu ahaa midka ugu milgaha cuslaa oo mar-qura cusleeyey noloshii dadka. Labadaas sano gudahooda waxaa dhacday, iyada oo guud ahaan iibsashada badeecadda raashinka uu seyladaha kaga qiimeysnaa 8,7 %, marka loo eego badeecadaha kale. Muddo sanad gudaheed ah, qiimihii raashinka wuxuu gaaray 15,6 %, taas oo u dhiganta laba-jibbaar. In-kasta oo ganacsiga badeecadda aanan raashinka ahayn (guryaha, caafimaadka, gaadiidka iyo kk)

ay ahaayeen kuwo sicir-bararkoodu uu ka fududaa, misana ahmiyadda uu raashinku leeyahay ayaa ka dhigtay in si adag loo dareemo culeyska.

# Casharkii 17-aad

Dhallinyaro, diraasaad kala duwan iyo sahamo badan oo lagu daba-galay hannaanka siyaasadeed ee waddanka Ruushka, dhaqaal-yahannadii waawaynaa ee dalka u dhashay waxay ku qanceen in ay xaqiiq tahay in cudurkii uu soo gaaray dhaqaalahoodii. Dhaqaal-yahannada waxaa u muuqday, koboca dhaqaalaha Russia ee mustaqbalka dheer in uu yahay mid ku xiran curinta siyaasadda lacageed iyo siyaasadda dhaqaale oo ay kaga hor-tegayaan caqabadaha cudurka. Waxay ku tala bixiyeen, dowladda Ruushku in ay yarayso ku tiirsanaanta khayraadka dabiiciga ah, isla-markaas ay midabyo kala duwan u yeesho wax soo-saarka dalkeeda. Culimadu waxay tilmaameen, mustaqbalka dalku in uu yahay mid ku xiran hadba sida ay dowladdu u maareyso khayraadkeeda dabiiciga ah.

Haddii saadaalin nooc kasta ah la sameeyay oo ku saabsan kororka dhaqaalaha Ruushka ee mustaqbalka fog iyo in uu ka badbaado cudurka, waxaa muhim noqotay in la garowsado doorka ay masuuliyiinta Ruushku ka ciyaaraan maareynta kheyraadka dabiiciga ah. Waxaa arintaas xoojiyay aqoon-yahannadii shisheeyaha ahaa oo ka qayb-qaatay sahanka dhaqaalaha Ruushka. Markii uu cudurkii caddaaday, siyaasiyiintii iyo culimadii dalka iyaga oo mideysan waxay ku dhaqaaqeen istraateejiyaddii ay kula dagaalami-lahaayeen cudurka. Iyaga oo ka faa'iideysanaya khibradaha dowladihii uu cudurku ku dhacay, waxay howsha ka bilaabeen in ay la dagaalamaan kor u-kaca lacagtoodii Ruble-ka ahayd.

Waxaa xusid mudan waddanka aanu ka hadlayno in uu ka duwan yahay kuwii hore oo aanu tusaalaha u soo qaadanay. Waddanku waa dalka dunida ugu dhul wayn, kaas oo bedkiisu uu

le'eg-yahay 17,125,200 km2. Wuxuu xuduud la leeyahay 16 dal oo saddex qaaradood ku kala dhaqan (Yurub, Aasiya iyo Amerika). Tirada dadkiisu waxay ku dhow-yihiin 150 melyan. Khalalka dhaqaale ee ku yimid dalka baaxaddaas leh waa mid ka duwan dhaawaca dalalka yar-yar. Laakiin sida suubanihii Maxamed ahaa (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) uu inoo sheegey, cudur-walba wuxuu leeyahay daawo. Laakiin dadka ayaanan aqoon u lahayn. Waa arin looga mahadceliyo hoggaanka dalkan sida ay uga tallaabiyeen dadkooda sanadihii adkaa oo ay ku badbaadiyeen hannaankooda dhaqaale. Siyaasad maaliyadeed oo dhowr ah ayay dowladdu ku dadaashay in ay ku daweyso caafimaad-darrida dhaqaalaheeda heley.

Bangiga Dhexe ee Ruushka ayuu ahaa mu'asasadda ugu wayneed ee dagaalka ku qaaday Rubul-kii isaga oo caafimaad dhaqaale raadinaya. Bangigu wuxuu si rasmi ah u qirtay

tilmaamaha siyaasaddiisa in sanadahsaas iyo howlahoodii uu khalal geliyay qul-qulkii lacagaha. Sidaa darteed bangigu wuxuu ku dadaalay hagaajinta sii wadidda tartanka badeecadaha Ruushka ay kaga jirto seyladaha caalamka, si ayan hoos ugu dhicin.

Vladimir Putin oo ah hoggaamiyaha dalkaas ayaa wuxuu qaatay tallaabooyin la mahadiyay oo ay ugu horeyso in uu musuqa kala diriro hay'adaha maaliyadeed ee dalka. Waxaa jirtay in uu horey u weeraray hantiilayaalkii xaaraan ku-naaxa ahaa ee u dhashay dalka, kuwaas oo uu ka dhigay qaar uu xiro iyo qaar dalka ka baxsaday. Arintaasi oo uu sii xoojiyay ayuu markiisii hore wuxuu ku doonayay in uu xukunkiisa ugu caga-dhigo. Dagaalkii uu ku qaaday cayilka lacagta Rubulka waxaa u weheliyay xoojinta aynida badeecadaha ah oo Ruushku uu u iib-geynayo dunida.

Waxaa la xoojiyay halabuurkii iyo hor u-marintii aqoonta teknolojiyada casriga. Sida jirka caafimaadka qaba uu isaga difaaco cudurrada soo weerara, si lamid ah ayaa dowladaha mu'sasaadku u dhisan yahay ay isaga difaacaan cudurrada siyaasadeed iyo kuwo dhaqaale.

Ruushku wuxuu kamid noqday dowladahaas u xanuunsaday cudurka hollandeeska, dabadeed dadaal isbiirsaday oo ay hor-seedayaan wax-garadkooda iyo hoggaankooda ay kaga badbaadeen dhaawacyadiisii.

24/ 3- 2016-kii, wasiirkii maaliyadda ee Ruushka Anton Sluanov wuxuu ku dhawaaqay bayaan uu ku muujinyo in dhaqaalaha Ruushka uu ka bogsoonayo cudurkii Hollandeeska. Shir-weyne ay qabatay hay'adda lagu magacaabo Xiriirka Wershadaha iyo Ganacsatada Ruushka (Federation of Russian Industrialists and Entrepreneurs), ayuu wuxuu ka sheegey,

wershadaha waawayn ee Ruushka oo aanan ka shaqayn saliidda, in ay ka soo kabteen nabarradii ka soo gaaray cudurka dhaqaale. Isla-markaana ay ka soo gudbeen hoos u dhicii ku yimid markii qiimaha saliidda uu sarreeyay.

Ruushka oo sida aanu soo xusnay ka mid ah dhoofiyayaasha ugu weyn adduunka ee tamarta, wuxuu abuuray shuruudaha dib u soo kabashada warshadihiisa.

Ninka la yiraahdo Arkady Dvorkovich oo ah ra'iisul-wasaare ku-xigeenka ayaa isna wuxuu kulankii ka sheegey in dhaqaalaha Ruushka uu la jaan qaaday xaaladaha soo kordhay oo uu kamid yahay hoos u-dhaca rubulkii Ruushka, taas oo ay saamayn ku yeelatay hoos u-dhaca sicirka saliidda Masuuliinta fadhiga ka soo qayb-gaay waxaa kamid ahaa Alvari Naiolina oo isna ah guddoomiyaha bangiga dhexe ee Ruusiya.

Wuxuu kamid ahaa masuuliinta madashii ka hadlay. Wuxuu sheegey in dhaqaalaha Ruushka uu yahay mid la jaan qaaday xaqiiqada cusub ee dhaqaalaha adduunku marayo, isla-markaas rubulkii Ruushka uu noqday mid la caam yeeley. Dadkii fadhiga ka soo qayb-galay wuxuu si gaar ah ugu baraarujiyay, hoos u-dhaca ku yimid rubulka Ruushka in ay gacan ka geysanayso xoojinta dhinacyadii kale ee xoojinta wax soo-saarka, gaar ahaan beeraha, wershadaha cuntada iyo wershadaha kiimikada.

# Casharkii 18-aad

Dhallinyaro, bartamihii 1970-aadkii cudurkii hollandeeska wuxuu yeeshey weji kale, markaas oo qandhadiisii ay ka soo muuqatay qaar kamid ah wadamada soo koraya ee ku hodmay saliidda ceyriin.

Cudurkii wuxuu xididdo ku yeershey dowladihii dhaqaale-kororkoodu uu ka yimid qul-qulka lacagaha shisheeye. Dabaylaha hodantooyada ayaa kor ula-kacay muwaadiniintii waddamadaas. Waxaa la kacay baahidii ay u qabeen in ay nolosha ku raaxaystaan.

Sida aanu ku soo xusnay cudurka, dadkaasi baahidoodii in ay wax soo dhoofsadaani waa ay korortay, iyaga oo weliba wax-walba wixii uu ka qaalisanaa dibadda ka soo dhoofsanaya. Isla-markaas waxaa hoos u dhacay wixii ay dhoofin jireen. Saliiddii ayaa shiiqisay badeecadihii kale

oo dhan oo dalku soo saari jiray. Cudurkan ayaa sida aanu soo aragnay, haddaanan laga taxadarin wuxuu ummadaha u horseedaa xanuunka lagu magacaabo xanuunkii fadhiidka ee ku laasimanaa dhaqaalaha" Immiserising Economic Growth syndrome".

Taasi waxay sababtaa in uu xumaado siyaasaddii dalka iyo daryeelkii bulshada.

Dowladaha afarta ah (Holland, Australia, Kanada iyo Ruusiya) oo aanu tusaalaha ugu soo qaadanay cilladaha cudurkan, waxaa weheliya dowlado badan oo sidaas si lamid ah uu cudurku ugu dhacay.

Laakiin afartaas ayaanu kaga gaabsanaynaa, waayo guul wanaagsan ayay ka gaareen habkii ay u dhayeen nabarradii uu cudurku lahaa. Waxaa jira dalka Norway oo qudheedu aanu soo xusnay, taas oo iayana tallaabooyin lagu amaano

kaga guuleysatay cudurka. Dalkan ayaanu war-bixintiisa dib u dhiganaynaa, waayo waa dal shirkadihiisa waawayn ay si xooggan ugu laban-yihiin siyaasadaha boobka ah oo lagu doonayo in si fudud lagu bililiqeysto hantida ceyriin ee Soomaalidu leedahay.

Arintaasina waxaa ka markhaati ah warar si-hoose lagu heley oo dhowr cisho horteed lagu soo daabacay khaanadda ay internetka ku leedahay hay'adda la yiraahdo Africaintellegence. Warkaas ayaa wuxuu sheegayaa in sir-doonka Ingiriiska uu u sheegey shirkadaha Norwejiyaanka ah in Soomaaliya ay u daayaan hantidooda.

Haddii aanu faham guud ka helney xanuunkii hollandeeska, haddana si aanu u fahamno khataraha uu xanuunku leeyahay iyo cirib-tirka uu ummadaha gaarsiiyo, aynu marka hore is-weydiino dhaqaale muxuu yahay?

Iyada oo aqoon-yahannadu ay si kala duwan u qeexaan, ayaa misana jawaabahoodu ay macna qura ku gudanayaan.

Dhaqaale waa adeegsi uu taxadar ku jiro lacagta iyo hantida uu qofku haysto ama ummaddu haysato. Qeexid kale, dhaqaale waa habka loo dhaliyo lacagta oo qofka ama umaddu u adeegsadaan.

Qeexid saddexaad waxay tahay, waa wax soo-saar, qaybin, ganacsi iyo adeegsi la gaarsiiyo fagaaraha looga baahan yahay. Mid ay tahayba waxaa hubaal ah in dhaqaaluhu yahay cabbirka lagu ogaado heerka saboolnimada iyo heerka hodannimada.

Dhaqaalaha wuxuu ka dhashaa dhaqdhaqaaq uu dadku sameeyo, wuxuu ku abyoodaa in dadku adeegsado. Sidaa darteed curintiisa iyo

qaybintiisa waxay u baahan tahay siyaasad hagaagsan oo lagu maareeyo.

Sidaa darteed ayaa waxaa la yiraahdaa dhaqaale oo ayan siyaasad la socon maahan dhaqaale, siyaasad oo ayan dhaqaale la socon maahan siyaasad. Dhaqaaluhu wuxuu leeyahay faracyo badan. Labadiisa farac oo ugu wayn waxay yihiin:

1. Dhaqaalaha mugga-wayn (Macro - Economy) oo isagu daneeya howlaha, hab-dhiska, dhaqanka iyo go'aan qaadashada dhaqaalaha guud ahaan heer gobol, heer waddan ama heer caalami ah. Wuxuu xiriir la leeyahay hor u-marinta guud ee bulshada.

2. Dhaqaalaha mugga yar (Micro - Economy) oo iyana ah anshaxa qofka ama shirkadaha ay ku qaataan go’aamada la xiriira qoondeynta kheyraadka yar iyo is-dhex-galka ka dhexeeyo shaqsiyaadkaan iyo shirkadaha.

Labadaas sawir oo uu dhaqaaluhu leeyahay ayay bulsho walba siyaasaddeeda ay salka ku haysaa. Qoyska wax soo-saarkiisa waa qofka u shaqeeya, bangiga wax soo-saarkiisa waa maal-gashiga, beeraha wax soo-saarkooda waa tacabka, shirkadaha wax soo-saarkooda waa farsamada, mu’asasaadkuna wax soo-saarkooda waa adeegga.

Hagaajinta siyaasadda ay howlahaasi ku shaqeeyaan iyo hab-dhiska xiriiradooda tooska ah iyo kuwa aanan tooska ahayn, ayay bulshadu ku baraartaa. Arimaha ay diinta Islaamka

cajiibka ku tahay ayaa waxaa kamid ah in ay hantida dhamaanteed ku sheegtey mid ay leeyihiin dad-waynaha.

Fiisikada laf-dhabarta lagu joogsado oo ah tilmaamaha ugu milgaha culus oo aadamigu kaga duwan yahay xoolaha ayaa quraanku uu kala-mid dhigay dhaqaalaha. Maareynta hagaagsan ee dhaqaalahana waa tilmaanta ugu milgaha culus oo nolosha aadamigu ay kaga duwan tahay nolsoha bahaahimka. Cid walba oo hantidu ay gacanta ugu jirto (qof, shirkad iyo dowlad), hantidu waa wax ay bulshadu leedahay.

Haddii ay hagaajiyaan waa la xoojinayaa, haddii ay xumeeyaanna waa lagala wareegayaa. Suuradda AlNisaa, aayaddeeda 5-aad ayaa inoo sheegeysa arintaas:

ْمُكَل ُهَّللا َلَعَج بِتَّلا ْمُكَلاَوْمَأ َءاَهَفُّسلا اوُتْؤُت الَو)
(اماَيِق

# Casharkii 19-aad

Dhallinyaro, waxaanu wax ka fahamnay xanuunka ku dhaca dhaqaalaha dowladaha ee lagu magacaabo (Dutch Disease).

Sida laga bartay aqoonta caafimaadka, unugyada jirka caafimaadka qaba, waxay leeyihiin hannaan difaac (Immune System) oo u hiilliya. Jirku markii uu arko cadow cayayaan ah oo gudihiisa soo weeraray, doonayana in uu degaan ku samaysto uu ku tarmo, waxaa abuurmaya jareero (Molecules) la dagaalama cayayaanka soo habaabay. Arin yaab leh ayaa waxay tahay, in jareerahan difaaca ah uu kala garanayo unugga cayayaanka cadowga ah ee jirka dhibaya iyo unugyada caadiga ah oo dhismaha jirka kamid-ka ah.

Haddii jareer kamid ah jareeraha difaaca ay khaldanto oo ay isku-deydo in ay unugyadii

caadiga ahaa la dirirto, jareertaas khaldantay waxaa la diriraya oo isugu-tegaya jareerihii kale ee difaaca. Iyagu waxay markaas difaacayaan unugyada caadiga ah.

Dabiicaddaas uu jirka caafimaadka qaba isu-daweeyo, ayaa bulshooyinka caafimaadka qabana ay cudurradooda u daweeyaan, hadday tahay siyaasad iyo hadday tahay dhaqaale iyo hadday tahay dhaqan. Difaaca jirku markii uu yahay mid liita, markaas waxaa dhacaya in cayayaankii ku guuleysto dagaalkii kala dhexeeyey jareerihii difaacayay jirka, dabadeed cudurkii uu noqdo tows (Chronic). Sidaas si lamid ah ayaa cudurka gala dhaqaalaha bulshada, haddii loo waayo istraatejiyaddii lagu daaweyn lahaa wuxuu bulshada ku noqdaa tows iyo bugto xun. Waxaa halkaas ka dhalanaya dhaawaca ay culimada aqoonyahannada ah u bixiyeen nicmadaha lacnadaysan.

Sida aanu soo xusnay, xanuunka iyo nacladaha uu wato waxaa u sabab ah khayraadka dabiiciga ah oo sida fudud ku soo gala dowladaha habaarku ku dhaco. Lacagaha la-midka ah dhibcaha roobka iyo qulqulka deg-degta ah oo ay ku soo gelayaan dalka ayaa waxay la imanayaan inkaar xooggan oo bulshdeeda ay ku hoobato.

Batroolka, gaaska, macdanta iyo dhagxanta qaaliga ah ayaa waxay yihiin hantida nacladaha wata. Inteynaan u gelin qaababka ay nacladuhu ku imanayaan, dhaawaca weheliya iyo sida looga hor-tegi karo, waxaanu isla eegeynaa khayraadkan ay nacladuhu la socdaan. Saliidda ceyriin (batroolka iyo gaaska) oo ah midka ugu milgaha culus ayaa wuxuu yahay jaheeyaha siyaasadda iyo dhaqaalaha caalamka.

Saliiddu waa dareerahaas madow oo cufan. Waa shey si sahlan u guban kara oo ka kooban

canaasir kiimiko ah oo dhowr ah. Wadar ahaan waxaa laysku yiraahdaa (Hydro-carbons). Saliiddaas dabiiciga ah waxay leedahay agacyo dhowr oo ay kamid yihiin batrool, shidaal, saliidda ceyriin iyo dahabka madow.

Waxaa laga helaa oo ay ceegaagtaa lakabyada dusha ah ee alwaaxda dhagaxa ugu sareeya dhulka. Saliiddan ayaa waxay leedahay ahmiyad heer caalami ah, waayo waa tamarta ugu fudud, uguna badan oo loo adeegsado nolosha. Baahida xooggan ee noloshan casriga ah loo qabo saliiddan darteed, sanadkii 2018-kii, aadamigu wwuxuu dhulka oogadiisa ku isticmaalay 7,5 bilyan oo bermiil oo batrool ah. Qofwalba oo idin-kamid ah nasiib ayaa ka-soo gaaray saliiddaas oo waxaa ku dhaqaaqayay gaari aad raacday ama ku shidmayay nal aad ifsatay. Waxaa xusid mudan, wax-kasta oo maanta dunida yaal wuxuu xiriir la leeyahay

dahabkaas madow. Iyada oo batrool ah waxaa loo adeegsadaa bansiin ahaan, waxay noqotaa dharka qaarkood iyo waxyaabo laysku qurxiyo, waxay gashaa raashinka qaarkiis iyo daawooyinka.

Maahan shidaalka keliya nicmadahaas ay dunida casriga ah u baahi-qabto. Waxaa iyana jira macdan qiimo ku leh seyladaha caalamiga, kuwaas oo qudhoodu ay dowladuhu si deg-deg ah ugu hodmaan. 17 cunsur oo kamid ah curiyayaasha kiimikada ee dabiicadda laga helo ayaa waxay leeyihiin qiimo gaar ah. Labada dal ee ugu dhaqaalaha xooggan dunida (Mareekan iyo Shiino), ayaa isku raacdaysanaya koodii badsan lahaa macdantan.

Waxaa xusid mudan, tartankoodaas in uu kamid yahay mowjadaha siyaasadeed ee naqshadaynaya wejiga ay ku fadhido siyaasadda caalamka.

Macdanta laysku raacdaysanayo waxay yihiin Gadolinium, lanthanum, cerium, promium, dysprosium, erbium, europium, holmium, lutetium, neodymium, praseodymium, samarium, scamium, trbium, iyo trbium. Macdantan ayaa ahmiyad gaar ah u leh caafimaadka, teknolojiyada iyo difaaca. Qaar macdantan ah waxay xubno muhiim ah ka yihiin soo-saarista dawooyinka lagu dhayo cudurrada halista ah oo ay kamidka yihiin cudurka kaankarada, xanuunnada xubnaha (lowyaha) iyo khalalka ku yimaada wadnagaraaca.

Waxaa kale oo macdantan ay galaan dhismaha qaar kamid ah agabka qalliinka. Qaar kale oo kamid ah waxay galaan farsamada fiiro-tebiyaha (Telescope) xoogga wayn.

Waxaa kale macdantan ay galaan agabka difaaca ee elektoonikada ku shaqeeya iyo matoorka dayuuradaha, taleefannada jeebka lagu wato,

teknolojiyada tamarta la cusboonaysiiyo, wershadaha lagu sifeeyo batroolka iyo samaynta quraaradaha kala duwan.

Macdanka la yiraahdo neodymium, waxaa loo adeegsadaa soo-saaridda shucaaca casaanka ka hooseeya (Infra-red Radiation), taas oo laga dhaliyo ilayska urursan ee la yiraahdo LASER (Light Amplification by Stimulated Emission of Radiation). Waxaanu ogsoonnahay LASER-ku in uu ku laban yahay qalabka difaaca. Waxaa kale oo macdantan kamid ah kuwo loo adeegsado dhismaha agabka gantaallada dareenka ku shaqeeya, kombyuterrada yar-yar, kaamerooyinka, telefishannada, iyo beteriyada dib loo kiciyo.

# Casharkii 20-aad

Dhallinyaro, adeegsiga macdanta waxay tahay mid barbar-socota hor u-marka aadamigu ka gaaray aqoonta teknolojiyada. Kororka ku yimid wax soo-saarka agabka teknolojiyada iyo farsamadeeda ayaa waxay xoojisay fahmka baahida loo-qabo canaasirtan macdanta ah iyo kaalinta ay ka buuxinayaan dhaqdhaqaaqa nolosha.

Xawaaraha ay ku socoto farsamada adeegsiga macdanta waxaa laga garankaraa, wax soo-saarka agabka teknolojiyada, in sanadkii 2018-kii uu kordhay 68 % markii loo eego sanadkii ka horeeyey. Sida wakaaladda tamarta ee adduunku ay sheegtey, agbkaas laga sameeyey macdantan waxay gaareen 5,12 melyan oo agab.

Wax hal melyan ka-badan oo kamid ah agabkaas waxaa farsamadeeda keli ku-lahaa dalka

Shiinaha. Waxaa halkaas ka muuqda in macdantan ay yihiin khayraadka dabiiciga ah ee ahmiyadda u leh dhaqaalaha dowladaha dalalkooda laga qoto. Laakiin nicmad waliba naqmad ayay leedahay. Degaano badan oo macdanta qiimahaas leh laga gurto, nicmadihii eebe u hibeeyey ayaa naclad ku noqday.

Sababaha ay naqmada u noqonayaan waxaa kamid ah in kheyraadku uu yahay kuwo ay dowladdu leedahay. Taasi macnaheeda wuxuu yahay in ay tahay hanti lahaanshaheeda iyo maareynteeda u dhexeysa dad-waynaha. Dowladduna ay wakiil uga tahay. Waxaa xusid mudan, sida aanu ku arki-doonno qaybaha danbe ee casharradan, dhulka ay ku dhaqan-yihiin bulshada Soomaaliyeed in uu yahay degaan ku hodan ah nicmadahaas aanu soo xusnay. Caqli-xumida iyo caadifadda ay hoggaamada siyaasadeed ku hor-kacayaan

bulshada, maahan mid laga dhaxlay saboolnimada iyo baahida bulshadu ku sugan tahay oo keliya.

Bal cudurkii ay nicmaduhu wateen oo ay nacladuhu ugu wayn yihiin ayay aqoon-xumidooda ka badbaadisay bulshada.

Arinkaasi garashadiisa waxaa na fahamsiinaya dhibaatadii laga fahmay cudurka holladeeska iyo tijaabadii aqooneed ee laga dhaxlay, taas oo noqotay mid ka muuqata waddamada dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dakhligoodu yahay heerka dhexe.

Aadamiga u kuur-gala dhacdooyinka adduunka, waxaa fajiciso ku noqotay sababta ay u silicsan yihiin ummadaha adduunyada saddexaad ee waddamadoodu ay hodanka ku yihiin khayraadka dhaqaale. Wakhti dheer ayay qaadatay in dhaqaal-yahannadu fahmaan

sababta ay la raafdsan yihiin dadyowga eebe ku galladaystay nicmadaha dabiiciga ah. Ummadahaas silicsan, in ay hanaqaadaan waxaa ka hortaagan oo dabar ku ah noloshooda waa xanuunnada iyo inkaarta ay nicmaduhu wataan.

Halkaas ayaa waxaa ka bilowday aragtida garashada nacladaha weheliya nicmadaha. Waxaa markaas bilaabatay in ay muuqato in dhaqaalaha waddamadaas uu noqon-waayo mid ka qayb-qaata hor u-markooda iyo hor umarka dunida kale. Waxay ahayd arin si qun-yar socod ah loo fahmayay in aadamigu ku baraarugo nicmadaha nacladaysan. Aqoon-yahankii ugu horeeyey oo xusa ereyga nicmadaha nacaladaysan (Resources Curse) wuxuu ahaa dhaqaal-yahan u dhashay dalka Ingiriiska. Ninkan oo magaciisa la yiraahdo Richard Auty ayaa wuxuu macallin ka yahay jaamacadda Lancaster University.

Sanadkii 1993-kii ayuu curiyay erey-bixinta ah nicmadaha nacladaysan. Isagu wuxuu markaas fasiray sida aysan awood dhaqaale u lahayn wadamada hodanka ku ah kheyraadka dabiiciga ah. Hor u-mar la'aanta haysata ayuu ku sheegey in ay tahay naclad dhaqaale.

Waddamadaas ayuu ku tilmaamay in ay yihiin kuwo hor u-markooduna uu yahay gaabis, musuqooduna uu yahay mid xooggan. Aqoon-yahankan Ingiriiska ah Richard Auty, wuxuu xusay, sababta keentey awood la'aanta waddamadan ka haysata in hantidooda ay u adeegsadaan si ay u kobciyaan berya-samaadka nolosha bulshadooda.

Waddamadan ayaa kobocooda dhaqaale wuxuu wax-badan ka hooseeyaa waddamo badan oo aanan lahayn khayraadka dabiiciga ah.

Shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee, suubanihii aanu jecleyn wuxuu goor hore inooga tegey ishaaro tilmaamaysa nicmadaha nacladaysan. Isaga oo umaddiisa uga digaya cilladaha la socda barwaaqada nololeed wuxuu yiri, isaga oo weliba dhaaranaya:

(فَوَالله ِما اَلفَقْرَ َأخْشَى َعليكم ْولكنِّي أَخْشَى ْأَنَ ْتُبْسَطَ َعليكمُ ْالدّنْيا)

Tan iyo markii la daah-qaaday aragtida nicmadaha nacladaysan, waxaa u sahan tegey aqoon-yahanno badan si ay u xoojiyaan aragtidan.

Iyagu waxay diraasaad ka sameeyeen dhinacyo badan oo la xiriira nicmadaha ay nacladuhu weheliyaan.

Ololihii sahan-tagga ahaa oo ay culimadu ku qaadeen aragtidan, waxaa laga dhaxlay diraasado qiimi badan oo sharaxaad buuxda ka bixisay nacladda wehelisa nicmooyinka dhaqaale, gaar ahaan khayraadka dabiiciga ah. Waxaa kamid ah natiijo laga heley sahan ay sameeyeen laba dhaqaal-yahan oo u dhashay dalka Mareekanka, kuwaas oo la-kala yiraahdo Jeffrey Sachs iyo Andrew Warner.

Iyagu waxay soo urursheen diraasado qiimi badan oo ay ku soo bandhigeen xiriirka isu-dhiganta iska-soo hor-jeedda ee ka dhexeeya faxnaanta hodantooyada dabiiciga ah iyo koboca dhaqaalaha ee liita. Qoraallada ay arintan ka diyaariyeen waxay ku magacaabeen (Natural Resource Abundance and Economic Growth).

# Casharkii 21-aad

Dhallinyaro, labada dhaqaal-yahan oo kala ah Jeffrey Sachs iyo Andrew Warner waxay reebeen fasiraad badan oo ku saabsan sida, sababta, iyo goorta ay dhici karto in nicmaddu ay nacalad isu-beddesho. Si loo fahmo nacladda, iyagu waxay xuseen wax badan oo is barbar-dhig ah. Waxaa kamid ah tusaale-dhigga ah nacladuhu in ay lamid yihiin dadka ku guuleysta lacag badan oo ay ku heleen cayaaraha khamaarka.

Maadaama lacagahaas ay si sahlan ku soo galeen qofka khamaarka ku guuleysta, waxaa dhibaato ku noqota habkii uu u maareyn lahaa hantida tirada badan oo ku cusub iyo dhibaatooyinka ay kala kulmaan maareynta lacagahaas. Sidaas si lamid ah ayaa waxaa jira dowlado tira-yar oo ku guuleysta in kheyraadkooda dabiiciga ah ay ku dhistaan dhaqaale berya-samaad gaarsiiya bulshadooda. Laakiin inta dowladuhu waa ay ku

fashilmaan, markaas oo nicmaddii ay ku noqota naclad.

Sababtaas ay dhaqaal-yahannadu sheegeen ayaa maanta diraasaad xooggan waxaa ku haya aqoonyahanno badan, kuwaas oo cilmi-baarayaal dhaqaale ka ah jaamicado badan oo dunida ku yaal. Natiijooyinka ay isla-tilmaamaan cilmi-baarayaalku waxay tahay, tilmaamaha uu leeyahay cudurka dhaqaalaha gala iyo siyaabaha looga hortegi karo si uusan ugu gudbin heerka nacladda. Aqoonyahannada ku howlan sahanka nicmadaha nacladaysan, waxay raad-raacaan qaabka loo adeegsado dakhliga ka soo baxa khayraad uu dal leeyahay, hannaanka siyaasadeed oo dowladda dalkaas ay ku dhaqanto, heerka ku-dhaqanka dowlad-wanaagga iyo talo-wadaagga, nadaamka wershadaynta iyo ka fekerka beryasamaadka faca danbe. Arimahaas ayaa waxay xiriir la leeyihiin labada riwaayad middeeda masraxa

nolosha ka muuqanaysa. Ama guul beryasamaad wadata ama guul-darri naclad weheliso oo ummaduhu ay ku kala matalaan nolosha ay ka dhaxleen kheyraadkooda dabiiciga ah.

Waxaa hubaal ah in nolosha saldhiggeedu yahay dhaqaale la curiyo iyo siyaasad lagu maareeyo. Dhaqaale ideylkiis wuxuu ku abyoodaa raashin jidiinka la mariyo. Siyaasad ideylkeed waxay ku abyootaa nabadgelyo lagu hoydo oo lagu soo kaco. Sidaas ayaa laysu raacshaa aqoonta dhaqaalaha iyo aqoonta siyaasadda oo loo yiraahdaa (Political-Economy).

Kitaabka quraanka ah goor hore ayuu ishaarada caynkaas ah u bidhaamiyay aadamiga markii madaxya-waynta qabiiladii Qureysh la barayay eebaha xaqa ah, waxaa loo tilmaamay nicmadda lagu galldaystay labada ugu wayn in ay yihiin

cunnada ay ku helaan bartamaha saxaraha lama-degaanka ah iyo nabadgelyada ay ku haystaan qabaa’ilka bahaahimka la dhaqanka ah ee ku hareereysan. Aayadda 3-aad iyo aayadda 4-aad ee suuradda Qureysh ayaa arintaas tilmaamaya:

(مُهَنَمآَو ٍعوُج نِّم مُهَمَعْطَأ يِذَّلا . ِتْيَبْلا اَذَه ّبَر اوُدُبْعَيْلَف)
(ٍفْوَخ ْنِّم)

Sida lagu bartay taariikhda, wixii colaad ahaa oo aadamiga ku dhex-maray dulka oogadiisa, dhamaantood waxay salka ku hayeen dhaqaale. Colaadihii hore ee laysku gumaysanayay iyo kuwan casriga ah waxaa u asaas ah xakamaynta ilaha hantida dabiiciga ah. Haddaba markii aanu muuqaal wayn ku eegno dunida, arimaha inoo muuqanaya kuwooda ugu milgaha culus waxaa kamid ah raadadka dhaqaale oo ay reebayeen xoogagga waawayn ee dhulka ku loolamayay.

Waxaa hubaal ah, hardanka xoogaggaas ku dhex-maray dunida guudkeeda in uu galaaftay aadami badan, kuwo kalena ay ku waayayaan xasillooni ay ku noolaadaan.

Haddii dhacdooyinka caalamka aanu gadaal ula laabanno, innaga oo ka bilaabayna xasillooni darrida maanta dunida ka taagan iyo si gaar ah midda Soomaaliya haysata. Waxaanu arkaynaa sawirka uu leeyahay dhaawacii xoogganaa ee qaraxii Abriishii Madoobeyd (The Black April).

Dhacdadan ayaa waxay tahay middii ka dhacday is-goyska Soobe ee magaalada Muqdisho (14/ 10- 2017), taas oo astaan culus u noqotay hoogga iyo ba'a ka haysta nolosha bulsho-waynta Soomaaliyeed. Qaraxaas ayaa wuxuu ahaa, taariikhda qaaradda Afrika qarax goob ka dhaca midkii ugu cuslaa. Heer caalami ahna wuxuu labeeyaa midkii lala beegsaay daarihii mataanaha ahaa ee Mareekanka (11/ 9- 2001).

Qaraxa abriishii madoobayd, judhii horeba wuxuu dilay tiro dad ah oo ka badan 500 oo qof. Tiro intaas ku dhown ayay xilliyo danbe si qunyar ah u dhinteen dhaawacyadii ka-soo gaaray. Arintaasi maahayn wax si kedis ah isaga-dhacay ee waa arin ku abyoonaysa hardanka dhaqaale ee maanta dunida ka jira. Soomaaliduna ay u noqdeen bulsho nugul oo u baylah ah.

Falalka caynkaas ah, waa kuwo ku mataanaysan oo ay isku il ka soo burqanayaan colaadda lagu hoogay ee ka socota dalka Yemen, taas oo aanan loo heleyn sabab lagu fasiro. Waxaa ka horeeyey dagaalkii ISIS iyo maaleeshiyaadka shiicada ah ku dhex-maray dalka Ciraaq iyo fool-xumadii taariikhda gashay ee halkaas ka dhacday. Waxaa ka horeeyey falalkii dowladda Suuriya iyo xulufadeeda ay barmiillada qaraxyada ah ku qubayeen degmooyin lagu dhaqan yahay iyo dhallaankii lala qaxay oo meydadkooda ay badda soo tufaysay. Waxaa ka horeeyey

Ruushka oo gobolka Kriimiya xoog uga qabsaday Ukrain dunidiina ay isaga-aamustay. Waxaa ka horeeyey dagaalkii waynaa ee lagu qaaday Saddaam Xuseen iyo halaaggii reer Ciraaq ka qabsaday. Waxaa ka horeeyey weeraradii dhaqdhaqaaqa Al-Qaacida uu ka gaystay daafaha dunida oo ay ugu wayneed dhacdadii 11-kii sebtember. Waxaa ka horeeyey dagaalkii Koongo oo ay ku dhinteen dad ka badan 5,400,000 oo qof.

# Casharkii 22-aad

Dhallinyaro, dhacdooynkaas aanu soo xusnay waxaa ka horeeyey dagaalkii sokeeye oo ka dhacay Ruwaanda, kaas oo isaguna lagu laayay dad tiradooda lagu qiyaasay 1,500,000 oo qof. Labada reer oo dagaalku dhex-maray (Hutu iyo Tutsi) ayaa dadkaas iska-laayay.

Waxaa ka horeeyey bur-burkii ku dhacay Soomaaliya iyo bilowgii dagaalkii micna-darrida ahaa oo ay dagaal-oogayaalku hor-boodayeen, kaas oo dadka ku dhintay lagu qiyaasay 250,000 oo qof.

Waxaa ka horeeyey dagaalkii waynaa ee Ruushku uu ku soo duulay Afgaanistaan kaas oo dadkii uga dhintay labadii dhinac ee dagaalamayay ay ka badan yihiin 100,000 oo qof. Waxaa ka horeeyey qaraxyo dowladda Iiran

iyo dowladda Liibiya ay xilliyo kala duwan ka gaysteen qaaradda Yurub.

Waxaa ka horeeyey dagaalkii waynaa oo Ciraaq iyo Iiraan (1980 - 1888), kaas oo wadar labada dhinac ay ku dhinteen dad ka badan 1,000,000 oo qof. Waxaa ka horeeyey dagaalladii dhex-maray jabhadaha afrikaanka ah iyo dowladihii caddaanka tirada yar ay u talinayeen ee qaaradda madow koonfurteeda ka dhisnaa.

Sil-siladda taariikhda xasillooni-darrida dunida markaanu gooreysada dib ula raacno, waxay nala dhaafaysaa labadii dagaal-wayne ee dunida ka dhacay ee qarnigii 20-aad oo ay ku dhinteen dad ka badan 100 melyan oo qof. Gooreysadu waa nala sii fogaanaysaa oo waxay nala aadaysaa qarniyadii ka horeeyey iyo taariikho sii fogaanaya, kuwaas oo iyagana fool-xumidooda wata. Colaadaha dunida ka huray nuskii danbe ee qarnigii tegey iyo qarnigan 21-aad, in-kasta

oo sababtu ay ka mideysan yihiin misana waxay ku kala duwan yihiin goobaha ay ka dhacayeen iyo hubka laysu adeegsanayay.

Sida aanu soo xusnay colaad walba sababta curisa waxay tahay dhaqaale. Badeecadda maanta ugu qiimiga badan oo dowladuhu ku loolamayaan waa shidaal iyo macdan. Hubka laysku laynayo waa siyaasad iyo fikrado.

Mashruuca colaadaha ee xilligan casriga ah ka socda dunida, isaga oo kale dunida horey uma soo marin.

Haddii dhinac laga eego, colaadahan waxay sabab u noqdeen in aadamigu uu gaaro il-baxnimo xooggan. Waxaa halkaas ka dhashay, in aadamigu uu u kordho fahamkii nolosha, isla-markaas iyaga oo kaashanaya fahamkaas in ay hor u-mar mucjiso ah ku tallaabsadaan. In-

badan oo kamid ah hor u-marka farsamada teknolojiyada ee goorahan danbe la heley iyo wershadaha dhisa wax soo-saarka mugga wayn waxay yihiin kuwo xiriir la leh awoodda loo yeeshey ka-faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ee aan xaddidnayn.

Hantidaas xooggan ee dabiiciga ah xooggooda waxaa laga helaa waddamada soo koraya. Misana waxaa muuqata waddamadaas hodanka ku ah hantida ma-guurtada ah in ay heerka ugu hooseeya ka joogaan jaan-tuska lagu cabbiro baraaraha bulshada adduunka.

Markii la raad-raaco dhacdooyinka colaadaha casriga ah, waxaa muuqanaya hoogga iyo ba'a uu aadamigu isku-sameeyey. Tirada badan oo dadka ah oo ku dhintey dhibaatooyinkaas maahan kuwo la koobi karo. Waxaa arin cajiib ah in muuqaallada ay bixinayeen dhacdooyinku in ay kala duwan yihiin, laakiin sababahoodu waa

mid qura. Waxay tahay, dagaal walba lacag ayaa lagu raadinayay.

Cid-walba oo raad ku leh colaadihii dhacay iyo kuwa hadda dhacaya, waxay raadinaysaa lacag. Ciidamada tirada badan ee layska hor-keenayo, hubka iyo gantaallada laysla dhacayo, dicaayadaha dagaalka oo war-baahinta laysu marinayo, waxaa lagu doonayaa waa lacag.

Lacagahaas ay dadka iyo dowladuhu raadinayaan waxay sitaan cudur ay bulshadu la bukooto iyo naclad ay bulshadu la tir-tiranto. Waxaa jirta aragti ay ku shaqeeyaan bahda caafimaadka oo waxay tahay, ka hor-tagga ayaa ka wanaagsan ka daba-tagga.

Macnaheedu waxay tahay xubnaha jirka inta ay caafimaadka qabaan in la dhowro ayaa ka

wanaagsan, ka haboon kana fudud in la daaweeyo goortii ay xubnuhu jirradaan.

Dhaqaalaha dowladuhuna waa caynkaas oo kale, waxay ku haboon tahay inta uu caafimaadka qabo in lagu dadaalo sidii looga hor-tegi lahaa cudurrada fudud, kuwaas oo qudhoodu markii ay ku dhacaan haddaanan lala tacaalin ay noqonayaan krooniko loo dhinto. Sidaas si lamid ah ayaa nolosha bulshaduna ay u baahan tahay, gaar ahaan hannaankeeda dhaqaale oo ah xoogga ay ummaduhu ku hana-qaadaan.

Bulsho walba waxaa u takhaatiir ah siyaasiyiinta, gaar ahaan kuwa markaas xilka u haya. Sida uu xilkoodu u kala culus yahay ayaa masuuliyadda saaranna ay u kala culus tahay.

Sida cudur walba oo jira markii wax laga qaban waayo uu ugu xumaado qofkii uu hayay, ayaa

cudurka dhaqaalaha galana markii wax laga qaban waayo uu u noqdaa naclad baabi'isa bulshada. Wax-badan oo daaweynta bulshada ah waxay ku xiran yihiin inta uu takhtarka (siyaasiga) ka fahamsan yahay hantida cusubi in ay tahay tahay mid ku meel gaar ah oo eeyan joogto ahayn.

# Casharkii 23-aad

Dhallinyyaro, waxaa la ogsoon-yahay faxnaanta hantida dabiiciga ah in ay keento hodantooyo xooggan oo aanan caadi ahayn. Isla-markaas waxay leedahay naclado xaalufin ah oo hor-joogsada hor u-marka iyo barwaaqo-sooranka bulshada. Dhaawaca ay gaystaan nicmadaha nacladysan maahan mid ku eg waddamada khayraadka dhoofsada oo keliya.

Bal waxay saamayn ku leedahay waddamada loo dhoofiyo. Bal, dhaawacu wuxuu gaaraa ummado ka baxsan labada reerood (dhoofiye & dhoofsade) ee ka macaashaya dheefta nicmadahan.

Waddamada xeebaha ku leh badaha waawayn oo ay ku gooshaan maraakiibta lagu gaadiido nicmadaha nacladaysan iyo dowladaha ay sii-maraan dhuumaha lagu socodsiiyo shidaalka

laga ganacsanayo, qudhoodu nacladda waa ay gaareysaa.

Halaagga aadamiga ku haysata dhulka oogadiisa xilligan casriga ah waa kuwo u gaar ah waddamadaas aanu soo xusnay. Waxaa la ogsoon yahay wddamada hor u-maray in ay iibsadaan shidaalka, macdanta iyo dhagxanta qaaliga ah. Kheyraadkaas ayaa waddamada soo koraya waxay uga beddeshaan lacago badan iyo hub, kuwaas oo sabab u noqda colaad sokeeye oo leysku gumaado.

Markaas ayaa ummadahaas maamullada liita ay u dhisan yihiin waxay cagaha la galaan sil-silado nacladaysan oo dadkoodu ay ku gubtaan. Culimada dhaqaal-yahannada ee indha-indheeya xaaladaha dhaqaale dunidan aynu maanta joogno waxay isku-howlaan in ay dunida u helaan deggenaansho dhaqaale oo xasilloon

iyo in ay dhisaan hannaan hab dhaqaale oo si is daba-joog ah u guuleysta.

Aqoon-yahannadaasi ayaa iyaga oo anan la dooran waxay kamid yihiin dadka siyaasadda adduunka wax ka naqshadeeya. Aragtida ay ku howlan yihiin ee ah in dunida loo helo dhaqaale xasilloon oo horey u socda waa mid og-yihiin in ay noloshu khasbayo, waayo tirada dadku waa kordheysaa, baahiyahooduna waa kordhayaan. Iyada oo arinkaas laga duulayo, aqoon-yahannadu waxay sheegaan, haddii waddan uu doonayo in uu helo xasillooni dhaqaale middeeda ugu habboon, waa in waddanku uu guddoonsadaa go’aamo aan waxyeelo u geysan dalkiisa (dowladdiisa iyo dad-waynihiisa). Arinkaas maahan mid waddanka keliya u maslaxad ah, ee waa mid gebi ahaan dunida u maslaxad ah. Nasiib darro waxaa ah, qaar ka mid

ah go’aamada ay gaarayaan hor-joogayaasha waddamada in ay leeyihiin fal-celis cawaaqib xumo ku keenaya dalkii iyo dadkiisii, isla-markaas dhibaateynaya ummadihii kale.

Aqoon-yahanno badan oo indha-indheeya dhaqaalaha dunida, waxay cimilada aadamiga u arkaan hal xubin oo is-haysata, taas oo aanan kala googo’i karin. Muuqaalka caynkaas ah ayay ka dhalatay aragtida lagu magacaabo nimmadda nacladaysan. Fikradohooda maaham mid ay ku badbaadinayaan nolosha ummadahan dhibaataysan oo keliya. Bal nolosha ummadahooda barwaaqaysan ayay qudheeda ku badbaadinayaan. Ereyga ah nicmadaha naclaydsan wuxuu kamid yahay fikradaha cusub ee saamaynta badan ku leh doodaha hor u-marka bulshooyinka iyo siyaasadahooda dhaqaale. Sida aanu soo xusnay waa aragti

dhowaan fahamkeeda la heley, taas oo burineysa faham horey loo heystey. Aragtidan cusub waxay matashaa fikradda wayn ee ka dambaysa inkaarta wehelisa nicmadaha dabiiciga ah ee dhulka laga helo. Waxaa la hubaa qofka ay dhaqaalihiisu si togan (Positive) isu beddelaan in uu u gudbayo nolol hodan ah oo isaga iyo qoyskiisaba ay beryasamaad ku noolaanayaan. Sidaas si lamid ah ayaa waxaa fahamku wuxuu yahay bulshadii hesha dhaqaale badan in iyaduna ay nolosheeda isu-beddeleyso dhanka hor u-marka iyo barwaaqo-sooranka.

Aragtida ah nicmadaha nacladaysan waxay inoo tilmaamaysaa in mar-walba uusan xaalku sidaas ahayn oo qaacidada laga-haystay fahamkaasi uu ahaa mid khaldan. Khayraadka dabiiciga ah oo ay ugu waynyihiin shidaalka iyo macdanta ayaa waxay halis ku yihiin caafimaadka siyaasadda waddamada. Dowladaha ay khayraadkan ku badan yihiin waxaa laga fishaa in ay hor u-mar

deg-deg badan gaaraan, dadkooduna u horseedaan nolol wanaagsan. Laakiin inta-badan waxaa dhacda mid aanan middaas ahayn oo nicmadahan ayaa waxay horseedaan in ay soo saaraan natiijooyin koboc xumi ah. Marka laga hadlayo taariikhda aqooneed, aragtidan taban (negative) ee khayraadka macdanta iyo shidaalka waxay ka hor imaanaysaa fikradihii hore ee laga-qabay mowduucan. Aqoon-yahanno badan oo arintan falanqeeyay ayaa waxay soo jeediyeen faham muujinaya, haddii aanan laga digtoonaan sida ay isugu xiran yihiin khayraadka dabiiciga ah oo badan iyo hoos u-dhaca koboca nolosha aadamiga in markaas nicmadihii ay isu-beddelayaan kuwo nacladaysan.

Khayraadkaas la heley ayaa waxay albaabada u furayaan musuq iyo laaluush. Waxaa jira ooraah uu suubanihii Maxamed ahaa (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) nagu

tusaaleynayo weji kamid ah wejiyada ay noloshu leedahay. Wejigaasi wuxuu yahay xiriirka ay leeyihiin laaluushka iyo nacladda. Isaga oo ku dadaalaya in uu naga fogeeyo ayuu qaab habaar ah u sheegey oo yiri: nacladi ha-ku dhacdo laaluush bixiye, laaluush qaate iyo midka dhexdooda ka dallaala.

(َشِئاَّرلاَو َيِشَتْرُمْلاَو َيِشاَّرلا ُهَّللا َنَعَل)

# Casharkii 24-aad

Dhallinyaro, nicmadaha nacladaysan waxaa kale oo la yiraahdaa is-diidka hodantooyada (Paradox of Planty). Waa sawir kamid ah muuqaallada nolosha dhaqaale (phenomenon of economic life) ee aadamiga. Waa mid ka mid ah fikradaha saamaynta badan ku leh hadal-haynta hor u-marka bulshada casriga ah. Waa qodob milga culus oo kamid ah siyaasadaha dhaqaale ee dhowaan soo if-baxay. Fikradda wayn oo aragtidan ay bidhaaminayso waxay tahay, dhaqanka isu-dhiganta is-dhaafka ah ee saboolnimada iyo dib u-dhaca baday ummadaha khayraadka badan haysta. Hantida tirada badan oo dadkaasi ay haystaan ayaa waxay horseedey natiijooyin koboc xumi ah, oo ay ka mid yihiin wax-qabadka oo liita, koboca dhaqaalaha oo hooseeya, heerka musuqmaasuqa oo sarreeya, maamul xumida iyo rabshadaha siyaasadeed oo

ku sii weynaanaya. Kheyraadka dabiiciga ah oo lagu kala hodansan-yahay, ayaa waddamadii qaarkood waxay ka dhaxleen habaar iyo inkaar u diiday hor u-markii.

Erey-bixintan nicmadaha nacladaysan waxay tilmaamaysaa nicmadihii iyo dib u-dhicii oo si is-waydaar ah u kobcaya. Nicmaduhuna dhankooda ayay ka cayilayaan, bur-burkuna dhankiisa ayuu ka xoogeysanayaa. Sawirka caynkaas ah wuxuu ka muuqdaa inta badan ummadaha hodanka ku ah kheyraadka dabiiciga ah, isla-markaas ka arradan nolosha, hor u-marka iyo dowlad-wanaagga. Dowladaha laga hadlayo waa kuwa ku hodmay kheyraadka dabiiciga ah, gaar ahaan batroolka, gaaska, macdanta iyo dhagxanta qaaliga ah. Waddamadaas ayaa intooda badan waxay wax badan ka hooseeyaan waddamo aanan lahayn hantidaas dabiiciga ah. Faham laga heley farqigaas guracan oo aanan horey loogu

baraarugsanayn, ayaa wuxuu sababay, dhaqaal-yahannada casriga in ay ku tartamaan sahamo, cilmi-baaris iyo dood ay ku soo bandhigayaan cilladaha ay nacladdu wadato. Iyagu waxay tilmaameen nicmadaha nacladeysan in ayan ahayn xeer caalami ah oo khasbaya cid-kasta oo nicmeysan in ay nacladowdo. Bal, nacladdu wxaay tahay mid bulshooyinka qaarkood hesha, kuwaas oo xaalado gaar ah la yimaada.

Khayraadkan waxay u dhigmaan lacag tira-badan oo dhulka hoostiisa ku aasan, taas oo si sahlan loo daldalanayo. Laakiin nasiibka la malaynayo in ay heleen ummadaha ku hodmay khayraadkan, waa mid xaqiiqada ka dheer. Calafka hadiyadda dabiiciga ah wuxuu noqon-karaa hoog iyo halaag nolosha ka horjoogsada cidda lagu cawlyayo in ay heystaan. Qaar kamid ah waddamadaas hodanka ku ah khayraadka, waxay si xooggan ugu halgamayaan in ay gaaraan siyaasad talo-wadaag ah iyo nolol leh

berya-samaad leh iyo nabadgelyo. Laakiin waa ay gaari-la'yihiin oo waxaa ka hor-taagan jallaafooyinka nacladaha.

Bulshada caynkaas ah, wejiga rasmiga ah oo ay yeelato wuxuu yahay xukuumado madax ka-nool ah, kooxo xambaarsan aragtiyo xag-jir ah, shidaal dhiigeysan, fara-gelin shisheeye iyo hanti bulshadii lahayd ay ka qatan-tahay. Waxay ku danbeysaa, wax-kasta oo bulshadaasi ay ku kala duwan yihiin in ay noqdaan sababo ay ku dagaalamaan. Kuwii isku degaan ahaa, waxaa qaybinaya qowmiyad. Kuwii isku qowmiyad ahaa waxaa qaybinaya qabiil. Kuwii isku qabiil ahaa waxaa qaybinaya jifi. Kuwii isku jifi ahaa waxaa qaybinaya diin. Kuwii isku diinta ahaa waxaa qaybinaya mad-hab. Kuwii isku mad-hab ahaa waxaa qaybinaya ra'yi, kuwii isku ra'yiga ahaa waxaa qaybinaya lacagaha nacladaysan.

Sawirkaasi wuxuu si qeexan uga dhex-muuqdaa nolosha bulshada Soomaaliyeed. Qeylada ka yeereysa dhamaan degaanada ay maamulladu ka dhisan yihiin, waxaa u saldhig ah nacladahaas uu suubanuhu (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) goor hore aragtideeda ka digay, dhaqaale-yahannada casriga ahna ay bannaanka soo dhigeen tijaabooyin camali ah oo lagu fahmo. Iyada oo Soomaalidu ayan weli la soo bixin khayraadka shiddooyinka wata, ayaa intii yarayd oo gacantooda soo gaadhay waxay ku noqotay inkaar u diidey in ay nolosha u tallaabsadaan. Sababtu waxay tahay arin ayan bulshadeenu weli fahmin la-xisaabtankeeda. Waxay tahay odey-dhaqameedyo badankood u fadhiya laaluush, xubno barlamaan oo badankood ku soo baxay laaluush, doonayana codkooda in ay ku bixiyaan laaluush, hoggaamiye lagu doortey laaluush, gole dowladeed lagu xulanayo laaluush,

agaasimayaal xilkooda ku haysta laaluush, hay'ado dowladeed iyo kuwo madax-bannaan oo ku shaqeeya laaluush, culimadii diinta oo qaarkood u meel-deyaya laaluush.

Waxaa arinkaas ka markhaati kacaya diblomaasigii Ingiriiska ahaa ee magaciisu ahaa Nicholas Kay, kaas oo ahaa xog-hayihii JQ ka Dh u matalayay Soomaaliya. Isagu wuxuu yiri: haddii nin Jamayka u dhashay oo lacag wata uu yimaado Soomaaliya, madax-wayne waa uu ka noqon karaa. Sawirkaasi wuxuu si cad u qeexayaa inkaarta ku soo hor-martay bulshadeena, iyada oo aanan weli loo dhaadhicin in lala soo baxo nicmadihii nacladaysnaa.

# Casharkii 25-aad

Dhallinyaro, kheyraadka dabiiciga ah waxaa loo yaqaan badeecad dhulka laga helo oo aanan la cusbooneysiin karin. Iyada oo diyaar ah oo aanan u baahnayn in howl la geliyo ayaa badeecaddan loo iibgeeyaa seyladaha dunida. Sahalkaas lagu heley iyo baahida loo qabo oo fududeynaya iibintooda, ayaa waxay ka dhigeen kheyraad si deg-deg ah loogu hodmo. Foojignaan la'aanta aanan laga digtoonaan cilladeheeda ayaa keena in la badsado, dabadeed dhaawac xooggan lagala kulmo. Cimilada nololeed ee halkaas ka dhalata ayay culimadu diiradda ku hayaan. Sahanka xooggan oo kheyraadkaas lala beeganayo waa aqoon laga dhaxlay aragti iyo caddaymo lagu tixraacayo qaar ka mid ah noocyada ugu waawayn ee nacladaha ku dhaca aadamiga, taas oo kaga imanaysa nicmadihii ay heleen.

Khayraadka badan oo mar qura la helo iyada oo aanan loo dareen qabin, isla-markaas ay maamul-xumi iyo maarayn la'aan hesho, waxaa laga dhaxlaa habaar iyo inkaar loogu tago fool-xumooyinka nolosha. Culimadu waxay si adag uga digayaan nacladahan, iyaga oo diiradda saaraya illaa inta khayraadka dabiiciga ah uu saamayn bur-bur ah ku leeyahay wax-qabadka iyo dhaqaalaha bulshada. Waxay soo jeedinayaan caddaymo ka mid ah sababaha nacladda ugu dhacdo bulshooyinka markii ay nicmadu ku badato. Waxaa kale oo ay mu'asasaadka caalamiga ah iyo kuwa dowladaha u gudbiyaan qoraallo saamayn leh oo ay ku miin-guuriyeen siyaasadaha togan (positive), kuwaas oo ka dhashay aragtiyada ay isku-weydaaradaan doodda ay kaga hadlayaan nicmadaha nacladaysan.

Qodobka ay mar-walba farta ku fiiqaan wuxuu yahay, khayraadka dabiiciga ah in ay sababaan dheelli-tir la'aan lacagaha dakhliga ah ee dowladdu ay ka hesho. Markaas ayuu daciifinayaa kobocii dhaqaalaha iyo is-haysadkii bulshada. Dabadeed waxaa si xooggan u xumaanaya xiriirkii dhaqaale iyo wax isweydaarsigii kala dhexeeyey ummadaha kale. Maamulladaasi waxaa xataa ku adkaanaya in ay xisaab-xir u sameeyaan hantida ka baxaysa dalkooda iyo lacagta u soo laabanaysa. Shirkadaha waawayn ee iibsanaya khayraadkan, iyaga dantoodu waxay tahay faa'iidada ay helayaan oo keliya. Sidaa darteed, mar-kasta oo ay seyladaha caalamka u iib-geeyaan khayraad intii hore ka badan waa ay ku farxayaan. Maamullada curyaanka ah oo laga soo iibsanayo khayraadka, iyaguna waxay ku farxayaan lacagta badan oo ka soo geleysa badeecadda laga qaadanayo. Iyagu waxay markaas moog-yihiin

inkaarta wehelisa nicmadahan ku soo deg-degtey.

Aragtidan fahamkeeda lagu baraarugay dhowaan waa mid taabanaysa hannaanka dhaqaale ee ummad walba ee dunida ku dhaqan. Fahamku wuxuu saxayaa aragti khaldan ee horey loo rumeysnaa. Aragtidan cusub oo fahamkeedu ay dhaqaal-yahannadu heleen waa mid tilmaamaysa, khayraadka badan oo la helo in ayan damaanad u ahayn koboc dhaqaale iyo berya-samaad ay umaddaasi ku naalooto. Bal ay jirto naclado la socda hantida badan oo bulshooyinku ay ku baaba’aan. Khataraha weheliya khayraadka ayay aragtidu gowracaysaa oo dibadda soo dhigaysaa qurun badan oo ku qarsoon. Sidaa darteed haddii bulshooyinku ayan ka digtoonaan ay goor danbe ku hoogaan oo ku ba’aan.

Haddii waddan uu yahay mid ku hodan ah khayraadka dabiiciga ah, caqligu wuxuu keenayaa in uu ka nolol wacnaado kuwa ay ku yar-yihiin khayraadkaas. Waddamaduna waxay ahayd in ay ku kala hodansanaadaan sida ay ugu kala xooggan yihiin nicmadaha ay hibada u heleen. Laakiin aragtidan ah nicmadaha nacladaysan waxay ina tuseysaa sawir midkaas ka-soo hor-jeeda oo aanan laga filayn bulsho ku hodan ah khayraadka dabiiciga ah in ay yeelato muuqaal noocaas ah. Sawirkaas taban wuxuu yahay in sida loo kala hodansan yahay loo kala saboolsan yahay. Waa fahamka caynkan ah garashada ay xambaarsan tahay aragtida nicmadaha nacladaysan.

Marka laga hadlayo taariikhda aqooneed ee aragtida dhaqaale ee togan in ay salka ku hayso maalgashiga (gudo iyo dibad) iyo kordhinta wax soo-saarka. Mana ahan fekerkii hore oo la haystay ee ahaa in hodantooyada ummaduhu ay

tahay mid ku xiran faxnaanta khayraadka dabiiciga ah. Falanqeeyayaal badan ayaa soo jeediyey falal taariikhi ah ee togan, kuwaas oo kala saaray koboca dhaqaale iyo hanashada khayraadka dabiiciga ah. Macnuhu waxaa weeye in bulshadu ayan dhaqaalaheeda ku xirin khayraad badan oo la soo saaro oo keliya. Hoggaamada ku cararaya in khayraadka dabiiciga ay xoojiyaan maamulkooda, waxay moog-yihiin nacladda wehelisa khayraadkaas.

# Casharkii 26-aad

Dhallinyaro, sida aanu soo xusnay nicmadaha nacladaysan mid saamayn ku leh dhaqaalaha oo keliya. Bal siyaasadda iyo dhaqanka ayay si taban u naafeysaa. Nacladda ku dhacda ummadaha khayraadka heystaa maahan mid kaga timaadda falalka dowladohooda oo keliya, laakiin waxaa wax ka-sii hurinaya dowladaha waawayn oo qudhoodu u iilanaya dowladaha ay ku badan yihiin nicmadaha nacladaysan. Danaha ay dowladaha waawayn ku qabaan waddamadan hantida dabiiciga ah ay ku badan tahay, maahan oo keliya in ay ka iibsadaan hantidaas dabiiciga ah. Waxaa kale oo dowladahaas ay ka dhigtaan jaal siyaasadeed oo dhinac-taagan. Markaas ayaa waxay ka helaan saldhigyo ciidan, waxay ka helaan taageero siyaasadeed maxfallada caalamiga ah, illaa ay dhaqankii iyo diintii ay haysteen waddamadaas

yar-yar uu noqdo aalado u adeega danaha sowladaha waawayn ee uu ganacsigu ka dhexeeyo.

Shirkadaha waawayn ee dowladaha qaan-gaarka ah, waxay lacago ku hafiyaan maamullada u dhisan dowladaha haysta hantida dabiiciga ah. Dabadeed khayraadkoodii ayaa waxay u boobaan si aanan arxan lahayn. Kuwa hantida lehna ma gartaan waa idin-ka dhamaanayaa ee tashiisha si facaha danbe ay u gaadho hambo ay iyaguna waayo ku noolaadaan. Hoggaamadu kama fekeraan dhibaatooyinka dadkooda ragaadiyay oo ay kamid yihiin saboolnimada, jahliga cudurrrada, laalushka, anshax-xumida, cimilada wasakhaysan iyo khasaaraha soo gaaraya dhulkooda. Iyagu waa dad nacladaysan, markaas ayay nacladdii u qeybiyaan bulshada.

Waxay la nacladoobeen lacagaha badan ee ee ka soo gelaya dakhliga khayraadka ka soo laabanaya.

Dowladaha ku guuldaraystay in ay daweeyaan cudurrada ku dhaca hannaankooda dhaqaale, oo cudurka hollandeeska ugu wayn yahay, waxeeyan hureynin in ay ku soo deg-degto nacladihii dhaqaaluhu watay. Weliba waxay sii xoogeysanaysaa, goortii ay nicmaddu siyaado noqoto. Diraasad dhaqaale oo caalami ah ee la sameeyay sanadkii 1995-kii, waxaa lagu ogaaday, ganacsigii la xiriirey dhoofinta agabka badan oo waddamada aduunka ay soo saaraan. Ganacsiga caynkan ah ayaa si tartiib ah kor ugu kacayay muddadii u dhexeysey sanadaha 1971-kii ilaa 1989-kii. Ganacsigan ayaa kor u kacayay xataa markii ay dowladuhu adkeeyeen sharciyada ganacsiga wax isu-dhoofinta iyo maal-gashiga.

Misana dowladaha leh khayraadka aanan laga shaqayn ee dabiiciga ah, waa ku yar-yihiin dowladaha guusha dhaqaale ku gaaray waxa ay dibadda u dhoofiyaan.

Nicmaduhu maahan kuwo mar-kasta leh saamayn taban. Marka laga hadlayo saamaynta togan oo nicmaduhu leeyihiin, dalka Botswaana ayaa kamid ah waddamada tusaale-dhigga loo soo qaadan karo. Dalkan ayaa wax soo-saarkiisa sanadkii 2017-kii wuxuu gaaray 17,41 bilyan oo dollar. Dhaqaalahaas 40 % wuxuu ka soo galay macdanta ah (Copper, Gold, Nickel, Coal) iyo dhagxan qaaliga ah (Dheemanka). Haddaanu dib taariikhda u raacno, sanadkii 1960-kii, qofka reer Botswana dakhliga ku soo aadayay wuxuu ahaa 70 dollar sanadkii. Ku-dhowaad 60 sano dabadeed, sanadkii 2018-kii, dakhliga qofka reer Botswana wuxuu ahaa 18,146 oo dollar. Maanta dalkan wuxuu kamid yahay horseedayaalka dowladaha dhaqaalahoodu yahay heerka dhexe.

In-kasta oo markii uu madax-bannaanida qaatay 1966-kii dal dhaqaalihiisu uu ku xiran-yahay 100 % beeraha. Wax soo-saarkaas ayaa wuxuu ku dhisnaa qaabkii cabiidsiga. Muddadii u dhexeysey sanadihii 1970 – 2010, dhaqaalaha dalka wuxuu kordhayay 6,3 % sanad-walba. Saddex-jibbaar ayuu ka koreeyey kororka waddamada hor u-marsan.

Botswaana waa dal dhaca koonfurta qaaradda Afrika, tirada dadkiisu waa ka yar-yihiin laba melyan iyo bar. Waa dal xiran oo aanan lahayn bad. In-kasta oo dhaqaalaha dalka uu ku kobcay helitaankii macdanta, misana Botswaana waxay ka hor-marsan tahay waddamo Afrikaan ah oo khayraad macdan leh, isla-markaas aanan haysan xasillooni siyaasadeed iyo mid dhaqaale. Sababta ay Botswana ku guuleysatay waxay tahay, iyada oo hoggaankeedu uu dhisay maamul ku shaqeeya hannaanka

dowladwanaagga. Dabaylaha nacladda ee ka imanaya nicmadaha khayraadka la socda, waxay isaga difaacday maamul ku shaqeeya daah-furnaan, isla-markaas oggo isla-xisaabtanka.

Botswana, si guul leh wuxuu dhaqaalihiisii uga fogeeyey cudurka hollandeeska. Si looga hor-tago saameynta sicir-bararka lacagteeda, waxay ku tiirsanayd dheelli-tirka ganacsiga kala duwan. Waxay joogteysey miisaaniyad ay weheliso canshuur dheeri ah, iyada oo ururinaysa lacag canshuuro ah oo ka badan kharashaadka ay dowladdu ku shaqeeneyso. Taasi waxay u saamaxday in lacagoay gasho khasnadda dowladda. Iyaga oo hoos u dhigaya sicir-bararka isla markaana ka hortegaya saamaynta sii kordhaysa ee daabacaadda lacagta ee bangiga dhexe, habkan Botswaana waxay kaga fogaatay cudurka hollandeeska, iyada oo isla-markaas sii xoojinaysa tartankii qaybta dhoofinta badeecadaha kala duwan.

Qaabkaas ayuu dalkan kaga caafimaaday cudurkii halistak u ahaa dhaqaalihiisa, isaga oo ka hor-tegey nacladdii wehelisay cudurka. Wuxuu kale oo dalku yeeshey keyd lacag ah oo uu dhaqaalihiisa ku badbaadiyo goorta ay dabaylaha caalamiga ah kacaan oo sicirka iibka khayraadka uu is-dhimo.

# Casharkii 27-aad

Dhallinyaro, guusha dalka Botswaana waa arin mudan ku-joogsi oo maahan mid meel cidla ah ka timid. Waa siyaasad talo-wadaag ah oo loo hirgeliyay si ula-kac ah oo ku dhisan niyad-wanaag. Waa dowlad lagu adkeeyey cadaalad iyo ilaalinta xuquuqda muwaadinka, isla-markaas ay xoojinayaan hab dhismeedka is-bahaysiga qabaa'ilka dalka ku dhaqan. Waa dal hoggaamiyayaaashiisa ka yeeley kuwo oggol in lala-xisaabtamo, kuwaas oo ogsoon wakhtiga ay imanayaan iyo wakhtiga ay tegayaan, ogsoonna adeegga xaddidan ee laga doonayo muddada ay xilka hayaan. Shanta hoggaamiye ee soo maray, marka laga reebo ninkii ugu horeeyey oo xisbiga BDP (Botswana Democratic Party) uu doortay gobanimada horteed, afartooda kale mid waliba wuxuu ku yimid oo ku baxay hiraal iyo wax-qabad.

Maahan sida maamullada Soomaalida u dhisan oo qofku moodayo in dalka iyo dadka uu isagu leeyahay, muddada uu joogona xooggeeda uu ka shaqaynayo sidii uu u soo laaban lahaa.

Reer Botswaana waxay dhisteen hay'ado ka madax-bannaan madaxtooyada, kuwaas oo dhowra cadaaladda dowladeynta iyo hantida dad-waynaha. In-kasta oo dalku uu yeeshey madax-weynayaal taxane ah oo xilka isaga-danbeeyey muddo sanado badan, Botswaana waxay si caaqibo leh udhaqan gelisay dadkeeduna ay ku liibaaneen doorashada qof iyo cod ah oo lagu doorto xubnaha barlamaanka iyo guddoomiyayaasha gobollada, taas oo waddamo badan oo Afrikaan ah ay u suurageli-weydey. Waxaa ayaan-darro ah oo in la xuso mudan, doorashada caynkaas ah in Soomaaliya ay ka jirtay sanadkii ay Botswaana madax-bannaanida qaadatay (1966).

Maantase doorashaddii Soomaaliya ay noqotay mid xilli-walba oo dowlad timaaddo, sanadka ugu danbeeya uu ku dhamaado doodda ah, goorma ayaanu doorashada geleynaa iyo qaabkee ayay u dheceysaa?

Botswaana waxay ka faa'iideysatay damiirka aanan wasakhaysnayn iyo doonista uusan nifaaqu la socon oo hoggaamadeeda ay ku doonayeen in ay dadkooda u dhisaan dowlad. Markii ay ka dheeraadeen musuqa waxay oggolaadeen in lala-xisaabtamo. Inteeyan khayraadka helin horteed, iyaga oo sabool ah ayay si miyir-qab leh waxay u fuliyeen tiirarkii dowlad-wanaagga ee dalka u saamaxayay in mu’asasaadkiisu ay caga-dhigtaan.

Waxaa u kacay hoggaan mudnaanta koowaad siinaya dalka iyo hor umarkiisa. Arintaasi waxay ka fogeysey inkaarta haysata waddamo badan oo Afrikaan ah iyo nacladdii nicmadaha.

Markaas ayay ku guuleysteen xasilloonida siyaasadeed iyo iyo barwaaqada dhaqaale oo ay maanta dadkeedu ku nool yahay.

Tijaabada uu dalka Botswaana ku guuleystey, waa cashar laga fahmayo in nicmaduhu ayan ahayn kuwo mar-kasta nacladaysan. Bulshada hibada u heley nicmadaha, haddii ay maamul wanaagsan helaan waxay ku guuleysanayaan nolol aayatiin wacan. Siyaasad talo-wadaag ah iyo maamul dowlad-wanaag ah ayaa lagu xakamayn karaa nacladaha xooggan ee weheliya nicmadda. Sida dadku ay aqoonta isaga-qaataan ayaa bulshooyinkuna ay tijaabooyinka nololeed isaga-qaataan. Tijaabooyinka kuwooda togan (positive) iyo kuwooda taban (negative) labaduba nolosha waa ku xardhan yihiin oo waa u diyaar ciddii doonaysa in ay wax ka-barato.

Goorta dhaqaalaha bulshadu ay ku bilaabanayaan cilladaha u keenaya cudurka waa goorta la helo hanti fara badan iyada oo cimilada siyaasadeed ay ka maqan-tahay hannaanka dowlad-wanaagga. Musuqa, eexda iyo isla-xisaabtan la’aanta loo helo hantida badan waa cudur bulshada dhaawacaya. Haddii laga hor-tegi waayo cilladahaas cudurka keenaya, waxaanan shaki ku jirin in ay ka dhalanayso nicmadihii nacladaysnaa.

Hanti kasta oo u kororta hannaanka caynkaas ah, bulshadeeda waa ku sii merganayaan oo noqon-mayso hanti ay ku baraaraan. Soomaalida ka dhur-sugaya in loo soo saaro shidaal ay ku barwaaqoobaan, ha ogaadaan cidda ka faa’iideysa in ay tahay shirkadaha howsha qabanaya oo keliya, laakiin bulshadeenu ay heleyso nicmado nacladaysan.

Taas oo sida saadaashu tahay na-gaarsiineysa xaalad ka xun xaaladihii la soo maray.

Cuna-qabashada ay nicmadaha nacladaysan ku merjiyaan bulshada waxaa sawir qurxoon u ah fal-celiska dalka Venzuela uu ka dhaxlay khayraadkii badnaa ee uu kala soo baxay dhulkiisa. Waxaa xusid mudan, dalkan in uu yahay midka dunida ugu hodansan markii la'eego shidaalka iyo macdanta ku aasan ciiddiisa. Dalkaasi oo dhaca waqooyi-bari ee qaaradda koonfurta Ameerika, khayraadka dabiiciga ee uu leeyahay wadar ahaan waxaa lagu qiyaasaa 14,3 trilyan oo US.$ ah. Batroolka dalkaasi kaydka u ah wuxuu ka badan yahay wadar-ahaan batroolka keydka u ah waddamada Mareekanka, Kanada iyo Meksiko. Sidaa darteed Venzuela waa dalka I-aad dunida ee shidaalka ugu badan dhoofiya, waa dalka saddexaad ee dunida ee dhuxul-dhagaxa

dhoofiya, isla-markaas waa dalka II-aad dunida ee haysta keydka dahabka ugu badan.

# Casharkii 27-aad

Dhallinyaro, guusha dalka Botswaana waa arin mudan ku-joogsi oo maahan mid meel cidla ah ka timid. Waa siyaasad talo-wadaag ah oo loo hirgeliyay si ula-kac ah oo ku dhisan niyad-wanaag. Waa dowlad lagu adkeeyey cadaalad iyo ilaalinta xuquuqda muwaadinka, isla-markaas ay xoojinayaan hab dhismeedka is-bahaysiga qabaa'ilka dalka ku dhaqan. Waa dal hoggaamiyayaaashiisa ka yeeley kuwo oggol in lala-xisaabtamo, kuwaas oo ogsoon wakhtiga ay imanayaan iyo wakhtiga ay tegayaan, ogsoonna adeegga xaddidan ee laga doonayo muddada ay xilka hayaan. Shanta hoggaamiye ee soo maray, marka laga reebo ninkii ugu horeeyey oo xisbiga BDP (Botswana Democratic Party) uu doortay gobanimada horteed, afartooda kale mid waliba wuxuu ku yimid oo ku baxay hiraal iyo wax-qabad.

Maahan sida maamullada Soomaalida u dhisan oo qofku moodayo in dalka iyo dadka uu isagu leeyahay, muddada uu joogona xooggeeda uu ka shaqaynayo sidii uu u soo laaban lahaa.

Reer Botswaana waxay dhisteen hay'ado ka madax-bannaan madaxtooyada, kuwaas oo dhowra cadaaladda dowladeynta iyo hantida dad-waynaha. In-kasta oo dalku uu yeeshey madax-weynayaal taxane ah oo xilka isaga-danbeeyey muddo sanado badan, Botswaana waxay si caaqibo leh udhaqan gelisay dadkeeduna ay ku liibaaneen doorashada qof iyo cod ah oo lagu doorto xubnaha barlamaanka iyo guddoomiyayaasha gobollada, taas oo waddamo badan oo Afrikaan ah ay u suurageli-weydey. Waxaa ayaan-darro ah oo in la xuso mudan, doorashada caynkaas ah in Soomaaliya ay ka jirtay sanadkii ay Botswaana madax-bannaanida qaadatay (1966).

Maantase doorashaddii Soomaaliya ay noqotay mid xilli-walba oo dowlad timaaddo, sanadka ugu danbeeya uu ku dhamaado doodda ah, goorma ayaanu doorashada geleynaa iyo qaabkee ayay u dheceysaa?

Botswaana waxay ka faa'iideysatay damiirka aanan wasakhaysnayn iyo doonista uusan nifaaqu la socon oo hoggaamadeeda ay ku doonayeen in ay dadkooda u dhisaan dowlad. Markii ay ka dheeraadeen musuqa waxay oggolaadeen in lala-xisaabtamo. Inteeyan khayraadka helin horteed, iyaga oo sabool ah ayay si miyir-qab leh waxay u fuliyeen tiirarkii dowlad-wanaagga ee dalka u saamaxayay in mu’asasaadkiisu ay caga-dhigtaan. Waxaa u kacay hoggaan mudnaanta koowaad siinaya dalka iyo hor umarkiisa. Arintaasi waxay ka fogeysey inkaarta haysata waddamo badan oo Afrikaan ah iyo nacladdii nicmadaha. Markaas ayay ku guuleysteen xasilloonida siyaasadeed

iyo iyo barwaaqada dhaqaale oo ay maanta dadkeedu ku nool yahay.

Tijaabada uu dalka Botswaana ku guuleystey, waa cashar laga fahmayo in nicmaduhu ayan ahayn kuwo mar-kasta nacladaysan. Bulshada hibada u heley nicmadaha, haddii ay maamul wanaagsan helaan waxay ku guuleysanayaan nolol aayatiin wacan. Siyaasad talo-wadaag ah iyo maamul dowlad-wanaag ah ayaa lagu xakamayn karaa nacladaha xooggan ee weheliya nicmadda. Sida dadku ay aqoonta isaga-qaataan ayaa bulshooyinkuna ay tijaabooyinka nololeed isaga-qaataan. Tijaabooyinka kuwooda togan (positive) iyo kuwooda taban (negative) labaduba nolosha waa ku xardhan yihiin oo waa u diyaar ciddii doonaysa in ay wax ka-barato.

Goorta dhaqaalaha bulshadu ay ku bilaabanayaan cilladaha u keenaya cudurka waa goorta la helo hanti fara badan iyada oo cimilada siyaasadeed ay ka maqan-tahay hannaanka dowlad-wanaagga.

Musuqa, eexda iyo isla-xisaabtan la'aanta loo helo hantida badan waa cudur bulshada dhaawacaya. Haddii laga hor-tegi waayo cilladahaas cudurka keenaya, waxaanan shaki ku jirin in ay ka dhalanayso nicmadihii nacladaysnaa. Hanti kasta oo u kororta hannaanka caynkaas ah, bulshadeeda waa ku sii merganayaan oo noqon-mayso hanti ay ku baraaraan.

Soomaalida ka dhur-sugaya in loo soo saaro shidaal ay ku barwaaqoobaan, ha ogaadaan cidda ka faa'iideysa in ay tahay shirkadaha howsha qabanaya oo keliya, laakiin bulshadeenu ay heleyso nicmado nacladaysan.

Taas oo sida saadaashu tahay na-gaarsiineysa xaalad ka xun xaaladihii la soo maray.

Cuna-qabashada ay nicmadaha nacladaysan ku merjiyaan bulshada waxaa sawir qurxoon u ah fal-celiska dalka Venzuela uu ka dhaxlay khayraadkii badnaa ee uu kala soo baxay dhulkiisa. Waxaa xusid mudan, dalkan in uu yahay midka dunida ugu hodansan markii la’eego shidaalka iyo macdanta ku aasan ciiddiisa.

Dalkaasi oo dhaca waqooyi-bari ee qaaradda koonfurta Ameerika, khayraadka dabiiciga ee uu leeyahay wadar ahaan waxaa lagu qiyaasaa 14,3 trilyan oo US.$ ah. Batroolka dalkaasi kaydka u ah wuxuu ka badan yahay wadar-ahaan batroolka keydka u ah waddamada Mareekanka, Kanada iyo Meksiko.

Sidaa darteed Venzuela waa dalka I-aad dunida ee shidaalka ugu badan dhoofiya, waa dalka saddexaad ee dunida ee dhuxul-dhagaxa dhoofiya, isla-markaas waa dalka II-aad dunida ee haysta keydka dahabka ugu badan.

# Casharkii 28-aad

Dhallinyaro, dowladda Maleesiya ayaa waxay iyana reebtey tijaabo looga tusaale qaadan karo in dadkeedii ay ka bad-baadisay nacladdii nicmadaha. Dalkan oo uu ka dhisan yahay nadaam boqortooyo federaali ah, ayaa madax-bannaanidiisii wuxuu ka qaatay dowladda Ingiriiska. Bedka dalkani wuxuu yahay 330,803 km2. Tirada dadka ku nool waa ku dhowaad 34 melyan. Hor u-marka uu dalku gaaray wuxuu bilowday bilowga sanadihii 1980-aadkii. Waxaa u sabab ahaa hoggaamiyahoodii Dr. Mahatiir Maxamed, kaas oo dalka ka soo saaray nolol saboolnimo iyo xaalad dib-dhac. Wuxuu gaarsiiyay in dalku noqdo waddamada ugu hor-marsan, ugu dhaqaale wanaagsan uguna koboc fiican.

Qofku markii uu kulansado tilmaamihii hoggaaminta oo aqoonta iyo ogaalku ay ugu horeeyaan, isaga oo keliya ayaa u sabab noqon-kara nadbaadinta umaddiisa. Dr. Mahatiir, ajeendooyin siyaasadeed oo uu dejiyey ayaa u sabab noqotay guusha uu dalkan gaaray, taas oo sida uu bangiga adduunku sheegey, siisay dalkii cimilo maal-gashi middeeda ugu wanaagsan. Mahatiir Maxamed wuxuu dejiyey tub-raac ay ku caddahay meesha uu dalka ula hayaamayo. Tub-raacaas ayuu wuxuu ku caddeeyey ahdaafta uu leeyahay iyo natiijooyinka uu doonayo in uu ku gaaro.

Aqoonta iyo sahamadeeda ayuu ka dhigtey qodobka ugu milgaha culus oo uu dadkiisii ugu hagar-baxay. Barnaamijkiisii faafinta la aqoonta oo uu dhaqaalihii dalka qayb xoog leh ka siiyey waxaa kamid ahaa la dagaalanka jahliga, cirib-tirka akhris-la'aanta iyo dhigaal la'aanta, diyaarinta aqoonyahanno iyo farsamoyaqaano

khibrad leh, dhismayaal jaamicado iyo xarumo cilmi-baaris, barashada afka Ingiriiska, tobaneeye kun oo arday ah oo loo diray jaamacadaha ugu wanaagsan ee dunida. Barnaamijka ay dowladda doonayso iyo qorshayaalka ay ku fulineyso waxaa lala-wadaagay dad-waynaha oo maahayn kuwo laga qarinayay. Waxaa kale oo si qayaxan dad-waynaha loogu sheegey nadaamka isla-xisaabtanka oo dowladdu ay ku shaqeeneyso, ciqaabtiisa iyo abaal-gudkiisa.

Mahaatiir Maxamed, dadkiisii waa ay aamineen. Iyada oo dadka dalkaasi ku nool ay aaminsan yihiin 28 diimood oo kala duwan, ayaa bulshadii waxay ku daba-safteen hoggaamiyhoodaas muslinka ah. Kalsoonidoodii ayay siiyeen, isaguna ma uusan khiyaanin oo kalsooni ayuu ku hoggaamiyay. Hawlahii hor u-marinta wuxuu ka bilaabey dalagga beeraha oo uu u arkay midda ugu fudud oo laga jibad-keeni karo.

Labadii sano ee xukunkiisa, waxaa dalka lagu tallaaley laba melyan oo geed-saliid (Qoone) ah, si markaas ay Maleesiya u noqoto dalka koowaad ee soo-saaridda iyo dhoofinta saliiddan laga sameeyey geedka la yiraahdo (Palme Tree). Dabadeed waxay u tallaabsadeen dhanka dalxiiska oo mashaariicdiisa la hirgeliyey labadii sano ee xigay. Waxay dhiseen dhamaan wixii soo jiidanayay nolosha dalxiiska, taas oo Maleesiya ay ku heshey in ay kamid noqoto xarumaha caalamiga ah oo lagu qabto tartamada gawaarida, fardaha, doonyaha iyo cayaaraha kale.

Sida aanu soo aragnay, dhaqaalaha ku tiirsan khayraadka dabiiciga ah wuxuu leeyahay qiimo xooggan oo si taban dalka uga baxa. Tobaneeye sano oo Maleesiya ay keydkeeda u raadinaysay maal-gashi iyo xiriir ganacsi, waxaa tabar-yareeyey mu'sasaadkii dowladda.

Sababtu waxay ahayd ganacsato waa-wayn iyo siyaasiyiin xilal sare ka hayay dalka ayaa hor-kacayay dhaqdhaqaaqa lagula heshiinayay shirkadaha shisheeyey ee daneynayay maal-gashiga. Ganacsatadaas iyo siyaasiyiintaas ayaa mid-walba uu is-lahaa ka faa'iideyso fursadaha ku soo maray. Waxaa halkaas ka abuurmay musuq xooggan iyo laaluush badan oo la-kala qaato. Waxaa daciifay dowladnimadii iyo mu'asasaadkeedii.

Maleesiya markii ay heshey kheyraadka dabiiciga ah (Batroolka iyo gaaska), waxay la timid hannaan wanaagsan oo lagu maareeyo khayraadkaas. Mu'asasaad adag ayay dhisteen, dadkeedii waxay u yeeleen aqoon xirfadeed kala duwan oo la xirira sahanka, soo-saarka, ka-shaqaynta iyo dhoofinta. Waxay curiyeen hay'ado dhiirrigeliya iskaashiga, xoogag ka shaqeeya daba-galka faa'iidooyinka iyo daahfurnaanta dakhliga, hey'ado leh go'aan

gaaridda howlaha socda. Waxaa intaas weheliyay dejinta habab sharci ah oo adag iyo nidaamyo kormeer oo ay dowladaha hoose la-gaga hor-joogsanayo in ay la macaamilaan kooxo dano gaar ah leh oo u oggolaanaya in ay marin u helaan dhulalka iyo ilaha kale ee qayb ka ah hantida qaranka.

# Casharkii 29-aad

Dhallinyaro, in-kasta oo ay adag-tahay in laga wada badbaado nacladda khayraadka, misana Maleesiya waxay foojignaan ka muujisay maamul-xumida ay nicmaduhu xoojiyaan, kaas oo uu ku baraaro anshaxa musuqa iyo laaluushka. Maadaama qaybo badan oo dadka reer Maleesiya ay yihiin kuwo ku nool miyiga isla-markaana ay ka shaqeeyaan beeraha, dowladdu waxay iska xil-saartay hagaajinta iyo hor u-marka noloshooda. Waxay xoojisay adeegyada deegaanka ee muhiimka u ah reer miyiga. Waxay ilaalisey guntiyada xargaha xiriirinaya bulshada.

Arimaha guusha u keeney Maleeshiya waa mid ummad walba oo maamul caynkaas ah dhisata ay ku guuleysanayso. Arimahaas ayaa kuwooda ugu hilan culus waxay yihiin talada baahsan oo aanan qof iyo koox gacanta ugu jirin (multi-

sectoral decision making), aragti guud oo laga qaato joogteynya maareynta haboon ee nicmadaha (broad view of sustainable useful resource management), iyo hannaan hab-raac sharciyeysan iyo daba-gal joogto ah (strong legal mechanisms and monitoring systems).

Ruuxda lagu maareeyo maamulka khayraadka dabiiciga ah waa mid u baahan in ay buuxiso xaglaha dowladda dhamaan iyo xubnaheeda. Waana in ay maal-gashataa adkaynta hay'adaha dowladdu leedahay. Muuqaalkan guud ee ah maamul ku fadhiya saldhig ballaaran wuxuu Maleesiya u horseedey jaad nololeed ee dheelli-tiran, kaas oo si hagaagsan u kobaciyay dhaqaalihii dalka haddii ay ahayd reer miyigii iyo haddii ay ahayd reer magaalkii. Hay'adaha heer-dowladeedka ee adag oo leh helitaanka xogta iyo masuuliyadaha maaraynta kheyraadka dabiiciga, waa kuwa keliya ee xaqiijin-kara in

dakhliga dalaku leeyahay faa'iido ay bulshadu u siman-tahay.

Mahaatiir maahayn nin naqshadeeyey hor u-marka Maleesiya ee timaaddada oo keliya, bal wuxuu ka soo badbaadiyay dabaylihii bur-burka dhaqaale ee sanadkii 1997-kii heley waddamada laysku yiraahdo shabeelladii Aasiya (Asian Tigers). Xilligaas oo mushkiladihii soo food-saaray dowladahaas ay hoos udhac ku keeneen dhaqaalahoodii, Mahaatiir wuxuu diidey in uu aqbalo lacagihii deynka ahaa oo hay'adda lacagta adduunka IMF ay usoo bandhigtay. Sanduuqa hay'addan ayaa dalka Arjentiin hadda ka hor wuxuu ku magacaabey sanduuqii sheydaanka. Ujeeddada loo abuuray sanduuqan waxaa lagu sheegaa in uu yahay in ay kobciyaan dhaqaalaha dowladaha soo koraya.

Laakiin dowlad walba oo deyn la siiyo, natiijadu waxay noqotaa in mushkiladdii dhaqaale oo ay

ka dirireysey ay ku sii weynaato, dabadeedna hantideeda intii u hartay uu sanduuqu ka gurubsado. Hor u-marka iyo baraaraha ay dowladuhu doonayeen wuxuu markaas noqdaa dhaan daba-gaale aanan la gaarin.

Mahaatiir waa uu diidey in uu deyn ka qaato hay'adda, sidaas oo ay yeeleen dowladihii la degaanka ahaa. Mahatiir wuxuu ku dadaalay in uu ku xalliyo mushkiladda dhaqaale heer dalka gudihiisa ah, waana uu ku guuleystey in uu yareeyo dhaawaca soo gaaray. Laakiin waddamadii degaanka ee kale waxay qaateen deynkii, sidaa darteed dhaawac intii ka culus ayay la kulmeen. Waddamadaas waxaa kamid ah Filibiin, Indoneesiya iyo Koonfurta-Kuuriya.

Waxaa nasiib-darro ah masuuliinta Soomaalida oo ku cararaya in IMF ay Soomaaliya ka cafiso daynka lagu leeyahay. Marka fadhiyada caynkaas ah lagu casumayo Soomaalida,

masuuliinta ka qayb-gelaya fadhigaas, waxeeyan garanayn in ayan jirin dowlad ay IMF deyn ka cafisey oo ku liibaantay. Dalka Jiili ayaa ugu danbeeyey oo xilligii ra'iisul-wasaare Khayre iyo wasiir Beyle ay New York kula shirayeen IMF, waxaa dalkaas ka socday bannaan-baxyo lagu xir-xirey dad ka-badan 15,000 oo qof. Waxaa xukun degdeg ah lagu soo rogey 16 magaalo oo kuwa ugu waawayn ah. Dowladdii dalka ka jirtay waa ay dhacday. Sababta rabshadaha keeney waxay ahayd dhibaatooyin dhaqaale oo dalka ka jiray. Shiddada intaas le'eg waxaa u keeney heshiisyo hore oo ay IMF-ta la saxiixdeen. Haddaba qofkii wax garanaya wuu fahmikaraa in Soomaaliya deynta lagu leeyahay, si-kasta oo ay u badan tahay dalku waa uu bixin karaa. Laakiin Soomaaliya uma baahna mana qaadi karto heshiisyo sheegisteedu ay qurxoon-tahay (deyn la cafiyo), culaabteeduna ay goor danbe soo baxdo.

Weliba xilli looga baqayo haddii shidaal la soo saaro in ay soo deg-degto nicmadihii nacladaysnaa.

Maleesiya, markii ay isku tashadeen, si garaad iyo garasho lehna ay u fekereen ayaa xisaabtankii nolosha ay u hagaagtay. Guushii ay gaareen waxay kaga caafimaadeen cudurkii dhaqaalaha iyo nacladihiisii.
Waxay kaga maarmeen deyman iyo deeqo shisheeye. Natiijadii waxay noqotay, muddadii u dhexeysey 1981-kii – 2003-dii, Mahatiir Maxamed wuxuu awooday in dalkiisa uu ka soo dhex-qaado waddamada ugu saboolsan dunida oo uu ku soo daro waddamada ugu hodansan dunida. Iyada oo sanadkii 1974-kii, dowladdu ay yeelatay dhamaan ceelashii shidaalka, ayaa waxaa la dhisay shirkadda wayn ee lagu magacaabo Petronas. Waa shirkad dowladeed oo ka masuul ah wax-kasta oo la xiriira shidaalka dalka Maleesiya.

Dalxiiska keliya oo sanadkii ka soo geli jiray 900 oo melyan oo US.$ ah, wuxuu gaaray in sanadkii uu ka soo galo 33 bilyan oo US.$. Waxaa la dhisey laba gegi-dayuuradeed oo waawayn iyo waddooyin waasac ah oo fududeynaya isu-socodka dadka deggan, kuwa maal-gashiga u socda iyo kuwa dalxiiska ah. Tirada dadka noloshoodu tahay heerka khadda saboolnimada waxay ka soo hoobatay 52 % iyada oo gaartay 2 % sanadkii 2000. Dakhliga qofka reer Maleeshiya wuxuu kor u kacay 1.200 oo US.$ sanadkii 1970-kii, kaas oo gaaray 90,000 oo US.$ sanadkii 2012-kii. Waxaa la dhisey mid kamid ah jaamicadaha Islaamiga kuwooda ugu wayn dunida.

Waxaa la dhisey magaalo-madax maamuleed, taas oo ku mataanan magaalo-madaxda ganacsiga. Waxaa ku nool laba melyan oo qof, waxaa la qorsheynayaa in ay degaan u noqoto toddoba melyan oo qof sanadka 2020-ka

# Casharkii 30-aad

Dhallinyaro, haddii aanu soo aragnay Botswana iyo Maleesiya in kamid yihiin dalalka ka badbaaday nicmadaha nacladaysan, maraanna waxaanu eegeynaa labada dal ee kala ah Venzuel iyo Koongo. Waa laba dal oo kamid ah kuwa ugu khayraadka badan dunida, laakiin ay nacladihii nicmadda ku dhaceen. Haddaanu ku hor-marno Venzueal, waxaa dalkan soo maray xilli ay dadkeedu ahaayeen kuwo beryasamaad ku noolaa. Waxay kamid ahaayeen bulshooyinka ugu nolol wanaagsan ee dunida ku nool. Waxaa sababay khayraadka dabiiciga ah oo dhulkeeda laga heley.

Sanadihii 1960-aadkii, dalkan waxaa lagu xisaabinayay dal hodan ah, goortaas oo uu heley shidaal badan. Wuxuu keligiis soo saarayay wax ka badan 10 % shidaalka dunida laga adeegsado.

Dakhliga soo gala qofka reer Venzuela xilligaas wuxuu wax badan ka badnaa dakhliga soo gala dadka ku nool dowladaha la deriska oo ay kamid yihiin Koloobiya iyo Braaziil ay kan´mid yihiin. Isla-markaas wax badan kama hooseyn dakhliga qofka Mareekanka ah. Siyaasadda dalka waxay ahayd mid ku dadaalaysay in ay ka fogaato nacladda nicmadaha, sidaa darteed, sanadahaas hore hoggaankoodu wuxuu muujiyay howlo maamul oo hagaagsan.

Waxay tusaale u noqdeen habka dowlad-wanaagga ee dowladaha qaaradda Laatiin Ameerika. Isla-markaas waxay bilawday isku-dey in ay dhisaan hab dhaqaale oo ku dhisan wax soo-saar kala duwan.

Waxaanu soo xusnay, dalkan in uu yahay kamid yahay kuwa dunida ugu hodansan markii la’eego shidaalka iyo macdanta ku aasan ciiddiisa.

Dalkaasi oo dhaca waqooyi-bari ee qaaradda koonfurta Ameerika, khayraadka dabiiciga ee uu leeyahay wadar ahaan waxaa lagu qiyaasaa 14,3 trilyan oo US.$ ah. Batroolka dalkaasi kaydka u ah wuxuu ka badan yahay wadar-ahaan batroolka keydka u ah waddamada Mareekanka, Kanada iyo Meksiko. Sidaa darteed Venzuela waa dalka I-aad dunida ee shidaalka ugu badan dhoofiya, waa dalka saddexaad ee dunida ee dhuxul-dhagaxa dhoofiya, islamarkaas waa dalka II-aad dunida ee haysta keydka dahabka ugu badan.

Iyada oo ayan jirin sabab uu dhaqaalaha dalka Venzuela la bur-buro, ayaa bilowga sanadihii 1970-aadkii, caalamku wuxuu la kulmay sicir-barar la xiriira qiimihii shidaalka. Arintaasi waxay dhacday iyada oo dhaqaalaha Venzuela uu weli si xooggan ugu xiran yahay shidaalka.

Si ay ula tacaalaan hoos u dhaca dakhliga, waxaa u muuqatay meesha ay sida fudud uga kaban karaan in uu yahay soo-saarka shidaalka oo la kordhiyo. Arintaasi waxay dakhligii dowladda gaarsiisey in 90 % gala uu noqdo mid ku tiirsan saliidda ceyriin oo ay dhoofsadaan. Dhibaatadan cusub waxay dalka ku bilaabatay sanadkii 2014-kii, markaas oo sicirkii shidaalka uu heer caalami ah u hoobtay. Dal Venzuela oo kale ah oo 90 % uu dhaqaalaheedu ku tiirsanaa shidaalka, waa arin la fahmi karo dhibaatada mar-qura ku soo farabaxsanaysa. Weliba haddii aanan horey loogu diyaar-garoobin, si fool xun ayay u legdeysaa ciddii ay bannaan cidla ah ka hesho.

Halkaas ayaa laga raacay mudka go'ay dhaqaalaha reer Venzuela iyo nacladdii ku dhacday. Hoos u dhacaas sicirka shidaalka oo heer caalami ah, iyada oo dalka uu ka maqnaa wax soo-saarka kala ayniga ah, ayaa mar-qura wuxuu harraati xoog badan ku dhiftay

dhaqaalihii dalka. Waxaa u weheliyay maaraynta dakhliga oo ahayd mid aad u liidatay. Goortii ay nacladdii ku dhacday, dhaqaalihii wuxuu ku dhacay bur-bur uusan muddo dheer ka soo kabanayn. Wuxuu ka gudbay heerarkii kala cuslaa ee sicirbararku lahaa, Inflation (sicirka badeecadaha oo kordha), deflation (wax soo-saarka oo yaraada), Stagflation (labada arimood oo sii xoogaysta), Hyperflation (lacagtii oo badata iyo qiimaheedii oo yaraada).

Waxaa dalka soo food-saartay dhibaato dhaqaale oo aanan horey usoo marin.

Dhibaatadii a ka jirta Venezuela waxay ku reebtey raad aan caadi ahayn oo leh saameyn bani aadamnimo iyo mid dad ahaaneedba. Wadanku wuxuu la kulmay soogalooti shisheeye oo badan, kuwaas oo ka faa’iideysanaya xaaladda liidata ee dalka. Khayraadkiisii ayay boobayaan.

Marka ay sidaas dhacayso, dadka reer Venzuela si xooggan ayay u qaxayeen. Iyagu waxay ka qaxayaan gaajao baahsan iyo amni-darro korortay. Sanadkii 2017-kii, dadka ku nool khadda saboolnimada waxay gaarayeen 87 %. Sanadkii 2018-kii, heerka sicir-bärarka ku dhacay dhaqaalaha Venzuela waxaa lagu qiyaasay 1,000,000 %.

Waddanka aanu ka soo war-bixinay khayraadka eebe ku manaystay, wuxuu ku danbeeyey, inta-badan dadkiisa in ay ku nool-yihiin biyo aanan tubooyin ku iman. Korontada oo magaalooyinka ka go'da waxay noqotay arin maalinle ah. Cabbirka falalka denbiyada dilalka ah, wuxuu ka kor-maray waddamada ugu dilalka badan dunida (Hunduraas iyo El-Salvadoor). Cudurrada faafa oo ay kamidka yihiin malaaryada, jadeecada iyo difteriya ayaa si ba'an u laysa. Goortii dadku ay waayeen waxyaabihii nolosha

u saldhigga ahaa oo amniga iyo luqmaddu ay ugu horeeyaan, waxaa bilowday qaxid xoog badan. Dadku waxay u qaxeen waddamada Laatiin Ameerika ee deriska la ah, sida Braaziil, Beeruu, Jiili, Koloombiya iyo Elwadoor. Dalka Koloombiya oo keliya ayaa waxaa galay 800 oo qof. Guud ahaan tirada dadka dibadda uga qaxay dalkooda waxaa lagu qiyaasay in ay ka badan yohoon afar melyan oo qof.

# Casharkii 31-aad

Dhallinyaro, dalka Koongo ayaa isna wuxuu leeyahay tusaale nool oo lagu tilmaansado dhaawaca nicmadaha nacladaysa. Dalkan magaca loo yaqaan wuxuu yahay Koongada Dimoqraadida ah. Wuxuu dhacaa bartamaha qaaradda Afrika. Waxaa ku nool dad tiradoodu gaarayso 92 melyan oo qof. Dalka Jazaa'ir dabadiis, waa dalka labaad ee qaaradda Afrika ugu dhul-wayn, kaas oo bedkiisu uu le'eg-yahay 2,345,409 km2. Dalka intaas le'eg xeeb dhererkeedu yahay 37 km oo qura ayuu wuxuu ku leeyahay badwaynta Atlantikada. Waa laga yaabaa in aad is-tiraahdaan Mareekanka waa dalka dunida ugu hodansan.

Laakiin waxaa xaqiiq ah in dalka Qatar uu yahay dalka kala wareegey taajkii hodantooyada. Dalka Koongo haddii uu heli lahaa maamul dowlad-

wanaag ayaa labada dalba ka qaadi lahaa taajka hodantooyada dunida. Waayo wuxuu leeyahay keyd xooggan oo macdan ah, kaas oo qiimihiisa lagu qiyaasay 24 trilyan oo US.$. Laakiin nasiib-darrida heshey ayaa waxay tahay in ay ku dhacday nacladdii nicmadaha.

Waxaa xusid mudan 40-ka dal ee ugu saboolsan dunida, 33 kamid ah in ay dhacaan qaaradda Afrika ee saxaraha ka hooseeya. Waddamadaas waxaa kamid ah Burundi, Zimbaabwe, Nijer iyo Libeeriya. Sanadkii 1960-kii oo Koongo ay madax-bannaanida heshey, dalku wuxuu ahaa waddanka labeeya dalka Koonfur Afrika oo ugu wershadaha badan qaaradda. Waxaa arintaas u sabab ahaa wax soo-saarka macdanta iyo beeraha oo aad u u badnaa. Khayraadka dabiiciga ah oo dalku uu hodanka ku yahay waxay yihiin Tantalum, Tin, Lithium, Uranium, Cobalt iyo Copper. Waxaa intaas u dheer dahab, dheeman iyo saliidda ceyriin.

Sahan ay sameysey hey'adda jeolojiga ee Mareekanka, waxay qiyaaseen, macdanta la yiraahdo Lithium oo keliya in Koongo laga helayo hal melyan oo tan. Dalkan ayaa waxaa la yiraahdaa waa danbiil ay nicmadi ka buuxdo oo qaaradda Afrika dhex-taal.

Tan iyo xilligaas uu dalku madax-bannaanida qaatay waxaa dalka ka jiray nadaam ku shaqaynayay laaluush, musuq, eex iyo qaraaba-kiil. Siyaasadda liidata, khilaafka lagu dirirayo dhulka hodanka ku ah khayraadka dabiiciga ayaa dalka waxay gaarsiisay heer uu noqdo dalka dunida ugu saboolsan. Sanadkii 1965-kii waxaa dalka af-gembi kula wareegey sarkaal la magaciisa la yiraahdo Joseph - Desire Mobutu, kaas oo magaciisiina beddeshay, dalkiina magaca ka beddeley.

Wuxuu la baxay Mobutu Sese Seko Kuku Ngbendu Wa Za Banga, oo macnahiisu yahay

Mabuutihii guusha waday oo qof joojin-karaa uusan jirin. Magacii dalkana wuxuu ka beddeley Koongo oo wuxuu u bixiyay Zaire.

Ninkan ayaa muddadii uu xilka hayay, wuxuu dhisay hannaan looga tusaale qaato siyaasadda qaraamiga ah ee keli-talisyka oo ay qaaradda Afrika ku caan-baxday. 32 sano ayuu dalka wuxuu ku xukumay caburin iyo caqliyad hal nin leeyahay. Dastuurku wuxuu awoodda dowladda ku urursha shakhsiyaddiisa. Awooddaas ayaa waxay u saamaxday in uu dalka ka dhaco lacag dhan 175 bilyan US.$. Lacagtaas ayuu haystay iyada oo dalka lagu leeyahay deyn dhan shan bilyan US.$. Madax-wayne Mabutu, meeshii uu ku mashquuli lahaa in uu ka shaqeeyo kobcinta dhaqaalaha dalka, wuxuu ku mashquuley sidii uu lacag badan u heli lahaa.

Sarkaalkan oo ahaa taliyaha ciidanka Koongo ee xilligaas, waa ninka soo qabtay halgamaagii reer

Koongo ee la oran-jiray Patrice Lamumba, kaas oo ahaa ra'iisul-wasaarihii ugu horeeyey.

Sida u caadada ah meel-kasta oo keli-talis ka jiro, nadaamka dowladeed waxaa ku xoogeystey musuqii iyo laaluushkii. Waxaa hoos u dhacay dhisma-hoosaadkii. Xukuumaddu waxay ku liidatay siyaasadda dhaqaale ee fur-furan. Sharcigii waa noqon-waayay mid ka sareeya dadka masuuliinta ah. Waxaa fududaatay boobka hantida dad-waynaha. Dhaqanka siyaasadeed ee caynkaas ah, Koongo waxay ka dhaxshay sanadihii 1980-aadkii in noloshii dadka ay u hoobato saboolnimo meeshii ugu liidatay. Dadka reer Koongo waxay gaareen in 70 % ay awood u waayayaan in ay qoysaskooda ay u helaan raashin ku filan. Tirada dadka saboolka ah ee xilligaas dalka ku noolaa waxay ahayd 44 melyan, kuwaas oo 12 melyan oo kamid ah ay ku noolaayeen magaalooyinka waawayn.

Xaaladda waxay ahayd mid sii xumaanaysay tan iyo sanadkii 1998-kii. Dalku wuxuu markaas lugaha la galay dagaal sokeeye. Dagaalkaas ayaa loogu magac-daray (Dagaalkii Adduunka ee Afrika), maxaa yeelay waxaa ka qayb-qaatay sagaal waddan oo Afrikaan ah iyo labaatan kooxood oo hubaysan. Dagaalku wuxuu si ba'an u bur-buriyay dhaqaalihii dalka Zaire (Koongo), waxaa ku dhintay 5,400,000 oo qof. Dadkaasi badankood waxay u dhinteen hoy la'aan, raashin la'aan, biyo la'aan iyo daawo la'aan. 47 boqolkiiba dhimashada waxay ahaayeen carruuro da'doodu tahay shan sano jirro iyo ka yar. Bil kasta waxaa dhimanayay qiyaas 45,000 oo carruur ah. Dhaawaca oo dagaalkaas gaystay ayaa wuxuu yahay mid illaa iyo hadda uusan dalka ka bogsoonin.

# Casharkii 32-aad

Dhallinyaro, inkaarta nicmadaha nacladaysan waa aafad ku habsata ummadihii aanan ka digtoonaan. Waa arin inoo tilmaamaysa xiriirka adag ee ka dhexeeya dhaqaalaha iyo siyaasadda, kuwaas oo khalalka midkood ku yimaada uu saamayn ku yeelanayo midka kale. Haddii dhaqaale dhamaantiis uu yahay hunguri, siyaasad dhamaanteedna ay tahay amni, markii labadaas ay bur-buraan waxaa ka dhalanaya gaajo iyo cabsi xad-dhaaf ah. Fahamka caynkaas ah waxaa ku hor-maray aayadaha kitaabka quraanka ah oo mucjisadiisa ayan dhamaan. Suuradda Al-Naxal, aayadda 112-aad ayaa arinkaas xuseysa, weliba shiddada bulshada ku dhacda ku xiriirineysa fal-xumida siyaasadeed ama dhaqaale ee bulshada ka dhacda. Aayaddu waxay ku soo gaba-gaboobeysaa oraahdan:

(فَأَذَاقَهَا اللَّهُ لِبَاسَ الْجُوعِ وَالْخَوْفِ بِمَا كَانُوا يَصْنَعُونَ)

Aqoon-yahanka Ingiriiska ah ee la yiraahdo Richard Auty, waa ninkii ugu horeeyey oo sanadkii 1993-kii si cilmiyeysan u kashifay raadka casriga ah ee nicmadaha nacladaysan ay ku yeeshaan nolosha ummadah. Xilligaas wixii ka danbeeyey aqoon-yahannada cilmiga dhaqaalaha iyo siyaasadda waxay ku tartamayeen soo-bandhigidda raadadka nacladdan iyo muuqaalada kala duwan ee ka soo if-baxa dowladaha u nugul. Waxaa jira laba qodob oo aqoon-yahannadu ay isku-raaceen kuwaas oo saldhig u ah nacladda nicmadaha. Waxay yihiin hannaanka siyaasadeed ee keli-taliska ah iyo hannaanka dhaqaale ee laaluushka ku dhisan. Labadaas arimood oo saldhig u ah

dhamaan anshaxa nololeed ee laga dhaxlo nacladaha ay nicmaduhu weheliyaan, ayaa waxay yihiin kuwo ay diinta Islaamku goor hore fogeysey, aqoon-yahannada casriga ahna ay maanta ka dhawaaqayaan.

Nick Butler waa aqoon-yahan u dhashay dalka Ingiriiska. Iasgu wuxuu madax ka yahay machadka (Kings Policy Institute at Kings College), isla-markaas muddo 29 sano wuxuu ku-xigeen ka ahaa faraca siyaasadda iyo istraateejiyadda lagu hor-marinayay shirkadda BP (British Petroleum). Ninkan ayaa khudbad uu jeediyay sanadkii 2004-tii wuxuu yiri:

” Waxaa arin muuqata ah, hor u-marka khayraadka dabiiciga ah in uu yahay mushkiladaha lagu ibtileeyey waddamada qaarkood.

Mana ahan arin la imkiri-karo. Aniguna waxaan ku qanacsanahay in ay jiraan howlo laynooga baahan yahay, si aanu u fududeyno xanuunka ay leeyihiin caqabadaha qaarkood.

Waxaana khalad buuxa ah in mowqifkayaga aanu ka bilowno is-diidsiin (lagu inkirayo arintan)".

Nicmadaha nacladaysan, waxaa isna wax ka sheegey aqoon-yahan kale oo u dhashay dalka Ingiriiska, kaas oo la yiraahdo Leif Warner. Isagu wuxuu kamid yahay filosofiinta gorfeeya siyaasadaha casriga ah. Ninkan wuxuu yahay madaxa faraca falsafadda iyo sharciga ee machadka King's College ee magaalada London. Isagu wuxuu kamid yahay in-dheer garadka ku howlan in ay dibadda soo dhigaan raadka foosha xun oo nicmadaha nacladaysan ay ku leedahay nolosha dad-yowga dunida. Isagu wuxuu wax ka

qoray danaysiga siyaasiyiinta qaabka xun u dhaqma ay kaga dukaamaysanayaan hantidan dad-waynaha. Wuxuu gaarsiiyay in hannaankan uu hor-seedayo shrciyo shatiyeysan oo xoojinaya is-adduunsiga aadamiga iyo mabaadi hayb-sooc ah oo uu xoojinayo boob hanti ummad ka dhexeys.

Waa dhif iyo naadir in xikmad-yahannadu ay qoraan buug wayn oo wax ka beddeli-kara halka ay u jihaysan tahay siyaasadda ummadaha. Leif Warner, kama uusan xishoon kamana uusan gabban in uu ka hadlo cawaaqib xumida ka dhalan karta dhaqannada lagu hal-abuuro nicmadaha nacladaysan iyo doodaha lagu daah-qaadayo arintan. Buuggiisa la yiraahdo Shidaal Dhiigeysan (Blood Oil) oo 500 oo safxadood ka kooban, waxay ku qaadatay 10 sano in uu diyaariyo.

Wuxuu si qayaxan oo run ah ugu sheegayaa hoogga iyo ba'a ay nicmadaha nacladaysan ku hayaan dadka uu dhulkooda ka yimaado khayraadka dabiiciga ah. Wuxuu xoojinayaa tayada xuquuqda ay dadku u leeyihiin in ay si wanaagsan ugu noolaadaan nicmadaha ay heystaan. Waa Buug uu si akaadeemig ah ugula hadlayo dowladaha waawayn ee khayraadka iibsada, in ay iyaguna is-xushmeeyaan aadamiga kalena xushmeeyaan oo ayan noqon kuwo iyaga keliya ka faa'iideysta nicmadaha.

Nicmadaha nacladaysan ayuu ka sheekeeyey in ay tahay hanti sababaysa awood aanan lala xisaabtamin, caddaalad-darro furan iyo baahi joogto ah, taas oo dad badan oo dnida ku nool ay la dhiban yihiin. Buuggu wuxuu tilmaamayaa in dhibaatada dunida maanta ayan ahayn madaxda dowladaha waawayn oo keliya, bal ay tahay xataa xeerarka dowladaha waawayn, kaas oo xasillooni-darri u geysanaya dadyowga ku

dhaqan Afrika iyo bariga dhexe. Isla-markaas qoraagu wuxuu tilmaamayaa in ay suuragal tahay in xeerarkaas wax laga beddelo oo la raadiyo cadaalad u dhexeysa haybta aadamiga iyo xasillooni la-wada dheefsado.

Leif Wenar, qoraalkiisa kagama uusan harin keliya in uu soo bandhigo nicmadaha nacladaysan, bal wuxuu raaciyay hagidda lama huraanka ah oo looga badbaadi karo nacladdan. Waxay tahay in aanan lakala qaadin siyaasadda, dhaqaalaha, iyo anshaxa, oo loo arko mid isku-dhafan. Waxaa arinkaas lagu ogaanaynaa ayuu yiri Leif Wernar, sida iyo sababta ay dad badan ugu lug leeyihiin curinta nacladda. Waxaa kale oo aqoon-yahankan uu xusayaa sida lagu khasban yahay in la sameeyo si adduunyo lagayeeley degaan fiican oo lagu nasto.

# Casharkii 33-aad

Dhallinyaro, dhaqaal-yahanka la yiraahdo Peter Albert Singer ayaa kamid ah culimada ka qaylisay dhaawaca nicmadaha nacladaysan ay u geysanayaan aadamiga. Isagu wuxuu u dhashay dalka Australia, wuxuu macallin ka yahay jaamacadda Princeton ee dhacda dalka Mareekanka. Wuxuu ku takhasusay Falsafadda Anshaxa Noolaha (Bio-Ethics Phylosophy). Wuxuu qoray buug uu ku magacaabay duni mid ah waa waxa ugu wanaagsan oo aad samayn-karto (One World and The Most Good You Can Do). Qoraalka buuggaas waxaa kamid ah sidan:

” Dhibaatooyinka aadamiga ugu sugan anshax-la’aanta ganacsiga maanta jira, wuxuu tilmaamayaa in uu yahay mid nolosha quus ka gelinaya dad aad u tira badan, kuwaas oo xaq u lahaa in ay nolol wacan helaan”.

Dhaqaal-yahanka la yiraahdo Angus Deaton ayaa isna wuxuu kamid yahay culimada ishaartay nicmadaha nacladaysan. Isagu wuxuu u dhashay dalka Mareekanka Wuxuu macallin ka yahay Jaamacadda Princeton ee magaalada New Jersey (USA). Sanadkii 2015-kii wuxuu ku guuleystey billadda caalamiga ah ee Nobel Prize. Ninkan ayaa wuxuu qoray buug uu ugu magac-daray Baxsashadii Wayneed Caafimaadka, Barwaaqada, iyo Asalka Sinnaan la'aanta (The Great Escape: Health, Wealth, and the Origins of Inequality). Isaga oo la hadlaya muwaadinka u dhashay waddamada horey u-maray, wuxuu buuggiisa ku qoray:

” Miyaad weligaa ka walwshay in kharashka aad bixinaysid uu taageerayo kuwa hoggaamiya bulshooyinka xanuunsan (Socio-Pathic) iyo

marya-calasta xag-jirka ah kuwaas oo murugada ku reeba dalal badan oo Afrika iyo adduunka kale ah. Iibsigaaga shidaalkana in uu gacan siinayo caddaalad-darrida iyo dulmiga si lamid ah sida Ingiriiska sokor uu mar-qura soo iibsaday ay u dhalisay in uu qaaradda Afrika gumeysto”.

Haddaanu soo aragnay waddamo dhisan oo xasillooni siyaasadeed haysta sida ay nacladdu u baabi’isey, bulsho xanuunsan oo ciidamadeedu marya-calas u badan yihiin, maxaa laga filayaa markii ay khayraadka la soo baxdo. Waxaa hubaal ah in ay la kulmayaan nacladaha ay ka digayaan khuburada kuwooda ugu xun. Haddaanu eegno waddanka Koonfurta Suudaan, waxaanu heleynaa in dadkeedu ay muddo nus qarni ah u soo dagaalamayeen madax-bannaani. Si ay uga go’aan waqooyiga Suudaan oo ay u noqdaan dowlad xor ah waxay soo mareen halgan kharaar oo ku badiyay qubuuro iyo dhaawac ay weheliso saboolnimo. Iyagu waxay

doonayeen in ay u tallaabaan nolol ay weheliso xasillooni siyaasadeed iyo beryasamaad dhaqaale. Laakiin waxaa hoog iyo ba' dadkeedii ku noqday lacagihii badnaa oo uga soo noqonayay shidaalkii uu dalka soo saarayay. Khilaafkii lacagahaas ay ka dhex-dhaliyeen qabaa'ilkii Koonfurta Suudaan, wuxuu noqday mid ka qallafsan midkii dhex-yiil iyaga iyo dowladdii Suudaan oo uu dagaalka ka dhexeeyey.

Dalkan oo madax-bannaanidiisii ka qaatay waqooyiga Suudaan 9-kii july 2011-kii, ayaa dadka ku dhaqan waxay dhan-yihiin 12 melyan. Dalku wuxuu hodan ku yahay hantida dabiiciga ah oo xoolaha iyo beeraha ay ugu horeeyaan. Waxaa dalka dhex-mara webiga Niil. Waxaa Koonfurta Suudaan intaas u weheliya nicmadda nacladaysan (saliidda ceyriin). Isla-markaas dalku wuxuu leeyahay awood iyo kaabayaal dhaqaale oo ka nadiifisan kana xalaalsan

shidaalka ay dowladdu ku tiirsan tahay maanta. Shirkadda Nilepet (Nile Petroleum Corporation) oo ay dowladdu leedahay waa shirkad ku xiran shirkadaha shidaalka ee caalamiga ah.

Isaga oo dalku uu lix bilood madax-bannaani haysto ayaa dowladda Mareekanka waxay fadhi u qabatay masuuliin kamid ah Koonfurta Suudaan. Shirkaas oo lagu qabtay magaalada Washington, arimaha laga hadlayay waxaa ka mid ahaa qaabkii ay dowladdooda ku badbaadsan lahaayeen. Shirku wuxuu dhacay 13/ 12- 2011-kii. Masuuliintii iyo aqoon-yahannadii ka hadlay waxaa jamid ahaa wasiiraddii dibadda ee Mareekanka Hillary Clinton. Iyadu waxay sheegtey hoggaanka ka arradan damiirka iyo lacagaha ay bixinayaan shirkadaha shisheeye in ayan noqon kuwo dila rajada ay dadku qabaan. Waxay kula dardaarantay madaxdii shirkaas ka soo qayb-galay oo uu kamid ahaa madax-waynaha hadda

xilka haya Salva kiir Mayardit, in ay xoojiyaan siyaasadda daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka, gaar ahaan qaybta shidaalka. Haddii taas la waayo, wasiiraddu waxay madashii ka sheegtey in khayraadkaasi uu nacald ku noqonayo shacabka koonfurta Suudaan. Hadalkii ay jeedisay waxay ku sheegtey kheyraadka dabiiciga ah oo dalkaasi leeyahay in uu noqon karo mid baraare u horseeda dowladda iyo dadkeeda. Iyadu waxay tiri:

” Waanu ogsoonnahay in ama uu noqonayo mid gacan-siiya dadaalka uu dalkiina ugu jiro in uu kaga baxo saboolnimada, ama inaad baylah u noqon-doontaan nacladaha ay nicmaduhu wataan, taas oo hodan ka dhigaysa kooxda hor-joogayaalka tirada yar iyo shirkadaha dowladaha shisheeye. Sidaas ayaa xaaladda shacabkiinuna ay u ahaanaysaa mid aanan ka-soo rayn”.

# Casharkii 34-aad

Dhallinyaro, wuxuu Soomaaliya kala mid yahay siyaasadda qabiilka, dhaqanka xoolo-raacatada iyo dib udhaca. Wax badan oo kamid ah natiijooyinka ka soo baxa cabbirka kala duwan ee hal-beegga u ah hor umarka ummadaha, Koonfurta Suudaan waa dalka nagula tartamaya lambarka ugu hooseeya. Waxay na dheer-yihiin shidaalka badan oo dalkooda laga heley. Sidaa darteed wuxuu tusaale wacan u noqon-karaa, goorta Soomaaliya ay hesho shidaal badan sida uu sawirkeeda noqonayo. Koonfurta Suudaan waxay soo-saartaa 75 % shidaalkii uu dalka Suudaan soo saari jiray markii ay midaysnaayeen. Hantidaas ayaa dalkaasi go'ay wuxuu ka yeeli karay dalka ugu hodansan dowladaha gobolka, haddii si wanaagsan loo maarayn lahaa. Yeeyanba lahaan hanti kale, laakiin waxay heleen xaashiyo badan oo lacag

ah. Nasiibdarrida heshey ayaa waxay noqotay in koox yar oo fursad ku heshey taladii dalka ayaa waxay noqdeen kuwo garaadkoodii uu dhaafi-waayay xantoobsiga dakhligii dowladda ee ka imanayay shidaalka. Dabadeed sidii la filayay ayaa dhacday oo hantidii ay heleen ayaa nacalad ku noqotay.

Guud ahaan shidaalka Suudaan hantida gashay 40 % waxaa lahaa Shiinaha, 30 % waxaa lahaa Maleesiya, 25 % waxaa lahaa Kanada, 5 % waxaa lahaa dowladda Suudaan. Shixnaddii ugu horeysey oo shidaal ah waxay ka dhooftay dekadda dekadda Bashaa'ir ee dhacda badda Cas. Shidaalka markaas baxay wuxuu ahaa mid soo qul-qulay tuubo wayn oo dhererkeedu yahay 1,600 km, taas oo ka imanaysay gobolka Gardafaan. 30/ 8- 1999-kii ayay ahayd maalinta uu baxay shidaalkaas oo qiyaastiisu ahayd 160,000 oo bermiil oo batrool ah. Muddo saddex sano ah waxaa la gaarsiiyay 220,000 oo bermiil.

Qabaa'il tobaneeye ah ayaa dalka ku dhaqan, kuwaas oo qabaa'ilka reer Niil (Niletic Tribes) ay ugu badan yihiin. Qabaa'ilka Niil waxay matalaan 65 %. Waxaa qabaa'ilkan u dhashay reeraha awoodda ku leh siyaasdda dalka. Qabiilada ugu badan reer Niil waa qabiilka la yiraahdo Dinka, kuwaas oo matala 40 %. Waxaa reerahan ka dhashay madax-waynihii hore John Garan iyo madax-waynaha hadda jooga Salva Kiir. Qabiilka labeeya waxaa la yiraahdaa Nuweyr, waa qabiilo ay reer Niil isla-yihiin. Nuweyr waxay matalaan 25% reer Niil. Labada qabiilo (Dinka iyo Nuweyr) waa wada dhasheen oo waxay ku abtirsadaan odey mid ah oo ay u aqoonsan yihiin in uu awoowe u yahay, kaas oo la yiraahdo Laangoor. Odeygaas ayaa laba wiil oo uu dhalay midna waxaa la yiraahdaa Ding oo waxaa ka soo farcamay qabaa'ilka Dinka, midka kalena waxaa la yiraahdaa Abiino-Yaniq oo waxaa ka soo farcamay qabaa'ilka Nuweyr.

Reerkan danbe waxaa ka dhashay madax-wayne xigeenkii dowladda Koonfurta Suudaan, kaas oo magaciisa la yiraahdo Riek Machar.

Labada reer waxaa ka dhexeeya af-qura iyo dhaqan mid ah. Caqiidaduna waa ka mideysan yihiin. Waxay ku wada jireen jabhadda SPLA (Sudan People's Libretion Army), taas oo muddada dheer u soo halgantay madax-bannaanida dalka. Mar qura ayaa qabaa'ilkii koonfurtu waxay isla-heleen madax-bannaani ay hoggaankeeda diyaar u ahayn iyo shidaal ayan xisaabtankiisa diyaar u ahayn. Arin muuqata ayay ahayd in ayan tabar u lahayn ay ku wladaamiyaan noloshan cusub oo ay galeen. Markii ay ku heshiin waayeen dowladnimadii iyo hantidii, waxaa ku soo deg-degey nacladihii weheliyay nicmadda. Madax-bannaanidii Koonfurta-Suudaan waxay noqon-kartay barnaamij qurux badan oo caalamku uu si guud uga soo shaqeeyey, kaas oo lagu soo af-jaray

dhiiggii badnaa oo halkaas ku qubanayay. Waxaa kale oo loo hanwaynaa xukuumaddan curdanka ah in ay noqoto hannaan dimoqraadi ah oo qaaradda Afrika ku soo kordhay. Laakiin laba sano gudahood ayaa nicmaddii nacladaysneed waxay miiskii u soo fariisatay golayaalkii dowladda. Goortii lays qancin-waayay, dagaal sokeeye ayaa ka dhex-qarxay oo qabaa'ilkii waxay noqdeen kuwo is-laaya.

Dabayaaqadii sanadkii 2013-kii, ayuu dagaalkaas qarxay, isaga oo ka bilowday tuhun isku-dey af-gembi oo madax-waynuhu uu ku eedeynayay ku-xigeenkiisii Riek Machar. Hub noocyadiis oo ay haysteen ayay isu adeegsadeen. Kufsashada dumarka waxay kamid ahayd ciqaab ay qabaa'ilku u adeegsanayeen colaadda ayisu-hayeen. Qabiilo-walba caruurteeda waa ku dagaal-geleysey, iyada oo caruuraha qabiilka kale layneesa. Is-xasuuqid iyo is-qixin fool-xumo badan ayay muddo gaaban is-mariyeen labadii

reer ee walaalaha ahaa (Dinka & Nuweyr). Tiro ka-badan 10,000 oo qof ayay iska-dileen.

Dhaawaca nicmadda nacladaysan ay u geysatay dalkan maahayn mid ku ekaa Koonfurta Suudaan oo keliya. Bal waxay u gudubtay qaxooti badan oo u tallaabay Suudaan oo ah dowladdii ay ka soo go'een. Dalka Suudaan xilligaas maahayn mid qaadi-karay tirada badan oo qaxootiga ee uga imanay dalkii ay kala go'een. Dhaqaale ahaan iyo nabad-gelyo ahaan, dadkaasi muddada gaaban ku soo qacay, culays ayay ku ahaayeen Suudaan. Waxaa kale oo dhibaatadu ay gaadhay labad oo la deris ah kuwaas oo qudhoodu aanan xasilloonayn. Dalka Koongo iyo dalka Bartamaha Afrika oo qudhoodu uu dagaal-sokeeye ka jiray ayaa qaxootigii Koonfurta Suudaan ay u tallaabeen. Waxaa iyana xuduud la leh Koonfurta Suudaan Ugaandha, Keenya iyo Itoobiya, kuwaas oo fiiro gaar ah ku hayay shidaalka halkaas laga heley.

Damac dhaqaale oo xoogganna uu kaga jiray in ay qayb ka helaan lacagahaas badan oo dowladdan curadnka ah ay heshey.

# Casharkii 35-aad

Dhallinyaro, taariikhdu markay ahayd 6/ 3-2018-kii, hay'adda la yiraahdo Global Witness, waxay qoraal ka soo saartay, dowladda Koonfurta Suudaan boobka iyo dhaca ay ku haysa hantida uu dalku leeyahay oo dadku ay wadaagaan. Hay'addan waa mid madax-bannaan oo kuma xirna dowlado iyo ururo siyaasadeed. Si heer caalami ah ayay daba-gal ugu samaysaa saamaynta adeegsiga khayraadka dabiiciga ah uu ku leeyahay saboolnimada, laaluushka iyo ku-tumashada xuquuqda aadamiga. Qoraalka ay hay'addan soo saartay wuxuu sheegaya, qaar kamid ah siyaasiyiinta dalka hoggaamiya iyo saraakiisha sare ee ciidanka in ay si gaar ah u qaybsadaan lacagta ka timaadda shidaalka.

Shirkadda la yiraahdo Nile Petroleum Corporation (Nelpet), oo ah shirkad shidaal oo dowladdu lahayd ayaa maamulkeeda wuxuu si buuxa ugu gacan-galay madax-wayne Salva Kiir iyo kooxdiisa. Shirkaddu waxay si qoto dheer ugu dhex-jirtay silsiladaha shirkadaha waawayn ee dunida ka jira. Waxay xiriir la leedahay wershadaha dib-u-habaynta caalamiga ah iyo ganacsatada saliidda iyo badeecadeheeda.
Shirkadaha waawayn ee caalamiga ah oo Nilepet ay la macaamali-jirtay, waxay leeyihiin masuuliyad iyo fursad ay ku istcimaalaan saameyntooda. Nilepet waxay awood u lahayd in ay ka faa'iideysato khibradda iyo hufnaanta ay shirkadahan ku shaqeeyaan.

Shuraakada ganacsi ee caalamiga ahi waxay door muhiim ah ka ciyaari kartaa loollan hab-dhis maamul leh hannaan daah-furan oo ku shaqeeya isla-xisaabtan. Laakiin arintaasi waxay ka hor-imanaysaa maslaxadda gaarka ah oo ay

leeyihiin masuuliinta hoggaanka u haya siyaasadda dalka lagu maamulo. Sidaas ayaa nicmaddii uu dalku heley waxay ku noqotay mid nacladaysan oo bulshadii u soo jiidda inkaar iyo habaar. Hay'adda Global Witness, waxay ku tilmaantay dalkaasi in uu lamid yahay dalka Soomaaliya. Hay'adda daahfurnaanta dunida, ayaa ku tilmaantay labadan dal (Koonfurta Suudaan iyo Soomaaliya) in ay yihiin kuwa ugu fasaad badan dunida. Sababtaas ayaa dhalisay in Koonfurta Suudaan ay u la'dahay xasillooni tan iyo markii ay madax-bannaanida qaadatay. Nin la yiraahdo Michael Gibb oo kamid ah masuuliinta hay'adda ayaa yiri:

” In-kasta oo dadka Koonfurta Suudaan ay weli la silcayaan dagaal aan caqli-gal ahayn iyo qalalaasaha dhaqaale ee hoggaamiyayaashoodu samaynayaan, shirkadda Nilepet xubnaheedii dhabta ahaa waxay ku guul darreysteen in ay u adeegaan danaha qaran.

Sidaa darteed waxay noqdeen kuwo loo istcimaalo sidii loo sii dheereyn lahaa colaadda foosha xun".

Xaaladda Soomaalida ayaa waxay u muuqataa mid aanan ka agab-sokeyn mashaqada ay Koonfurta Suudaan ka dhaxashay nicmaddii iyo madax-bannaanidii ay mar qura gacanta ku dhigtay. Eebe kama dhigo, laakiin waxaanan laga fursanayn, haddii shidaal la soo saaro iyada oo aanan laga gaashaaman nacladda la socota nicmadaha, in markaas Soomaaliya ay wajahayso xeerkii ahaa nicmadaha nacladaysa. Sidaa darteed qof-kasta oo arintan fahamsan wuxuu ka digayaa inaanan lagu deg-degin heshiisyada guracan oo waraaqaha saxiixyadooda laysku weydaarsanayo daahyada gadaalkooda, iyada oo dadwaynaha lagu qancinayo barwaaqo-sooran ayaanu gaareynaa. Musaqa baahsan, maamullada laaluushka ku dhisan, hannaanka madax ka-noolka ah, daah-

furnaan la'aanta, maqnaanshaha isla-xisaabtanka, talada aan la wadaagin, hay'adihii xeer-ilaalinta oo liita, dhamaantood waa dhuxulo dansan oo dhowraya in lacagaha shidaalku ay huriyaan.

Cilladaha dhaqaale ee lagu magacaabo nicmadaha nacladaysan waa hab-dhaqan nololeed ee cakiran, taas oo ay sabab u tahay maamul-xumo siyaasadeed ama maalgashi lacago ka yimid dakhli shidaal oo ay soo galeen dowladaha soo saara saliidda. Haddii aanan si cilmiyeysan looga hor-tegin cilladahan ku laasiman khayraadkan, hadba inta uu le'egyahay xoogga khayraadka, naclad u dhiganta ayaa bulshada ku dhacaysa. Tan iyo sanadkii 2003-dii, kharajka ku baxa howlaha la xiriira sahanka iyo soo-saaridda shidaalka ee caalamka wuxuu kordhay 300 %. Arimaha sababay kororka qiimaha waxay ka dhalatay howlaha lagu gaarsiinayo shidaalka seyladaha caalamiga iyo

tayaynta shidaalka qudhiisa, kirada aqoonyahannada ka qayb-qaadanaya heerarka kala duwan ee howsha, dhowrista dhaawacyada cimilada gaaraya iyo fulinta howlaha wakhtigii loogu tala-galay degaanada aanan xasilloonayn.

Ma-jirto dowlad dhulka ka dhisan oo aqoon-yahannadu ayan u qaadan cabbirka nicmadaha nacladaysan. Sida ay nolosha ula hayaanto waayaha, si lamid ah ayaa hannaan walba oo aadamigu dhistay ay nolosha ula hayaamaysaa. Hayaanka hannaanka siyaasadeed in uu yahay mid togan iyo in uu yahay mid taban ayay ku xiran tahay in laga badbaado iyo in ay dhacdo cuqubada nacladdan.

Ummadaha fahmay cudurkan iyo cilladaha weheliya, waxay bixiyaan daal xooggan oo ay ku hagaajinayaan dowladnimadooda. Tallaabada ugu muhimsan waa musuqa oo la yareeyo, taas oo yareeneysa kharajka hawlgalka, isla-markaas

muunad u yeeleysa howlihii socdey iyo dowladnimada. Musuqa oo la yareeyo waxaa la yaraanaya arimo badan oo ay kamid yihiin qiimaha ku baxaya kordhinta wax soo saarka, qiimaha ku baxaya kor u qaadidda heerarka nolosha ee dadka ku nool waddamadan. Waxaa markaas fududaanaya abuurista baahiyo cusub iyo seylado ka qayb-qaata baraaraha iyo barwaaqo-sooranka bulshada.

# Casharkii 36-aad

Dhallinyaro, waxaa jira erey-bixinno badan oo fagaaraha aqoonta iyo siyaasadda ka dhaqan-galay, kuwaas oo la xiriira shidaalka. Erey-bixinadan oo dhamaantood ah kuwo ku mataanaysan erey-bixintii ahayd nicmadaha nacladaysan, ayaa waxay tilmaamayaan shiddooyinka iyo mixnadaha la socda shidaalka. Ereyadan cusub waxaa kamid ah colaadda betroolka (Petro-aggression), dagaalka betroolka dollareysan (Petro-dollar warfare), siyaasadda betroolka (Petroleum Politics), nabadgelyada saliidda (Oil Security), asmadda saliida (Oil Crisis) iyo istraatejiyadda shidaalka (Oil Strategy). Erey-bixinnadan mid waliba wuxuu leeyahay qeexid aqooneed oo lagu fasirayo raad kamid ah raadadka uu shidaalku ku leeyahay noloshacasriga iyo mashaqooyinka uu aadamigu dhex-dhigay.

Ereyga ugu shiddada badan waa ereyga ah nicmadaha nacladaysan, kaas oo taabanaya siyaasadda, dhaqaaliha iyo anshax laga dhaxlayo shidaalka. Waddamada ku hodmey hantida shidaalka, intooda badan maamullada u dhisan waxay noqdaan kuwo dad-waynahooda dhaxlsiiya saboolnimo baaxad wayn iyo colaad sokeeye.

Taasi waa dhacdada dhabta ah oo siyaasadda dhaqaale ee khayraadku ay wataan. Nolosha musuqa ah ayay dhurwaayadu waxay u helayaan cimilo siyaasadeed oo u saamaxda ugaarsiga lacagaha dakhliga ah oo dalka ugu soo dhacaya sidii dhibcaha roobka.

Xaaladdu waxay sii xumaanaysaa haddii uu nadaamku yahay mid intuusan khayraadka helin musuqa iyo cadaalad-xumida ay ku baahsan tahay.

Markaas khayraadka la heley ma noqonayaan cudur oo keliya, ee waxay noqonayaan nicmado nacladaysan.

Goobta ugu horeysa oo ay ka bilaabanayso cilladda nacladaha keenaya waxay tahay, qandaraasyada musuqa lagu saxiixayo ee lagu bixinayo degaanada ay ku jiraan khayraadka dabiiciga ah. Gaar ahaan iyada oo lala kaashanayo xuquuqda hantida si khaldan loo bixinayo. Sida aanu soo xusnay, seyladaha suuqa madow iyo qaab dhismeedka sharciga ee dalka waxay keenaan kiro qarsoon oo ay ku heshiiyaan kooxda musuqleyda ah iyo shirkadaha soo-saarayaasha khayraadka.

Waxaa halkaas bulshada laga weecinayaa xuquuqdii ay ku lahaayeen talo-wadaagga iyo nafac-qaybsiga.

Meesha ugu horeysa oo nacladda nicmadaha ay ka imanayso waxay tahay inaanan la diraaseyn khayraadka, seyladda ganacsiga iyo qaab-dhismeedka xeerka dalka u yaal ee kheyraadka.

Sababta ay nacladdu ku soo deg-degeyso waxay tahay, qaabka ay dowladuhu u bixinayaan kirada degaanada khayraadku ku jiraan. Waxaa jira ayniyo kala duwan oo heshiisyada loo dhigto, kuwaas oo qaarkood lagu-galo heshiisyo saxiixan oo ku dhisan musuq-maasuq.

Gaar ahaan arin dareen abuureysa ayaa waxaa ah heshiisyada hor-dhaca ah oo laysku gacan-saarayo in wax la xado. Sidaa darteed xubnaha dowladda u matalaya wada-hadalka khayraadka, iyaga oo ka faa'iideysanaya awoodda ay ku heleen xilka ay dad-wayanaha ku matalaan, ayaa waxay ku dadaalayaan in ay carqaladeeyaan heshiiyadii saxa ahaa oo lala geli-lahaa shirkadihii saxa ahaa.

Xubnahaasi oo iyaga iyo kuwa ka sareeyaba aanan lahayn dhaqan hagaagsan iyo anshax hufan, waxay ku dadaalayaan in heshiiska ay siiyaan shirkado iyo shakhsiyaad ay heshiis-hoosaadyo qarsoon la dhigteen.

Heshiisyada kirada iyo lacagaha laga helo ee dhuumaalaysiga lagu kala qaato, lacagaha badan ee faa’iidada ah ayay ka weecinaysaa tubtii habooneyd ee looga faa’iideysan lahaa. Sida caadadu tahay, arintaasi waxay curyaamisaa hababka saxa ah oo ummaduhu ay ku hagaagsadaan nolosha kuna qaangaaraan.

Kirooyinka musuqa ku dhisan waxay xoojinayaan dhiiri-gelinta shakhsiyaad ku hodma heshiisyada la dhiganayo, kuwaas oo ku naaxa hantida ka dhexeysa dad-waynaha.

Shakhsiyaadkaas ayaa markii ay is-fahmayaan shirkadaha shisheeye, waxay cudur ku noqdaan

socodsiinta nadaamka dowladnimo. Waxaa halkaas ka dhalanaya in uu xumaado hannaankii dhaqaale ee dowladda iyo in ay daciifto cadaaladdii ay bulshada ku wada-joogtay. Dabadeed waxaa baaba'aya is-haysadkii bulshada iyo wada-noolaanshihii. Waxaa xumaanaya dhaqankii iyo xeerarkii ay dadku ku wada-noolaayeen.

Musuqaas qalloocinaya u qoondaynta nicmadaha dad-waynihii dhaxalka u lahaa iyo hambada loo reebayo facahooda danbe wuxuu tallaal u noqonayaa wax-tar la'aanta nicmadaha iyo in ay nacladdii soo deg-degta. Dhaqaal-yahannada ku howlan diraasaadka nicmadaha nacladaysan waxay si adag uga digaan musuqa weheliya heshiisyada bilowga ah ee lagu bixinayo kirada degaannada nicmaduhu ku jiraan. Bahdalaadda lagu samaynayo xeerarka u degsan dowladda doonaysa in ay khayraadka la soo baxdo iyo musuqmaasuqa maaliyadeed oo

ay sida qarsoon ugu adeeganayso, ayaa waxay caqabad ku noqdaan hufnaanta dhaqaalaha iyo koboca laga filayo in lagu gaaro nicmado dadku ku nastaan. Markaas ayaa waxay nicmadihii dalku lahaa oo faco badan ay ahayd in ay masruuftaan, waxaa dheefsanaya shirkado shisheeye iyo koox yar oo xilal sare haya.

# Casharkii 37-aad

Dhallinyaro, marka ayan ummaduhu u diyaargaroobin adeegsiga khayraadkooda dabiiciga ah waxay ku hoobataa khilaaf siyaasadeed oo curiya dagaal sokeeye, kaas oo lamid ah dagaalladii sokeeye oo ka dhashay dheemanka. Colaadaha caynkaas waxaa la qiyaasayaa in ay ku dhinteen dad lagu qiyaasay in ay ka badan-yihiin toban melyan oo qof. Dagaalladaas waxaa kamid ah dagaallada loo yaqaan Dheemankii Dhiigeysnaa (Blood Diamod), kuwaas oo ka dhacay waddamo badan oo qaaradda Afrika ku yaal.

Waxaa kamid ah Angola, Sierraleon, Koongada Dimoqraadiga ah, Ivory Cost, Liberia, Zembabwe iyo Dalka Kongo. Dhagxanta dheemanka ah waxaa laga soo saaraa aagag ay ka taliyaan xoogag mucaarad ah oo ku gadoodsan dowladdo caalamka laga aqoonsan yahay.

Mucaaradka ayaa iibiya dheemankan, lacagtana waxaa loo adeegsadaa in lagu iibsado hub ama lagu maalgeliyo falalkooda mileteri.

Waxaa xusid mudan in dhagxantaas laga sameeyo lacago balaayiin dollar ah. Colaadaha halkaas ka curta maahan kuwo ka dhasha oo keliya dhaawaca qul-qulka lacagta aanan loogu adeegeyn danaha guud ee bulshada.

Bal waxaa intaas u dheer in lacagtii ay musuq iyo laaluush ku bur-burinayso mu'asasaadkii dowladeed ee dalka u dhisnaa iyo hannaankii sareynta sharciga. Waxaa intaas ka xoog wayn oo dhalinaya in bulshadu ay is-leyso waa damaca xoolo-badsiga oo ku abuurmaya ragga hoggaanka haya iyo saaxiibadooda xaaraan ku-naaxa ah. Iyagu waxay isku-deyayaan muddada xil-haynta oo la dheereysto. Markaas ayaa waxaa sii xoogeysanaya in hantidii dhaqaale iyo hoggaankii siyaasadeed ay si adag ugu ururaan

gacmaha koox aanan arxan lahayn, kuwaas oo dhaqaalihii dalka ku xoojinaya xooleyntan kooxaha xukunkooda daacadda u ah. Is-diidka iyo is-xoqidda dowladda iyo dad-waynaha waxaa ku daciifaya magacii iyo madax-bannaanidii umaddaas nacladdu ku dhacay.

Haweeney u dhalatay dalka Mareekanka oo la yiraahdo Prof. Gildred Terry Karl ayaa sanadkii 2004-tii waxay soo bandhigtay diraaso ay samaysay oo la xiriirta aragtida nicmadaha nacladaysan. Haweeneydan oo ku takhasustay aqoonta siyaasadda, ayaa waxay macallimad ka rahay jaamacadda (Standford University). Siminaar loo qabtay toddobaadkii shidaalka ayay ku soo bandhigtay shax aynu ka soo qaadanay qayb tusaale ah, taas oo tilmaamaysa shidaalka badan oo la soo saaro iyo sida uusan marna uga qayb-qaadan hor u-marka bulshada.

Shaxdaas oo inoo tilmaamaysa nicmadaha nacladaysan waxay muujinaysaa, dowladaha shidaalka badan haysta in ay kamid yihiin kuwa ugu nolosha liita dunida. Shaxdii waatan ee hoos ka dheeho:

Sanadkii 1983-kii, dalka Ciraaq dakhligiisa 98,87 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 2003-dii, dalka Nijeeriya dakhligiisa 97,90 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 1991-kii, dalka Angola dakhligiisa 94,83 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 1997-kii, dalka Liibiya dakhligiisa 94,78 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 1995-kii, dalka Koongo dakhligiisa 87,64 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 2000, dalka Venzuella dakhligiisa 84,56 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Sanadkii 2000, dalka Turkmanstaan dakhligiisa 81,01 wuxuu ku xirnaa shidaalka

Waddamada shidaalka ku hodmay ee ku bahoobay ururka soo-saarayaasha shidaalka OPEC (Organization of the Petroleum Exporting Countries), muddadii u dhexeysey 1965 – 1998, dakhliga dadkooda wuxuu hoos u dhacay 35 %.

Isla-muddadaas dadka u dhashay waddamada hor u-maray oo aanan shidaalka lahayn, dakhliga dadkooda wuxuu kor-dhay 105 %. Arintaasi waxay tilmaamaysaa sida dowladaha qaarkood u hor-mareen iyaga oo aanan lahayn hanti dabiici ah iyo sida nicmadaha nacladaysan ay addimada u qabtay dadkiisa.

Waxaa intaas dheer, waddamada dhaqaalahoodu ku xiran yahay shidaalka, waxay kamid yihiin kuwa ugu liita cabbirka dowladaha adduunka ee dhanka caafimaadka, gaar ahaan geerida hooyada iyo dhallaanka.

Isla-markaas dadkoodu waxay kamid yihiin, guud ahaan kuwa ugu caafimaad liita. Hantida dowladdu maahan kuwo lagu bixiyo tayaynta nolosha dad-waynaha. Marka la eego dhanka waxbarashada, caruurtoodu mahaystaan waxbarasho tayo wanaagsan.

Dowladaha ku bahoobay ururka OPEC, wadar ahaantooda, caruurta fursadda u haysta in ay dugsi sare dhigtaan waa 57 %. Waxaa halkaas ka muuqata tiro ku dhow kala-bar caruurta waddamadaas in ayan awood u lahayn in ay dugsi sare fariistaan.

Australia, Kanada, Norway, Ingiriis iyo Mareekan waa shanta dal oo cabbirka dowlad-wanaagga dunida mar-walba isku-beddela tirsiga ugu sareeya. Dowladahan shanta ah ayaa waxay leeyihiin 5 % keydka shidaalka adduunka.

Waxaa taas ka-soo hor-jeedda 12 dal oo leh 68 % keydka shidaalka adduunka. Waddamadan 12-ka ah ayaa waxay mar-walba fadhiyaan meesha ugu hooseysa cabbirka dowladwanaagga. 12-ka dal waxay yihiin Aljeeriya, Angoola, Shiino, Ciraaq, Iiraan, Kasakhistaan, Liibiya, Nayjeeriya, Ruush, Sacuudiga, Venzuela iyo Yaman.

Nicmadaha nacladaysan waxaa laga bartay, shidaalku in uu hor-joogsanayo talo-wadaagga iyo gebi ahaan dowlad-wanaagga. Dowladaha shidaalka soo saara, labaatanka dal oo ugu waawayn, hoggaamadooda waxaa doorasho xor

oo xalaal ah ku yimaada laba dal oo qura (Meksiko iyo Venzuela).

# Casharkii 38-aad

Dhallinyaro, nacladda dhaqaalaha ka timaadda waa inkaar ku dhacaysa dal-kasta oo dhaqaalihiisa ka yeela mid ku tiirsan hodantooyada nicmadaha dabiiciga ah, isla-markaas ka caajisa in uu qorsheysto siyaasad dhaqaale oo ku dhisan xirfado kala duwan. Waxay ku dhacaysaa ummad kasta oo dhaqaalihii dulmi u adeegsata. Waa inkaar tilmaamaysa dowladaha caynkaas u dhaqma in aayahoodu ku danbeynayo saboolnimo, colaad iyo qaxooti. Waxaa arin lala fajaco ah, masuuliinta waddamada khayraadka soo saara, waa ay soo dhoweynayaan in lagala shaqeeyo wixii la xiriira sharciyada lagula heshiinayo shirkadaha ka shaqaynaya soo-saarka shidaalka. Laakiin iyagu waxay neceb yihiin in lagala shaqeeyo hannaanka daah-furnaanta leh ee lagu

maaraynayo lacagaha dalku leeyahay ee ka imanay iibka shidaalka.

Nabarka ugu culus oo ay ka bilaabanayaan dhaawacyada khayraadka wuxuu yahay in uu kala-jaro xiriirka u dhexeeya cashuur bixinta iyo dowlad dhisidda. Haddii uusan dalku lahayn dowlad talo-wadaag ah iyo mu’asasaad kala madax-bannaan, markii shidaalka la-helo dowladdu waxay markiiba isu dhalan-rogtaa hannaan keli-talis. Sababtu waxay tahay, marba haddii ay si fudud ku heleyso dakhligii ay wax ku maareyn lahayd, uma ay baahna dad-wayne ku taageera xoog dhaqaale (cashuuro ururin) iyo taageero siyaasadeed (cod doorasho). Sidaa darteed, dhibaatada ka imanaysa nacladdan maahan mid salka ku haysa ciriiri dhaqaale ee waa mid salka ku haysa ciriiri cadaaladeed.

Goortii shidaal laga soo saaro waddan sabool ah, mu'asasaadkiisuna ay liitaan, waxaa markiiba curanaysa falal laaluush ah, taas oo aan la celin-karin illaa ay gaadho meesha ugu sareysa oo ay bulshadu ku baaba'do. Waxaa jira dakharro waawayn oo shidaalka nacladaysan uu ku dhufto ummadaha. Waxaa kamid ah saboolnimo dhaqaale (Poor economic outcomes), laaluushka oo kor u-kaca (High level of corruption), mu'asasaadkii oo daciifa (Weak institutions), xukun ku dhisan yeershe (Authoritarian law), dowlad taag-daran (Weak states), hayb lagu kala-soocmo (Ethnic Separation), cimri-dhererka kooxda talada haysa (Regime durability). Aakhirkana waxay ku danbeynaysaa dagaal sokeeye (Civil War).

Prof. Gildred Terry Karl, waxay muxaadaradeeda ku sheegtey naqshadda siyaasadeed oo ay ka siman yihiin dowladaha shidaalka soo saara. Waxay tahay, lacagaha shidaalka ka soo gala,

dowladdu waxay dowladda u yeeshaa awood xoog badan. Laakiin inta badan dowladahaas waxay awooddii u adeegsadaan siyaabo gurracan si ay xukunka muddo u haysataan. Sidaa darteed lacagtaas xooggeeda waxay gaaraysaa kuwa la jaalka ah ninka xilka haya, kuwaas oo noqonaya kuwa la qabiilka ah, la gobolka ah, la aragtida ah, la maslaxadda ah, la mad-habta. Arintaasi macnaheedu wuxuu yahay, ninka xilka haya oo jecleysanaya in uusan xilka ka degin, iyo kuwa jaalkiisa ah oo maslaxaddooda ku ilaashanaya. Waxaa halkaas ka dhalanaya saddex kooxood oo dal qura ku nool. Iyagu waxay kala yihiin koox ku baraara hantidaas badan oo sida sahlan u soo gashay dalka. Koox ay u arkaan in ay mucaarad ku yihiin oo ay ka soo horjeedaan baraarahooda. Iyo koox saddexaad oo danaystayaal ah, kuwaas oo aanan xukuumadda ku raacin dhalasho iyo mabaadi laakiin ka danaysanaya.

(https://www.youtube.com/watch?v=ORkgMaHkv6U ).

Bulshada intooda fursadda u hela in ay lacagahaas wax helaan, waxay xukuumadda ku difaacayaan gar iyo gar-darro. Kuwa ayan waxba soo gaarin, waxaa u muuqanaya dulmiga ay dadka qaarkood ku baraareen, sidaa darteed saboolnimada ayaa waxay ku riixeysaa in ay xukuumadda ku cadowsadaan gar iyo gar-darro.

Dowladda ay dadkeeda qaabkaas u qaybsamaan, waxay noqotaa mid ciidan adag dhisata oo ay ku muquuniso dadka ka-soo hor-jeeda. Lacago badan oo laaluush ah ayay ku bixisaa si ay u shiiqiso carada iyo ciilka ay dad-waynuhu u qaadaan. Goortii ay lacagta shaqayn-wayso waxaa la gaarayaa xilli ay dowladdu adeegsato ciidamada si ay u xasuuqaan muwaadiniinta mucaaradka ah, iyada oo kula dhaqanta xabsi iyo dil.

Sawirka caynkaas ah wuxuu ka muuqdaa inta badan dowladaha shidaalka soo saara, kuwaas oo ku cimriyay muddada ay xukunka hayeen. Marka laga yimaado dowladaha ay ku dhacday inkaarta nicmadaha nacladaysan, waxaa jira dowlado yara-dadaalay oo la harjadaya in ayan la bur-burin nicmadaha nacladaysan. Laakiin qudhoodu keli-talisnimadii iyo dulmigii bur-burin lahaa caloosha ayay ku sitaan.

Dowladahaas waxaa kamid ah kuwa ka dhisan khaliijka carabta. Waxaa tusaale u ah caa'iladda reer Aala-Sacuud ee ka taliya dalka Sacuudiga muddo 90 sano ku dhow (1932 – tan iyo maanta) iyo caa'iladda reer Aala-Sabaax oo iyagana ka taliya dalka Kuweyt muddo 60 sano ku dhow (1961 – tan iyo maanta). Caruuraha dhaxla xukuumadaha caynkaas ah waxay ku caan-baxaan faham yari iyo dadka oo ay ula dhaqmaan si aadaminimada ka baxsan.

Barwaaqada ay ku koraan ayaa ka indha-tirta anshaxa aadamiga, markaas ayay noqdaan dad la dhaqan ah dugaaggii.

# Casharkii 39-aad

Dhallinyaro, wiilashan ay dhaleen boqorrada carbeed ee ku hodmay nicmadaha nacladaysan, falaad xumida ay ugu awood sheeganayaan dad-waynaha ay u taliyaan waa mid dugaagnimo ah. In-kasta oo tira-yarida dadka ay u taliyaan iyo lacagta badan oo ay haystaan ay yihiin sababaha qarinaya ficil-xumida dulmiga ay gelayaan, misana marar badan ayay dibadda u soo baxdaa oo akhbaarta caalamka lagu soo qaato.

Waxaa tusaale ah laba dhacdo oo ay kala-sameeeyeen laban nin oo kamid ah caa'iladaha ka taliya Imaraatka iyo Sacuudiga. Labada nin, mid wuxuu yahay Ciise bin Zaa'id bin Sultaan Aala-Nahyaan, waxaa dhalay suldaankii ka talinayay dalka Imaraatka Shiikh Zaa'id bin Suldaan Aala-Nahyaan. Wiilkan ayaa islamarkaas wuxuu la dhashay ninka hadda xilka haya Shiikh Khaliifa bin Zaa'id Aala-Nahyaan.

Amiir Ciise waa nin ku caan baxay in uu si xun u garaaco shaqaalihiisa oo weliba uu filimo ka duubo si uu goor danbe u daawado oo ugu raaxaysto dhibaatada uu u geysanayo dadkaas uu ka itaalka roon yahay. Bartamaha sanadkii 2009-kii, waxaa baraha war-baahinta caamka ah ku soo baxay filim laga duubay Shiikh Ciise oo nin Afgaanistaan u dhashay si xun u ciqaabaya. Ul ay musmaaro ka soo jeedaan ayuu ku garaacayaa, goortii uu debcay ninkii la ciqaabayay oo uu dhulka ku dhacay waxaa addimada u qabanaya niman biliis ah oo lebisan, kuwaas oo ka tirsan wasaaradda gudaha.

Ninkan afgaanka ah oo uu ciqaabayo waxaa magaciisa lagu sheegey Maxamed Shaah Buur. Iyada oo ay addimada hayaan biliiska kala qaybqaadanaya ciqaabta, ayuu amiir Ciise wuxuu ciid afka iyo sanka kaga gurayaa ninkaas miskiinka ah. Waxyaabaha uu ku samaynayo waxaa kamid ah in uu dabada ka geliyo ul dheer

iyo in uu gubo timaha ku ag-yaal xubintiisa taranka. Falkaas dugaagnimada ah waxaa ka duubay oo la soo baxsaday wiil Libnaani ah oo dhalasho Mareekan ah haysta, kaas oo kamid ahaa shaqaalaha amiirkan dugaagga ah.

Fal kale oo isna kamid ah tusaalaha waxshinimada ah oo ay ku kacaan qooqaayada ku xoogeysta nicmadaha nacladeysan, wuxuu yahay falkii lagu dilay wariyihii Sacuudiga ahaa Jamaal Axmed AlKhaashiqji. Sida lagala socdey warbaahinta caalamka, wariyahan ayaa lagu shirqoolay qunsuliyadda Sacuudiga ee Istanbuul gudaheeda. Goor uu waraaqo sharci ah u soo doontey, ayaa waxaa loo diyaariyay dhowr iyo toban nin oo ciidan ah. Ninkaas ayaa inta la dilay, jirkiisii la jar-jaray, dabadeed foorno lagu gubay si aanan raadkiisa loo arag.

Falkaas arxan-darrida iyo anshax-darrida ah ninka ka danbeeyey wuxuu ahaa Maxamed bin Saleebaan Aala-Sacuud. Dowladda Turkiga oo soo bandhigtay naqshaddii shirqoolka, ayaa adduunyadu ku ogaatay masuuliyad xumida nimanka u dhashay caa'iladahaas ku xoogeystey nicmadaha nacladaysan.

Wiilkan ku sakhraamay awoodda iyo lacagta, waxaa intaas u dheer, xilli uu dhaqaalaha dalkiisa uu hoobanayo, in uu iibsaday saddex badeecadood oo uu ka bixiyay lacag dhan hal bilyan iyo boqol melyan oo dollar (1,100,000,000). Hantidaas uu wiilkan iibsaday waxay ahaayeen guri qasri ah, markab lagu raaxaysto iyo loox lagu xardhay sawir-gacmeed. Saddexdan waxyaabood mid-walba wuxuu ahaa midka qaalisanaa xilligaas oo aynigiisa ah.

Gurigu wuxuu yahay qasrigii uu degganaa boqorkii la oran-jiray King Luise-kii 14-aad, kaas

oo xilka hayay 1754 – 1793. Qiimaha iibka guriga wuxuu ahaa 300 oo melyan oo dollar.

Wuxuu kaloo iibsaday loox uu ku xardhan-yahay sawir-gacmeed uu leeyahay farshaxankii Talyaaniga ee caanka ahaa Leonardo da Vinci (1452 - 1519). Looxaas ayaa lagu magacaabaa Salvatur Mundi oo waxaa ku sawiran muuqaal lagu sheego in nebi Ciise uu ku soo bixi-doono.

Markab ah kuwa lagu dalxiiso ayuu isna iibsaday oo ka bixiyay lacag ku dhow nus bilyan dollar.

Sida caadada u ah nadaam-kasta oo keli-talis ah in uu wax qarsado, ayaa saddexdaas iib waxay ku dhaceen si qarsoodi ah oo waxaa iibiyay qaraabo iyo saaxiibo uu amiirku leeyahay. Laakiin goor danbe ayaa waxaa la ogaaday ninka loo iibinayay in uu yahay Maxamed bin Salmaan.

In-kasta oo heshiisyadii beeca ay ahaayeen kuwo si sir ah ku dhacay, goor danbe waxaa ogaaday oo ka shifay wargeyska Mareekanka laga leeyahay ee codka dheer (New York Times).

Falalkaas ka dhacay labadaas wiil waxay noqonayaan bad-wayn dhibic biyo ah la bar-bar dhigay, markii la eego dhibaatada iyo anshax xumida ay caa'iladahaasi ku hayaan dadka ay u taliyaan. Waxaa intaas dheer shirqoollada ay ku fuliyaan gacmaha qorsoon, iyaga oo adeegsanaya lacagta nacladeysan oo ay ku bara-kicinayaan ummadaha la deriska ah. Waxaa xusid mudan bulshada Soomaaliyeed in ay ugu yihiin dadka ugu horeeyey oo reerayowga ay barakiciyeen nimankaas ku mabay nicmadaha nacladaysan.

# Casharkii 40-aad

Dhallinyaro, qiso xiiso leh oo iga yaabisay ayaan jecleystey inaan casharkan raacsho ayaa waxaan la kulmay sanadkii 2012-kii. Aniga iyo shan kamid ah qoyskeyga oo cimraysanayna ayaa masjidka nebiga hortiisa waxaanu ka kireysanay gaari na qaada oo nagu soo wareejiya goobaha ku xusan siiradii rasuulka (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee). Ninkii darawelka ahaa wuxuu na wareystey dalka aanu ka soo cimreysanay. Waxaan u sheegey inaan waddan Yurub ah ka nimid.

Wuxuu igu yiri: ilaahay waa uu naga jecel yahay dadkaas. Waxaan iri: shiikhow ma ula-kac ayuu kaa yahay hadalka mase waad ila kaftamaysaa. Wuxuu yiri: kula kaftamimaayo, waana iga dhab in ilaah naga jecel-yahay. Waxaan weydiiyay wuxuu ku sababaynayo arinkaas. Wuxuu iigu jawaabay: ilaah waa baasid (mid wax bixiya) iyo

qaabid (mid wax ceshada). Iyagana wax badan ayuu siiyay, annagana waa naga ceshaday wax-siintii. Hadalkaas oo tan iyo maantaas aan jawaab i qancisa u la'aa waxa ka keeney ninkaas, ayaa waxaan jawaabtii heley maalintii ay dibadda u soo baxaday lacagta bilyanka ka badan oo Maxamed bin Salmaan uu ku iibsaday markab uusan raacayn, aqal uusan degeyn iyo lowxad uusan u baahnayn daawashadeed. Maantaas ayaa waxaan ogaaday fool-xumada iyo hudurka ay ku baxdo risiqa uu ninkaasi ku eedeynayo ilaaha gacantiisu ay qof-walba u faxan-tahay.

Guud-ahaan dowladaha khaliijka carbeed ee ku hodmay waxaa loo yaqaan (Petro-cratic Regimes). Waa dowlado aanan taagnaan-karin lacagta shidaalka la'aanteed.

Diinaamikada siyaasaddooda waxay ku caan-baxday saddex arimood.

(1) waxay dibadda ka helaan lacag badan,
(2) waxay ku iibsadaan hub xooggan
(3) dulmi ayay lacagtii iyo hubkii ku sameeyaan. Taasi waxay u sahashay arinta ay ku caan baxeen oo ah in ay quudiyaan meel kasta oo dhaqdhaqaaq xag-jir ah uu ka curto, iyaga oo ku xoojianaya lacag iyo saanad.

Gaar ahaan ummadaha islaamka ah oo ay ugu soo dhuuntaan dhanka diinta. Sababtaas weeye, nin kamid ah amiirada carbeed markuu ku yiri ra'iisul-wasaaraha Itoobiya Abiy Axmed: waxaan idiin dhiseynaa machad lagu barto diinta islaamkaa, in Abiy Axmed uu ugu jawaabo: na-bara afka carabiga, kadib annaga ayaa idin-barayna islaamka saxda ah.

Markii dib looraaco dhaqanka siyaasadda dibadda ee dowladaha khaliijka, wixii ka horeeyey 1975-kii, waxay ahayd siyaasad qun-yar socod ah oo xasilloon. In-kasta oo ay u muuqdeen kuwo heley hanti badan, misana diinaamikada diblomaasiyadeed ee xiriirkooda dibadda, maahayn mid dhaafsiisnaa lacago deeq ah oo ay bixiyaan. Boqortrooyada Sacuudiga ayaa deeq-bixinta waxaa u dheeraa faafinta diinta islaamka, iyada oo adeegsanaysa jamciyadda raabidada islaamka.

Laakiin sanadkaas aanu soo xusnay wixii ka danbeeyey waxay bilaabeen in ay soo fara-geliyaan arimaha u gaarka ah qaar kamid ah dowladaha islaamka. Gaar ahaan kuwii ay kala kulmaan soo dhoweyn iyo dhega-nugayl.

Boqorrada carbeed waxay ahaayeen kuwo Soomaaliya si gaar ah ugu haya indhaha. Iyagu waxay xilligaas ugu muuqatay dal khatar ku ah aayaha noloshooda. Sabatu waxay ahayd arimo dhowr ah. Waxaa kamid ahaa degaanka uu dalku dhaco oo marin u ah dhamaan maraakiibta shidaalka ee ku socda waddamada galbeedka.

Sabab kale waxay ahayd mabaadiida lagu hagayay siyaasadda Soomaaliya oo ahaa hantiwadaagga cilmiga ku dhisan (Scientific Socialism), taas oo ay is-diidayeen caqiidada iyo curfiga diinta islaamka. Sabab saddexaad ayaa jirtay oo waxay ahayd Soomaaliya oo dowlad xoog leh noqotay, sidaa darteed u sharaxnayd in ay waayeel ka noqoto dowladaha degaanka.

Dowladaha khaliijka ayaa markaas iyaga oo adeegsanaya lacagaha nacladaysan, waxay dabin u dhigeen Soomaaliya.

Markii ay ogaadeen in siyaasadda dalka ay ku jahaysan tahay madax-bannaanida gobolladii soomaaliya ka maqnaa, khaliijku waxay ku soo dhowaadeen dowladdii Soomaaliya.

Iyaga oo ballan.-qaaday in ay taageero xad-dhaaf ah la garab-joosanayaan, ayaa waxay dowladdii Soomaaliyeed ay ku dhiiri geliyeen in ay weerar ku qaadaan Itoobiya.

Sanadkaas aanu soo xusnay (1975-kii) sanadkii xigay, dowladaha khaliijka waxaa u suuragashay in ay faraha la-soo galaan siyaasaddii Soomaaliya, iyaga oo lug ku lahaa dhismaha jabhaddii ugu horeysey ee mucaarad ku ah rijiimkii Soomaaliya ka talinayay.

Jabhaddaas ayaa waxaa magaceeda la yiraahda SODAF (Somali Democratic Action Front).

Sanadkii 1977-kii, goor dowladdii Soomaaliyeed ay ku fogaatay dagaalkii ay Itoobiya la gashay,

Ruushkiina ay ku dhega-adeygtey taladiisii, ayaa boqorradii khaliijka ay xiriirkii u gaabiyeen Soomaaliya. Waxaa xigay jabhadihii mucaaradka ahaa in qaarkood abaabulkooda ay lug ku lahaayeen waddamo kamid ah khaliijka. Waxaa xusid mudan, jabhadihii hubeysnaa ee iska dabacurtay (SSDF, SNM, USC) in dhamaantood ay ahaayeen kuwo ka soo farcamay jabhaddan ururka SODAF.

# Casharkii 41-aad

Bulshada Soomaaliyeed carabta lagama maro oo jacaylka ay u hayaan waa mid ku miisaaman diinta Islaamka. Laakiin awoowayaal Soomaaliyeed ayaa ka digay jacaylkaas in uusan noqon mid indha-la'aan dhaca oo waxay reebeen maah-maahyo siyaasadeed oo dhaxal-gal ah. Waxaa kamid ah (Carab inta ku nabto ayay nebigii kaaga hor-martaa).

Suubaneheena aanu jecel-nahay (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee), haddii uu ahaa nin ka dhashay qowmiyadda carabta, Abuu-jahal oo lagu tilmaamay fircoonkii umadda islaamka ayaa isna ka dhashay carabta.

Siyaasaddii Soomaalida, dowlad iyo jabhado mucaarad ahaaba waa ay la iman-waayeen siyaasad ay kula cubtamaan munaafaqada dowladaha carbeed iyo luggooyada ay la

doonayeen Soomaalida. Sidaa darteed wixii maantaas ka danbeeyey waxay ku soo sikanayeen iyaga oo u soo kala tartamaya bur-burinta iyo ka danaysiga Soomaaliya iyo dadkeeda.

Sanadkii 1979-kii, goortii uu bilowday dagaalkii Afgaanistaan, dowladihii khaliijka waxay siyaasaddii lacagaha nacladaysan waxay ku wajaheen dalkaas. Dagaalkaasi waxaa u sabab ahaa dowladdii Midowga Soofyeeti ayaa weerar ku soo qaaday dalkaas. Kumanaan ciidamada Soofyeetiga ah oo ay weheliyaan tekniko dagaal oo culus ayaa ka soo tallaabay xuduudda ay la wadaageen Afgaanistaan.

Markaas ayaa Sacuudigu waxay ku baaqeen jihaad lagu kaalmeynayo dadkaas muslinka ah. Dowladihii khaliijkana waa ay ku raaceen.

Jihaadka ay ku dhawaaqayeen aadaankiisu waxaa laga addimayay galbeedka iyo waddamada hanti-goosadka ah oo Mareekanka ugu wayn-yahay, laakiin salaaddiisa waxaa laga tukanayay khaliijka.

Hanti balaayiin ah ayay ku bixiyeen ka qayb-qaadashada dagaalkii Afgaanistaan iyo ololihii loogu dhoofinayay dhallinyarada waddamada islaamka ah si ay uga qayb-qaataan jihaadka.

Goortii uu dagaalkii dhamaaday oo ciidamadii Soofyeetiga ay dib ugu laabteen xuduuddoodii, lacagihii nacladaysnaa ee dowladaha khaliijka waxay mar-qura isu-beddeleen in reer Afgaan ay qabaa'il iyo qowmiyaad u qaybiyaan iyo in lagu ugaarsado dhllinyaradii dagaalkaas ka qayb-galay oo ay tigidhada ka soo bixiyeen.

Magaca markaan ay ku xambaareen wuxuu ahaa argagixiso.

Waddanka Sacuudiga oo ah midka ugu wayn uguna hodansan waddamada khaliijka, dhaqaalihiisa waxaa laga fahmayaa faa'iidada ribixa ay heshey shirkadda Aramko sanadkii 2018-kii. Ribixaas ayaa wuxuu gaaray 111 bilyan oo US. $.

Dowladaha carabta ee lacagta nacladaysan ku dhibay dadkoodii iyo dad badan oo dunida ku nool waxaa kamid ahaa keli-taliyihii Liibiya Mucamar Al-Qadaafi. Lacagtaasi waxay Liibiya ka yeeli kartay dalka dunida ugu hodansan. Misana markii la dilay 20/ 10- 2011-kii, dad.waynihii reer Liibiya waxay cayaaro farxadi ka muuqato ku bandhigeen waddooyinka.

Taasina waxay ka danbeysey kacdoon uu dhiig badan ku daatay. Muddadii uu xukunka hayey oo ahayd 42-sano, Qadaaafi wuxuu Liibya ka dhigay masiibo caalami ah oo hoy u ah argagixisooyin caalami ah.

Wuxuu kharaj badan geliyay barnaamijyada hubka kiimikada iyo hubka nukliyeerka wuxuuna faragaliyay dagaallada sokeeye ee waddamo Afrikaan ah oo Soomaaliya ay kamid tahay.

Maalin kadib geeridii Qadaafi, wargeesyada caalamka kuwooda ugu af-dheer waxaa ku soo baxay faallooyin lagaga hadlayo lacagaha ay inkaartu ka raacday shacabka reer Liibiya, inteeda uu Qadaafi hanti ahaan u qaatay.

Wax badan ayaa laga sheegey hantidaas, tiro badanna waa lagu sheegey.

Laakiin marka la eego khalalka xisaabeed ee dhex-yiil dakhliga ka soo noqonayay shidaalka ee soo gelayay dowladda iyo miisaaniyadda ay dowladdu adeegsanaysay, waxay dhalinaysaa in la garan-waayo hantida uu Qadaafi ku leeyahay dalka gudihiisa iyo dibaddiisa.

Sababtu waa maqnaanshaha hey'ad madaxbannaan oo xisaabisa hantida dalku leeyahay.

Qadaafi wuxuu ahaa nin jecel in uu u muuqdo qof aanan hanti lahayn oo badow ah, kaas oo hantida uu ku faanayo ay tahay dhaqankiisii asalka ahaa. Sidaa-darteed ayuu teendho ugu qaabili jiray madaxda adduunka ee soo booqata dalkiisa.

Laakiin xaqiiqadu waa ka duwanayd sawirkaas uu caalamka u muujinayay. Hantida Qadaafi iyo qoyskiisa ay muddada afartanka sano ka badab ururinayeen waxay ka dhigtay nin ku fadhiya carshiyada dowladaha adduunka u dhisan mid kamid ah kuwooda ugu hodansan.

Liibiya, maahayn meel ay kala soocan-yihiin hantida dowladda iyo hantida Qadaafi.

Isaga iyo xaashadiisu waxay xoolaha dowladda u arkeen xoolo ay iyagu leeyihiin. Si toos ah ayuu u magacaabayay masuuliinta bangiyada waawayn, isaga oo sidii askartii u amrayay. Lacag intii uu doono ayuu keena oranayay, iyaga oo aanan la weydiin wuxuu ku samaynayo lacagta.

Saxiixisa Qadaafi oo keliya ayay ku baxaysay lacagta iyada oo ayan jirin isla-xisaabtan.

# Casharkii 42-aad

Dhallinyaro, sanadkii 2010-kii, 365-ta maalmood uu ka koobnaa, maalin-walba oo kamid ahayd ayaamahaas dalka Liibiya saliidda uu soo saarayay waxay ku qiimeesneyd 2,6 melyan oo bermiil. Sanadkaas gudihiisa qiimaha shidaalku wuxuu bermiilkii ahaa 71 US.$. illaa 82 US.$.

Haddii aanu ka soo qaadno tirada dhexe, qiimaha ay bermiil walba ka heleen wuxuu noqonayaa 76 US.$. Guud ahaan lacagta sanadkaas ka soo gashay shidaalka waa (2,600,000 x 76 = 197,600,000 US.$.).

Lacagtaas maahan mid ku timid shaqo culus oo ay qabteen ee waa hanti dhulka hoostiisa ay si sahlan ugala soo baxeen.

Qadaafi lacagtaas ayuu waayeel ka ahaa, oo keli-taliye ka ahaa, oo uu wiil qooqaa ku noqday.

Sida aanu soo xusnay waa ay adag-tahay in la xisaabiyo lacago dowladeed oo aanan raadraac sax ah lahayn. Qaar kamid ah dhaqaal-yahannada daba-galka ku sameeyey hantida uu ka dhintay Qadaafi waxay gaarsiiyaan in ay dhan-tahay 200 oo bilyan US.$.

Taas oo ninkan ku daraysa dadka tirada yar ee ugu hantida badan dunida. Hantidaas waxay u qaybsanayd caa'iladdiisa, iyada oo ku kala jirtay bangiyo lagu keydiyo lacago kaash ah iyo shirkado waawayn oo ka shaqeeya waddamo ku kala-yaal daafaha dunida.

Shirkadahaasi qaarkood waa caalami, qaarkoodna dowlado ayaa laga leeyahay.

Bangiyada ay lacagaha u tiil waxaa laga leeyahay dowlado ka dhisan bariga dhexe (Imaraatka), bariga fog iyo (Maleesiya) kuwo ka ylaa Laatiin Ameerika (Panama) ayay lacagtu tiil.

Shirkadaha qoyska Qadaafi ay lacagaha maal-gashiga ugu darsadeen waxaa kamid ah Shirkadda biraha ee caalamiga ah (Alestorm), shirkadda shidaalka ee Fransiiska (Total), shirkadda tamarta ee Ingiriiska (EDF), shirkadda gaadiidka gaaska ee Franssa laga leeyahay (GDF), shirkadda gawaarida samaysa ee Talyaaniga (FIAT), naadiga kubadda cagta ee kamid ah kooxaha horyaallada Talyaaniga (Juventus) ikk. Waxaa kale oo Qadaafi uu maal-gashtay beero waawayn, hoteello shan-xiddigood ah iyo mashaariic kale oo yaalla waddamo badan oo Afrikaan ah.

Waxaa xusid mudan in goor danbe la ogaaday 30 melyan US.$, taas oo xubno qoyskiisa kamid ah ay dalka ka saareen muddo yar horteed intaanan xilka laga tuurin. Madax-waynihii Koonfur Afrika Jacob Zuma (2009 - 2014) aya loo dhiibey si markii loo baahdo looga qaato.

Isaguna wuxuu ku qariyay meel dhulka hoostiisa ah oo goor danbe oo xilkii uu ka degey ayaa la ogaaday oo lagala wareegey.

Liibiya, tan iyo sanadkii 1969-kii, markaas oo Qadaafi uu af-gembi kula wareegey taladii dalka, saliidda ay soo-saartay waxaa ka soo galay lacag gaaraysa saddex trilyan US.$. Lacagtaas waxay goysaa 1/3 waxkasta oo qiima leh ee dunida yaal. Kala-bar wax ku dhow oo lacagtaas ah waxay aaday khasnadaha Qadaafi iyo caa'iladdiisa.

Nacladda wehelisay lacagtaas, ayaa waxay sababtay in ayan calfan dadwaynihii reer Liibiya iyo qoyskii hoggaanka u hayay midkoodna.

Lacagtaas hudurka ku baxday waa dhaqaalihii loogu adeegi lahaa dad-waynaha Liibiya iyo ummadaha walaalahood ah oo xuquuqda ehelnimo ay ka dhexeyso.

Run ayuu sheegey suubanihii Maxamed ahaa (shacni iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) markii uu yiri:

(والله ما الفقر أخشى عليكم، ولكنّي أخشى أنْ تُبْسَطَ عليكم الدُّنيا كما بُسِطَتْ على من كان قبلكم، فتنافَسُوها كما تنافَسُوها، وتهلككم كما أهلكتهم )

Xadiisku waa digniin culus oo laynoogu sheegayo lacagaha nacladaysan iyo waxa ka unkamaya haddii aanan laga digtoonaan. Bulshooyinka aadamiga gaar ahaan kuwa curdanka ah, duruus wacyi-qaadasho waxaa ugu filan qof xil uu mar qabtay darteed uga sare-maray dadkii, dabadeed xaabsaday balaayiin lacag ah oo uusan xaq u lhayn, taas oo markii uu dalkii iyo dadkii baabi’iyay, naftiisii iyo qoyskiisii ku halaagey.

Casharka caynkaas ah waxaa inoo xardhay lacagihii ay ku gubteen dad-waynaha Liibiya iyo meeshii ay ku danbeeyeen. Dowladdii cusbayd ee ka dhalatay Liibiya waxay markiiba isku-deydey in ay dalka ku soo celiso wixii hanti ahaa oo Qadaafi iyo caa'iladdiisii ay dibadda dhigteen.

Colaaddii sokeeye ee ka dhex-aloosantay qabaa'ilka Liibiya ayaa waxay hor-joogsatay in lacagtaas ay dalka dib ugu soo laabato. Dalka Koonfur Afrika oo keliya, wuxuu ballan-qaaday in uu dib Liibiya ugu celiyo lacag Qadaafi halkaas ka tiil.

Lacagtaas waxay ka badan tahay toddoba bilyan oo dollar.

Kororka fasaadka iyo boobka waalida ah ee lagu dhacayo hantida dad-waynaha waa meelaha ugu horeeya oo ay nacladdu ka imanayso.

Hanti badan oo dalka soo gasha ayaa waxaa iska maamulanaya dad masuuliin ah, eheladooda iyo asxaabtooda. Prof. Peter Fragiskatos, wuxuu wax ka dhigaa jaamacadda Western Ontario ee dalka Kanada. Geeridii Qadaafi dabadeed, isaga oo ka waramaya nicmadaha nacladaysan sida ay u dhaawacday dalka Liibiya wuxuu yiri:

” Intii dadka laga ururin lahaa cashuuro oo loo horseedi lahaa hannaan talo-wadaag ah iyo dowlad iyaga matasha, nadaamkii Qadaafi wuxuu lacagihii faa’iidada ahaa ee shidaalka ka imanayay ayuu u adeegsaday in uu xukunka ku raago. Lacagta caddaanka ah ee kusoo qul-qulaysay bangiyada dalka, waxaa xaqiiqa ah shardiga keliya oo lagu fulinayay in ay ahayd dhismo xoog nabad-sugid iyo xoog ciidan oo awood u leh in ay aamusiyaan calaamad walba oo mucaarad ah ”.

# Casharkii 43-aad

Dhallinyaro, dowladaha Afrika ee saxaraha ka hooseeya, waxaa la ogsoon yahay in ay hibo u heleen khayraad badan oo macdan ah. Qiimaha khayraadkaas waa uu kordhay sanadihii tobaneeyada ahaa ee la soo dhaafay.

Laakiin inta badan dadkii qaaradda ku noolaa arintani uma ayan hor-seedin wax aanan khasaaro iyo luggooyo ka ahayn.

Hay'adda lacagta adduunka IMF (International Monetary Fund), shirsanadeedkii ay qabteen bishii juun 2019, waxay ku soo bamdhigeen graafiko ay kaga hadlayeen caqabadaha hor-taagan khayraadka Afrika in ay gaaraan dadka Afrikaanka ah.

Hay'addu waxay diraasadeeda ku sheegtey, Afrikada saxaraha ka hooseysa in ay tahay meesha ugu khayraadka dabiiciga badan dunida,

marka laga reebo waddamada ay carabtu ku nool yihiin ee dhaca bariga dhexe, khaliijka carabta iyo waqooyiga Afrika. Isla-markaas waa meelaha ugu saboolsan dunida.

Graafikada ay hay'adda soo bandhigtay waxay sheegeysaa, khayraadka dabiiciga ah ee dunida laga adeegsad iyo keydka dhulka ku dahsoon in 22 % oo kamid ah ay dhacaan dowladaha carabta waddamadooda. Markii dunida loo qaybiyo shan gobol oo waawayn oo ay dad isku-hayb ah ku nool yihiin, gobolka ugu nasiibka batay wuxuu noqday degaanadan carabtu ku dhaqan yihii.

Waxaa labeeya degaanada ay ka dhisan yihiin dowladaha Afrikaanka ah ee saxaraha ka hooseeya Sawirkii graafikada ee lagu qeexayay sida ay gobollada adduunka ugu kala hodansan-yihiin khayraadka dabiiciga ah wuxuu ahaa sidan:

Ummadaha carbeed ee ku dhaqan degaanada bariga dhexe iyo waqooyiga Afrika waxay haystaan 22 % khayraadka dhulka yaal. Ummadaha ku dhaqan Afrikada saxaraha ka hooseeya, waxay haystaa 18 %.

Ummadaha ku dhaqan qaaradda Laatiin Ameerika iyo jasiiradaha Kariibiyaanka waxay haystaan 8 %. Ummadaha ku dhaqan koonfurta qaaradda Aasiya waxay haystaan 5 %. Ummadaha ku dhaqan waqooyiga Ameerika waxay haystaan 2%.

Dalka Nijeeriya ee dhaca galbeedka Afrika ayaa kamid ah waddamada laga helayo casharrada tusaalaha wacan u ah nicmadaha nacladaysan iyo inkaarta ay ku reebaan bulshada. Dalku wuxuu kamid yahay 12ka dal oo ku bahoobay isbahaysiga la magac-baxay OPEC (Organization of th Petroleum Exporting Countries), kaas oo uu

ku biiray sanadkii 1971-kii. Muddo ka badan nus qarni ayaa dalkan wuxuu ahaa dalka ugu soo-saaridda badan shidaalka waddamada qaaradda Afrika ee saxaraha ka hooseeya. Heerka adduunkuna wuxuu ka yahay dalka lixaad ee soo saara shidaalka ugu badan.

In-kasta oo dalkaasi uu hor u-mar ka muujinayo dhanka dhaqaalaha, misana dadkiisa waxaa u kordhaya saboolnimo. Tirada dadka Nijeeriya waxay hadda gaareen 150 melyan oo qof.

Soddon sano dabadeed (2050-ka) waxaa la filayaa in ay gaaraan 480 melyan oo qof. Wuxuu markaas noqonayaa waddanka saddexaad ee dunida ugu dadka badan. Shiinaha iyo Hindiya oo keliya ayaa ka dad badanaya. Tira-koob la xiriira saboolnimada ee dalkaas laga sameeyey sanadkii 2010-kii waxaa lagu caddeeyey, 61 % dadka in ay ku nool-yihiin wax ka-yar hal dollar maalintii. Isla sanadkaas dalku wuxuu soo

saarayay 2,35 melyan oo bermiil oo saliid ah. Muddadii ka horeysey xilliga uu dalku heley shidaalka oo ahayd bilowgii sanadihii 1970-aad, saboolnimadu sida ay maanta tahay waa ay ka yarayd. Tirada dadka ku nool 1 dollar maalintii waxay markaas ahayd 35 %.

Nijeeriya waa dal sida uu u dad badan-yahay u hanti badan. 95 %-kiiba dakhliga dalka wuxuu ka yimaadaa saliidda. Maalgashiga joogtada ah ee dalku uu sameeyo wuxuu ku dhacaa waaxda saliidda. Arintaasi waxay hoos u dhigtay dhiifinta waxyaabihii kale ee dhaqaalaha dalka uu ku dhisnaa, sida kookaha iyo alwaaxda. Wixii kale oo dhan dhoofintoodu waxay noqotay 5 % oo keliya. Si aan la qiyaasi karin, ayaa soo helista iyo dhoofinta saliida waxay abuurtay in dhaqaalihii dalka uu ku tiirsanaado ha il oo qura. Sidaas oo ay tahay dadku wuxuu ku sugan yahay saboolnimo xooggan iyo kala duwanaansho wayn oo xagga nolosha ah.

Waxaa si buuxa u maqan hannaankii cadaaladda ku dhisnaa ee hantidaas loogu qaybin lahaa muwaadiniinta.

Dalku wuxuu ku caan-baxay musuqa, laaluushka, dilka, wasakhda, tuugonimada, xushmad-la'aanta iyo boobka. Anshaxa caynkaas ah wuxuu sabab u noqday iyada oo dalku uu hor u-mar ka gaarayo dhanka koboca dhaqaalaha, misana saboolnimada ay si mataan ah ula kordheyso. Muddadii u dhexeysey 2003dii iyo 2010-kii, dhaqaalaha dalka sanad-walba wuxuu kordhayay 7,6 %. Isla-muddadaas saboolnimadu waxay ka kacday 51,6 %, iyada oo gaadhay 61,2 %. 25-kii sano ee ugu danbeeyey dalka wuxuu dakhli ahaan u helayay sanad walba 300 oo bilyan US.$. Hantidaas ayaa dalka waxay ka soo gashaa shidaalka. Laakiin hantidaas dalku wuxuu ka dhaxlay cawaaqib xumi siyaasadeed. Lacgta nacladaysa waxay dalkaas u diidey in uu noqdo dal xasilloon.

Saliiddii ayaa waxay shidaal u noqotay in ay huriso colaad qowmiyadeed, mid qabyaaladeed, mid diineed iyo mid dhaqan.

# Casharkii 44-aad

Dhallinyaro, ka-sokow ogaallada la xiriira dhibaatooyinka dhaqaale oo laga fahmayo aragtidan ah nicmadaha nacladaysan, waxaa jira mushkilado siyaasadeed oo ay dadka dhaxalsiinayso. Dhaawaca ay nicmadahan u geysanayaan siyaasadda ummadaha middeeda ugu milgaha culus waxay tahay in nicmaduhu yihiin kuwo aadamiga ka hor-taagan in ay dhistaan hannaan talo-wadaag ah. Bannaanbaxyadii la magac-baxay gugii carabta oo shucuubta carbeed ay kaga gilgisheen dulmiga ay xukuumadohooda badeen, waxaa laga bartay in dowladihii shidaalka lahaa ay noqdeen kuwo caburiya shacabkooda. Waxaa tusaale ah Sacuudiga iyo Cumaan oo shacabkii lacago ku aamusiyay, taas oo horjoogsatay mudaaharaadyadii laga filayay in ay dadwaynuhu ku soo bannaan-baxaan.

Laakiin dowladihii aanan shidaalka lahayn waxaa shucuubtoodii waxaa u suuragashay in ay ridaan hoggaamadoodii. Waxaa tusaale u ah dowladaha Tuunis iyo Masar oo madax-weynayaashoodii la ridey. Madax-wayne Zeyn AlCaabidiin iyo madax-wayne Xusni Mubaarak ayaa labaduba ay dad-waynihii ka qaadeen xukunkii.

Liibiya iyadu waa arin gaar ah oo qudhiisu waa fadhiyi lahaa lacgtaas nacladaysan darteed intuu shacabka xasuuqo, haddii dayuuradaha NATO ayan duqeymo u geysteen saldhigyadii ciidamadiisa. Waxaa halkaas ka cad in shidaalku uu xoojinayo nadaam walba oo taladiisu ay tahay mid ku urursan koox ama qoys iyo nin u waayeel ah. Lacagtaas ma-noqonayso mid hagaajisa siyaasadda uu dal leeyahay haddii ayan jirin hannaan dhaqaale oo ay kala soocan tahay xalaasha iyo xaaraanta.

Habka qaybinta lacagaha nacladaysan ee hannaanka aan oggolayn talo-wadaagga, waxay caan ku tahay taageerada nidaamka jira xaq iyo xaq-darro, iyad oo ka fogeeneysa halista bannaan-baxyada ama kacdoomada ay dad-waynuhu kaga turjumayaan baahiyadooda.

Adeegsiga lacagtaas wasakhaysan waxay caan ku tahay xoojinta nidaamyada dowladihii ay hoggaaminayeen kali-talisyo oo ama ciidan ah ama boqortooyo ah. Waxaa halkaas ku cad xiriirka ka dhexeeya saliidda iyo maqnaanshaha dimoqraadiyadda in uu yahay mid si adag isugu lammaanan.

Bulsho walba oo uu u taliyo nin ah yeershaa, cilladdooda siyaasadeed waxay ka bilaabanaysaa markii yeershaagu uu ka maarmo cashuur dadwaynaha laga qaado, markaas oo uu meelo kale ka helo dakhligii dowladda. Waayo cashuur la'aantu waa matalid la'aan.

Dad-waynuhu markii ay yihiin kuwo u bisil wacyiga siyaasadda, waxay si xooggan u ilaashadaan cashuurta laga qaaday inaanan lagu falaadin ee loogu adeego.

Lacagta khayraadka, oo sidoo kale lagu yaqaanno is bed-bedel fara badan, waxay tilmaamaysaa isbarbardhigga in waddamada leh ilaha dabiiciga badan, ay u muuqdaan in ay yihiin kuwo kobocooda nololeed uu hooseeyo, wacyigooda siyaasadeedna uu hooseeyo.

Markii la barbar-dhigo waddamo aanan lahayn khayraad dabiici ah, farqiga u dhexeeya wuxuu noqonayaa mid wyan. Waxaa jira aragtiyo badan oo aqoon-yahannadu ay dood-cilmiyeed geliyaan, kuwaas oo ku saabsan sababaha dowladaha ka reeba ama ku riixa natiijooyinkan xun ee laga dhaxlo lacagah ay nacladda weheliso.

Khubarada badankood waxay aaminsan yihiin nacladda la socota kheyraadka in aysan ahayn xeer caalami ah ama mid lama huraan ah oo mar-walba dhacaya. Aqoon-yahannadu iyaga oo xujo ka dhiganaya sahanka iyo diraasaadka ay aragtidan ku sameeyeen, waxay tilmaameen in nacladdu ay tahay mid saameyn ku yeelan karta wddamo hannaankooda dowladeed uu ku sugan yahay xaalado gaar ah.

Waxaa jira 97 dal oo muddo 20 sano ah lagu hayay sahan lagu diraaseynayay nicmadaha ay haystaan iyo hor u-marka ay ku tallaabsanayeen. Waddamadaas ayaa waxaa lagu arkay, midba midkuu ka hodansan yahay in uu ka dib dhacsan-yahay. Waddamadaas waxaa ugu horeeya oo garaafikada hor u-marka ka taagan heerka ugu sareeya Singabor iyo Kuuriyada Koonfureed. Sida la ogsoon yahay labadan dal waxay kamid yihiin waddamada aanan lahayn khayraadka dabiiciga ah. Garaafikada koboca ee 97-ka dal

waxaa ugu hooseeyey Imaraadka Carabta iyo Kuweyt oo la ogsoon yahay hodantinimada ay haystaan. Culimadii dhaqaal-yahannada ahaa aad ayay ula yaabeen markii ay arkeen natiijada sahankooda. Waxaa iyana xusid mudan, waddanka Jabaan oo ah dal aanan lahayn wax khayraad dabiici ah, ayaa wuxuu astaan u yahay hor u-marka uu aadamigu gaari-karo. Sidaa darteed, sida la malaynayo nicmaduhu maahan kuwo xiriir la leh hor u-marka bulshooyinka. Bal waxaa halkaas ku cad raadka dib u-dhaca ah oo nicmaduhu ay ku leeyihiin nolosha dowladaha qaarkood.

# Casharkii 45-aad

Dhallinyaro, dowladaha soo saara badeecadda dahabka madow (batroolka) waa kuwo ku dhex-nool laba nacladood dhexdooda. Mid waxay tahay lacnadda dhaqaale oo saboolnimada ay hooyo u tahay. Midna waa lacnadda siyaasadeed oo fowdadu ay hooyo u tahay. Cudurrada foosha xun oo bulshada ka raaca foofka jirrooyinkeeda. Cudurradaas oo aadamiga u diida in ay si il-baxnimo leh u noolaadaan, calaamadaha xanuunadooda waxaa kamid ah is dhex-yaac oo bulshadu ayan yeelan madax iyo majo (Amalgamation), qabyaalad iyo hayb-sooc (Tribalism), qof-jecleysi (Favoritism), laaluush (Corruption), hoggaamin aanan kuf ahayn (Incompetent Leadership), Keli-talis (Dictator-ship), nadaam is-gumeysi (Authoritarian Regime), xukunka oo laga hor-joogsado dadka qaarkood

(Marginalization of Some Ethnic Groups), xag-jir diineed (Religeon Extremism), dastuurka oo aanan dhaqan-gelin (Constitutional Revoke).

Xanuunadan aanu xusnay waa kuwo laga qaado badeecadda shidaalka iyo siyaasaaha la xiriira ganacsigiisa. Taariikhda heshiisyada shidaalka waa mid aad iyo aad u qallafsan. Waa taariikh ay weheliso wasakhaynta cimilada. Waa taariikh ay weheliso khilaaf iyo colaad. Waa taariikh ay weheliso nicmado nacladeysan. Sawirka caynkaas ah wuxuu si wanaagsan uga muuqdaa dowladaha shidaalka dhoofsada, gaar ahaan kuwa bariga dhexe. Is rog-rogga sicirka oo iyadana ah muuqaal caalami ah wuxuu kamid yahay dhaawaca ay gaystaan nicmadaha nacladaysan. Dhibaatooyinka tirada badan ee nicmadaha la socda, maahan kuwo ku eg dowladaha shidaalka soo saara oo keliya. Sida aanu soo xusnay dhaqaalaha dunida waa mid u xiriirsan sidii shabaagtii.

Wuxuu lamid yahay xasharaadka caara-caarada ah, taas oo haddii uu cudur galo addimadeeda midda ugu danbaysa, qolfoofka ugu hooseeya uu cudurkii u soo gudbayo caloosha. Dabadeedna jirkii oo dhan uu ku faafayo oo ay u dhimanayso.

Sida aanu soo sheegney, aqoon-yahannada u dhashay dowladaha waawayn ee baaluqa ah, natiijooyinka sahankooda waxaa uga muuqday hoogga iyo ba'a ay wataan naicmadaha nacladaysan. Waxaa u muuqday dhibaatooyinkaas dhibaatooyinkaas in ay yihiin kuwo usoo gudbaya dowladaha hor u-maray oo shidaalka dhofsada. Dhaqaal-yahannadu waxay sheegeen in ay lagama-maarmaan tahay in aadamigu uu gaaro heshiis caalami ah (Global Agreements) si ayan xukuumado tira-yar u lumin xasilloonida iyo nabad ku wada-noolaanshaha dunida.

Sidaa darteed, aqoon-yahannada ku howlan daba-galka nicmadaha nacladaysan waxay soo jeedinayaan in la helo siyaasad la fuliyo xilli ay magacaabeen kalaguur (Transitional Period). Xilligaas waxaa haboon in shirkadaha dhamaantood laga helo saxiix sharciyaysan oo lagu qeexayo in ay xisaabaadkooda soo bandhigaan. Arintaasi maahan xalkii kama danbaysta ahaa, laakiin waa bilowgii xalka.

Waxaa xusid mudan, in seyladaha shidaalka ay yihiin kuwa ugu xasilloonida daran suuqyada dunida. Seyladahan maahan kuwo xasilloon oo waxay isla rog-rogaan is-beddellada siyaasadeed ee dowladaha caalamka iyo xiriiradooda diblomaasiyadeed. Dhuumaha shidaalka ee dunida, maalin-walba waxaa ku shubaa batrool iyo gaas, kuwaas oo si joogto ah ugu qul-qulaya si ay u gaaraan goobaha looga baahan yahay.

Hayaanka uu qulq-ulkaas ku socdo waxaa la muddeysan is rog-rogga sicirka shidaalka iyo gaaska ee lagu qiimeynayo seyladaha caalamiga. Sidaa darteed dowladaha adduunka waxaa ku adag, qorshe dhaqaale in ay ka yeeshaan mustaqbalka oo ay kula tacaamulaan shidaalka. Xasillooni-la'aantaasi seyaladaha shidaalka waxay dhalinaysaa xasillooni la'aan dhaqaale.

Taasina waxaa ka dhalan-kara xasillooni la'aan siyaasadeed oo saamayn ku yeelata waddamada shidaalka dhoofsada, si lamid ah sidii ay ugu yeelatay xasillooni la'aan siyaasadeed waddamada shidaalka laga soo dhoofiyo.

Arimahaas waxaa u sabab ah heshiisyada iyo faa'iidooyinka la qarinayo, taas oo u sabab ah kororka saboolnimada iyo hor u-mar la'aanta nolosha aadamiga.

Waxaa xigaya mucaarado hubaysan iyo aadamigii oo is-cuna. Sidaa darteed, aqoon-yahannadu waxay tilmaamaan, inkaarta iyo habaarka la socda nicmadaha nacladeysan, xalkii lagaga bad-baadi lahaa, in uusan ahayn mid laga sugayo dowladaha shidaalka soo saara ee ku mabay musuqa iyo laaluushka.

Laakiin waxaa iyagana laga sugayaa dowladaha hanaqaadka ah oo iyagu shidaalka soo-iibsada.

Fikradaha ay aqoon-yahannadu soo bandhigaan waxay tahay in si cadaalad leh loo adeegsado nicmadihii la heley.

Cadaaladdu waa in ay u dhexeysaa heshiisyada dhex-maraya shirkadaha iyo dowladaha oo dhinac ah iyo dowladaha iyo dadkooda oo dhinaca kale ah.

Daah-furka iyo isla-xisaabtanku in ay noqdaan kuwo wax ka jaan-gooya cadaaladda qaybsiga khayraadka iyo hor u-marka bulshooyinka. Sidaa darteed sanooyinkan danbe caalamku wuxuu dadaal ku bixinayay in lala dagaalamo fasaadka maaliyadeed oo laaluushku ugu horeeyo. Ujeeddadu waxay ahayd in hannaanka daah-furka lagu ilaasho hantida ka-soo noqota khayraadka dabiiciga ah oo ay dowladaha soo koraya helaan.

# Casharkii 46-aad

Dhallinyaro, qaabka siyaasadeed ee dunida maanta u fadhido waxaa u yeeley waab batroolka.

Badeecaddan oo loo yaqaan dahabka madow (Tha Black Gold), ayaa sida caadiga ah markii ayan la socon nacladdu, waxay tahay hanti lagu baraaro oo lagu barwaaqooobo. Waa sheyga ugu milgaha culus ee dunida lagu kala iibsado. Sanadkii lasoo dhaafay (2018) batroolka dowladaha dhoofiya waxay ka heleen lacag ka badan 1,7 trilyan oo US.$. Lacagtaas oo ay bixiyeen dowladaha dunida ugu hor u-marsan ayaa waxay ku dhacday gacanta dowlado intooda badan ay naclad ka dul shidan-tahay.

Mucaadalada iska soo hor-jeedda waxay tahay in kuwii shidaalka soo dhoofsanayay ay ku baraareen khayraadkii ay soo iibsadeen, kuwii

khayraadka lahaana uu ku rafaadeen khayraadkii ay lahaayeen.

Sidaa darteed aqoonyahannada reer galbeedka waxay ka digayaan maahan dhibaato ku eg waddamada shidaalka soo saara oo keliya.

Bal dhibaatadu in ay tahay mid raad ku leh mushkiladaha caalamka ka jira.

Dulmiga ku faafaya dunida, siyaasadaha gurran ee saboolnimada dhalinaya, qaxootiga iyo xag-jirnimada ee ka curanaya xogaha ku-tiri ku-teenta ah oo dhaqaalaha dunida dhaawacaya, shidaalka badan oo lagu kala iibsanayo suuqyada-madow, kuwaas oo calwinaya seyladihii dunida, boobka damaca ku dhisan oo dowladaha qaarkood ay ku doonayaan in ay dhacaan dhul aanan xuduuddoodii ahayn, af-gembiyada iyo shir-qoollada siyaasadeed, arimahaas iyo kuwo kale ayaa waxay

noqonayaan sababaha wax ka naqshadeeya xasilloonida xiriirka caalamiga.

Bangiga adduunka (Worl Bank) waa hay'adda caalamka u qaabilsan hannaanka dhaqaalaha ee heer carri-edeg. Hay'addu waxay isku-deydey in ay raad-raac ku samayso musuqa dhaqaale oo ay nacladdu ka dhalanayso. Waddamo 51 ah ayaa dowladohooda waxay ka oggolaadeen, si tabaruc ah in ay u aqbalaan in hay'addu ay daba-gal xisaabeed ku sameeyo lacagaha badan oo ay helaan shirkadohooda waa-wayn. Gaar ahaan shirkadaha shidaalka ka ganacsada, shirkadaha macdanta iyo kuwa tamarta.

Ujeeddadu waxay ahayd in la diro aqoon-yahanno hanti-dhowrlayaal ah oo qaada baaritaano nidaamsan oo madax bannaan. In loo fasaxo in ay guda-galaan buugaagta shirkadaha,

xisaabaadkooda, diiwaannadooda sharciga, dukumiintiyadooda, koontooyinkooda iyo feylasha keydka ah oo ay leeyihiin dhamaantood, si loo hubiyo illaa iyo inta qoraallada maaliyadeed, lacagaha aanan la shaacin iyo hantida aanan lacagta ahayn oo shirkad walba lala xiriirinayo. Markaas ayay muuqanaysaa xogaha dhabta ah ee cadaaladda ku dhisan oo lagu qiimeyn karo hufnaanta shirkad walba.

Waddamadaas 51-ka ah waxaa kamid ah dowladaha ugu hodansan dunida. Waddamada oggolaaday codsigii Bangiga Adduunka waxaa kamid ahaa Ingiriiska iyo Holland. Labada shikadood ee kala ah BP (Ingiriis) iyo Shell (Holland) oo lagu tilmaamo kuwo wax-badan ka daacadsan shirkadaha kale ee shidaalka, ayaa waxay aqbaleen in ay wax ka muujiyaan faa'iidada ay la qaybsadaan dowladaha ay

waddamadooda ka soo saaraan shidaalka. Gaar ahaan shirkadahaas faracyadooda ka howl-gala dalka Angola ayaa waxay soo bandhigeen balaayiin lacag ah oo dowladda ay lunsatay, kuwaas oo ka soo galay shidaalka. Lacagahan ayaanan gaarin dad-waynaha saboolka ah iyo hor u-marka dalkaas dib-dhacsan.

Aqoon-yahannadu waxay ka codsadeen faracyo oo kale oo shirkadahan ay leeyihiin iyo shirkado kale oo waawayn oo ay leeyihiin dowlado kala duwan in ay tallaabadaas mid lamid ah qaadaan. Laakiin shirkadihii dhamaantood waa ay diideen markii dowladda Angola ay shirkadihii Ingiriiska ahaa u u gudbisay canaan iyo handadaad. Sirtii ay shirkaduhu kashifeen ayay canaantu ka timid, iyada oo weliba loo sheegey, haddii mar-kale ay faafiyaan xogta dowladda, in dalka laga saarayo, dabadeed shirkado kale lagu beddelayo.

Aqoon-yahannada Mareekanka oo ah kuwa ugu fir-fircoon oo aragtidan gadaal ka riixaya ayaa barlamaanka (Cpongress-ka) dalkooda waxay geeyeen ra'yigan in buugaagta shirkadaha la baaro si loo ogaado dhaqaalaha soo gala iyo dhaqaalha ay helaan dowladah ya ka shaqeeyaan. In-kasta oo bilowgii la soo dhoweeyey ra'yiga, misana goor-danbe turubkii dhanka kale ayaa loo-rogay oo waa la diidey. Bishii marso 2019-kii, madax-wayne Donald Trump wuxuu soo saaray wareegto uu ku diidayo in Mareekanka laga hirgeliyo ra'yi mashruuc lagu baarayo buugaagta shirkadaha waawayn. Isagu wuxuu markaas saxiixay waraaq diidmo ah oo dib loogula noqonayo oggolaansho faaqidaadda xisaabaadka isdhaafaya ee shirkadaha tamarta iyo shirkadaha macdanta ee dalka Mareekanka.

Nicka la yiraahdo Rex Tillerson oo ahaa xog-hayihii arimaha dibadda ee madax-wayne Donald Trump, ayaa shaqsiyan u ololeynayay diidmada sharcigan. Waxaa arrinkaas la qabay Darren W. Woods oo ah madaxa shirkadda wayn ee shidaalka Exxonmobil. Dowladda Kanada iyo Midowga Yurub ayaa iyaguna qaatay sharciyo kan la mid ah oo ka dhan ah mashruuca la dirirka musuqa nicmadaha nacladaysan.

# Casharkii 47-aad

Dhallinyaro, dhaqaal-yahannada adduunka waxay isla-qirayaan, in khayraadku ay naclad noqdaan waxaa u sabab ah kooxda hoggaanka haya oo judhii horeba ku fashilma hagaajinta qorshaha lagu soo saarayo khayraadka. Haddiiba qorshihii soo-saarka uu khalal la socday, dabadeed markii la soo saaro waxaa khasab ah in lagu fashilmayo maareynta dakhliga badan ee ka imanaya khayraadka. Fahamkan waxaa ka dhalanaya laba fikradood oo is garab-socda.

Fikradda I-aad oo ah midda haboon oo ducada iyo khayrku uu la socdo waxay tahay in kuwa xilka haya ay gartaan hantidan in ay tahay nicmad eebe ugu deeqey umadda ku dhaqan degaanka oo ay waayeelka u yihiin. Sidaa darteed loo baahan yahay in si xilkasnimo leh loo soo saaro, isla-markaas si cadaalad ku dhisan loo

maareeyo. Fikradda II-aad oo ah midda nacladaysan oo inkaarta iyo habaarka uu la socdo waxay tahay in kuwa xilka haya ay fasaxaan in nicmadihii loo soo saaro si habqan ah oo ay ka danaystaan. Lacagihii laga helo waxay markiiba u adeegsadaan in ay dadkii ku kala qaybiyaan oo ay ka dhigaan koox la jirta (muxaafid) iyo koox ka jirta (mucaarad). Bulshadii wada-noolayd ayay ka yeelaan koox ay ku adeegtaan oo u cadaadiya bulshada iyo koox ay ka adeegtaan oo cadow loo ekeysiiyo.

Diinaamikada labadaas aragti ayaa waxay kala jeexeysaa hadba waddada nicmadaha lala aadayo. Waa laba fikradood oo mid ay oranayso dhaqalaha ha loo qaybiyo qaab dalka loo hor-mariyo bulshada iyo mid oranaysa dhaqaalaha ha loo qaybiyo si aan talada u hayo. Waxaa hubaal ah, haddii aad qof siiso lacag waxaad ka fishaa beddelkeeda inaad wax ka hesho.

Sidaa darteed ayaa dadyowga nolosha fahmay, waxay ilaaliyaan cashuuraha laga qaadayo iyo meelaha ay dowladdu ku bixinayso. Ummadaha dowladnimadoodu ay qaan-gaarka noqotay, cashuurtooda ama mid qof ka timid ha ahaato ama mid shirkado ka timid ha ahaato, waxaa daba socda dalab dad-wayne iyo hay'ado hanti-dhowr ah. Iyagu waxay u madax-bannaan yihiin in ay si joogto ah u hubiyaan lacagaha si-guud loo wadaago oo ay ka ilaashaan in si gaar ah loo adeegsado.

Siyaasadaha laga dhaxlo nicmadaha nacladeysan waa kuwo marka horeba hor-joogsanayaan in dadwaynuhu ay wax ka ogaadaan heshiisyada ay gelayaan dowladaha kheyraadka leh iyo shirkadaha soosaaraya kheyraadka. Waxaa xusid mudan in shirkaduhu yihiin kuwo si gaar ah loo leeyahay oo xaq ayay u leeyihiin in ay xogtooda iyo heshiisyadooda qarsadaan. Laakiin waxaa kale oo shirkaduhu ay qariyaan faa'iidada ay

helayaan dowladaha khayraadka leh. Tusaale-dhig, shirkadda Aramco oo Sacuudigu uu leeyahay iyo shirkadda Exxonmobil oo Mareekanku leeyahay midkoodna ma sheego faa'iidada ay qaybsadaan oo ay ka helaan fagaaraha shidaalka ay ka wada-shaqeeyaan. Mid waliba wuxuu qarinayaa xogtiisa iyo xogt shirkadda kale oo ay la shaqaysato.

Nicmadaha nacladaysan waxay kala jartaa xiriirka ay leeyhiin kuwa xilalka haya iyo dad-waynaha xilka loo hayo. Waxaa halkaas ka dhasha in la waayo shacab xisaabtami kara iyo masuuliin lala xisaabtamo. Lacagihii dalku ka heley kheyraadka dabiiciga ah, dad-waynuhu lama socdaan. Shirkaduhu waxay la tacaamulayaan shakhsiyaad gaar ah, kuwaas oo lacagta dibadaha dhigta. Waxaa halkaas ku kala go'aya xiriir muhim ah oo saldhig u ah dowladnimada iyo dowlad-wanaagga.

Xiriirkaasi wuxuu yahay cashuurbixintii (Taxation), matalaaddii dad-waynaha (Representation) iyo isla-xisaabtankii (Accountability). Sida aanu soo xusnay, dowladdii waxay noqonaysaa mid aanan cashuur u baahnayn oo ka maaranta xooggii dhaqaale oo ay ku taagneyd, kaas oo ka imanayay dad-waynaha. Waxaa halkaas ku baaba'aya matalaaddii ay dowladdu matalaysay dadkeeda oo waxay noqonaysaa mid iskeed u danaysata. Dadkiina maadaama hantida ay dowladdu ku shaqayso ay tahay mid aanan jeebabkooda ka iman, waxay noqonayaan kuwo aanan fursad u lahayn in ay la xisaabtamaan dowladdooda.

Waxaa jira culeys takaaliif xooggan oo musuqa iyo maamul-ximada ay ka masuul yihiin.

Sida qaalibka ah, culeyskan wuxuu dusha ka fuulaa dowladaha iyaga oo tabar-daran haddana shidaalka dhoofsada.

Judha horeba, waddamada caynkaas ah suuragal uma ahan in ay faa'iido badan ka helaan shidaalka. Waayo muddadii la qorsheynayay howlaha soo-saaridda saliidda iyo heshiisyada la dhiganayo, ayaa masuuliinta musuqa jecel waxay leexinayaan heshiiyada caamka ah oo ay la dhigayaan shirkado ay si gaar ah uga adeegtaan. Arintani waa meesha ay ka bilaabato khalalka dhalinaya nacladda. Dowladuhu haddii ay ku fashilmaan in ay hagaagsadaan naqshada asaaska ee saldhigga u ah howlaha shidaalka, waxay raacaysaa waddo ambad ah, taas oo gaarsiinaysa waadigii nacladuhu fadhideen. Waxaa markhaati ah in waddamada ay ka curteen dagaallada sokeeye, kuwooda shidaalka leh waxay ku laba-jibbaarmaan kuwooda aanan shidaalka lahayn.

Sanadkii 1988-kii bangiga adduunka wuxuu sameeyey sahan lagu baarayo hannaanka dhaqaale ee lix waddan oo kamid ah kuwa shidaalka soo saara. Waddamadaasi waxay ahaayeen Jazaa’ir, Ekwadoor, Indoneesiya, Nijeeriya, iyo jasiiradda Trinidad iyo Tobago. Diraasadii lagu sameeyey dhaqaalaha waddamadaas, waxay noqotey mid isku-muuqaal ah. Lacagta badan ee ka soo noqota dhoofinta shidaalka, ayaa kharashaadka ay ku baxdo, xooggiisu wuxuu yahay kuwo aanan lagu hagaajin hannaanka dowladnimada iyo mu’asasaaskeeda. Diraasadu waxay muujisay in siyaasad ahaan la waayey sababihii ugu yaraa oo xoojin lahaa kobcinta nolosha dad-waynaha waddamadaas. Waxaa kale oo ay muujinaysaa sawirka dhabta ah ee dalalkan kheyraadka badan ku guuldareysteen in siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan ay hanaqaad u noqdaan.

# Casharkii 48-aad

Dhallinyaro, markay dawladdu ayan haysan aqoon iyo farsamooyin siinaya awood ay uga faa'iidaysato khayraadkeeda dabiiciga ah, waxay u gacan-geleysaa shirkado maxalli ah oo aanan khibrad lahayn. Waxaa la ogsoon yahay in caalamku ay ka shaqeeyaan shirkado waawayn oo hana-qaad noqday, kuwaas oo ku hor-maray aqoon iyo khibrad. Shirkadahaasi oo dhaqaale ahaan xooggan, waxay ku shaqeeyaan siyaasado u gaar ah. Shirkadaha waawayn maahan kuwo meel-kasta ku kufa iyaga oo faa'iido-doon ah, waayo baahi uma-qabaan. Sidaa darteed, shirkadahaas waawayn waxaa ka soo hor-mara shirkado yaryar oo dallaaley ah. Iyagu waxay qaataan heshiisyada hor-dhaca ee la xiriira howlaha cilmi-baarista, sahaminta, soo-saarka, dib-u-habeynta iyo ugu dambeyntii dhoofinta iyo iib-geynta seyladaha caalamka.

Shirkadahaani waxay wada-hadallo maaratoon ah la galaan dowladaha si ay ugu guuleystaan qandaraasyada ugu macquulsan ee suurtagelinaya in ay helaan wax soo-saarka ugu badan ee suuragalka ah. Si arinkaas uu ugu hir-galo, mararka qaar waxay damac gelinyaan wasiirrada iyo masuuliinta xilalka ka haya oo u tin-jileecsan in ay xilka ay hayaan wax ku xadaan. Si ay taageero uga helaan waxay siiyaan laaluush iyo saamiyo qarsoodi ah oo ay khayraadka ku yeeshaan. Markaas ayaa damaclayda nafafyaalka daciifka ah wata, hanti ay dadkoodii ka dhuun-qabteen ayay u xadaan shirkadahaas shisheeyaha ah.

Himilada fog ee shirkadahan hor-dhaca ah waa in ay gacanta ku dhigaan qandaraasyada halbowlaha ah ee wolaha shidaalka iyo dib u-soo celinta qandaraasyada la iibsadey ee shuruudaha muddada gaaban ku xiran.

Musuqu wuxuu sii xoogeysanayaa markii uu helo dhiiri-gelin ka socota labada dhinac, gaar ahaan markii uusan qof ahayn cidda doonaysa laaluushka, bal ay tahay dowladdii dalka u talisay ay noqoto mid laaluush ka doonaysa shirkadaha. Sida caadadu tahay, farsamada aanan xalaasha ahayn ee dowladda iyo shirkaduhu ay ku kala qaadanayaan qandaraasyada saliidda, waxay ka yimaadaan dowladaha uu musuqu ku xooggan yahay. Dowladahaas ayaa xafiisyadooda rasmiga ah, laaluushku wuxuu u yeelaa awood xaddhaaf ah. Haddii aan eegno in shirkaduhu ku doonayaan waddo walba oo ay ku heli-karaan qandaraasyada wata faa'iidada ribixa badan, xataa waxay laaluush ku bixiyaan in ay kuraasta sii fadhiyaan masuuliinta ay isku af-garteen xatooyada.

Laaluushka ay shirkaduhu bixinayaan ma-noqdo mid ku ekaanaya fagaaraha ganacsiga, bal wuxuu u gudbaa in dowladdu ayan raad ku

yeelan qaabka ay shirkaduhu dalka uga shaqeynayaan. Waxaa markaas dhacaysa in shirkaduhu ay la baxsadaan lacag badan oo cashuuro ah oo dalku heli-lahaa.

Tusaalooyinka musuqa iyo laaluushka ee weheliya barnaamijyada shidaalka, dunida waa ay ku badan yihiin. Musuqaas oo ah mid ku baahsan waaxda shidaalka, waa midka sababta u ah dib u-dhaca haysta dowladaha soo koraya.

Nooca ugu caansan musuqa dhex-mara dowladaha yar-yar iyo shirkadaha waa laaluush kala-qaadashada. Waddamada carabta iyo kuwa Afrikaanka ah ee shidaalka dhoofsada ayaa safka hore kaga jira musuqa iyo xaaraanta ay nacladdu ka danbayso.

Waddamadaas oo ay maamul-xumo baahsan dabartay, waxaa kamid ah Suudaan, Ciraaq,

Liibiya, Venezuela, Angola, Zimbabwe, Nigeria, iyo kuwa kale.

Musuqa iyo laaluushka caynkan ah oo dowladuhu ku gelayaan daahyada gadaalkooda, nicmadaha nacladaysan waxaa ka khuseeya in masuuliintu ay qarinayaan wixii dakhli ah oo dowlad ahaan ku soo gala heshiiska. Ujeeddada ay u qarinayaan waxay tahay in dad-waynuhu ayan ogaan hantida dalka soo gashay iyo adeegyada bulshada loo qabanayo in ay yihiin kuwo aanan isu-dhigmin. Sidaa darteed ayaa aqoon-yahannada reer galbeedka oo ka hadla nicmadaha nacladysan eeyan uga harin ololaha ay dowladaha kaga codsanayaan in ay soo bandhigaan dhaqaalaha ay ka helaan kheyraadka dabiiciga ah.

Sidaas si lamid ah ayay u ololeynayaan in shirkaduhuna ay sheegaan faa'iidada ay u celiyaan dowladaha ay wada-shaqeeyaan.

Kheyraadka lagu kala qaadanayo laaluushka, iyada oo dad-waynuhu ka qatan-yihiin, saamaynta habaarka ka yimaada waxay ku caddahay farqiga wayn ee ka jira xagga daryeelka bulshada dalalka saliidda badan dhoofsada. Norway iyo Nijeeriya ayaa tusaale u noqon kara maamulka taogan iyo maamulka taban ee lagu kala maareeyo shidaalka, kuwaas oo dalna uu ku baraaray dalna uu ku ba'ay. Norway waxay maamushay kaydkeeda shidaalka iyo dakhliyada ka soo gala si ay ugu faa'iideyso bulshadeeda iyo jiilalkeeda mustaqbalka. Nijeeriya, in-kasta oo ay warshadaha shidaalka iyo gaaska aad u ballaaran yohiin, misana waxay la kulantay koboc dhaqaale oo xun, kaas oo ay weheliso saboolnimo ba'an. Musuqa oo ku faafsan dalka ayaa wuxuu fasirayaa inta badan dhibaatooyinka Nijeeriya ragaadshay.

# Casharkii 49-aad

Dhallinyaro, waxaa hubaal ah casrigan aynu joogno si gaar ah waxay ummaduhu ku hodmaan kheyraadka dabiiciga ah oo shidaalku uu ugu horeeyo. Waxaanu soo xusnay in aadamiga casrigan nool uu baahi badan u qabo kheyraadkan. Waxaa loo baahi qabaa tamarta dhaqaajinaysa wejiyada nolosha casriga ah oo ay kamid yihiin xoogga lagu kicinayo wershadaha iyo dhuumanka uu shidaalku maro, gaadiidka lagu socdo iyo kuwa xamuulka (baabuurta, tariinada, maraakiibta iyo dayuuradaha). Si kayraadkan uu u gaaro fagaaraha looga baahan yahay, waddamada uu ka yimid dadka ku nool waxaa ku qul-qula lacag badan oo looga beddelanayo nicmaddan ciidda ku aasan oo ay bilaashka ku heleen. Waxaa xusid mudan, cel-celis, qof-kasta oo u dhashay waddamada reer galbeedka waxaa sanadkii jeebkiisa ka baxa lacag dhan 255 dollar. Lacagtaasi waxay gashaa khasnadaha dowladaha shidaalka ku hodmay.

Hantidaas waxay noqonaysaa lacago gaarsiisan balaayiin oo dad fadhiyadooda loogu geynayo. Lacagtan waxay cagaha dhulka ugu xasilisaa hannaanka dowladeed oo u dhisan waddamada saliidda dhoofiya. Lacagahaas ku soo qul-qulaya waddamadaas, waxay dadkooda ka dhigi kartay kuwo ku naalooda nolol baraare iyo berya-samaad leh. Laakiin xaalad nacladeed oo middaas hore ka duwan ayay gelisay, taas oo baday dib-dhac iyo saboolnimo leh. Sidaasi waxay dhacdaa goorta masuuliinta xilalka sare u haya waddamada ay noqdaan kuwo ku saaqida sidii ay u maareen lahaayeen khayraadkaas xooggan. Waxay ku saaqidaan mugga ay lacagta ka adeegsanayaan iyo mugga ay kaydsanayaan. Waxay ku saaqidaan imasa oo lacagtaas ah ayay gelinayaan aqoonta iyo caafimaadka dadka, imisa ayayse gelinayaan dhismahoosaadka dalka.

Naqshadaynta arimahaas waxaa dowladaha ka saacida dad khuburo ah, fulinteedana waxaa ka saacida mu'asasaadka caamka ah. Laakiin kuwa xilalka sare haya markii ay isu arkaan in iyagu ku filan-yihiin dejinta qorshaha qallafsan ee lagula tacaamulayo nicmadaha nacladaysan, isla-markaas mu'asasaadkuna ay yihiin kuwo liita, waxaa halkaas ku fashilmaya dhamaan qorshihii iyo wax-qabadkii looga faa'iideysan lahaa lacagtan badan ee soo qul-quleysa. Masuuliinta xilka u hayana, inta badan kama ay fekeraan sidii ay dadkooda uga tallaabin lahaayeen mashaqada nacladda ay lacaguhu wataan. Bal waxay sakhrad ka qaadaan lacagaha badan oo khasnadahooda ku soo shubmaya. Sidaas ayaa waddamada ku hodmay khayraadka dabiiciga ah ay u noqdeen kuwo dadkoodu ay ku dhiban yihiin saboolnimo, dowlad-xumi iyo laaluush.

Sida aanu soo xusnay, shidaalku wuxuu kow ka yahay khayraadka dabiiciga ah oo loogu baahi badanyahay sayladaha dunidan casriga ah. Waa hanti baahideeda ay joogto tahay, si fududna looga helayo lacag fara-badan oo aanan soo daahayn. Waxaa loo yaqaan ooraahda ah shidaal lagu beddesho lacag (Oil to Cash). Lacagahan markii ay ka soo baxdo khasnadaha kuwa iibsaday shidaalka, waxay u soo gudubtaa bangiyada dowladaha shidaalka dhoofsada. Iyada oo uusan jirin isla-xisaabtan ayay lacagtii ku aroortaa khasnado madow oo dad-waynuhu ayan talo ku lahayn. Masuulka dowladda ugu sareeya iyo qayb uu ka xushay xaashadiisa ayaa haysta furayaalka khasnadaha madow.

Wax yar oo lacagtaas ah ayaa dadka loo soo saaraa, si loogu ilaasho magaca dowladda iyo mu’asasaadkeeda daciifka ah. Inta badan

dowladaha shidaalka ku hodmay, lacagahaas ayay ku masruufaan shaqaalahooda kuwa ugu muhimsan. Bulshada caynkaas ah, laamaha kala duwan ee ciidamada ayaa lagu tilmaamaa in ay u yihiin shaqaalaha ugu milgaha culus. Iyagu waxay ilaaliyaan dowladda iyo khasnadeheeda. Dowladahan oo u xuub-siibta hannaan keli-talis, waxay dhisaan ciidamo magacyo badan leh. Waxaa kamid ah ciidanka biliiska iyo laamihiisa, ciidanka dharcadda rayidka ah iyo laamihiisa (gudo iyo dibad), ciidanka milleteriga iyo laamihiisa, ciidanka dhar-cadda milleteriga, ciidanka asluubta, ciidanka nabad ilaalinta, ciidanka gurmadka deg-degga, ciidanka madaxtooyada, ciidanka ……….. . Waxaas oo ciidan ah waxaa laga masruufayaa lacagah ku soo qul-qulaya dowladda ee ka imanaya shidaalka. Ciidankuna muhimaddiisu waxay tahay in ay muquuniyaan dad-waynaha. Sidaas ayaa lacagtii badnayd ee shidaalka laga heley ay

ku noqotaa mid dadka ka hor-joogsata in ay helaan hannaan talo-wadaag ah.

# Casharkii 50-aad

Arin kale oo iyana naclad ku ah dad-waynaha ayaa waxay tahay, hantida badan in ay disho hal-abuurkii iyo wax soo-saarkii bulshada. Lacagahaas badan oo sida fudud ku yimid, isla-markaas aanan lahayn islaxisaabtanka ayuu qof waliba u hanqal-taagayaa in uu wax ka-helo. Hor-joogayaashii bulshada iyo indheer-garadkoodii waxay u kala tartamayaan sidii ay lacagtaas qayb uga heli lahaayeen. Waxaa markaas xoogeysanaya siyaasadda musuqa iyo qaraaba-kiilka, kuwaas oo quudinaya hannaanka kelitaliska ah. Dhaqaalihii ayaa xumaanaya, iyada oo isla-markaas uu kor u kacayo qiimaha sarifka cumladda uu dalku adeegsado. Dabadeed xumaantii ay lacagtu keentey waxay u dhaadhacaysaa dhaqankii.

Kooxaha sida xad-dhaafka ugu hodmay iyo caruurtooda ayaa waxay anshax-xumi ku faafinayaan bulshada saboolka ah dhexdeeda. Dadku waxay markaas waayayaan awooddii ay kula xisaabtami lahaayeen khaladaadka xad ka-baxa ah oo kaga imanaya xubnaha siyaasadda u matala. Mar-kasta oo rajada dad-waynuhu ay hoos u dhacdo, waxaa adkaanaya awoodda xooggan (Hard Power) ee xukuumadda keli-taliska, kuwaas oo ah ciidamada. Fal-celiskeedu wuxuu noqonayaa awoodda jilicsan (Soft Power) oo iyadana dhankeeda isu ururisa sidey ula dagaalami lahayd. Waxaa xigaya dagaal sokeeye iyo colaad lagu hoobto, taas oo astaan u ah nacladihii ilaahay.

Dalalkaasi heley nicmadaha nacladaysan, dhaqaalahoodu wuxuu noqdaa mid ku xiran muujiyaha sayladaha caalamiga ah, kaas oo la

sabeynaya sicirka dunida wax lagu kala-iibsado. Markaas ayaa wakhti kasta waxay halis ugu jiraan in dhaqaalahoodu uu mar-qura hoos u dhaco, dabadeed ay ku bur-buraan. Hantidaas ay nacladdu la socoto ayaa waxay tahay awood qarsoon ee ummado badan ka hor-joogsatay in ay gaaraan hor u-mar nololeed iyo mid siyaasadeed. Sida aanu soo xusnay aqoon-yahannada reer galbeedka sodoonkii sano ee ugu danbeeyey waxay diraasaad ku hayeen xiriirka ka dhexeeya dhiig-baxa ku socda kheyraadka dabiiciga ah ee waddamada soo koraya iyo musuqa xooggan oo masuuliinta dowladahooda ay ku kacayaan, taas oo sabab u ah caqabadaha ka hor-taagan hor u-marka.

Xaqiiqadu waxay tahay adeegsiga shidaalka iyo ganacsigiisaba in ay yihiin kuwo nool oo kobcaya. Baahida loo qabo nicmaddan

nacladaysan waa mid sii soconaysa, waayo shidaalku waa isha ugu wayn ee tamarta oo aadamigu u adeegsado nolosha. Waxay u muuqataa in baahideeda ay tahay mid wayn oo sugan oo haddana waaraysa. Hay'ado badan ayaa ku mashquulsan howlaha la xiriira dhaqaalaha, siyaasadda iyo anshaxa uu shidaalku ku soo kordhiyo nolosha aadamiga. Baahida caalamiga ah ee looqabo waxaanu ka garanaynaa sanadkii 2018-kii, batroolka iyo gaaska lagu adeegsaday dhulka oogadiisa in maalin walba ay ahayd 99,2 melyan oo bermiil. Waxaa intaas dheer, in qiyaastii sanad-walba baahida shidaalka loo qabo ay tahay mid kordheysaa hal melyan oo bermiil. Tan iyo sanadkii 2017-kii, wax soosaarka guud ee adduunka, qiyaas ahaan shidaalka wuxuu u dhexeeya $ 75 tiriliyan ilaa $ 87.5 tiriliyan.

Hantida ay ku shaqeeyaan waaxaha ku howlan sahanka iyo qodista saliidda iyo gaaska waxay hadda u dhigantaa 3% dhaqaalaha adduunka.

Sidaa-darteed dowladuhu waxay si xooggan ugu mashquulsan yihiin sahanka suurtagalnimada khayraadkan ceegaaga dhulka engegan hoostiisa ama qalfoofka badda hoostooda. Waxaa si xad-dhaaf ah loogu tartamayaa baadi-goobka in la helo aagag cusub oo shidaal laga qoto. Waxaa kale oo lagu mashquulsan yahay xogta lagu helo sahanka sidii looga faa'iideysan lahaa oo saliidda loola soo bixi lahaa.

Shirkadaha shidaalka, in-kasta oo ay hor u-mar xooggan sameeyeen, misana waxaa looga fadhiyaa in ay waxbadan sii qabtaan. Cadaadiska sii kordhaya oo ka dhalanaya baahida loo qabo

shidaalka, ayaa wuxuu kallifayaa in shirkadahaas ay maalgashi ku sameeyaan aqoon walba oo fududeeneysa adeegsiga shidaalka, gaar ahaan aqoonta teknolojiyadda. Ahmiyadda culus ee shidaalku leeyahay darteed, ayaa aagagga uu batroolku fadhiyo iyo howlaha la xiriira soo-saarkooda waxay noqotay arin u gaar ah mu’asasadda dowladeed ee ah xukuumadaha. Dowladaha leh dhulka shidaalka laga qodayo, waa kuwa naqshadeeya siyaasadda fududeeneysa in badeecaddaas si haboon loola soo baxo oo looga faa’iideysto. Taasina waxay ku xiran tahay sida ay dadkeeda u qanciso ama khasab haku qanciso oo xoog iyo jajuub weheliya ama faham haku qanciso talo la wadaagay iyo masaalix la ilaashanayo haku qanciso. Dowladahaasi waa kuwo ka taliya ruqsadaha, qandaraasyada soo saarista, iyo aruurinta canshuuraha, waxayna xoojinayaan

xeerarka deegaanka iyo amniga lagula soo baxayo shidaalka.

Arin xusid mudan waxay tahay, in shidaalka dunida ay xukumaan 13-ka dowladood ee ku bahoobay ururka OPEC. Dowladahan kooban ayaa waxay soo saaraan 80 % shidaalka dunida laga adeegsado. Iyagu waxay kala yihiin Jazaa’ir, Angoola, Ecuador, Equatorial Guinea, Gaboon, Iiraan, Ciraaq, Kuweyt, Liibiya, Nijeeriya, Dowladda Koongo, Boqortooyada Sacuudiga, Isu-tagga Imaraatka iyo Venezuela. Laba dal oo kamid ahaa ururka ayaa jiray laakiin ka baxay is-bahaysiga. Dalka Indonesiya wuxuu ka baxay bishii may 2008-dii, kadib markii ay hoos u dhacday soo-saarkiisii shidaalka. Qatar ayaa Iyana ka baxday ururka bishii june 2017-kii, taasina waxay ka danbaysay markii ay go’aansatay in ay yarayso batroolka ay soo

saarto oo booskiisii ay kordhiso gaaska. Waxay kula dirireysey cunaqabatayn ay kala kulantay saddex dal oo reer khaliij ah.

# Casharkii 51aad

Dhallinyaro, shidaalka ama saliidda ceyriin waa dareere kiimiko ah oo ka abuurmay walxo orgaanik ah, kuwaas oo muddo malaayiin sano ah dabadeed isu-rogay jareeraha la yiraahdo Hydro-karbon. Waxay dhulka hoostiisa fadhiyaan iyaga oo keyd ah. Mararka qaarkood dhulka oogadiisa ayay ka muuqdaan.
Xilliya hore ayaa dareerahan iyo aadamigu ay saaxiibeen. Intaanan la il-bixin, dadku waxay dareerahan u adeegsan jireen dhismaha iyo caafimaadka. Sanadkii 1846-kii ayaa la fahmay in qaab tamar ah loo adeegsado. Bartamaha qarnigii 19-aad, bulshadii ku noolayd Yurub iyo waqooyiga Ameerika waxay ku guuleysteen kacaankii wershadaha. Iyagu waxay markaas u baahdeen tamar ay ku socodsiiyaan wershadihii ay hal-abuureen. Dhuxul-dhagaxa ayaa waxay

noqotay shidaalkii ugu horeeyey oo buuxiya baahidoodii tamarta.

Sanadkaas aanu soo xusnay wixii ka danbeeyey waxaa la fahmay shidaalka saliidda, kaas oo kana fudud kana raqiisisan. Si deg-deg badan ayaa waxaa u faafay in la daneeyo saliidda ceyriin. Ruushka, Yurub iyo Mareekanka ayay ka bilaabatay sahan iyo adeegsi xooggan oo saliidda lagu raadinayo. Sida la ogsoonyahay, Mareekanka waa dalka ugu isticmaalka badan shidaalka. Sanadkii 1859-kii, ayaa loo aqoonsan yahay in uu yahay sanadka uu curtay shidaalka Mareekanka. Dalkan ayaa maanta wuxuu yahay dalka ugu ugu adeegsiga badan uguna soo-saar badan saliidda. Maalintii wuxuu soo saaraa 12 melyan oo bermiil. Waxaa intaas u dheer in uu yahay dalka ugu keydka badan shidaalka dhulka laga soo saaray.

Sanadkii 1973-kii, markii waddamada Khaliijka ay joojiyeen shidaalka ay u dhoofinayeen dowladaha reer galbeedka, istraateejiyaddii shidaalka ee waddamadaas waa ay is-beddeshey. Gaar ahaan dalka Mareekanka oo nasiibka ugu badan ka heli jiray shidaalka khaliijka siyaasadda uu ka yeeshey waxaa kamid ah in uu keydsado qayb kamid ah saliidda uu soo dhoofsado. Sidaa darteed, xogta lagu keydiyo elektroonka ee keydkan waxay sheegeysaa in Mareekanka ay maanta u keydsan tahay qaddar ka badan 640 melyan oo bermiil oo saliid ah. Sanadkii 2018-kii istaatistikada waxay sheegtey in dalku uu maalintii adeegsanayay 20,5 melyan oo bermiil. Taasi waxay noqonaysaa in keydkaasi uu dalka ku filan yahay 31 maalmood.

Madaxwaynaha dalka oo keliya ayaa bixin kara amarka fasaxaya in keydkaas la adeegsado.

Saddex jeer oo keliya ayaa illaa iyo hadda la fasaxay in la isticmaalo shidaalkaas keydka ah.

Marka koowaad waxay ahayd sanadkii 1991-kii. Waa markii la weerarayay Ciraaq oo dalku uu baahday adeegsi shidaal dheeri ah. Marka labaad waxay ahayd sanadkii 2005-tii oo dabaylihii la magac-baxay (Katrina Hurricane), taas oo bur-burisay dhisma-hoosaadkii shidaalka ee ku dhereran xeebaha khaliijka Meksiko. Khasaarahaas ay gaysatay dabayshan waxay gaartay 108 bilyan oo US.$. Marka saddexaad waxay ahayd sanadkii 2011-kii, markaas oo uu khalal xooggan ku yimid sicirkii saliidda, taas oo sababtay in qiimihii saliidda ay si xad-dhaaf ah kor ugu kacday..

Ahmiyaddaas uu u leeyahay nolosha aadamiga darteed, ayuu shidaalku u ahaanayaa badeecadda ugu milgaha culus oo la kala iibsado. Dowlad walba midda ay ka wayn-tahay waa uga baahi badan-tahay dahabkan madow. Sidaa darteed arin lala-yaabo maahan dowladdan adduunka ugu xoogga wayn (USA), siyaasaddeeda qodobka labaad, marka laga yimaado xasilinta amnigeeda dowladeed, in ay ahaato tamarta. Waxaa xusid mudan, siyaasadaha dowladaha waawayn iyo shidaalka in ay siyaabo adag oo kala duwan isugu laran-yihiin.

Waxaa jira xiriir labaalay ah oo caalamka dhaqaalaha laga xushmeeyo. Xiriirkaasi wuxuu ka dhxeeyaa saliidda iyo doollarka. Mid waliba oo labadaas kamid ah wuxuu raad ku leeyahay midka kale. Haddii uu sicirka midkood kor u kaco ama hoos u dhaco, waxaa la sabayna qiimaha midka kale. In-kasta oo arintaasi ayan ahayn mid

si fudud ku dhacda, misana waxaa jira hannaan guud oo ay dariiqooyinkeeda uu xiriirkaasi raaco. Arinkaasi ayaa wuxuu bilowday markii uu Mareekanku bilaabay in uu soo dhoofsado batroolka, isla-markaas lacagta dollarka ah uu looga iibsado shidaalka. Xilligaas dollarku wuxuu ahaa cumladda ugu xooggan oo wax lagu kala iibsado, wuxuu kaloo ahaa cumladda ay adeegsato dowladdii ugu weyneed ee soo dhoofsata shidaalka iyo macdanta.

Bilowgii qarnigan 21-aad ayaa waxaa soo if-baxay xiriirka caksiga ah ee sababaha leh ee ka dhexeeya sarifka dollarka iyo sicirka saliidda. Diraaso uu sameeyey bangiga dhexe ee Yurub sanadkii 2014-kii, waxay soo bandhigeen in dollarka iyo saliidda ay leeyihiin xiriir toos ah oo saameentiisa leh. Maadaama Mareekanku uu yahay dalka adduunka ugu saamaynta badan xagga ganacsiga, wax soo-saarka wershadaha iyo dhaqdhaqaaqa socdaallada, markii ay

cumladdiisu (dollarku), wuxuu saamayn toos ah ku yeelanayaa seyladihii, ganacsigii, socdaalladii, diblomaasiyaddii, siyaasaddii, dagaalladii iyo seyladihii. Saamaynta intaas le'eg ee dunida ka dhacaysa waxaa u keenaya haddii dollarku kaco, cidda dollarka haysata waxay iibsan kartaa shidaal badan oo waa uu u raqiisayaa. Haddiise uu dhaco, wuxuu ku noqonayaa qaali oo cidda batroolka haysata ayaa faa'iideysa.

# Casharkii 52aad

Dhallinyaro, aqoonta la yiraahdo deegaan-dhaqaale (Geo-politic) waxay tahay midda si tifaf-tiran uga hadahsa xiriirka uu degaanku la leeyahay dhaqaalaha. Iyadu waxay qaadaa-dhigtaa dhamaan wixii hanti ah oo uu xambaarsan yahay dhulka oo ah dad iyo xoolo (Human Resources & Natural Resources). Waxaa kale oo aqoontan ay ka hadashaa siyaasadaha uu aadamiga kula macaamiltamo si uu uga faa'iideysto hantidaas, heer dal, heer deegaan iyo heer caalami. Hantida dadeedka waa khibradda ay nolosha u leeyihiin iyo garaadka ay isku abaabulaan si ay u noolaadaan.

Hantida deegaan dhaqaale waxaa kamid ah meesha uu joqraafi ahaan dhulku dhaco (Geographical Location), macdanta ku keydsan (Mineral Deposit), xoolaha ku dhaqan (Life Stocks), kalluunka

(FishStocks), dhirta (Forest), tayada cimilada (Atmospherc Quality), marin-meerka xilliyada (Geo-sationary

Orbits) iyo qaybta ka soo gaadha degaanka awoodda jacda bir-qabatada (Portions of Electro-magnetc

Spectrum). Sidaa darteed dhulku wuxuu lamid tiro geel ah oo xero ugu jira qoyskii lahaa. In goortii ay doonaan sidii ay doonaan u intifaacsadaan waxay ku gaarayaan howlaha qallafsan oo ilaaladiisa iyo xannaanadiisa ay u baahan yihiin, taas oo lixi-jecli ay weheliso. Iyada oo aragtidaas la caddaynayo ayaa ayaadda 15-aad ee suuradda Al-Mulk waxay leedahay:

اَهِبِكاَنَم يِف اوُشْماَف اًلوُلَذ َضْرَأْلا ُمُكَل َلَعَج يِذَّلا َوُه)
(ُروُشُّنلا ِهْيَلِإَو ۖ ِهِقْزِّر نِم اوُلُكَو

Eebe wuxuu dhulka inoogu dulleeyey xoog iyo xeerar inoo dabraya oo uusan ka baxsan-karin. Wuxuu inoo dhigay dushiisa iyo gudihiisaba hanti qiimi badan. Culimada ku takhasusay dhaqaalaha waxay dhulka ka sheegaan in ayan jirin hal km2 oo dhul ah, kaas oo aanan lahayn nafac dhaqaale. Laakiin dadka ayaanan garanayn qaabkii ay uga faa’iideysan lahaayeen. Waxaa tusaale ah, cunsurka Uranium-ka, qarnigii 20-aad wixii ka horeeyey, kama uusan duwanayn ciidda lagu dul-socdo oo qiimi kama lahayn aadamiga dhexdiisa. Laakiin markii la heley fahamka awoodda ku jirta iniinaha curiyayaasha, wuxuu noqday cunsur qiimi wayn ku leh jahaynta siyaasadda iyo dhaqaalaha dunida. Sidaas ayaa buqcad kasta oo dhulka ah ay u qiimeysan tahay, laakiin ciddii garatay oo qura ayaa ka faa’iideysanaysa. Ciddii aanan garan, waxay noqonaysaa marti lagu maamuuso hadba inta garaadkoodu gaarsiisan yahay.

Marka laga yimaado hantida ceyriinka ah ee uu leeyahay dal-walba oo leh ahmiyad deegaan-dhaqaale, waxaa ka hilan culus hantida dadeed (Human Resource) ee dalku leeyahy.

Kaas oo la’aantiis uusan jirin dal ka faa’iideysan kara kheyraadka uu leeyahay. Soomaaliya waa dhul dhamaantiis ka kooban buqcado hanti badan xambaarsan. Haddii deegaan-dhaqaalaha Soomaaliya si aqoon leh loo eego, waxaa la helayaa 18-kii gobol ee maamulkii dowladda dhexe ay ku bur-burtay, mid walba oo kamid ah, keligiis waxaa ku noolaan kara 15-ka melyan oo u dhalatay jamhuuriyadda Soomaaliya iyo tiro intaas ka bada.

Isla-markaas waxaa laga dhalin karaa dhaqaale ay masruuftaan tiradaas dadka ah.

Dhaawaca ay nolosha Soomaaliya la fool-xumaatay waxay tahay in uu maqan-yahay hanti-dadeedkii looga faa'iideysan lahaa khayraadkan. Xaqiiqada ay dhallinyaradu uga qaxayaan dalku waa sidaas.

Arintaasi waxay dhacaysaa xilli maalin walba uu culaab ku sii kordhayo qadiyaddii waddaniyadeed ee dalku uu lugaha kagala bixi lahaa shabaagtan dabartay. Waa arin aanan caqli-gal ahayn sida ay isu waafaqayaan hodantooyada eebe ku galladaystay dalkan iyo gaajada ay dadkkiisa ku sugan yihiin.

Waxaa xusid mudan, hantida ugu qiimiga badan ee qarnigii tegey aadamigu uu ganacsi aahaan iskudhaafsaday waxay ahayd saliidda. Qarigan 21-aad oo dadka maanta nool kooda u cimri dheer uu ku wakhti dhamaysanayo ayaa isna saliiddu ay ahaanaysaa badeecadda ugu qiimiga badan.

Waayo ahmiyadda ay saliidda u leedahay aadamiga casrigan nool waa mid aanan daqiiqad ka maqnaan dhulka oogadiisa. Maalin-kasta waxay taabanaysa nolosha qof-kasta oo maanta dunida ku dul-nool. Meel-kasta oo qorraxdu ay ka soo baxdo iyo meel-kasta oo qorraxdu ay ka dhacdo waxaa ku sugan dad adeegsanaya nafac saliid ka yimid.

Shidaalku wuxuu xiriir la leeyahay tiro gawaari ah oo ka badan hal bilyan oo dhulka oogadiisa ku socda. Shidaalku wuxuu xiriir la leehyahay tiro dayuurado ah oo ka badan 39,000 oo xamuul iyo socdaal loo adeegsado. Shidaalku wuxuu xiriir la leehyahay tiro doonyo iyo maraakiib ah oo ka badan 53,732, kuwaas oo iyana xamuul iyo socdaal loo adeegsado. Sanadkii 2018-kii, dayuuradaha oo keliya ayaa waxay maalin-walba ku duulayeen batrool gaaraya 1,7 melyan oo bermiil.

Hay'adda tamarta dunida IEA (International Energy Agency) waxay soo saartay xog ay ku sheegtey, 4,4 bilyan oo qof ayaa dayuurado ku socdaalay sanadkii 2018-kii. Hay'addu waxay sheegtey, tiradaas in ay saddex jibbaarmayo sanadaka 2050-ka.

# Casharka 53-aad

Dhallinyaro, shidaalku waxaa kale oo uu xiriir la leeyahay shabakadaha tariinnada caalamka oo maalin walba ay ku gooshaan dad balaayiin gaaraya iyo malaayiin ton oo xamuul ah. Dalka Hindiya oo keliya ayaa sanadkii 2013-kii waxaa tariinada ku socdaalay dad gaaraya 8,4 bilyan oo qof. Shidaalka waxaa intaas u weheliya in laga dhaliyo dabka lagu shito birjikooyinka ay raashinka ku karsadaan dad tiradoodu ay dhaafsiisan yihiin saddex bilyan iyo bar, kuwaas oo badankoodu xilliga saliidda u adeegsada agabka ay ka dugaalsadaan qaboobaha xilliyada uu barafku ka dhaco dalalkooda.

Shidaalka ewaxaa laga dhaliyaa korontada loo adeegsado wershadaha, bakhaarada, isbitaallada, xarumaha waxbarashada iyo guryaha lagu nool-yahay.

Waxaa intaas u dheer oo saliidda ceyriin laga sameeyaa ama ay qayb ka tahay agab-wershadeed 180 jaad ah, kuwaas oo lagu magacaabo (Petrochemicals). Waxaa kamid ah agab loo adeegsado beeraha iyo caafimaadka, waxaa kamid ah agab jirka lagu qurxiyo iyo agab guryaha lagu qurxiyo. Shidaalka ahmiyaddaas u leh nolosha, waxaa la ogsoonyahay in baahidiisa ay si xowli ah u-sii kordheyso.

Hay'adda shidaalka adduunka, xog ay arinkaas ka diyaarisay waxay ku sheegtey, shidaalka laga adeegsaday dunida sanadkii 2001-dii in uu ahaa 77 melyan oo bermiil maalintii. Maanta oo ay ka soo wareegatay wax 20 sano ka yar waxaa maalintii la adeegsadaa ku dhowaad 90 melyan oo bermiil. Waddamada dhaca qaaradda Aasiya oo ay kamid yihiin Shiinaha, Hindiya iyo Indoneesiya ayaa kor u sii qaadaya adeegsiga siyaadada ah ee shidaalka.

Marka la xusayo baahida uu maanta dalka Shiinaha u qabo shidaalka, waxaa lays barbar-dhigaa baahidiisii muddadii ka horeysey sanadkii 1993-kii iyo baahidiisa maanta ah. Sanadkaas aanu soo xusnay wixii ka horeeyey Shiinaha waxaa ku filnaa shidaalka iyo dhuxul-dhagaxa uu dalkiisa kala soo baxo. Laakiin hadda Shiinuhu wuxuu seyladaha caalamka ka iibsadaa shan melyan oo bermiil maalintii.

Baahidaas xooggan waa mid si siyaado ah u kordheysa oo dhinac socota hor u-marka uu aadamigu guud ahaan ka gaarayo nolosha. Arintaas ayaa shirkadaha shidaalka waxay ku khasbaysaa in ay helaan ceelal cusub oo laga dhaansado saliidda ceyriin. Sidaa-darteed ayaa raadaarradooda sahanku ay ugu dhacaan degaanada lagu tuhmayo in ay hodan ku yihiin saliidda bad (Ofshore) iyo berry (onshore).

Faa'iidodoonka ka sokow, ujeeddadu waa in la haqab-tiro baahida uu aadamigu u qabo badeecaddan intaanan la yablasin. Hay'adda tamarta ee dunida waxay xustay.

In-kasta oo sahanka lagu ugaarsanayo saliidda degaanka uu ahaa mid bilowday horraankii qarnkii 20-aad, misana wixii ka danbeeyey sanakii 1950-kii ayay shirkaduhu xoojiyeen baadi-goobka. Sahanka saliidda ee degaanka bariga Afrika waxaa bilaabay arah la yiraahdo (Dudly Expedition Angola-American Oil Company), taas oo ku baxday degaano kamid ah dhulka ay degaan qowmiyadda Xabashida. Waxaa xigay sanadihii 1930-meeyadii iyo 1940-meeyadii oo ceelal dhaadheer laga qoday dalka Ugaandha iyo meelo kamid ah xeebta Badda Cas ee Eriteeriya.

Arimahaasi waxay ahaayeen sahamo habqan ah oo aanan nidaamsanayn.

Muddadii uu socday dagaal-wayihii II-aad ee dunida, shidaalka bariga Afrika waxaa loo arkayay in uu yahay mid dhamaystir u ah ceelasha waawayn ee jasiirad u-egta khaliijka carabta. Shirkad Mareekan ah oo la yiraahdo Sinclair Oil, ayaa waxay sahan ka bilowday dalka Itoobiya, gaar ahaan gobolka Soomaalidu degaan. Sanadihii 1950-meeyadii, waxaa kale oo jiray sahamo isa-soo tarayay oo shirkaddu ay la beegsatay waddamada Tansaaniya, Kenya, Ugaandha, Itoobiya, Soomaaliya, iyo Ereteriya.

Goor danbe, dhulkii ay Sinclair Oil sahmisay, shirkaddu waxay ku samaysay sawir ah (Scanning), kaas oo lamid ah sawirka ay xilligaas ku samaysay ceelasha waawayn ee Scuudiga ee Al-Gawaar. Waa ceelal ku yaal gobolka Al-Axsaa ee bariga dalka Sacuudiga. Shirkadda BP/Shell, xilligaas waxaa sahankeedu saarnaa waqooyiga Soomaaliya oo Ingiriisku uu gacanta ku hayay iyo dalka Kenya.

Waxaa kale oo degaanka ku sugnaa shirkad uu Talyaanigu leeyahay oo la yiraahdo AGIP (Azienda Generale Italiano Petroli). Shirkadahan ayaa muddadii u dhexeysey 1950 – 1960 waxay sahmiyeen 36 ceel shidaal. Sahamadan waxay ahaayeen kuwo xooggan oo aan ku ekeyn Soomaaliya. Goobaha la sahmiyay waxaa kamid ahaa xeebta balliga la yiraahdo (Lake Albert) ee dhaca galbeedka dalka Ugaandha. Bandhigyadii jeolojiga ee natiijooyinkii sahanka qaarkood waxay ahaayeen kuwo dhiiri-gelin leh.

Kuwa ugu quruxda badnaa oo xilligaas la ogaaday waxaa kamid ah natiijooyin laga heley gobolka Gallaadi ee degaanka Soomaalida Itoobiya iyo degaanka Dhega-Shabeel ee waqooyiga Soomaaliya.

# Casharkii 54-aad

Dhallinyaro, waxaa xusid mudan, xilligaas aanu soo xusnay (1950-1960) gobollada koonfureed ee Soomaaliya muddo 10 sano ah ayaa JQ ka Dh (Jamciyadda Quruumaha ka Dhexeysa) ay maxmiyad ahaan gacanta ku haysay. Dowladda Talyaaniga ayaa wakiil uga ahayd maamulka gobolladan. Waxaa jiray arin ay gobolladan kaga duwanaayeen xilligaas gobolladii kale ee dalka iyo dowladaha dhaca bariga Afrika marka laga reebo Itoobiya. Marka la eego cabbirka madax-bannaanida, in-kasta oo gobolladu ayan ahayn xilligaas kuwo si buuxda u madax-bannaan, misana waxay ahaayeen kuwo loo diyaarinayay istiqlaalkii. Heshiis ay gaareen dowladihii ku adkaaday dagaalkii II-aad ayaa ku abyooday, muddada tobanka sano ah (1950-1960) in gobolladan la siiyo aqoonsigii dowladnimada.

Codsigaas wuxuu markiisii hore ahaa mid ka yimid is-bahaysigii dhallinyarada Soomaaliyeed SYL.

Talyaaniga oo ahaa mid dalka amaano ku hayay, ma-uusan ahayn mid xaq u lahaa in uu bixiyo qandaraasyo shidaal iyo ruqsad lagu sahmiyo degaanka middoodna. Iyada oo ay sidaas tahay ayuu sanadahaas wuxuu u fasaxay shirkadda Sinclair in ay degaanka baaritaan ku samayso. Bilowgii sanadihii 1950-aadkii ayay shirkaddu ka bilowday howl-galladeedii gobollada koonfureed.

Sahanku wuxuu xilligaas ku ekaa dhulka engegan (Onshore) ee gobolladan. Aqoon xooggan looma lahayn sahanka badda. Shirkaddu Judhii horeba waxay heshey natiijooyin wanaagsan oo ku bishaaraynaya khayraadka dhulkan ku duugan.

Nin la yiraahdo Kamaalu-Diin Salaax oo ahaa diblomaasi u dhashay dalka Masar, isla-markaas kamid ahaa saddex nin oo JQ ka Dh u matalayay Soomaaliya ayaa arintan wax ka qorey. Isagu wuxuu xasuusqorkiisa ku xusay in uu xafiiskiisa kula kulmay masuul ka tirsan guddida sare ee shirkadda Sinclair. Ninkan oo magaciisa uu ku sheegey Adams, ayaa Kamaalu-diin wuxuu ka codsaday in uu kala hadlo hoggaanka xisbiga SYL (Somali Youth League), si uu Soomaalida uga helo heshiis ah in shirkadda Sinclair lagula heshiiyo soo-saarka shidaalka dalka, goorta ay Soomaaliya madax-bannaanida qaadato. Waxaa xusid mudan in madaxda xisbiga SYL ay ahaayeen kuwo kalsoonida ay Kamaalu-diin Salaax u qabeen ay ka weyneed kalsoonida ay ku qabeen masuuliintii Talyaaniga oo ay u arkeen in ay yihiin haraadiga nadaamkii fashiistada ahaa.

Kamaalu-diin wuxuu ku yiri Adams oo ahaa masuulkii Sinclair, haddii ay shirkaddu la geleyso SYL heshiis lamid ah heshiisyadii ay la gashay Sacuudiga iyo Kuweyt, markaas waan la hadlayaa. Sida muuqata, masuulkii Sinclair waa uu ka gows-qabsaday arinkii. Sababtu waxaa lagu sheegaa, Soomaaliya oo xilligaas aanan weli madax-bannaani qaadan iyo goor danbe xogtii ay shirkaddu heshey oo lala wadaagay waddamo kamid ah khaliijka, kuwaas oo laaluush ku bixiyay in shirkaduhu ay hor-joogsadaan arintan mashruuc-saliideedka ah oo Soomaaliya laga bilaabayo.

Sanadihii 1960-aadkii, in-kasta oo aagagga oggolaanshaha uu ahaa mid guud ahaan hoos loo dhigay waddamada Itoobiya iyo Soomaaliya, misana hawlihii sahaminta waa ay yara-kordheen.

Shirkadaha waawayn iyo kuwa yar-yar ee xilligaas sahanka waday tiradooda waa ay is-le'ekaayeen. Afartan ceel ayaa muddadaas laga qoday degaanka bariga Afrika. Qayb badan oo ceelashaas kamid ah waxaa khasbayay natiijooyin laga heley sahanka adeegsiga mowjadaha dhul-gariirka (Seismic Waves). Laakiin dhowr ceel ayaa lahaa muuqaallo muhiim ah. Waxaa kamid ah ceelka Dhodori-1-da oo ku yaal gobolka Soomaalidu degaan ee Kenya. Taasi waxay ahayd dhiiri-gelin wayn oo soo jiidata in shirkaduhu ay sii wadaan sahanka.

Qodobka ugu sarreeya oo sahankii tobankaas sano lagu ogaaday wuxuu yahay gaaska xooggan ee fadhiya agagaarka degmada Afgooye ee Soomaaliya.

Bilowgii sanadihii 1970-aadkii, waxaa degaanka ku soo qul-qulay shirkadihii waawaynaa ee shidaalka.

Soomaaliya xilligaas waxay ahayd waddan siyaasaddiisu ka xarig furatay dowladaha reer galbeedka.

Dowladdii ay ciidamadu caynaanka u hayeen waxay xilligaas saaxiib dhow la ahayd dalkii la oran-jiray Midowga Soofyeeti (Ruushka). Sidaa darteed Soomaaliya xilligaas nasiib uma ayan helin in ay qayb ka hesho maal-gelintii ay shirkadaha reer galbeedka ku sameynayeen sahanka saliidda degaanka. Shirkaduhu waxay sahankooda la beegteen Itoobiya iyo Kenya.

Shirkadaha waawayn ee xilligaas bariga Afrika ku sugnaa waxay ahaayeen Exxon (Mareekan), Elf (Fransiis), Total (Fransiis), Chevron (Mareekan) iyo Tenneco (Mareekan). Shirkadahan ayaa dhammaantood waxay ahaayeen kuwo ku tartama dahabkaas madow oo la filayay in uu ceegaago bariga Afrika.

# Casharkii 55-aad

Shirkadda Conoco oo iyana laga leeyahay dalka Mareekanka ayaa waxay qaadatay howlihii ugu horreeyay ee sahanka balliga Lake Albert ee u dhexeeya Ugaandha iyo Koongo. Waxaa jiray dhowr shirkadood oo yar-yar oo firfircoon, kuwaas oo xilligaas dhinac socday sahanka shirkadaha waawayn. Waxaa kamid ahaaa shirkadda la yiraahdo White-Stone oo fadhigeedu yahay degmada Dalas (USA). Afar ruqsadood ayay shirkaddan ka heshey Itoobiya iyo Kenya. Sanadahaas aanu soo xusnay, shirkaduhu waxay bariga Afrika ka qodeen 27 ceel. Tansaaniya ayaa markaas waxay heshey ceelka gaaska ee la yiraahdo Soongo-Soongo (Songo Songo Gas Field).

Sanadkii 1972-kii, sahan ay shirkadda Tenneco ay la beegsatay gobolka Soomaalidu degaan ee Itoobiya, waxay ka heshey shidaal xooggan. Itoobiya ayaa shaqaalaha shirkadda waxay soo raacisey ciidan ilaaliya howlaheeda. Soomaaliya waxay dhibsatay ciidanka Itoobiya oo ku soo dhowaadey xuduuddeeda. Sidaa darteed waxay dhacdadii kaga jawaabtay in Iyana ay cuntubyo ciidamadeeda kamid ah dhigt xuduuddeedii ku beegneyd degaankii uu sahanku ka socdey.

Howshaasi waxay xilligaas kicisay xasaasiyad siyaasadeed oo labada dal ay is dareensadeen.

Xiisaddii iyo howlihii sahanka, labaduba waxaa baajiyay kacdoonkii ardayda ee Itoobiya ka curtay iyo af-gembigii ciidamada xukunka kagala wareegeen boqor Xayle Selassie.

Dabadeed waxaa xigay dagaalkii waynaa oo Soomaaliya ay ku qaaday Itoobiya, kaas ooh or-dhiciisa uu bilowday sanadkii 1977-kii.

Sanadihii 1980-aakii, howlihii shidaalka ee bariga Afrika waxay gaareen heerkii ugu sarreeyey. Waxaa sanadahaas kor u kacay sicirkii saliidda dunida. Arintaasi waxay dhiiri-gelisey sahamo waa-wayn oo laga galay wadamada Suudaan iyo Yemen. Meelaha ay sahamintu u dhaqaaqday waxaa kamid ah balliga Anza Graben ee Kenya, kaas oo isu-mara dhul dheer oo u tallaabaya gobollada Soomaaliya (Gedo, JubadaDhexe iyo Jubada-Hoose). Waxaa kaloo sahanka lala-beegsaday dooxooyinka la cimilada ah dhulalka lama-degaanka (Karoo Basin) ee dhaca koonfur-galbeed ee dalka Tansaaniya. Sahankii degaankaas waxaa lagu qoday 58 ceel.

Waxaa kale oo jiray 42 ceel oo sahan-la'aan laga qoday isla-degaankaas. Majiraan wax wayn oo sahamadaas lagu gaaray.

Dhanka Soomaaliya, sanadahaas, waxaa sahankii ku soo biiray shirkado waawayn oo ay kamid yihiin Conoco-Phillips, Shell (Pectin), Eni-Amoco, Total iyo Texaco.

Mid ka mid ah sababaha ugu wayn ee shirkaduhu ay xilligaas u xiiseynayeen Soomaaliya waxay tahay, xaqiiqada cilmiyeed oo ay ku qanceen in dhulka Soomaaliya uu yahay mid leh rajo wayn. Sahamin joqraafi ah oo laga sameeyay xeebta badda Cas ee Soomaaliya ayaa waxay xaqiijisay in ay la cimilo tahay dhulka Yemen, kaas oo leh keyd shidaal oo ku dhow 9 bilyan oo bermiil.

Sahan cilmi-dhuleed ah ayaa wuxuu sheegaya, labada marin-shidaal ee dhaca koonfurta Yemen

(Ma´rib-Shabwa iyo Sayun-Masila) iyaga oo soo hoos-maraya qalfoofka badda Cas in ay ku xiran yihiin xirmooyinka Nugaal iyo Darhoor ee waqooyiga Soomaaliya. Joqraafi ahaan, xirmada Nugaal waxay isu soo martaa gobollada Tog-dheer, Sanaag, Sool iyo Nugaal. Xirmada Dharoor ayaa iyana isu marta gobollada Sanaag iyo Bari.

Diraasaad ay markaas hoggaaminayeen Baangiga Adduunka (World Bank) iyo Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Horumarinta UNDP (United Nations Development Program), ayaa sanadkii 1991-kii waxay si wada-jir ah u dejiyeen qiimeyn noocan oo kale ah. Gabagabadii diraasadu waxay muujisay, waddamada dhaca Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, in Soomaaliya ay u tahay midda ugu mustaqbalka wacan saliidda ceyriin ee keydka ah.

Nasiib-darro, riyadii ay shirkaduhu filayeen in ay xaqiijiyaan waa noqon-weydey mid u dhabowdo. Taasina waxay ka danbaysay markii dowladdii ciidanka lagu kacay bilowga sanadkii 1991-kii.

Waxaa xigay dagaal sokeeye oo dalka ka curtay kaas oo dhaliyay in si lama filaan ah ay u joogsataan dhamaan howlihii lagu baadi-goobayay saliidda oo shirkadaha shisheeye ay ka wadeen degaanka.

Sanadihii 1990-aadkii, xaaladdii degaanka iyo tii dunida si xooggan ayay isu beddeleen. Soomaaliya waxay gashay dagaal sokeeye.

Itoobiya dowladdii dhexe ayaa dhacday iyada taladii dalka ay jabhado la wareegeen.

Dagaaladii ka socday koonfurta Suudaan waa ay cuslaadeen. Degaanadaas oo dunidu ay ka raja-qabtay in ay qayb ka qaataan seyladaha shidaalka, ayaa dhamaantood waxaa heley dib u-dhac siyaasadeed. Nabadgelyadii iyo xasilloonidii degaanadan waa ay xumaadeen. Waxaa arintaas weheliya, qiimihii shidaalka oo kor u kacay. Soomaaliya, inteeyan dowladdii dhexe ka-bixin fagaaraha, waxaa jiray sahamo ka socday gobollo kamid ah dalka, kuwaas oo la joojiyey bilowgii 1991-kii. Shirkadda Conoco oo gobolka Nugaal ka waday howlo sahan, ayaa shaqadii joojisay iyada oo aanan weli gaarin ogaallo wax kuool ah oo ay soo bandhigto.

# Casharkii 56-aad

Dhanka Soomaaliya dagaalkii sokeeye waa uu daba-dheeraaday oo wuxuu noqday khilaaf lagu hayo taariikhda aadamiga midka ugu cimriga dheer, kaas oo sida muuqata illaa hadda aanan xal buuxa loo helin. Dhanka Itoobiya, dagaalkii wuxuu ku dhamaaday in Eriteeriya ay ka go'do dowladda Itoobiya oo ay noqoto waddan madax-bannaan. Madax-bannaanida Eriteeriya waxay mushkiladdii Soomaaliya ku kordhisay culeys, waayo Itoobiya oo dadkeedu uu 100 melyan yahay ayay ka dhigtay dal hareereysan oo aanan lahayn albaab badeed oo ay dunida kala xiriirto. Soomaaliya oo la ogsoon yahay in ay tahay dalka ugu hantida badan uguna istraateejisan degaanka ayaa markaas waxay baylah u noqotay degaan dowladaha deriska la ah gaar ahaan Itoobiya ay soo milicsato xeebaha baddeeda.

Tun-jilicsanaanta Soomaaliya ayaa waxay sababtay in Itoobiya ay ishaarato in dekadaha Soomaaliya ay mustaqbalka si sahlan uga adeegato.

Madax-waynaha Eriteeriya Isaias Afawerqi oo isu arka in uu waayeel ka yahay siyaasadda degaanka Geeska Afrika, tan iyo markii uu yimid wuxuu ku dadaalayay in uu hoggaanka u qabto dowladaha dhaca degaanka. Waxaa damaca geliyay da'da uu ka wayn-yahay iyo khibradda uu dheer-yahay madaxda kale ee waddamada dhaca Geeska Afrika. Sidaa darteed wuxuu dalkiisa saldhigyo ka siiyay dhamaan ururada ku mucaaradka ah dowladaha ka dhisan Soomaaliya, Itoobiya iyo Jabuuti si uu u cadaadiyo. Dalka Jabuuti ayaa xigsaday in uu Soomaaliya waalid u noqdo, taas oo uu u arko waddanka qura oo kula tartamaya ahmiyadda dhaqaale iyo ahmiyadda istraateejiyadeed oo dekadeheeda ay leeyihiin.

Waddamada Khaliijka, iyaguna waxaa u muuqday hantida xoogga badan oo Soomaaliya taal, marka la raacsho degaanka istraateejiga ah oo uga dhow seyladihii dunida, in ay hoos u-dhac wayn ku keeni-karto badeecaddooda.

In-kasta oo arimahaasi ay degaanka ka dhigeen mid nasiib-daran, dabayaaqadii sanadihii 1990-meeyadii, afar ceel oo aanan la sahmin ayaa ku-nasiibso looga qoday. Afartuba waxay dhacaan salka Itoobiya. Nasiib-darro, wax lasoo bandhigo lagama helin. Shan ceel ee Tansaaniya laga qoday, ayaa qudhooda waxay noqdeen kuwo aanan lagu guuleysan. Shirkadda Tullow Oil oo laga leeyahay dalka Ireland, sahan ay galbeedka Kenya ka qabatay ayaa waxay ku ogaatay in batrool yar uu ku ururay dooxada la yiraahdo (Lokichar Basin) oo u dhaw harada Turkana ka hooseysa.

Guud ahaan, muddadii u dhexeysey sanadihii 1950 – 2010, geyiga beriga Afrika sahanka xooggan oo ay shirkadaha shidaalku ka galeen waxaa laga fahmi karaa ruqsadaha badan oo ay bixiyeen dowladaha dhaca degaanka. Xarunta caalamiga ee keydka ogaallada la xiriira shidaalka ee la yiraahdo AAGGDatabase waxay xustay, muddadaas aanu soo sheegney in labaatan shirkadood ay dowladaha degaanka ka heleen qandaraasyo ceelal shidaal. Wadar ahaan shirkadahaasi waxay degaanka ka heleen qandaraasyo 626 goob-saliideed (Oil Blocks). Sida ay u kala nasiib badan yihiin fursadaha ay shirkaduhu kala yeesheen waa sidan:

1 SHELL: waa shirkad laga leeyahay dalka Holland. Waxaa la asaasay 1907-kii, laakiin waxaa hadda la wadaaga Ingiriis oo waxay midoobeen shirkadda BP (British Betroleum). Waa shirkad caalami ah oo

waxay ka shaqaysaa 70 dal. Xarunteedu waxay dhacdaa degmada Houston (Texas - USA). Shirkaddan oo ah midda ugu qandaraasyo badan heshiisyada degaanka, ayaa waxay ka haysataa degaanka bariga Afrika 88 goobood.

2 BP (British Petroleum): waa shirkad laga leeyahay dalka Ingiriiska. Waxaa la asaasay 1908-dii, laakiin waxaa hadda la wadaaga Nederland (Holland) oo waxay midoobeen shirkadda Shell. Wada-jirkooda waxay kamid yihiin lixda shirkadood ee shidaalka oo ugu waawayn dnida. Shirkaddan oo ah midda labaad ee ugu qandaraasyo badan heshiisyada degaanka, ayaa waxay ka haysataa degaanka bariga Afrika 49 goobood.

3 AMOCO: waa shirkad laga leeyahay dalka Mareekanka. Waxaa la asaasay 1889-kii. Xarunteedu waxay dhacdaa degmada Chicago (Illinois - USA). Waxay ka shaqysaa 14 dal. Waa shirkadda saddexaad oo ugu qandaraasyada badan marka la eego ruqsadaha ay bixiyeen dowladaha bariga Afrika. Waxay qandaraas u haysataa 47 goobood oo degaanka ah.

4 AGIP: Asalka shirkaddu waa Talyaani. Waxaa la asaasay 1926-kii. Sanadkaa 2003-dii wixii ka danbeeyey, shirkaddu waxay hoos-timid shirkadda caalamiga ah ee la yiraahdo Eni (Ente Nazionale Idrocarburi). Xarunteeda waxay dhacdaa magaalada Roma (Talyaaniga). Shirkaddu waxay ka shaqysaa 67 dal. Degaanka bariga Afrika waxay ku leedahay 43 goobood.

5 SINCLAIR: Shirkaddu waa Mareekan. Waxaa la asaasay 1916-kii. Waxay qayb ka tahay shirkado badan oo isku-jira. Xarumteeda waxay dhacdaa degmada Salt Lake (Utah - USA). Shirkaddu waxay ku sugan tahay 35 waddan oo kala duwan. Qandaraasyada ay ka haysato degaanka bariga Afrika waa 41 goobood.

# Casharkii 57-aad

Dhallinyaro, sida aanu soo xusnay saadaashu waxay tahay, dowladaha dhaca degaanka bariga Afrika in ay noqonayaan degaanka labeeya Khaliijka Carabta ee caalamka ka haqab-tira baahida shidaalka ee mustaqbalka. shrkadaha 20-ka ah oo illaa iyo hadda qandaraasyada ka haysta waxaa kale oo kamid ah:

1 CONOCO: Shirkaddu waa Mareekan. Waxaa la asaasay 1875-kii. Sanadkii 2002-dii, 66 % oo kamid ah saamiyadii shirkadda waxaa iibsatay shirkadda PHILIPS. Sidaa darteed magaca cusub oo shirkaddu leedahay wuxuu yahay Conoco-Philips Co. Wadar-ahaantooda, sanadkii 2018-kii, hantida ay ku shaqeynayeen waxay ahayd

11,044 bilyan oo US.$. Dhaqaalaha faa'iidada ah wuxuu noqday 6,257 bilyan oo US.$. Marka la'eego shirkadaha ka shaqeeya shidaalka oo keliya E & P (Exploration and Production), shirkaddan waa midda ugu wayn dunida. Xarunta dhexe ee shirkadda waxay ku taal magaalada Houston (Texas - USA). 17 dal ayay shirkaddu ka shaqaysaa. Qandaraasyada ay shirkaddan ka haysato bariga Afrika waa 35 goobood.

2 MARATHONE: Waa shirkad shidaal oo Mareekan ah, taas oo ka shaqeysa sahanka, soo-saarista, sifeynta, suuq-geynta iyo gaadiideynta shidaalka. Waxay kamid tahay shirkadaha waawayn ee shidaalka. Waxaa la asaasay 1887-kii.

Xarunteeda waxay ku taal degmada Houston (Texas - USA). Sanadkii 2017-kii, hantida ay shirkaddu lahayd wuxuu ku qiimeysnaa 21,321 bilyan oo US.$. Sanadkii xigay oo ahaa 2018-kii, shaqada ay shirkaddu qabatay lacagta uga soo noqotay waxay ahayd 6,6 bilyan oo US.$. Faa'iidada ay ka heshey wuxuu ahaa 1,096 bilyan oo US.$.Maanta shirkaddu waxay ka shaqaysaa 196 dal. Geyiga geeska Afrika, shirkaddu waxay ruqsad u heysataa 35 goobood oo ay qandaraas ku qaadatay.

3 EXXON: Waa shirkad baaxad wayn oo caalami ah, taas oo ay isku-bahaysteen shirkado badan. Waxaa kamid ah Imperial Oil Ltd (Kanada), XTO Energy (Mareekan),

Mobile Producing Nigeria Unlimited (Nijeeriya), Aera Energy LLC (Mareekan) iyo EXON Neft-gas Ltd (Ruusiya). Shirkadda EXXON, waxay horey u lahayd magaca ah Standard Oil of New Jersey, taas oo kamid ahayd toddobadii shirkadood oo laysku oran-jiray walaalaha (Seven Sisters). Magacaas waxaa u xigey ESSO. Ugu danbayntii, sanadkii 1972-kii shirkaddu waxay la baxday magaca EXXON. Sanadkii 2000 EXXON waxay la midowdey shirkad kale oo wayn oo iyana shidaalka ka shaqaysa, taas oo lagu magacaabo MOBIL. Markaas waxay wadar u yeesheen magaca ah EXXONMOBIL. Waxaa u muuqatay fursadaha dhaqaale oo ay ku helayaan isbahaysiga. Shirkaddan cusub waxay ka shaqaysaa waddamo gaaraya 200 oo dal.

Xaruntooda guud waxay ku taal degmada Irvin (Texas - USA). Hantidooda waxaanu ku soo bandhigeynaa markaanu xuseyno shirkadda MOBIL. Shirkadda EXXON oo keliya ayaa geyiga bariga Afrika ka haysata xuquuq qandaraasyo 29 goobood.

4 ELF: Waa shirkad shidaal oo Fransiis ah. Waxaa la asaasay 1965-tii. Shirkaddu waxay asal ahaan ka soo jeeddaa saddex shirkado shidaal oo isu tegey. Waxay kala yihiin RAP (Regie Autonome des Pétroles), SNPA (Societe Nationale des Petroles d'Aquitaine) iyo BRP (Bureau de Recherches de Petroles). Sanadkii 1993-kii, madax-waynihii Ciraaq Saddaam Xuseen wuxuu ELF u saxiixay in shirkaddu ay noqoto midda keliya oo ka shaqeysa shidaalka Ciraaq. Sanadkii 2000, dowladda

Fransa waxay iibisay qayb kamid ah saamigii ay shirkaddu lahayd, iyada oo reebatay qayb xoog leh. Sanadkii 2003-dii, ELF waxay la midowdey shirkadda la yiraahdo TOTAL-fina, markaas oo ay la baxeen magic qura, kaas oo ah TOTAL. Shirkaddu waxay kamid tahay toddobada shirkadood oo ugu wayn dunida ee shidaalka ka shaqeeya. 30 dowladood ayay ka qoddaa kana sahmisaa shidaalka. Waxay ka howl-gashaa 130 dal. Xarunteedu waxay ku taal degmada Courbevoie (Fransa). Bariga Afrika waxay ku leedahay 25 goobood oo ay qandaraas ka haysato.

5 PETRONAS: Waa shirkad shidaal oo ay leedahay dowladda Malesiya. Waxaa la asaasay 1974-kii. Waxay ka howl-gashaa 35 dal. Xarunteedu waxay ku taal Kuala Lampur (Malesiya). Waxaa jira shirkado badan oo hoos-yimaada shirkaddan, kuwaas oo leysku yiraahd PETRONAS - Group. Waxay ka kooban yihiin 103 shirkadood oo PETRONAS ay si buuxda u leedahay, 19 shirkadood oo ay qayb ku leedahay iyo 57 shirkadood oo ay wada-shaqeyn ka dhexeyso. Dhamaantood waxay ka shaqeeyaan howlaha la xiriira batroolka iyo gaaska oo ay kamid tahay sahanka, soo-saaridda, sifeynta, gaadiideynta, suuq-geynta, iibinta iyo farsamada betro-kiimikada. Shirkadda PETRONAS waxaa lagu tiriyaa in ay kamid

tahay SevenSisterska cusub. Shirkaddu waxay kamid tahay shirkadaha bariga Afrika ku leh qandaraasyada. Waxay ruqsad u haysataa goobo 26 ah.

# Casharkii 58-aad

Dhallinyaro, waxaa jiray xilli xijigu (beeyada & meydiga) ay ahaayeen badeecadda ugu qiimiga badan oo ummaduhu ay ganacsi isku dhaafsan-jireen. Waxay sabab u noqon jireen siyaasado ku abyoota isxulufeysiyo caalami ah iyo colaado dhex-mara dowladihii xilligaas ugu xoogga waynaa. Colaadaha lagu hayo taariikhda aadamiga, kuwooda ugu da'da wayn middeeda afaraad waxay ka dhacay geeska Afrika. Boqortooyo kamid ah Fircoonadii ayaa weerar soo qaaday iyaga oo daba-socdey xijiyo ay bililiqeystaan. Sidaas ay badeecadda xijigu ay ugu qiimi badnayd xilli kamid ah xilliyada, ayaa waxaa jiray badeecado ay marba mid ugu qiimi badnayd ganacsiga caalamiga ah. Waxaa kamid ah Dharka, Birta, Xariirta, Cusbada, Dahabka ikk.

Mar-kasta oo aqoontu kororto badeecad ayaa laga guurayay oo badeecad kale ayaa loo guurayay.

Xilligan aynu joogno, qiimihii qiimihii badeecadahan isma-beddelin, in ay sii kordhaan mooyee. Laakiin aadamigii ayaa il-baxay oo aqoon iyo garasho u korortay. Sidaa darteed, waxyaabaha kale oo la hindisey ayaa shiiqiyey, balse qiimahoodii weli hoos uma dhicin. Bal waxaa muuqata in qiimahooda uu mustaqbalka xoogeysanayo. Sidaas si lamid ah ayuu shidaalku ka dhigan yahay oo qiimihiisa marna hoos u dhici-maayo. Si-kasta oo loo hor u-mariyo ilaha laga dhaliyo tamarta dabiiciga ah (dabaysha, biyahay, qoraxda orgaanikada), shidaalku wuxuu ahaanayaa mid kaalintiisa ayan hoos u dhicin. Sidaa darteed ayay hay’adaha caalamiga ah iyo shirkadaha waawayn ee shidaalka waxay ku howlan yihiin ayimidda shidaalka caalamka.

Ummad waliba oo eebe uu ku mannaystay nicmaddan, waxay halis ugu jirtaa in ay ku naclowdo, haddii ayan la iman siyaasad ay weheliso taxadar iyo waaya-aragnimo. Shirkadaha waawayn ee u sharaxan in ay ka ugaartaan shidaalka bariga Afrika waxaa kale oo kamid ah:

1 TEXACO: Waa shirkad shidaal oo Mareekan ah. Waxaa laga asaasay magaalada

Beaumont ee dowlad-goboleedka Texas sanadkii 1901-dii. Markaas hore magaca ay wadatay wuxuu ahaa Texas Fuel Company. Sanadkii 1928-kii, shirkaddan waxay noqotay shirkadda qura oo shidaalka ay soo saarto uu gaaray dhamaan gobollada dalka Mareekanka. Saddex sano dabadeed shirkaddu waxay iibsatay

shirkad kale oo la yiraahdo Indian Oil Company, taas oo saldhiggeedu ahaa Illinois (Chicago). Shirkaddii TEXACO, si xooggan Bishii Oktoobar 15, 2000, TEXACO waxaa la wareegey shirkadda CHEVRON, taas oo kula-wareegtey qiime dhan 45 bilyan oo US.$. TEXACO waxay markaas noqotay mid ka hoos-shaqaysa CHEVRON. Arintaasi waxay ka danbeysey goortii ay falistay shirkaddda TEXACO. Laakiin is-raacii labada shirkadood waxaa ka abuurmay shirkadda labaad ee saliidda ee ugu weyn dalka Mareykanka, isla-markaas ah shirkadda afaraad ee ugu weyn adduunka ee ka ganacssata shidaalka. TEXACO waxay bariga Afrika ku leedahay 26 goobood oo ay qandaraasyadooda qaadatay. 12) AMERADA HESS: Waa shirkad caalami ah oo Mareekanka laga leeyahay. Shirkaddan oo ah mid ka shaqaysaa shidaalka, ayaa asaaskeedu wuxuu ahaa sanadkii 1919-kii. Sanadkii 1968-kii ayaa waxay midoobeen

American Petroleum. Hadda waxaa la yiraahdaa HESS CORPORATION. Shirkaddan oo xarunteedu ay tahay magaalada New York (USA), ayaa waxay tahay mid ka shaqeysa sahanka iyo soosaaridda saliidda ceyriin. Sanadkii 2016-kii waxay xigsatay tirsiga 394 markii la eego shirkadihii 500 ahaa ee dunida ugu nasiibka wacnaa (Fortune Companies). Sanadkii 2018-kii dakhliga shirkaddu ay ka heshey howlihii ay qabatay wuxuu ahaa 6,466 melyan oo US.$. Isla-sandkaas faa'iidada caddaanka ah oo ay heshey ayaa isna wuxuu ahaa 282 melyan oo US.$. Degaanka bariga Afrika, shirkaddu waxay ka haysataa qandaraasyo 25 goobood ah, kuwaas oo ay xuquuq u leedahay in ay ka shaqeyso.

2 PAN-CONTINENTAL: waa shirkad cusub oo la asaasay 1985-kii. Maahan shirkad wayn oo waa ay yartahay. Waxay qayb ka tahay shirkado badan oo laysku yiraahdo ASX Companies. Waxay isugu jiraan gaadiid,

alwaax, bangiyo, caymisyo, bir, macdan, maal-gelin, adeeg nabad-sugid, adeeg caafimaad, ikk. PAN-CONTINENTAL, waxay u qaabilsan tahay sahanka saliidda iyo gaaska. Shirkadaha ASX, dhamaantood waxaa laga leeyahay dalka Australia. Sanooyinkii la soo dhaafay shirkadda PAN-CONTINENTAL dhowr jeer ayay khasaartay. Xarunteeda waxay dhacdaa degmada Brisbane (Queensland - Australia). Shirkaddan ayaa iyana bariga Afrika waxay ku leedahay 25 meelood oo goob-saliideed ah.

3 MOBIL: Waxay kamid tahay shirkadaha waa-waayn ee shidaalka, kuwaas oo laga leeyahay dalka Mareekanka. Shirkaddu waxay ka dhalatay markii ay kala fur-furatay shirkaddii Standard Oil qarnigii

20aad bilowgiisii. MOBIL waxaa la asaasay 1911-kii, taas oo magaceeda markii hore uu ahaa Mobil-Oil. Sida aanu soo xusnay, sanadkii 1999-kii waxay la midoday shirkadda Exxon oo waxay isku noqdeen ExxonMobil. Labadan shirkadood ayaa waxay ahaayeen kuwa ugu xoogga waynaa shirkadaha shidaalka muddadii u dhexeysey sanadihii 1940-eeyadii iyo 1970-neeyadii. Maanta shirkadda EXXONMOBIL waxaa hoos yimaada 14 shirkadood shidaal, sidaas darteed waxay tahay shirkadda 1-aad oo faa'iidada ugu badan ka hesha shidaalka. Sanadkii 2018-kii, dakhliga ay ka sameysey shaqadii ay shirkaddu qabatay (Revenue) wuxuu ahaa 279,3 bilyan oo US.$. Faa'iidada caddaanka ah (Net Incom) oo shirkaddan

ay heshey waxaa lagu qiyaasay 20 bilyan oo US.$. Dunida oo dhan ayay ka howl-gashaa. Xarunteedu waa

Irvin (Texas - USA). Qandaraasyada ay shirkaddu ku leedahay degaanka bariga Afrika waa 23 goobood.

# Casharkii 59-aad

4 AFRICA OIL: Waa shirkad curdan ah oo oo laga leeyahay dalka Kanada. Waxaa la asaasey sanadkii

1983-kii. Waxay hoos timaaddaa shirkadda la yiraahdo LUNDIN PETROLEUM oo laga leeyahay dalka Sweden. Waxay ku howlan-tahay sahanka shidaalka. Hanti xooggan ayay ku leedahay waddamada Itoobiya iyo Kenya. Waxaa xusid mudan in shirkaddan ay tahay shirkaddii qoday ceelka Dharoor.
Xrunteedu waa Vancouver – Kanada. Waxay qandaraasyo ka haysataa 23 goobood oo degaanka bariga Afrika ah.

5 CHEVRON: Waa shirkad caalami ah oo kamid ah shirkadaha ka shaqeeya tamarta

kuwooda ugu wayn. Waa madax-bannaan tahay oo waxaa laga leeyahay dalka Mareekanka. Waxay kamid tahay lixda ugu waawayn shirkadaha shidaalka dalkaas. Waxaa la asaasay sanadkii 1879-kii, iyada oo ka soo dhambalantay shirkaddii ahayd STANDARD OIL. Xarunta CHEVRON waxay dhacdaa magaalada San Ramon (California - USA). Shirkadu waa shirkad ka shaqeysa tamarta jaad walba oo ay tahay. Waxay ka howl-gashaa 180 dal oo kala duwan. Sanad-walba waxaa si caalami ah loo qiineeyaa shanta boqol oo shirkadood oo ugu faa'iido badan dunida (Fartune Companies). Sanadkii 2019-kii, CHEVRON waxay noqotay shirkadda 11-aad. Sanadkaas aanu xusnay shirkadda shaqadii ay qabatay waxay ka heshey 158,9 bilyan

oo US.$. Faa'iidada caddaanka ah oo ay heshey waxay ahayd 15,45 bilyan oo US.$. Waxay kamid tahay shirkadaha laysku yiraahdo toddobada walaalaha ah (Seven Sisters). CHEVRON waxay ku leedahay bariga Afrika qandaraasyo ay ku heshey 19 goobood.

6 TULLOW: Waa shirkad madax-bannaan oo ka shaqaysa sahanka iyo soo-saaridda shidaalka. Shirkaddu waa curdan oo waxaa la asaasay 1985-kii. In-kasta oo ay caalami tahay, misana waxaa laga asaasay dalka Ireland, xarunteeduna waa London. 25 dal ayay ka howl-gashaa oo 67 ceel ka soo saartaa shidaal. TULLOW waa shirkad ku shaqeysa heer-dhexaad. Sanadkii 2018-kii,

dakhliga uga soo noqday shaqadii ay qabatay wuxuu ahaa 1,859 bilyan oo US.$. Faa'iidada caddaanka ah oo shirkaddu ay ka heshey waxay dhan-tahay 528,4 melyan oo US.$. Waxay ruqsad u haysataa sahanka 80 goobood oo kala duwan. Waxay ku dhacaan 15 dal oo ku yaal bariga iyo galbeedka Afrika. TULLOW waxay degaanka bariga Afrika ka haysataa qandaraasyo ay ku heshey xuquuqda 19 goobood.

7 HERITAGE: Waa shirkad curdan ah oo misana caalami ah. In-kasta oo laga leeyahay dalka Fransa, misana sanadkii 1992-kii ayaa waxaa laga xereeyey suuqa sarrifka ee London. Xarunteeda oo markii

hore ahayd magaalada Calgary (Kanada), ayay ka wareegatay sanadkii 2008-dii oo waxay u wareegtey magaalada Jersey ee Ingiriiska. Waxay kamid tahay 28-ka shirkadaha oo ugu badan dunida dakhliga ay soo xereeyaan. Shirkaddu waxay bariga Afrika ku leedahay 17 goobood oo ay qandaraasyadooda haysataa.

8 TOTAL: Waa shirkad caalami ah oo laga leeyahay dalka Fransa. Waxaa lagu tiriyaa in ay tahay shirkadda saddexaad ee ugu wayn shirkadaha shidaalka. Waxaa ka xoog wayn oo keliya BP-Shell iyo Exxon-mobil. Waxaa la asaasay sanadkii 1924-kii. Waxay kamid tahay 28-ka shirkadaha oo ugu badan dunida dakhliga ay soo xereeyaan.

Hantida ay ku shaqayso waa 256,762 bilyan oo US.$. 118,114 bilyan oo kamid ah shirkadda ayaa leh, inta kale waa saamiyo. Faa'iidada ay sanadkii shaqayso waa 11,55 bilyan oo US.$. Xarunteeda waa Paris (Fransa). Waxay bariga Afrika ku leedahay 16 goobood oo ay ruqsad u haysataa.

9 WHITESTONE: Waa shirkad curdan ah oo la asaasay sanadkii 2014-kii. Waxay ka shaqaysaa shidaalka, dhismaha dhuumaha shidaalka iyo is-gaarsiinta. Waxaa laga leeyahay dalka Mareekanka. Xarunteedu waa degmada Whitehouse (Texas - USA). Shirkaddu waxay degaanka bariga Afrika ku leedahay 15 goobood oo ay wqandaraayadooda ruqsad u haysato.

Qandaraasyada lixda boqol ka badan oo shirkadahan ay ka heleen degaanka waxay markhaati cad u tahay hodantooyada loo rajeynayo nolosha dadka gobolkan. Shidaalka laga sahmiyay muddadan danbe bariga Afrika, ma-jiro degaan sahan midkaas lamid ah laga sameeyey gobol dunida ah. Meel-kasta oo degaankan kamid ah oo shidaal lagu sheegey waa mid soo jiidanaysa xiisaha ay shirkadaha shidaalku u qabaan in ay ka howl-galaan. Bariga Itoobiya (Ogaadeenya), salka harada Lake Albert ee Ugaandha ku taal, gobolka Turkana ee waqooyiga Kenya, salka harada Tanganyiika ee Burundi, jasiiradda Songo-songo ee Tanzaaniya dhamaan waxaa hoos ceegaaga dhulkooda saliid caalamku xiiso u hayo. Si lamid ah xeebaha Soomaaliya, Kenya, Tanzaaniya iyo Musambiik, ayaa iyaguna qolfoofka salka biyaha ah hoostooda waxaa fadhiya saliid xooggan.

# Casharkii 60-aad

Dhallinyaro, waxaanu soo aragnay, shirkadaha waawayn ee hoggaamiya shidaalka adduunka sida ay u xiiseynayaan degannka bariga Afrika. Shirkadahan, waxaa saadaashooda ku wayn in gobolkan uu kamid noqonayo degaanada ku hodanka ah shidaalka. Hantida ku aasan ciidda dhulkan iyo shirkadaha xooggan oo quud-darraynaya in ay ka shaqaystaan, waa arrin muujinaysa hodantooyada mustaqbalka dadka ku dhaqan bariga Afrika. Sida ay saadaashu tahay, muddo dheer qaadan-mayso in ilayska waabariga ee shidaalka oo ka soo if-baxo bariga qaaradda madow.

Waxaa la filayaa dabayaaqada sanadaha 2050aadka in dowladaha degaankan ay dhoofinta shidaalka kula baratamayaan dowladaha khaliijka carabta.

Arin xusid mudan ayaa waxay tahay, in ay jiraan saddex jaad oo shirkado shidaal ah. Waxay kala yihiin shirkadaha sida xad-dhaafka ah u xooggan, kuwaas oo lagu magacaabo (Super Major Compnies), kuwa dhexe (Major Companies) iyo kuwa madaxa-bannaan (Indipendent Companies). Sahanka shidaalka bariga Afrika waxaa ka qayb-qaatay saddexda jaad oo shirkadaha. Dareenka ah in loo fiiro-lahaado xeebaha waddamada Soomaaliya, Kenya, Tanzaniya iyo Mosambiik in uu bilowday sanadihii 1980-aadkii ee qarnigii tegey.

Marka laga reebo dalka Soomaaliya, shirkadihii ku tartamay degaanka, dhamaantood waxay ruqsado u heleen sahanka baraakadaha jeolojiga ah ee lagu magacaabo Paleozoic, Mesozoic iyo Tertiary ee dhacagobolka bariga Afrika.

Shirkadda la yiraahdo JEBCO SEISMIC oo ah qandaraaasle fadhigeedu yahay Ingiriiska. Waxay bixisaa adeegyo badan oo la xiriira helitaanka iyo socodsiinta barnaamijyada sahanka. Iyaga oo akhrinaya cufnaanta, jardiinooyinka iyo awoodda jacda birqabatada (badda iyo hawada), shirkaddu waxay qiimeysaa sawirrada ka muuqda garaafikada mowjadaha dhul-gariirka. Shirkaddan waxay diyaarisaa xirmooyinka xogaha, mashaariicda soo saarista iyo qiimeynta lagu maareeyo mashaariicda sahanka. Natiijooyinka sahamintii dhul-sawirka ee la qaaday ayaa tilmaamaya in bariga Afrika sida ugu dhakhsaha badan ay u noqon karto mid ka mid ah aagag shidaal baarista adduunka ugu wanaagsan.

Isu-geynta sahamadii horey looga qabtay degaanka iyo kuwa hadda laga wado geyigan, waxay tilmaamayaan khariidado toobograafik ah oo muujinaya natiijooyin astaamo rajo

gelinaya mustaqbalka. Tan iyo xilligaas, guud ahaan geyiga bariga Afrika waxaa si wayn loogu hadal hayaa in ay tahay mid ka mid ah gobollada uu ka soo if-baxayo wax badan oo kamid ah shidaalka la adeegsanayo qarnigan 21-aad. Tobankii sano ee la-soo dhaafay wixii ka horeeyey geyigu wuxuu hurdo kaga sugnaa saliidda tirada badan ee hoos ceegaagta ciiddiisa iyo biyihiisa (badda iyo harooyinka).

Xilligan aynu joogno, dowladaha geyigan dhamaantood fayiigsigoodu wuxuu yahay sida loo xoojin lahaan awoodda warshadaha si ay dhaqaalahooda u kobciyaan. Imaanshaha shirkadaha caalamiga ah ee soo saaraya saliidda waxay siinaysaa dowladahan rajo wanaagsan oo malaayiin dad ah ay saboolnimada kaga baxaan. Sida la ogsoon yahay dadka ku dhaqan bariga Afrika waxay kamid yihiin dadyowga ugu saboolsan dunida. Waana dadka ugu hor u-mar liita ummadaha dunida ku nool.

Dadka ku dhaqan degaankan, in-badan oo kamid ah waxay ku nool-yihiin 1 dollar maalintii. Cudurrada faafa kuwooda ugu xun (AIDS, Malaariya iyo TB) ayay u dhintaan. Hor u-marka liita ayaa wuxuu ka hor-joogsaday in ay u howl-galaan dhisma-hoosaadkii ay nolosha ku hagaagsan lahaayeen. Haddii ay hantidan la soo baxaan waxay u noqonaysaa gacan-qabad xooggan oo ay kaga baxaan dhibaatada nolosha ku haysata.

Waxaa jira saddex qodob oo caqabad ku ah in dadyowga degaanka ay ka faa'iideystana khayraadkan. Waxay kala yihiin:

1. saboolnimada ay ku sugan yihiin waddamadan
2. siyaasadda dowladaha waawayn oo aanan aragti mid ah ka lahayn degaanka
3. Degganaansho la'aanta siyaasadeed ee degaanka. Haddii aanu ku hor-marno

qodobka koowaad, waxaanu arkaynaa sahanka iyo soo-saaridda shidaalka in ay yihiin mashaariic taklifo badan. Marka la eego khuburada takhasusaadka kala duwan leh oo aanan looga maarmin in ay howsha u caga-dhigaan, qalabka teknolojiyadda ah ee la adeegsanayo, farsamoyaqaannada ku shaqeynaya iyo kuwa xannaaneynaya, soo-saaridda iyo sifeynta, gaadiideynta iyo iibgeynta, farsamada haraaga shidaalka, dhamaan waa howlo isku xiran oo mid waliba u baahan kharash baaxad wayn.

Marka laga reebo kharashka badan oo ku baxaya sahanka, kirada dadka iyo agabka ka shaqeynaya ceelka qodistiisa oo keliya, ayaa markii dhulka laga qodayo waxay ku kacaysaa maalintii 10,000 – 19,000 oo US.$. Haddii ceelka laga qodayo

badda hoosteeda, qiimuhu waa toban jibbaar-mayaa oo wuxuu gaarayaa 85,000 – 100,000 oo US.$. Sidaa darteed, shirkadaha ka shaqeeya qodista badda hoosteeda, waxay u iishaan hannaanka qodista legdan (Horizontal Drilling). Macnaheedu wuxuu yahay, iyada oo laga fogaanayo caqabadda ay biyaha baddu ku yihiin qodista, ayaa qodidda waxaa laga bilaabayaa meel xeebta ah oo badda ku dhow. Dabadeed markii godka uu gaaro mid la siman harada uu fadhiyo shidaalka badda hoosteeda ah, ayaa godkii loo-soo leexinayaa dhankii harada.

# Casharkii 61-aad

Qodobka labaad ee caqabadda ku ah soo-saaridda shidaalka bariga Afrika wuxuu yahay raadka siyaasadda carri-edeg ay ku leedahay degaanka. Waxaanu ogsoonnahay, afartii qarni ee la soo dhaafay in qaaradda Afrika ay dayac u ahayd in xoogag shisheeye ay dhacaan kheyraadkeeda. Xataa dadkii ku noolaa qaaradda kama ayan nabad-gelin boobka oo waxay kamid noqdeen badeecadihii la iib-geynayay. Dhiig-baxaas xooggan ee heley guud ahaan qaaradda, wuxuu sabab u noqday in dadkeedii uu ka horjoogsado in ay dowlado casri ah dhistaan oo ay ka qayb-galaan loolanka dunida ka socda. Sidaas ayaa muddo ka yar qarni iyo bar ay qaaraddu u noqotay meesha keliya oo saddex jeer ay xoogag shisheeye qaybsadaan. Mar waxay ahayd dabayaaqadii qarnigii 19-aad oo magaalada Berliin ayaa ahayd madashii ay

dowladaha Yurub ku qaybsadeen dhulka qaaradda iyo kheyraadkiisa. Mar-labaad waxay ahayd bartamihii qarnigii tegey xilligii madax-bannaanida dowladaha qaaradda, markaas oo xuduuddowladeedyo loo sameeyey, kuwaas oo dowlad waliba ay ku xiriirsan tahay dowladdii gumeysatay. Mar saddexaadna waa hadda oo qaybintu waxay ku salaysan tahay khayraadka ku aasan dhulka qaaradda, gaar ahaan macdanta iyo shidaalka.

Dhamaadka dagaalkii qaboobaa iyo soo if-baxa xoogagga cusub waxay dhalisay in ay ku soo bataan xoogagga shisheeye oo damaca ka leh qaaradda. Dowladaha Yurub, waxay mid walba faraqa haysataa degaanada ay taariikhdu ku leedahay, si ay uga faa’iideysato. Mareekanka ayaa isna dhacdadii 11-kii sebtember wixii ka danbeeyey, si xooggan u daneeyey qaaradda,

iyada oo markaan ay xiisaddu ahayn xiriir diblomaasiyadeed oo keliya bal ay ku soo kurortay baadi-goob shidaal iyo ilaalinta nabadgelyada dadkiisa. Qarnigan 21-aad, waddamada Turkiga, Iiraan, Hindiya iyo dowladaha Khaliijka ayaa waxay kamid noqdeen jilayaasha ku soo biirey in ay ku tartamaan khayraadka dabiiciga ah ee qaaradda.

Dalka Shiinaha ayaa isna dhulka qaaraddan wuxuu goor hore ugu muuqday fagaare uu ka qayb-qaadan karo cayaaraha siyaasadeed ee ka socda. Waxaa xusid mudan dabayaaqadii sanadihii 1960-aadkii, dowladda Shiinaha iyada oo aanan xubin ka ahayn JQ ka Dh (Jamciyadda Quruumaha ka Dhexeysa), ayaa waxay xiriir la lahayd 19 dowladood oo Afrikaan ah. Waddamadan ayaa kamid ahaa 41 dal oo xilligaas xor ahaa. Sanadkii 1971-kii Shiinuhu waxay kamid noqdeen JQ ka Dh, iyada oo weliba

ay xubin ka noqdeen shanta dowladood ee golaha amniga, kuwaas oo kursigoodu uu joogto yahay. Abaalkaas waxay u hayaan 26 dal oo Afrikaan ah, kuwaas oo mar-walba u codeynayay xubinnimada Shiinaha. Soomaaliya hor-mood ayay ka ahayd ololaha siyaasadeed iyo midka diblomaasiyadeed ee sanadahaas hore ka socdey madasha JQ ka Dh ee loogu hiilinayay xubinnimada Shiinaha.

Markii ay xubinnimadii heshey, Shiinaha waxaa u muuqday hiil lamid ah midkii loo galay oo ay ugu abaalgudeyso dowladaha Afrikaanka ah. Gaar ahaan markii uu dhamaaday dagaalkii qaboobaa, waxaa joogsatay hiilladii ideolojiyada ku dhisnayd oo waxay isu-beddeshey hiillo baragmaatik ah taas oo mudnaanta siineysa ganacsiga iyo maal-gashiga. Dhaqaalaha sii xoogeysanaya ee dalka Shiinaha wuxuu sababay baahi badan oo dalku u qabo tamarta. Sanadkii 2004-tii, Shiinuhu wuxuu ahaa dalka ugu

horeeya ee soo dhoofsada shidaalka. Tan iyo markaas baahidiisa shidaalka waa ay sii kordheysey. Sidaa darteed, arin ayan melena uga baxsan karin ayay ku noqotay in ay labada indhood ku eegto degaanada dunida oo ay ka heli karto shidaal xooggan. Baahida shidaal ee Shiinuhu qabo waxay tahay mid ka soo kacday in 33 % oo ay xilligaas ahayd, sanadkan 2020-ka waxay gaadhay 66 % shidaalka in uu soo dhoofsado.

Degaanka bariga Afrika wuxuu kamid yahay goobaha ugu milgaha culus oo Shiinuhu uu la leeyahay xiriirka ganacsi. Suudaan iyo Kenya ayaa waxay kamid yihiin 10-ka dal oo ugu badan oo qaata gabka ay Shiinuhu u iib-geeyaan dunida. Sida aanu soo xusnay, goobahan ayaa waxay yihiin kuwa laga filayo ceelasha mustaqbalka. Shiinuhu waxay dhiiri-geliyeen isku-dey badan oo lagu xaqiijinayo mashaariic dhaqaale in laga fuliyo bariga qaaradda Afrika.

Tallaabooyinka ay qaaday waxaa kamid ah amaahin badan oo ay siisey dowladaha qaarkood, kuwo kalena waxay ka cafisey amah ay ku lahayd. Waxay ka hirgelisey mashaariic dhisma-hoosaad ah oo ay kamid yihiin waddooyin, kaabado waawayn, xarumo laga dhaliyo xoogga korontada, ilo waawayn oo biyaha laga cabo, nadaamka is-gaarsiinta iyo mashaariicda waraabinta beeraha. Waxaa intaas weheliya in Shiinuhu uu noqday seylad muhim ah oo dowladaha bariga Afrika ay ka soo iibsadaan hubka, kuwaas oo ay kamid yihiin Soomaaliya, Itoobiya iyo Eriteeriya. Labadan dal ee danbe muddadii uu dagaalku ka dhexeeyey, waxay Shiinaha ka soo iibsadeen hub qiimihiisu gaarayo hal bilyan oo US.$.

# Casharkii 62-aad

Dhallinyaro, waddamada reer galbeedka oo Mareekanku ugu wayn-yahay waxay il shaki ku eegayaan falaadka dhaqaale oo Shiinuhu uu ka wado qaaradda Afrika. Lacagaha deymaha ah oo lagu hafinayo dowladaha saboolka ah ee qaaradda ayaa waxay yihiin kuwo danqinaya siyaasadda reer galbeedka. Waxaa arintaas ka hadlay masuuliin badan oo u dhashay waddamada Yurub iyo Mareekan. Iyagu waxay ka digeen joogitaanka Shiinaha ee qaaradda, taas oo ah mid sii kordheysa. Afrika waxay noqotay gobolka ugu xawaaraha badan ee dadkiisa ay reer-magaaloobayaan. Qaaraddu waxay ku faanaysaa in ay ku yaalliin toddoba ka mid ah 20-ka dal ee sanadkii 2017-kii, dhaqaalahoodu uu ahaa kuwa ugu koritaanka xooggan yahay.

Arinkaas waxaa laga soo xigtay hay'adda lacagaha adduunka IMF (International Monetary Fund). Sidaa-darteed, Shiinuhu wuxuu doonayaa in uu buuxiyo baahida ay qaaraddu u qabto dhismaha kaabayaasha dhaqaale.

Sida aanu soo xusnay, shirkadaha Shiinaha waxay firfircooni ka muujiyeen mashaariicda dhismahoosaadka oo qaaradda ka socda. Dhismayaalkan ayaa waxay fududeynayaan xataa ganacsiga ka dhexeeya dowladaha Afrika ka dhisan. Arrin ay gadaal ka riixayaan Shiinaha ayaa wuxuu yahay ganacsiga isu-furan ee ka dhexeeya dadka qaaradda ku nool, kaas oo ujeedkiisa ugu dambeeyay uu yahay in qaaradda oo gebi ahaanteed la gaarsiiyo astaanta Ganacsiga Xorta ah ee Afrika AfCFTA (African Continental Free Trade Agreement). AfCFTA ayaa dhowaan bilaabay wejigeedii hawl-galka ahaa. Hadafka astaantan wuxuu yahay in seylad qura laysugu keeno ganacsiga dhammaan 55-ka

dowladood ee xubnaha ka ah Midowga Afrika. Arintaasi waxay noqonaysaa midka ugu wayn aagagga ganacsiga xorta ah ee adduunka. Suuqaas wuxuu u adeegayaa dhamaan dadka ku nool qaaraddan oo tiradoodu ay ka badan tahay hal bilyan iyo laba boqol oo melyan oo qof.

Mashaariicdan xooggan oo ay wadaan Shiinaha iyo lacagta deynka ah ee badan oo ay bixinayaan waa kuwo la socda mashruuca wayn oo Shiinuhu ay ka fulinayaan caalamka, kaas oo ay ku magacawday Waddada Xariirta ee Cusub (The New Silk Road). Marka laga tago wejiga hor u-marka ee mashruucan, wuxuu leeyahay weji kale oo muujinaya in mashruucu yahay mid cusleynaya garbaha dowladaha soo koraya ee qaaradda. Dhibaatada uu u geysanayo dowladahan yar-yar waxaa weheliya dhibaatada uu u geysanayo hannaanka dhaqaalaha dunida. Sidaa-darteed ayaa Mareekanku uu loolan adag

oo aanan gabbasho lahayn kula jiraa mashaariicda Shiinaha ay ka fulinayaan Afrika.

In-kasta oo mashaariicdu yihiin kuwo soo-jiidasho leh, misana lacagaha ay ku hafinayaan dowladaha taagta-daran ee Afrika waxay qayb ka noqdeen musuqmaasuqa ragaadiyay dadkii qaaradda. Waxay xoojinayaan fasaadka iyo hannaanka keli-taliska ah oo qaaradu ay ku can-baxday. Lacagaha laga helayo mashaariicda Shiinaha, waxay siisey fursado ay ku cimri-dheereystaan qaar badan oo kamid ah madaxdaas. Sidaa-darteed maal-gelinta Shiinaha wuxuu noqday mid hor-joogsada hannaankii talowadaagga iyo dowlad-wanaagga ee qaaraddu ay ku sikanaysay.

Waxaa kale oo deynka Shiinaha uu sababayaa in uu hor-joogsado fursadihii ay Afrika ku kala dooran-lahayd shirkadaha kale ee la looltami lahaa kuwa Shiinaha. Waxay isku-deyayaan in ay

dowladaha cuna-qabateeyaan haddii ay la macaamilaan shirkad aanan tooda ahayn. Sidaa darteed deymanka badan oo ay bixinayaan waxay leeyihiin wejigaas foosha-xun, kaas oo aanan ahayn hor u-marka ay ku bishaareynayaan.

In-kasta oo siyaasadda Mareekanka ay tahay mid ku fashilantay in uu hakiyo qul-qulka Shiinaha uu ku soo gelayo qaaradda, misana wuxuu si xooggan ula socdaa dhamaan dhaqdhaqaaqa ay halkaas ka wadaan. Sanadkii 2007-dii, Mareekanka wuxuu asaasay ciidanka la yiraadhdo US-AFRICOM (United States Africa Command), kuwaas oo ka howl-gala 53 dal oo kamid ah dowladaha qaaradda. Iyagu waxay hoos-yimaadaan wasaaradda difaaca ee Mareekanka. Waxaa Mareekanka ka jooga qaaradda Afrika ciidan gaaraya 6,500 oo khubaro iyo askar ah.

Ka-sokow tababarrada ay ciidankaasi bixiyaan, waxay mararka qaarkood ka qayb-qaataan dagaalka lagu magacaabo la-dagaalanka argagixisada si loo xasiliyo meelaha uu khilaafku ka jiro.

Bilowgii sanadkii 2018-kii, socdaal wasiirka dibadda Mareekanka uu ku maray waddamo Afrikaan ah. Muddadii u dhexeysey 6 – 13 bishii maarso ee sanadkaas ayuu wasiirku wuxuu isu maray saddex dal oo bariga Afrika dhaca, dal bartamaha dhaca iyo mid galbeedka ah. Waddamadaas uu booqday waxay ahaayeen Jaad, Jabuuti, Itoobiy, Kenya iyo Nijeeriya. Waddamada uu wasiirka u doortay socdaalka ayaa muujinaysa in hadafka socdaalkiisu yahay mid la xiriira nabadgelyada. Waayo Jaad iyo Nijeeriya waxay la tacaalayaan dhaqdhaqaaqyo

xag-jir ah. Saddexdan waddan ee kale ayaa iyaguna la deris ah Soomaaliya.

# Casharkii 63-aad

Dhallinyaro, xog-hayaha arimaha dibadda Rex Tillerson, fariinta uu waday waxaa ugn waynaa digniin uu madaxda Afrika uga digayo ku dhowaanshaha Shiinaha. Nasiib-darro, xilligaas Rex Tillerson uu socdaalka yahay, laba bil horteed ayay ahayd markii uu madax-waynaha Mareekanka (Donald Trump) af-lagaaddo u geystey waddamada afrikaanka ah. Isaga oo meel ka ka hadlaya ayuu wariyayaasha hortooda wuxuu ku sheegey waddamo ay kamid yihiin dalalka Afrika meel ay saxaradu marto. Sidaa darteed, Rex Tillerson socdaalkiisii wuxuu noqday mid lagu hungobay. Waxaa kale oo jira, ganacsiga Mareykanka iyo Afrika in uu hoos udhacay sannadihii ugu dambeeyay, halka Shiinaha uu hadda yahay dalka ugu weyn ee Afrika ay is-dhaafsadaan ganacsi.

Shiinaha, sida ay ku sheegaan siyaasaddooda dibadda in ay tahay mid ay ku doonayaan in ay caalamka ka kula dhaqmaan siyaasad is-ballaarin ah oo miisaaman, taas oo baal-socota siyaasadda Mareekanka.
Iyagu waxay doonayaan in ay isu-muujiyaan xoog caalami ah oo ku soo biiray dowladaha awoodda leh ee dunida ka dhisan. Waxaa la ogsoon yahay dalabka Shiinaha ee shidaalka wuxuu ka badan-yahay kororka dalabka Mareekanka. Arimaha caynkaas u dhacaya waxay sawir muuqda u yeelayaan khilaafka xooggan oo ka dhexeeya siyaasadda Mareekanka iyo Shiinaha ee degaanka. Waxay xoojinaysaa is afgaran waaga ka dhexeeya labada dal. Waxaa u tusaale ah siyaasadda ay labada dal ka kala qaateen dalka Suudaan. 7 % shidaalka Shiinaha wuxuu kai man jiray dalkaas, iyada oo Mareekanka uusan shidaal ka qaadan.

Sida aanu soo xusnay mustaqbalka Afrika ee shidaalka waa mid ubaxaynaya. Shirkadda la yiraahdo HIS Energy ee Mareekanka ah waxay qiyaastay, cilmi-baaris ay samaysay ayay ku sheegtey muddada u dhexeysa 2012 – 2025 in saliidda Afrika laga soo saaro ay kordheyso 20 %. Sidaa darteed qaaraddu ma ahaanayso mid kor-jooge ka noqota sayladaha shidaalka. Shiinaha iyaga oo ogsoon arinkaas ayay dadaal ugu jiraan in ay ku soo dhowaadaan dowladaha Afrikaanka ah ee lagu tuhmayo keydka saliidda. Dhan kale, dalabkooda shidaalka Afrika wuxuu albaabada u xiri-karaa shirkadaha shidaalka ee Mareekanka, isla-markaas wuxuu tabar-yareyn karaa doorka siyaasadda dibadda ee Mareekanka. Shiinaha ayaa qudhoodu qaba ra’y midkaas lamid ah.

Waxaa jira 16 dal oo la filayo in ay ku soo kordhi-doonaan waddamada saliidda dhoofsado.

Waxaa waddamadan kamid ah dalalka dhaca bariga Afrika. Waddamadan ayaa waxaa laga filayaa in ay siyaasadda iyo dhaqaalaha dunida ku soo kordhiyaan diinaamiko cusub. Sidaa darteed, dowladaha waawayn waxaa ahmiyad gaar ah u leh hanashada xiriirka waddamadan ayaa dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaan. Shiinaha oo 30 sano horteed aanan u muuqan dowlad lagu tiriyo quwadaha waawayn ee dunida, ayaa maanta wuxuu loolan ugu jiraa in uu noqdo xoog dunida ka muuqda. Si toos ah uma uusan soo gelin naadiga quwadaha waaway, bal daaqad gadaale ayuu kaga soo biirey loolanka.

Bariga Afrika ayaa wuxuu yahay mid leh ahmiyad gaar ah marka lagu eego aragti deegaan-siyaasadeed iyo il deegaan-dhaqaale. Taasi waxay gobolka ka dhigtay degaan kamid ah goobaha dunida ugu shidan.

U-soo gur-guurashada Shiinaha uu degaanka ugu soo sikanayo waxaa indhaha ku haya Mareekanka oo aanan marna oggolaanayn in Shiinuhu ay gacanta ku dhigaan degaan ahmiyaddaas leh. Damaca xooggan ee Shiinaha waa mid mar-walba kicinaya dareenkii Mareekanka. Wax badan oo diraasaadka caalamiga ee akaadeemiga ah waxay tilmaamayaan, sanadka 2040-ka in dhaaqaalaha Shiinuhu uu ka sare-marayo dhaqaalaha Mareekanka. Dowladda Mareekanka oo ah midda maanta ugu wayn dunida xagga dhaqaalaha iyo xagga ciidanka, kama ay aamusi karto arinkaas. Tibor Naghi oo ah ku-xigeenka xoghaynta wasaaradda dibadda Mareekanka ee arimaha Afrika ayaa dhowaan idaacadda BBC-da waxay ka wareysatay arrimaha Afrika. Waxaa hadalladiisii kamid ahaa:

“Afrikaanku muddo ayay garaacayeen irridaha maal-gashiga in loo-furo. Shiinuhu waxay noqdeen kuwa keliya oo irridahaas istaagay”.

Mareekanku, arinka Shiinaha wuxuu u arkaa mid halis ku ah siyaasaddiisa istrateejiyadeed iyo midda dhaqaale. Haddii shidaalka Mareekanka 22 % uu ahaa mid ku xiran dowladaha dhaca galbeedka qaaradda Afrika, mustaqbalka wuxuu noqonayaa mid shidaaalka bariga Afrika uu nasiib ku yeesho. Waddamada reer Yurub oo la wadaaga wal-walka, ayaa xiriirka ay la leeyihiin qaaradda Afrika wuxuu ka milga culus-yahay midka Mareekanka iyo Shiinaha. Ka-sokow xiriirka taariikhiga ah ee xooggan, iyaga mashaariicda badan oo ay ka fulinayaan qaaradda Afrika waa mid leh xagal amni.

Dhinacyada amnigooda khalalka ku keenaya oo ay ka dareen-qabaan ee qaaradda kaga imanaya waxay tahay qaxootiga badan ee ka imanaya

qaaradda Afrika iyo aragtida xag-jirka ah oo ku xoogeysanaysa dadka qaaradda. Sidaa darteed iyaga oo dhinac socda Mareekanka waxay wada-jir uga shaqeynayaan arimahan aanu soo xusnay iyada oo isla-markaas ilaashanaya danaha ay ka leeyihiin qaaradda.

Sidaas ayaa shirkad walba ee shidaal oo uu damac ka galo in ay ka shaqaysato degaanka bariga Afrika waxaa cabsi gelinaya siyaasadda ay loolamayaan dowlaha waawayn.

# Casharkii 64-aad

Dhallinyaro, labada qodob oo aanu soo xusnay ee dib-dhaca u keeney mashruuca shidaalka ee bariga Afrika waxay yihiin saboolnimada dowladaha gobolka iyo loolanka ka dhexeeya dowladaha waaawayn.

Qodobka asddexeeya arinkan wuxuu yahay khilasafka xudduudaha ee dowladaha dhaca bariga Afrika. Khilaafkan oo ah mid la xiriira muranka xudduudaha ayaa wuxuu ahaa, welina yahay gidaar u diiddan dadkii degaanka in ay dhurtaan nicmadahan ay deeqda u heleen. Khilaafka caynkan ah waa uu ku yaryahay waqooyiga iyo galbeedka qaaradda. Waxaa la ogsoon-yahay in shidaalku sida uu u xoojiyo dabka huraya, in uu u xoojiyo khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladaha. Sidaa darteed mashaariicda balaayiinta gaaraya iyo qorshahooda lagu doonayo soo-saaridda

shidaalka, maahan hanti ay shirkaduhu ku aamini karaan degaan uu khilaaf ka jiro. Muranka xudduudaha iyo dhimbilaha colaadeed oo shidaalku uu hurinayo waxaa tusaale aanu uga soo qaadanaynaa afar dhacdo oo ku taariikheysan bariga qaaradda Afrika:

1) Waxaanu ognahay in muran xooggan ee siyaasadeed uu ka jiri-jiray gobolka ay Soomaalidu degaan ee Itoobiya. Gobolkan ayaa Soomaaliya ay u doodi jirtay muddadii 30-ka sano ahayd oo ay dowladdu u dhisnayd. Intii uu bur-burku jirayna, gobolka waxaa ka jiray dhaqdhaqaaq u dagaalamayay aayakataliskiisa. Dhaqdhaqaaqaas oo la yiraahdo ONLF (Ogaden National Libration Front), muddadii ka horeysey xukunka Abyi Axmed waxaa dagaallo ay isaga hor iman-jireen ciidamada dowladda Itoobiya.

Iyada oo colaaddaasi ay taagan tahay ayaa dowladda Itoobiya waxay heshiis la saxiixatay shirkad shidaal ee la yiraahdo PETRONAS. Waa shirkad ay leedahay dowladda Maleesiya. Waxaa xusid mudan, xogta caalamiga ah oo laga hayo shidaalka gobolkan in lagu qiyaasay toddoba bilyan oo bermiil. Shidaalkan ayaa wuxuu ku jiraa dhul ku fadhiya 350,000 km2. Heshiiska shidaalka ee dhex-maray ee dhex-maray dowladda Itoobiya iyo shirkadda PETRONAS wuxuu dhacay bartamaha sanadkii 2006-dii. Waxaa magaalada Addis-ababa ku saxiixey heshiiska Maxamuud Dirir Geedi oo ah wasiirka shidaalka iyo macdanta ee Itoobiya iyo Shamsul-Azhar Cabaas oo ah ku-xigeenka odeyga shirkadda.

Heshiisku wuxuu ahaa in shirkadda PETRONAS ay shidaal ka baarto gobolka, isla-markaas ay soo-saarto haddii ay shidaal hesho. Heshiiska ay labada masuul ka wakiilka ahaayeen waa nooca loo yaqaan PSA (Production Sharing Agreement), kaas oo macnihiisu yahay in wixii soo baxa la wadaago. Sanadkii xigay ayay shirkaddu waxay ka howl-gashay dalka Itoobiya. Labada goobood oo ay judhii hore tilmaansatay waxay ahaayeen laba goobood oo la yiraahdo Block 4 iyo Block 5. Goobahaas waxay dhacaan degaanada la yiraahdo Culuub oo ka tirsan gobolka Gambella galbeedka dalka iyo Helaale oo ka tirsan dooxooyinka gobolka Ogaadeenya. Degaanka Helaale oo u jirta 1,200 km. magaalo-madaxda Addis-ababa, waxay ka tirsan tahay.

Degmada Qabri-daharre. Bedka dhulka uu sahanka shirkaddu ku dhacayay wuxuu ku fadhiyaa 15,356 oo km2. Shirkaddii PETRONAS waxay howshii qandaraas ku siisey shirkad laga

leeyahay Hong-Kong oo la yiraahdo SOUTH WEST ENERGY. Shirkaddan ayaa waxay howl ka bilowdey gobolka, gaar ahaan Helaale. Dowladda Itoobiya, iyada oo ogsooneyd in gobolku uusan xasillooneyn ayay 100 kamid ah ciidamadeeda waxay ilaalo uga dhigtay nabadgelyada goobtii ay shaqadu ka socotay.

Galabnimadii ay taariikhdu ahayd 24/ 4- 2007-dii, degaankii ay shirkaddu fadhiday waxaa soo weeraray dagaal-yahanno tiradooda lagu qiyaasay 200 oo nin. Iyagu waxay kamid ahaayeen jabhadda ONLF. Dagaalkii ay soo qaadeen waxay goobtii ku dileen 59 kamid ah ciidamadii Itoobiya ee shirkadda ilaalada u ahaa iyo 9 kamid ah shaqaalihii Shiinaha ahaa. Dagaal-yahannadii waxay goobtii ka kexeysteen 9 kale oo kamid ah shaqaalihii u dhashay dalka Shiinaha.

Laakiin dhowr maalmood dabadeed waa ay soo fasaxeen. Markii uu shilkaas dhacay, shirkaddii waa ay isaga-baxday degaankii. In-kasta oo ay soo laabatay, misana muddo sanooyin ah ayay dib u dhacday howlaheedii.

2) Shirkadda la yiraahdo Heritage Oil waxay qandaraas ka heshey dalka Ugaandha gaar ahaan goobo ay kamid tahay harada lagu magacaabo Lake Albert. Shirkadda waxaa laga leeyahay dalka Kanada. Iyada oo shirkaddan ay saamiga 50 – 50 kula wadaagto shirkad kale oo la yiraahdo TULLOW, ayaa waxay ka howlgashay goobtii ay qandaraasyada ku qaadatay. Goobta ay ka how-gashay oo ah waqooyi galbeed ee dalka, gaar ahaan waqooyiga harada Lake Albert ayaa waxay dhacdaa xuduudda u dhexeysa labada dal ee kala ah Ugaandha iyo Koongo. Markiiba ay

shirkadda bilowday in ay howl-gasho, waxay caqabada kala kulantay ciidamada Koongo ee fadhigoodu yahay xuduudda. Marar badan ayaa handadaad kaga timid ciidankaas.

# Casharkii 65-aad

Dhallinyaro, howshii ay Heritage Oil ka bilowdey Lake Albert, shilkii ugu waynaa wuxuu dhacay maalintii ay taariikhdu ahayd 3/ 8- 2007-dii, goor ay arooryo tahay ayaa qayb kamid ah shaqaalihii oo saaran doon harada ku dul-socota waxaa soo weeraray doonyo ay saaran yihiin ciidamo u dhashay dalka Koongo. Dabadeed xabbado ayay ku fureen iyaga oo sheeganaya in goobta ay marayaan ay tahay goob dhacda xuduudda Koongo. Dabadeed ciidankii waxay ku laabteen goobtii ay ka yimaadeen. Weerarkaas waxaa ku dhintay nin la yiraahdo Carl Nefdt, kaas oo ahaa qandaraasle u dhashay dalka Ingiriiska, laakiin ku dhashay dalka Koonfur Afrika. Wasiirka Tamarta ee Uganda Daudi Migereko ayaa isla-maalintii uu shilku dhacay ka sheegey khabarkii idaacadda dalka. Shir-jaraa'id oo uu ku qabtay

magaalada Kampala ayuu wasiirku wuxuu ka yiri:

“Intii uu socday weerarkan, Mr Carl Nefdt waa la toogtay wuuna dhintay ... Kuwani waa dhacdooyin halis ah oo aan lagu dhici karin marka loo eego qaababka hadda jira ee u dhexeeya labada waddan. Waxaa jira heshiis ku saabsan meelaha la wadaago oo saliidda laga qodayo”.

Waxaa xusid mudan in hadda ka-hor degaankaas laga af-duubtay askar u dhalatay dalka Ugaandha oo ay af-duubteen ciidamo hubaysan oo ka yimid dhanka Koongo. Wasiirka difaaca Koongo Ghislain Chikez Diemu, isaga oo ka hadlaya dhacdooyinka xuduuddan, weerarka lagu qaaday shirkadda Heritage Oil wuxuu ku sheegey in ay niman bur-cad ah ay ka danbeeyeen. Ciidanka la afduubtay ayuu iyagana ku sheegey in ay kamid ahaayeen tuugo

hubaysan oo dhibaatooyin u geysanayay dadka degaanka.

3) Dhacdo Soomaaliya ka dhacday laba sano horteed ayaa lagu tiriyaa in ay kamid tahay dhacdooyinka taagan oo lagu xuso muranka xudduudeed ee dadyowga bariga Afrika ka hor-taagan in ay khayraadkooda adeegsadaan. Arintan ayaa waxay tahay colaaddii ay isku laayeen ciidamada Somaliland iyo Puntland bishii January sanadkii 2018-kii. Tuulada Tuka-raq ee dhacda xuduudda u dhexeysa labada gobol ee kala ah Nugaal iyo Sool ayay labada ciidan ku dagaalameen. Waxaa halkaas ay isaga-dileen rag tiradoodu ay 100 kor u dhaaftay. In-kasta oo hoggaanka labada maamul ay dagaalka u yeelayeen wejiyo badan (weji xuduud maamul, weji xuduud qabiilo, weji dano siyaasadeed), misana wejiga dhabta ah oo dagaalka uu salka ku hayay wuxuu ahaa mid xiriir la wadaaga khayraadka dabiiciga ah ee degaanku leeyahay.

Haddaanu dib ugu laabanno xiriirka ay colaaddan la leedahay shidaalka, marka hore waa in la fahmaa

Soomaaliya in ay mustaqbalka tahay qibladdii shidaalka ee dowladaha bariga Afrika. Labada maamul ee Somaliland iyo Puntland, waxay gobollada kale kaga nasiib dheeraadeen dhismaha maamullada ay ku hor-mareen, kuwaas oo ahaa maamullo ka yimid 100 % beelaha ku dhaqan degaanadooda oo ayan talo ku lahayn dadyow ka baxsan degaanadaas. Laakiin iyagana waxaa dabray maqnaanshaha xurmadda dunida u hayso dowladda dhexe. Iyada oo arintaasi ay jidho, ayaa misana Hargeysa iyo Garoowe, iyaga oo ka faa'iideysanaya xasilloonida ay heleen ayay xilli isku dhow bilaabeen in ay shirkado shidaal la xiriiraan.

Somaliland, dhowr iyo toban sano horteed intuusan dhicin dagaalka Tuka-raq ayay dhulkeeda ka bilowday sahanka shidaalka. Sanadkii 2005-tii, Somaliland waxay heshiis shidaal la gashay shirkad la yiraahdo Ophir Energy oo saamiyadeeda inta badan laga leeyahay Koonfur Afrika. Shirkaddu 13 goobood ayay calaamadeysey, kuwaas oo badankood qandaraasyadooda horey loo heystey, laakiin u xanniban cabsida laga qabo dhacdooyinka lama-filaanka ah (Force Majeure), maadaama Soomaaliya guud ahaan ay ku xisaaban tahay degaan colaadeed. In-kasta oo Somaliland ay ku andacootay in dowladdii dhacday sharciyaddeedii ayan hadda shaqeeneyn, dowladdan cusubna ayan Soomaalidu weli si buuxda heshiis ugu ahayn, misana kuma ayan guuleysan in ay qanciso shirkadihii waawaynaa ee ka howl-geli lahaa goobahaas.

Isla-sanadkaas aanu soo xusnay (2005-tii) maamulka Puntland wuxuu hehsiis la dhigtay shirkad Mareekan ah oo la yiraahdo RANGE RESOURCES, taas oo xarunteedu tahay degmada Fort Worth (Texas - USA). Ninka xiriiriyey madaxda Puntland iyo shirkadda waa dallaal u dhashay dalka Australia oo la yiraahdo Terry Donnelly oo ka yimid magaalada Perth. Sanadkaas ayay bilaabatay heshiisyada nicmadaha nacladeysan ee ragga Soomaaliya xilalka u haya ay kala qarsanayaan kuna heshiin la'-yihiin tan iyo maanta. Shirkad curdan ah oo laga leeyahay dalka Kanada ayaa RANGE RESOURCES uga wakiil ahayd howsha. Taas oo lagu magacaabo AFRICA OIL. Heshiiska Puntland iyo AFRICA OIL wuxuu ahaa in shirkaddu ay shidaal ka sahmiso dhul bedkiisu le'eg-yahay 24,908 km2 oo dhaca dooxada Dharoor iyo mid kale oo isna bedkiisu le'eg-yahay 14,424 km2 oo isna dhaca dooxada Nugaal. Labadan degaan oo

sahanku qabanayo ayaa wadar-ahaantooda wuxuu le'eg-yahay 3,616,800 oo hiktaar.

# Casharkii 66-aad

Dhallinyaro, markay taariikhdu ahayd 6/ 2-2006-dii ayay shirkadda AFRICA OIL ka bilowday howlgalkeedii ugu horeeyey Puntland. Howsha ay shirkaddu ka qabanayso degaanka waxay isugu-jireen sahan batrool iyo sahan macdan. Nooca heshiiska ay labada dhinac kala saxiixdeen wuxuu ahaa heshiiska ah aynu qaybsanno wixii aanu helno PSA (Product Sharing Agreement). In-kasta oo wax badan oo wir-wir ah uu weheliyay heshiiska lala-galay shirkaddan iyo howlaha loo igmaday, misana si habsami leh ayay dhanka dooxada Dharoor ay uga bilawday shaqadii. AFRICA OIL waxay markaas RANGE RESOURCES ka qaadatay 45 % oo saamigeedii ah, sidaasna waxay kula wareegtey howsha qaybteedii ahayd sahankii shidaalka. Halka sahankii macdanta ay iyadu reebatay.

Waa ay habooneyd in shaqada shidaalka ay ka bilaabato dooxada Nugaal. Waayo waxaa degaankan dhaca goobta Hol-Hol oo shirkadda CONOCO ay qandaraaskeeda haysato, isla-markaas ay horey u qabatay qayb kamid ah marxaladda I-aad ee adeegsiga Shidaalka. Marxaladdan oo la yiraahdo (Upstream) ayaa waxay tahay marxaladda ugu culus, taas oo isugu jirta sahanka iyo soo-saarka. Waxaa xusid mudan marxaladda dhexe (Mid-stream) waxay tahay gaadiideynta shidaalka, marxaladda danbe (Downstream) ayaa iyana waxay tahay u diyaarinta suuq-geynta. Marxaladda ugu adag uguna kharaj badan waxay tahay marxaladda I-aad.

Shirkadda CONOCO, sanadihii 1988-kii ilaa 1989-kii, goobo ay sahmisey ayay ka qoday afar ceel. Goobtaas oo lagu magacaabo dooxada Nugaal (Nugal Basin), ayaa haradeeda waxay tahay mid hoosfadhida xuduudda u taal labada gobo lee

Sool iyo Nugaal oo labada maamul (Somaliland iyo Puntland) ay ku muransan yihiin. Tirsiga goobtu leedahay waa (Block 29) waxay hoos-fadhidaa. In-kasta oo AFRICA OIL ay heshiis ka heshey Puntland, misana waxaa jiray laba sabab oo loogu dhici-waayay in Hol-Hol laga bilaabo howsha sahanka. Mid waxay tahay arin la xiriidha shirkadda AFRICA OIL oo ah midda qandaraaska ka qaadatay Puntland. Si aanu u fahamno heshiisyada shidaalka, aynu yara-eegno ayniyada ay shirkaduhu kala yihiin. Waxaa maanta dunida ka shaqeeya saddex qaybood oo shirkado shidaal ah. Waxay kala yihiin:

Qaybta I-aad waxay yihiin shirkadaha waawayn oo lagu magacaabo shirkadaha cimlaaqa ah (Major Oil Companies). Waa shirkado hana-qaaday oo balaayiin lacag ah ku shaqeeya. Iyagu ma galaan heshiisyo ayan caddayn in ay muddo dheer shaqeynayaan, isla-markaas amniga degaanka laga shaqeynayo iyo dowladdiisa ayan

ahayn kuwo laysku hallayn-karo oo ayan ka taagnayn xasarad siyaasadeed. Waxaa shirkadahaas kamid ah Royal Dutch Shell iyo BP oo midoobey, Exxon-Mobil oo ah laba shirkadood oo midoobey, Conoco-Phillips oo iyana ah laba shirkadood oo waawayn oo midoobay. Iyagu waxay isku darsadeen awooddii sahanka, aqoontii soo-saarista iyo sifeynta, hannaankii gaadiideynta iyo agab kayeelista haraaga shidaalka. Waxaa kale oo shirkadahan ay ku horeeyaan u iib-geynta seyladaha caalamka. Sidaa darteed waa ay is-kala wayn-yihiin in ay u shaqo-tagaan goobo laysku haysto.

Qaybta II-aad ee shirkadaha shidaalka waxaa la yiraahdaa shirkadaha madaxa-bannaan (Independence Oil Companies). Sida magacooda ku xusan, waa shirkado aanan dabar ku xireyn oo oggol in ay ka shaqeeyaan degaanada khatartu ka jirto si ay faa'iido deg-deg ah u helaan.

Ceelasha ay sahmiyaan waxay isugu jiraan goobo qandaraasyadooda ay shirkado waawayn horey u qaateen iyo goobo cusub oo aanan weli la qaadan. Shirkadahan maahan kuwo dhaqaale heysta oo hantidooda asalka ah oo ay ku suuq-tegayaan waa saliidda ceelka fadhida. Waxay dakhligooda ka helaan wejiga hore ee ah soo-saarka saliidda. Waxay si gaar ah ugu jiraan qaybta sahaminta iyo howlaha soo-saarka. Iyagu awood uma lahan sifeynta iyo suuq-geynta saliidda. Awoodda soo-saarka shirkadahan ee maalintii, ma dhaafsiisna 50,000 oo bermiil. Faa'iidadooda sanadkii kama badna shan melyan oo US.$ ah. Shirkadahan waxaa kamid ah Labada shirkadood oo ku soo hor-maray Somaliland (Asanta Oil) iyo Puntland (Africa Oil).

Qaybta III-aad ee shirkadaha shidaalka waa shirkado da'yar ah (Junior Oil Companies). Iyagu waa shirkado yar-yar oo soo koraya. Waxay marayaan xilli curasho ama xilli ah marxaladdii

ugu horeysey oo ay wax ku soo saari-lahaayeen. Waxaa ugu horreeya oo shirkadaha da'da yar ay ku tallaabsadaan wuxuu yahay in ay raadiyaan goobo lagu tuhmayo in ay ku jiraan keyd kheyraad dabiici ah oo ay ka howl-galaan. Markii ay taasi dhacdo waxay shirkaduhu helayaan fursad lagu aamino oo seyladaha saamiyada bixiya ay kaga qaadato lacago saamiyo ah. Sahanka ay galaan shirkadaha caynkan ah, haddii ay keenaan natiijooyin togan, shirkadaha da'-yarta ah waxay kor u qaadaan raasumaalkooda si ay ugu gudbaan heer ka sareeya heerkii hore oo ay ku shaqaynayeen.

# Casharkii 67-aad

Dhallinyaro, haddaanu dib ugu laabanno howshii AFRICA OIL, xilliga ay howl-galka bilowday waxay ahayd xilli ay goobta (Block 29) weli gacanta ugu jidho qandaraaskii ay shirkadda CONOCO heysatay. Waxaa jira xeerar khuseeya kirada goobaha shidaalka, kaas oo ay ku heshiiyaan kireystaha (milkiilaha dhulka) iyo kiraalaha (shirkadda ka ganacsanaysa). Xeerarkaas labada qodob oo ugu milgaha culus waa midka hordhaca ah oo ay shirkaduhu ku qaadanayaan qandaraasyada oo ay khasab tahay in lagu xuso xilliga ay shaqadu bilaabanayso iyo xeerka lagu wada-joogayo markii ay shaqadu bilaabato.

Labada heshiis waxaa u dhexeeya haddii uu kireystaha ka baxo meesha xeerka caddaynaya in ciddii timaadda ay ku khasban tahay in ay fuliso heshiisyadii horey u yiil. Laakiin haddii cid timaadda la waayo sida Soomaaliya oo

dowladdii dhexe markii ay bur-burtay lagu heshiin waayay dowlad dhexe oo matasha Soomaalida, taas oo ay ahayd in ay la wareegto masuuliyadda heshiisyadii la dhigtay. Xaaladdaasi waxaa ka yaal xeer caalami ah oo sheegaya, haddii bur-bur lagu jiro muddo rubuc qarni ah (25 sano) oo muddadaas la waayo wax xilkii la wareega, waxaa markaas buraya dhamaan wixii heshiisyo ahaa oo la dhigtay muddadaas horteed. Gadaal ayay inooga iman-doontaa, dowladdii uu Madaxwaynaha ka ahaa Xasan Shiikh Maxamuud qaabkii ay ku heshey ictiraafkii Soomaalida lagaga saaray ku meel-gaarka si loo badbaadiyo heshiisyadii shidaalka ee horey u yiil.

Xilliga ay AFRIKA OIL imanayso, bur-burkii dwladda dhexe waxaa laga joogay 15 sano. Weli waxaa dhaqan-gal ahaa qandaraasyadii ay haysteen shirkadaha waawayn oo CONOCO ay kamidka tahay. Sidaa darteed ayay AFRIKA OIL

waxay isku-deydey in ay shirkadda CONOCO siiso saami dhan 30 % oo ay kagala wareegto goobta (Block 19) oo uu ku yaal ceelka Hol-Hol. Laakiin CONOCO waa ay ka diidey saamigaas.

Arintaasi waxay kamid ahayd sababihii ay AFRICA OIL uga fogaatay gebi ahaan sahanka degaanka Nugaal.

Sabab labaad ayaa jirtay oo looga fogaaday degaanka Nugaal. Garaad Jaamac Garaad Cali oo ah isinka guud ee beesha Dhulbahante ee gobolka Sool degta ayaa si cad ugu sheegey war-baahinta caalamka in degaanka Hol-Hol uu yahay degaan ay leeyihiin reerka Dhulbahante. Beeshuna ayan sina u oggolaanayn in loo gacan-dhaafo talada degaankeeda. Gabadha la yiraahdo Kerstin Lundell waa wariye u dhalatay dalka Sweden. Buug ay qortay oo ku soo baxay afka swedishka oo la yiraahdo Dhiiggii

Madoobaa (Det Svarta Blodet) ayay sanadkii 2010-kii waxay ku qaadatay billadda dalkeeda laga bixiyo oo la yiraahdo Guld-spaden. Waa billad dahab ah oo la siiyo wariyayaasha midkoodii muteysta. Gallad haka-gaadhee, ereyga isoo jiitay oo buugga ay ku bilaabatay ayaa wuxuu yahay:

“Waxaan u daabacay nafteyda iyo hooyo walba oo isku-deyeysa in ay caruurteeda ku badbaadiso duni ay adag-tahay in lagu noolaado”.

In-badan oo buugga ah waxay kaga hadlaysaa halista ay dadkeeda ku tahay nicmadaha fadhiya ceelka Fool-jeex (Block 5) ee gobolka Jarar iyo ceelka Hol-Hol (Block 29) ee gobolka Sool. Gabadhan ayaa buugan waxay ku soo bandhigtay xog la yaab-leh oo ka qarsoon adduun-waynaha, gaar ahaan bulshada Soomaaliyeed. Buuggan oo danqiyay qaar kamid

ah siyaasiyiinta waawayn ee waddamadan, ayaa gabadhan waxay ku soo bandhigtay nicmadahaas ay shirkaduhu sahminayaan iyo sida dadyowga saboolka dhiiggoodu ugu dul qul-qukayo. Kumanaan dhallinyaro ah oo ay suuragal tahay in ay u dhintaan nacladda nicmadahan ayay gabadhan ka-sii digtey. Ishaarada koowaad oo digniintu ay ka muuqato waxay tahay hadal uu kula hadlay masuul Soomaaliyeed oo xoghayn ka ahaa shir-wayne ay JQ ka Dh u qabatay Soomaalida. Shir-waynahan oo ka dhacay magaalada Istanbuul ee dalka Turkiya ayaa wuxuu qabsoomay laba maalmood oo ahaa 31-may iyo 1-juun sanadkii 2012-ka. Waxaa ka soo qaybgalay 55 dowladood, waxaa looga hadlayay mustaqbalka Soomaaliya. Masuulkaas ay Kerstin Lundell la kulantay markii ay u muujisay in ay doonayso in ay ka wareysato shidaalka, wuxuu ku yiri:

“Ma shidaal (ayaad igala hadlaysaa)? Mowduucu, waa ceeb aanan laga hadlin. Laakiin xiiso ayuu leeyahay. Goor danbe isoo wac, markaas ayaanu ka wada-hadleynaa “.

Kerstin Lundell, ninkaas ay la kulantay waxay ku tilmaantay nin da’-wayn isla-markaas ugu muuqday in uu masuul sare ka yahay dowladda Soomaaliya. Sidaa darteed ay ka heli karto ogaallo muhim ah oo ku saabsan nicmadda nacladaysan ee Soomaaliya. Xiriirka keliya oo ninkii masuulka ahaa ay ka heshey wuxuu ahaa taleefankiisii uu ku isticmaalayay Turkiga. Waxay u dooratay la-hadalkiisa, wuxuu ugu muuqday nin ay ka heli-karto xog wanaagsan oo ku saabsan shidaalka Soomaaliya. Markii ay arkiweydey, goor danbe ayay wacday. Kama uusan qaban taleefanka, laakiin sms ayuu qoraal ugu soo jawaabay oo u sheegey in uu mashquul

yahay. Dabadeed fursad uma ayan helin ay mar-kale kula kulanto oo waa uu qarsoomay.

# Casharkii 68-aad

Dhallinyaro, gabadhan u dhalatay dalka Sweden waxay daba-gal ku samaysay shirkadaha sida xaaraanta ah ku heley qandaraasyada lagu saxiixey suuqa madow, kuwaas oo lacagta ay samaynayaan ay dadyowga degaanka ku mudanayaan inkaar ay ku hoogaan oo ay ku ba'aan. Waxay kashiftay shirkado dhowr ah oo uu damac ka galay in ay ka shaqaystaan degaano khilaaf siyaasadeed ka taagan yahay. Shirkadahaas waxaa kamid ah kuwo ka socda dalalka Australia, Kanada, Sweden iyo Norway. Iyada oo waddamadan ay safka hore kaga jiraan waddamada ilaaliya xuquuqda aadanaha, ayaa misana sahankeedu wuxuu ku jaan-go'naa nicmadaha ay ka shaqaynayaan shirkadahan in ay naclad ku yihiin dadkii dhaxalka u lahaa.

Degaanada ay xustay oo dhamaantood dhaca qaaradda Afrika, ayaa sida aanu soo sheegney waxaa kamid ah Soomaaliya, gaar ahaan xadka u dhexeeya Somaliland iyo Puntland.

Iyada oo xadkaas ayan maamulladu heshiis ku ahayn ayay shirkadaha qaarkood ku indha-adeygeen in ay ku loolamaan heshiisyo ay la kala dhigtaan xukuumadaha isku-haysta degaanka. Kerstin Lundell, kulanka ay Garaad Jaamac kula yeelatay magaalada Istanbuu (Turkiya), markaas oo ay ka wada hadleen arinta Hol-Hol, waxay buugeeda ku qortay hadal uu Garaadka kaga war-celiyay su'aal ay weydiisey. Iyadu waxay markaas qortey:

"(Garaadka) Wuxuu ii sharxay in Soomaaliya ay tahay qabaa'il, iyaguna ay ku sugan yihiin degaankoodii.  Shidaalka Hol-Hol ku jirana uu yahay mid ay taladiisa u taal qabiilkiisa. …………………

Degaanka Hol-Hol annaga ayaa leh, waxba uma gooneyso haddii Puntland ay qandaraas ku qaadato".

Hadalka Garaadka wuxuu muujinayaa sida uusan ugu qanacsanayn in gobolka ay ka howl-gasho shirkad ayan taladeeda wax ku lahayn waayeelka beesha, taas oo uu xaq u leeyahay. Waana sida ay tahay oo bulshada degaanka ku dhaqan haddii ayan qanacsanayn, suuragal ma noqonayso in lagu faa'iido khayraad lagala soo-baxo. Arintaasi waxay kamid ahayd sababaha xoojiyay maamulka Puntland, in-kasta oo uu AFRICA OIL heshiis la galay, misana in uu ka dheeraado dhanka Hol-Hol. Iyada oo ay xaaladdu sidaas tahay, isla-amrkaas lagu guda-jiro qodista ceelkii I-aad ee Dharoor, ayaa markay taariikhdu ahayd 15/ 10- 2007-dii, ciidamo u daacad ah Soomaliland waxay Puntland kala wareegeen gacan ku-hayntii degmada Laascaanood. Markaas ciidamada

Soomaaliland waxaa u suuragashay in ay soo fariistaan galbeedka ceelka Hol-Hol. Arintaasi waxay sii xoojisay, shirkaddii ahayd Range Resources in sahankii Nugaal ay si buuxda u hakiso nabadgelyo xumi darteed.

Isla-sanadkaas, Somali-land waxay dhankeeda ka soo dhoweysey shirkad shidaal oo la yiraahdo ASANTE

Oil. Waxay ahayd shirkad yar oo laga leeyahay Ingiriiska iyo Norway. Markay taariikhdu ahayd 20/ 8- 2008-dii, xubno ka socda shirkadda ASANTE OIL ayaa waxay booqasho ku yimaadeen Hargeysa.

Wafdigan waxaa hoggaaminayay nin magaciisa la yiraahdo Jarand Rystad oo u dhashay dalka Norway. 21/ 8- 2008-dii, shir-jaraa'id oo isaga iyo wasiirka shidaalka (Qaasim Shiikh Yuusuf) ay ku qabteen hodheelka Maansoor ayuu wuxuu ka sheegey in shirkaddu ay ka howl geli-doonto

sanadka 2009-ka, markii shirkadda la yiraahdo TGS-Nope (Tomlinson Geo-physical Services Inc) ay dhamayso sahankeeda.

Shirkaddan danbe ayaa waxay tahay shirkad iyana laga leeyahay Norway oo ku hor-martay aqoonta dhulka. Badeecadda ay ka shaqaysato waxay tahay ururinta ogaallada dhulka (Geo-Science Data). Waxay xilligaas ku howlanaeyd sahanka degaano kamid ah qaab-dhismeedka dhulka Somaliland. Waxaa xusid mudan shirkadda ASANTE OIL in ay fallistey oo ay ka baxaday shaqadii shidaalka.

Howshii sahanka saliidda ee shirkadda AFRICA OIL waxay noqotay mid ku eg dooxada Dharoor oo ay shidaal ka sahmiso iyo buuraleyda Gal-Gala oo ay macdan ka sahmiso.

Shirkaddii macdanta ee RANGE RESOURCES ayaa iyana bilowday in ay ka howl-gasho Gal-gala ee

dhacda degaanka Oogo, gaar ahaan buuraleyda u xuduudda ah gobolka Bari iyo gobolka Sanaag ee galbeedka Boosaaso. Khilaafka ka dhashay sahankii shirkaddan, wuxuu sababy dagaallo goo-goos ah oo buuraha ku dhex-maray dadkii degaanka iyo dowladda Puntland. Dagaalkaas oo goor danbe u xuub-siibtay mid u dhexeeya xarakada Al-

Shabaab iyo dowladda Puntland ayaa wuxuu socdey muddadii u dhexeysey 14/ 7- 2010-kii illaa iyo 1/ 10- 2014-kii. Dagaalkaasi wuxuu noqday mid saamayn ku yeeshey dadkii degaanka, isla-markaas wuxuu kamid noqday dagaalka caalamiga ah ee lagu magacaabo la-dagaalanka argagixisada. Waxaa ku dhintay dad gaaraya 200 oo qof. Dad badanna waa ay ku bara-kaceen.

# Casharkii 69-aad

Iyada oo degaanku muddo xasilloon-yahay, ayaa markay taariikhdu ahayd 15/ 5- 2018-kii ay ciidamo u daacad ah Somaliland waxay qabsadeen tuulada Tuka-raq. Iyagu waxay markaan ku andacoonayeen in ay goballadii Ingiriiska iyo Talyaaniga gaaraan si ay usoo meyraan xeyndaabka xuduudda ay xaqa u leeyihiin. Waxaa xusid mudan, ciidanka lagala wareegey degaanka in ay ahaayeen ciidan u daacad ahaa maamulka Khaatumo, kaas oo matalayay beelaha ku dhaqan gobolka Sool, laakiin aanan weli awood ciidan ku lahayn beelaha dhexdooda. Sidaa darteed ciidankii Khaatumo waxay u baxsadey dhanka xuduudda Itoobiya. Toban cisho dabadeed (24/ 5- 2018) waxaa goobtii ka qarxay dagaal ishaaraya nacladdii wehelisey khayraadka degaanku leeyahay. Siddeed sano dabadeed, nacladdii ay

Kerstin Lundell ka digaysay haraatideedii ugu horeysey, ayaa heshey hooyooyinkii ay dartood buugga u qortay.

Iyada oo aanan la soo-saarin hantidaas qiimiga badan oo ay tahay in ay ka faa'iiddaan Soomaalida qaxootiga ku ah daafaha dunida iyo kuwa saboolka ku ah dalka gudihiisa, ayaa lagu dirirey oo ay isga hor-yimaadeen ciidamadii ay ahayd in ay si wada-jir ah u difaacdaan hantidan ummadeed. Sida ay idaacaduhu sheegeen, Somaliland iyo Puntland ayaa maalin-qura isaga-diley goobtaas tiro 100 qof ka badan. Dadka ka qaxay baadiyaha degaanka ayaa iyagana lagu qiyaasaa 100,000 qof. Dagaalka caynkaas ah wuxuu ishaaro u yahay nacladihii ay nicmaduhu wateen. Wuxuu kaloo tilmaamaya dgganaanshola'aanta siyaasadeed ee degaanka ka fogeynaya kalsoonidii lagu maal-gashan lahaa. Wejiyada qarsoon ee dagaalka u sababta

ahaa waxay yihiin Puntland oo qandaraaska Hol-Hol siisey AFRICA OIL iyo

Somaliland oo iyana qandaraaska Hol-Hol siisey DNO (Den Norska Olje-Selskap) oo laga leeyahay Norway.

Labadaas maamul ee labada shirkadood qandaraaska Hol-Hol kula heshiiyay, midkoodna ma haysto xuquuqdii uu ku bixin lahaa goobta. Xilliga qandaaraasyada ay bixinayeen waxay ahayd xilli ayan weli ka bixin ku meel-gaar. Waxaa intaas u dheeraa, xilli waxay ahayd ay ciidamo xooggan oo Itoobiyaan ah ay ku sugnaayeen Xamar. Diblomaasiyadda dunidana ay cadaadis ku haysay ra'iisul-wasaaraha Itoobiya Meles Zenawi, in uu sameeyo jadwal oo ciidamadiisa kagala soo baxayo Soomaaliya. Isla-xilligaas waxaa soo xoogeysanayay khilaafka ku saabsan xeerka shidaalka ee u dhexeeyey madax-waynihii dowladda dhexe Cabdullaahi

Yuusuf Axmed iyo ra'iisul-wasaarihiisii Cali Maxamed Geedi.

Waxaa xusid mudan ceelka dooxada Dharoor in uu dhaco goobta (Block M-9), waxaa qandaraaskeeda haysta shirkadda SHELL. Degaanka dooxada Nugaal, ceelasha dhaca labada degaan ee labada gobol, gobolka Sool ceelku wuxuu dhacaa goobta (Block 18), gobolka Nugaal ayaa isna ceelku wuxuu dhacaa goobta (Block 29). Asalka qandaraaska labada goob iyo labada ceel waxaa haysta shirkadda CONOCO. Waxaa kale oo xusid mudan, ogaallada lagu hayo sahamada degaanadan in ay sheegayaan, batroolka fadhiya dooxada Dharoor waxaa lagu qiyaasay 1,45 bilyan oo bermiil. Batroolka ku jira dooxada Nugaal xadka labadiisa dhinac (Sool iyo Nugaal), waxaa iyana lagu qiyaasay 4 bilyan oo bermiil. Waxaa la rumeysan yahay, marka ay Soomaali ku guuleysato in si toolmoon ay ula soo baxdo hantida goobtan ceegaagta, in jiilal

Soomaaliyeed ay qaxootinimada ka bixi lahaayeen, magacii ay ma-kastadu kaga cayaarteyna ay dib u soo ceshan lahaayeen.

4) Dhacdo afaraad ayaa jirta oo lagu tilmaansado khilaafka xudduudaha ee dowladaha dhaca bariga Afrika, kuwaas oo dib u dhigaya ka-faa'iideysiga khayraadka ku aasan gobolka. Waxay tahay muranka xuduud-badeedda ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Kenya.

Si aanu u fahamno murankan aynu dib ugu yara-laabanno fahamka guud ee uu salka ku hayo. Dagaal waynihii II-aad wixii ka horeeyey waddan walba oo dhaca dhul xeeb leh, wuxuu xisaabsanayay xuduud ku fadhida 6 mail oo dhul-badeed ah. Wixii intaas dhaafsiisan, biyaha badda qiimo aanan ahayn in lagu socdaalo ma lahaan-jirin.

Masaafadaas oo la yiraahdo (Maritime Boundary) ama (Sea Lines) ayaa waxay xiriir la leedahay xariiqimo wahmi ah oo badda dusheeda mara. Xuduudda caynkan ah, fahamkeeda wuxuu xiriir la leeyahay madaafiicdii lagu diriri jiray qarniyadii dhexe, oo waddan walba wuxuu biyaha badda ka ilaashan jirey masaafo ayan madaafiicdu soo gaari-karin. Qarnigii 20-aad dhowr jeer ayaa dowladaha dunida ay ka yeesheen kulamo ay ku dejinayaan xeerka xudduudaha badaha.

Dagaakii II-aad dabadiis, wada-hadalladii caalamiga ahaa oo ay dowladuhu isugu yimaadeen waxaa kamid ahaa xuduudda badaha. Wada-hadalladaas oo goobo kala duwan ka dhacay xilliyo kala duwan, waxay soo gaba-gaboobeen bishii abriil sanadkii 1959-kii. Gogosha wada-hadalka waxaa mar-walba dhigayay JQ ka Dh. In-kasta oo uu khilaafka qaarkood aanan lagu heshiin, misana waxaa si

hor-dhac ah laysugu raacay in xuduudda badaha la gaarsiiyo 12 nm (Nautical Mile). Waxaa xigay shir-wayne caalami ah oo JQ ka Dh ay ku qabtay magaalada Montego By ee dalka Jamaika. Soomaaliya waxay kamid noqotay 117 dal oo saxiixay heshiiska wada-hadalka dowladaha uu ka dhexeeyo muranada xuduudbadeedka. Kulanku wuxuu ahaa baaq guud oo dowladaha la oggoleysiinayo in ay si nabad ah ugu heshiiyaan wixii khilaaf ka iman-karo oo xuduud-badeed ah. Arintaasina waxaa u sabab ahaa, waxaa kordhay fahamka qiimaha ay baddu u leedahay dhaqaalaha iyo siyaasadda waddamada. Maadaama dhulku uu yahay mid ku xiriirsan qolfooka badda salkeeda ah, ayaa baddii loo qiimeeyey sidii dhul oo kale. Soomaaliya markaas waxay saxiixeysey heshiiskan wada-hadalka ah, iyada oo aanan ka tanaasulin xuquuqdii ay dowlad ahaan ku lahayd xuduudda biyaheeda.

# Casharkii 70-aad

10/ 9- 1972-kii, dowladdii Soomaaliya waxay ansixisay xeer tirsigiisu yahay 37, kaas oo khuseeya dekadaha iyo xuduudda badda dalkeeda. Xeerku wuxuu Soomaaliya siinayaa masaafo xuduud-badeed ah oo gaarsiisan 200 nm oo le'eg 370 km. Xeerkan wuxuu ka bilowday, xilligii madax-waynihii Mareekanka Harry S. Truman ayaa dowladdu waxay qaadatay go'aan u gaar ah oo ay ku fidsanayso xuduuddeeda badda dhanka bad-waynta Atlantika iyo dhanka bad-waynta Baasifigga. Waxay ahayd sanadkii 1945-kii. Markaas ayaa waxaa ku deydey qaar kamid ah dowladaha adduunka oo ay ugu horeeyaan kuwo dhaca qaaradda Laatiin Ameerika, gaar ahaan Jiili, Beeruu iyo Ekwadoor.

Waxaa xusid mudan, sanadkii 1960-kii in si buuxda laysugu raacay heshiiskan dhigaya masaafada ah 200 nm in ay yeeshaan dowladaha leh xeebaha badaha furan. Heshiiskaas oo la magic ahaa midkii ka horeeyey ayaa waxaa la yiraahdaa UNCLOS II. Sanadkii 1967-kii 25 dowladood oo qura ayaa ku haray adeegsiga xuduuddii hore, iyada oo 66 dowladood ay dheereysteen xuduud-badeedkooda. Dabadeed sanadkii 1949-kii waxaa si heer caalami ah loo magacaabay guddi ka taliya xuduudda biyaha, kuwaas oo u saamaxay dowladaha dhaca badaha furan in ay dheereysan karaan xuduud-badeedkooda. Xeerkaasi wuxuu beddeley xeerkii ka horeeyey oo isna caalamiga ahaa oo waddamada xaq u siinayay 12 nm oo keliya, kaas oo dunidu ka dhaqan-galay sanadkii 1966-kii. Xuduuddan siyaadada ah waxaa la yiraahdaa xuduud dhaqaale oo dalka u gaar ah EEZ (Exclusive Economic Zone). Wixii ka baxsan, cid

walba waa ay adeegsan kartaa. Iyada oo aanan marti uga ahayn cid kale ayay ku socdaali kartaa, ka kalluumeysan kartaa, kuna samayn kartaa sahamo cilmi-baaris ah.

Markii ay korortay fahamka khayraadka ku hoos jira qolfoof-badeedka ka hooseeya biyaha, waxaa yimid ururada caalamiga ah ee u xil-saaran xuduudda badaha in ay ka doodaan xuduud-biyeedka. Ururadaas waxaa kamid ah IMO (International Maritime Organization), IWC (International Wahling Commission) iyo ISA (International Sea-bed Authority). Muddadii u dhexeysey 1973-kii illaa iyo 1982-kii waxay ku howlanaayeen diraasaad cilmi ah oo lagu jaan-gooyo sidey dowladuhu u qaybsan lahaayeen xuduudbiyoodka caalamka. Xeerkaas oo loo bixiyay UNCLOS III, ayaa wuxuu ansixiyay masaafada ah 200 oo nm. Waxaa xeerkan u codeeyey 160 dowladood.

Xeerkan ayaa hir-gelintiisa waxay bilaabatay sanadkii 1994-kii, iyada oo Soomaaliya ay ka maqan tahay dowlad dhexe oo ilaashan karta xuduuddeeda dhulka, badda iyo hawada. Xeerku wuxuu dhigayaa, dowladaha leh badaha biyahoodu ay furan yihiin waxay leeyihiin saddex xuduud-badeed (Territorial Water). Iyada oo xariiqda dhulka laga qaadayo meesha ay xuduuddu ka taabato biyaha badda, xuduudda I-aad waxay ku dhamaanaysaa 12 nm (22 km). Way ka sii badnaan kartaa oo waxaa la gaarsiin-karaa 22 nm (44,4 km). Aaggan waxaa lagu magacaabaa xadkii deriska (Contiguous Zone). Dalka xuduuddan leh wuxuu xaq u leeyahay in uu si buuxda uga faa'iideysto kheyraadka ku jira badda iyo dhulka ka hooseeya.

Wuxuu kaloo leeyahay xuquuqda ah dhaqdhaqaaq walba oo uu ku ciqaabayo ciddii ku soo xad-gudubta. Markab walba oo biyaha xuduuddan soo gaara wuxuu ku khasban yahay

in uu dhowro sharciga maaliyadeed, midka socdaal, midka faya-dhowr iyo xeerarka gudaha dalka lagaga dhaqmo.

Xuduudda II-aad (EEZ) waxay ku dhamaanaysaa iyana 200 nm (370.4 km). Aaggan ayaa dalka la deriska ah wuxuu gacanta ku qabanayaa khayraadka ku jira badda iyo dhulka ka hooseeya. Waxaa kamid ah khayraadkaas kalluunka, macdanta iyo sahanka shidaalka. Wixii wasakh ah oo gaara cimilada degaanka, dalkaas ayaa ka masuul ah. Laakiin dalkan ma mamnuuci karo marinka waddooyinkeeda. Isla-markaas kuma samayn karo takri-fal xeerarka caalamiga ah iyo heshiisyada laga ansixiyo JQ ka Dh ee khuseeya badaha. Waxaa jira, in shuruucda caalamiga ah uu qabanayo maraakiibtii ku soo xad-gudba xudka dhaqaale ee biyaha oo waddamada kala leeyihiin. Waxaa xusid mudan, Soomaaliya oo xuduudbiyeedkeeda uu yahay mid furan, isla-

markaas aanan lahayn dowlad ilaashata, ayaa waxaa ku dhaca bililiqada ugu fool-xun oo khayraadka badda lagu boobo.

Xuduudda III-aad waa qalfoofka qaaradda (Continental Shelf), taas oo ah dhulka dhamaska ah oo qaaraddu ku fadhidu qaybta kaga aaddan dowladda xeebtu dhacdo. Gobollada xeebta waxay xaq u leeyihiin sahaminta iyo ka faa'ideysiga bad-waynta iyo kheyraadka dabiiciga ah ee ku dul yaal ama ka hooseeya. Si kastaba ha ahaatee dowladaha kale ayaa dhigan kara fiilooyinka feybarka iyo dhuumaha ay saliiddu marto haddii ay oggolaansho laga helo dowladda ka dhisan gobolka ay xeebtu dhacdo. Xadka dibadda ee khaanadda qaaradda waa in uusan ka weynaan 350 nautical miles (650 km) ee gundhigga ah, ama in kabadan 100 nm (190 km).

# Casharkii 71-aad

Sida la ogsoon yahay dhul-kasta oo dhaca aag badeed wuxuu yeelanayaa xuduud u qeexan oo uu ku heley qawaaniin caalami ah iyo xeerar dalka gudihiisa ah oo isku-dhafan. Sida aanu soo xusnay, xeerarka caalamiga ah ee badaha waxay qeexayaan xuquuqda uu dal-walba u leeyahay intifaacsiga badda iyo waajibaadka ka saaran ilaaladeeda. Sidaa darteed in dowladuhu ay si wada-jir ah uga shaqeeyaan xeerarkan waa arin ahmiyaddeeda leh, taas oo xoojinaysa nabadgelyada guud ee dunida. Waxaa kale oo arintaasi ay xoojinaysaa beryasamaadka dhaqaale ee dadyowga intifaacsanaya kheyraadka biyaheeda iyo nicmadaha ku aasan.

Sanadihii 1960-aadkii, hor u-marka aqoonta badaha waxaa lala tiigsanayay kalluunka ku jira

badaha moolkooda fog ama ku yaacsan bad-waynta. Sidaa darteed, maraakiibta sahanka ah, khayraadka ay badda ka baadi-goobayeen ma dhaafsiisnayn kalluunka. Soo bixitaanka aagagga cusub ee badda waa mid si wayn u kordhisay ahmiyadda ah in lala jaan-qaado xadka badda ee ku salaysan sharciga caalamiga ah ee casrigan. Muuqaalka ugu caansan ee aagaggan cusub ayaa ah masaafada wayn ee xeebta, kaas oo gobolka u oggolaanaya in uu xuduuddiisa ku fidiyo badda gudeheeda illaa iyo 200 nm (EEZ).

Calaamadeynta xuduudda badda ee dowladaha qaarkood, waa ay ka adag-tahay kana qallafsan tahay calaamadeynta xuduudda dhulka. Culeysku wuxuu ka imanayaa markii la eego xaaladaha jeolojiyada iyo xaaladaha joqraafiga ee ku hareereysan waddamada loo xadeynyo kuwooda suuragalka ah iyo kuwooda aanan

suuragalka ahayn. Waxaa kale oo qallafsanaanta calaamadeynta muujinaya adkaanta cabashooyinka ka imanaya hirgelinteeda. Qodobada sida gaarka ah u cuslaynaya ku-heshiisnta xuduudda badda waxaa kamid ah, su'aasha oranaysa waa tuma awoodda kama danbaysta ah ee iska-leh qaraarka xad-samaynta. Qodob labaad wuxuu yahay maraajicda hababka loo marayo calaamadeynta xuduudda. Qodob saddexaad ayaa isna wuxuu yahay, arimaha la xiriira farsamada ee lagu calaamadaynayo xuduuddan hawada maraysa oo misana badda dusheeda ah.

Haddaba si looga fogaado muran iyo mixnado dhex-mara dowladaha, markii uu soo baxay xeerka fidinta xadka dhaqaale ee badaha sanadkii 1982-kii, waxaa jiray qayb xeerar ah oo lagu kordhiyay maxkamadda caalamiga ah. Waa

qayb shrciyo ah oo falanqeynaya mabaadiida hababka iyo xaaladaha la xiriira xuduud dejinta badda. Xeerarkan iyo heshiiska loo dejiyay ee ah UNCLOS III, muhiim uma ahan oo keliya hor umarinta xeerarka caalamiga ah ee badaha. Laakiin waxaa kaloo ay yihiin astaan taariikhi ah oo la xiriirta hannaanka gor-gortanka diblomaasiyadeed ee xiriirka dowladaha. Ficilka xuduud-badeedka iyo xeerarkiisa waa mashruuc caalami ah oo leh wax soo saar caalami ah, kaas oo loo qabtay si caalami ah oo casriyeysan.

Xudduudihii dhulka ee la xariiqay dagaal-waynihii II-aad dabadiis haddii ay naqshadeeyeen dowladihii ku adkaaday dagaal-waynihii II-aad, naqshadaynta xudduudaha badda waxaa ka qayb-qaatay dowladihii dhallinyarada ahaa ee dhowaan curtay.

Dowladahan ayaa intooda badan aanan ka qayb-gelin geedisocodkii lagu dhisay heshiisyadii

xuduud-badeedka ee UNCLOS I. Marka is barbar-dhig lagu sameeyo, sanadkii 1958-kii oo heshiiskii UNCLOS I ay ka qayb-galeen 86 dowladood oo qura. Sanadkii 1982-kii heshiiska UNCLOS III waxaa ka qayb-galay 165 dowladood.

Heshiiska xuduud-badeedka saddexaad ee UNCLOS III, ayaa wuxuu yahay midka sida-gaarka ah u khuseeya mowduucayaga nicmadaha nacladaysan. Waa heshiiska sababta u ah muranka dhex-yaal dowladda Soomaaliya iyo Kenya oo kamidka ah sababta aanan loogu dhicin in la hunguriyeeyo khayraadka ku jira aagga lagu muransan yahay. Sidaa darteed waa ay haboon tahay in aanu eegno qayb kamid ah xaglihiisa kala duwan. Xeerkan ayaa waxaa la ansixiyay 10 fadhi markii mdikoodii ugu danbeeyey uu dhamaaday. Fadhiyadaasi waxay socdeen muddo 10 sano ah (1973-kii illaa 1982-kii). Khuburo, siyaasiyiin, aqoon-yahanno iyo xeer-beegti ayaa isugu tegey dejintiisa. Fadhigii

ugu danbeeyey oo ka dhacay magaalada New York, wuxuu socday muddo hal bil ah (9-kii maarso illaa 10-kii abriil 1982kii). Qoraalka xeerkan waxaa lagu xusay sidan:

“ Aagga dhaqaale (EEZ) ee dhaca qalfoofka qaaradda oo dowladuhu ay gaarka u leeyihiin, kuwaas oo dhaca laba dowladood oo iska-soo hor-jeeda ama laba dowladood oo deris ah, xuduuddeeda waxaa lagu caddaynayaa heshiiska xeerarka caalamiga ah. Si loo xaqiijiyo sinnaanta, xeerkaasi waxaa lagu tilmaamay qodobka 38-aad ee hannaanka saldhigga u ah maxkamadda adduunka ”.

Si aanu faham aanu qoraalka kula soconno u helno, khilaafkan xuduudda badaha ee lagu xusay sharcigan, laba siyaabood ayuu u

imanayaa. Mid waxay tahay laba dal oo iska-soo hor-jeeda, kuwaas oo masaafada biyaha u dhexeeya ay ka yar-tahay 400 nm, sida khilaafka xuduud-badeedda ee Ruushka iyo Azerbajaan. Haddii midkood dhulkiisa xeebta ah uu qallooc ku jiro, arintu waa ay sii murgeysaa sida khilaafka xuduud-badeedda Norway iyo Denmar. Hddii biyaha u dhexeeya ay dhacaan dhulal jasiirado ah, iyadana waa midda ugu qallafsan, sida khilaafka xuduud-badeedda ee u dhexeeya Turkiya iyo Giriig. Midda kale oo khilaafka uu ka imanayo waxay tahay, xuduudda dhulka ee u dhexeysa markii ay ku dhamaato khad qallooc ku jiro oo labadii dal ayan ahayn kuwo si siman isu garab-yaal, sida Liibiya iyo Tuunis. Ama markii labada khad ee labada dacal ee xuduud-badeeda ee dhulka ka bilaabanaya ay ka kacayaan xagal aanan toosnayn. Arintaasi waxay sababaysaa in labadii khad ay isu-yimaadaan oo dalkaas ay ka xiraan in uu bad-

waynta la tacaamulo, sida Kenya uu ku dacwoonayo.

# Casharkii 72-aad

Xeerka UNCLOS III, waxaa saxiixey 165 dal oo kamid ah 195-ka dal ee ku midoobey hay'adda JQ ka Dh. Ka-sokow masaafada ah 200 nm, xeerka wuxuu saamaxayaa haddii uu dalku leeyahay xeeb furan oo wax soo celinaya ayan jirin, in dalkaasi uu kororsan karo masaafo dhan 150 nm. Taasi macnaheedu wuxuu yahay dowladaha dhaca xeebaha badaha waawayn in ay xaq u yeelanayaan xuduud-badeed dhaqaale oo gaarsiisan 350 nm, taas oo u dhiganta masaafo gaarsiisan 648 km oo markii xeebta laga kaco ah. Sidaa darteed, dowladaha dhaca bariga qaaradda Afrika oo xuduud-badeedkoodu uu raacsan yahay badwaynta Hindiya, dhamaan waxay badda ku yeelanayaan masaafo gaarsiisan 350 nm, taas oo u dhiganta 648 km. Soomaaliya oo ballaca ay xuduuddeedu ay

gaarsiisan tahay intaas aanu soo xusnay ayaa misana waxay tahay dalka ugu xeebta dheer.

Biyaha fadhiya masaafadan lagu heshiiyay, xeerku wuxuu u saamaxayaa maraakiibta dowliga ah in ay dul-maraan. Laakiin khayraadka ku jira biyahaas hoostooda waxay u gaar yihiin dadyowga ay xuduudda u tahay. Waayo dhulka badda salkeeda ah ee xeebta ku dhow waxaa dhaca qalfoofka qaaradda (Continental Shell) oo waxay dhamays u tahay dhulka ay leeyihiin dowladaha xeebaha dhaca. Muranka xad-badeedka ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Kenya wuxuu yahay mid la xiriira diillimaha xuduudda labada dal (Soomaaliya iyo Tansaaniya) oo Kenya ay dhanka badda kala deristay. Labadan dal ayaa madax-bannaanida waxay ka hor-qaateen dalka Kenya.

Xuduudda biyaha ee labadan dal waxaa la xariiqay iyada oo Kenya ayan xor ahayn. Sidaa

darteed, xariiq dhankooda xagal toosan (900) ka-leh ayuu dal-walba heley. Laakiin dhulka qaaradda oo aanan ahayn mid siman, ayaa wuxuu keeney in xagasha dhanka Kenya xigta ay noqoto mid 900 ka yar. Taasi waxay dhalisay labadan xariiq ee calaamadda u ah xuduud-badeedda Soomaaliya iyo Tansaaniya in ay isugu yimaadaan bad-waynta meel ka sokeysa 250 nm. Waxaa halkaas Kenya kaga xirmanaya in ay sheegato dhul-badeed ka baxsan meesha ay labada diillin isugu yimaadaan.

Qodobkan ayaa wuxuu yahay midka ugu milgaha culus oo Kenya ay ku doonayso in ay xagal 900 ka badan ku waasiciso khadda xuduudda, si ay u gaadho bad furan. In dhanka Tansaaniya ay u sikiso khadda waxaa u diidaya laba arimood. Mid wxaay tahay Tansaaniya oo badda ku leh jasiirad, taas oo haddii khadda la sikiyo soo geleysa xuduudda Kenya. Midda labaad waxay tahay nuglaanta dowladda maanta ka dhisan

Soomaaliya oo Kenyaanku ay is-tusiyeen in ay ku filan-tahay laaluush la bixiyo si looga helo ansixin xubnaha ugu sareeya dowladda.

Waxaa iyana jirta biyahan ay Kenya ku haysato Soomaaliya, waxay dul fadhiyaan dhul bedkiisu yahay 100,000 km2. Waxaa halkaas lagu tuhmayaa in ay ceegaagaan hanti badan oo saliid ah. Goor danbe ayaanu si tifaf-tiran uga hadlaynaa murankan iyo xuquuqda ay Soomaalidu u leeyihiin in ay ku difaacdaan, haddii ayan siyaasaddu ka xumaan. Waxaase uusan shaki ku jirin in mowduucan uu kamid yahay muranka siyaasadeed ee hor-taagan in dadka ku dhaqan geyiga bariga Afrika ay faa'iideystaan khayraadka dihan dhulkooda.

5) Waxaa jira oo iyana muran kai man-doonaa xuduud-badeed ah oo u dhexeeya Yaman iyo Soomaaliya. Degaankaas oo hadda laga aamusan yahay ayaa wuxuu dhacaa dhulka u

dhexeeya jasiiradda Suqadara iyo xagasha fiiqa ah ee Raas-Casayr. Waxaa halkaas dhaca laba degaan-biyood oo u calaamadaysan in shidaal laga sahmiyo. Masaafada ay isu jiraan labada dhul ee engegan (Raas-casay iyo Suqadara) waxay tahay 290 km oo qura. Aagga calaamadaysan ee xiga Suqadara waxaa la yiraahdaa Samxax Block (95), wuxuu ku fadhiyaa dhul-badeed bedkiisu yahay 20,962 km2. Aagga soo xiga ciidda Soomaaliya (gobolka Gardafoy) waxaa isna lagu magacaabaa Abul-Kuri Block (Block 94), wuxuu ku fadhiyaa dhul-badeed bedkiisu yahay 12,886 km2. Dalka Yaman ayaa inta uusan ka bilaaban dagaalka sokeeye wuxuu qorsheynayay in uu labada degaan ka baarto shidaal, xilli ay Soomaalidu isku maqnayd. Sababta degaankan looga aamusan yahay waxay tahay iyada oo dowladdii dhexe ee Yaman ay bur-burtay, Soomaaliyana ayan weli ka curan

dowlad caga-dhigata oo dadkeeda si buuxda u matasha.

Arimahan aanu soo xusnay waxay tilmaan u yihiin xasillooni-darrida, shirkadaha shidaalka ay kaga fogaadaan in ay degaanada ka howl-galaan. In-kasta oo tobaneeyadii sano ee aanu soo dhaafnay, bariga Afrika iyo xeebaha ku teedan ee Bad-waynta Hindiya ay ka socdeen sahamin baaxad leh oo saliid iyo gaas ah, laakiin weli karti looma yeelan in riyadaas la xaqiijiyo. Waa arin mudan in aanu xusno dowladaha uu sahanku maray ee bariga qaaradda dhaca. Dalka Burundi, waa dal bedkiisu yahay 27,834 km2. Tirada dadkuusu waa 12 melyan, kuwaas oo goortii loo qaybiyo dhulka, 1 km2, waxaa degaya 401 qof. Dhakhliga dowladda sanadkii 2019 wuxuu ahaa 8,380 bilyan oo US.$. Sahankii dhowaanta laga galay ee mowjadaha dhul-gariirka iyo jacda bir-qabatada, wuxuu muujinayaa in laga yaabo inay saliid ka hooseyso harada webiga la yiraahdo

Rusizi iyo harada Tanganyiika oo ay biyiha webigan ka soo bilowdaan ee dhaca koonfur-galbeedka dalka.

# Casharkii 73-aad

Dalka Ruwanda ayaa isna kamid ah waddamada dhaca bartamaha qaaradda Afrika laakiin xiriirka uu la leeyahay dowladaha bariga Afrika darteed loogu tiriyaa in ay bah-wadaag yihiin. Ruwanda waa dal ay ku nool 12 melyan oo qof, kaas oo bedka uu ku fadhiyo uu dhan yahay 26,338 km square. Goortii dadka loo qaybiyo dhulka, km square walba waxaa ku aadaya 445 qof. Dalkan dhaqaalihiisa waxaa saldhig u ah beeraha. Dakhliga dowladda ee sanadkii 2019-kii waa 30 bilyan oo US.$. Dhaqaalahaas wuxuu sanadwalba kordhayaa 6 %. Dalkan wuxuu kamid yahay waddamada dhowaan laga heley shidaalka. Sahan cilmi-baaris ah oo laga sameeyay Balliga la yiraahdo Lake Kivu ee dhaca Galbeedka Ruwanda, waxaa lagu ogaaday in dhulka biyahaas ka hooseeya ay ku jirtu saliid la suuq-geyn karo.

Waddanka Tanzaaniya wuxuu kamid yahay waddamada ugu tunka wayn bariga Afrika. Magaca rasmiga ah ee dalka uu leeyahay waa Midowga Dowladaha Tansaaniya (United Republic of Tanzania), taas oo ka dhigan isu-tagga Tanganyika iyo jasiiradda Zenzibar. Waddanka waxaa ku nool dad gaaraya 46. Bedka dhulka waa 947,303 km square, kaas oo markii dadka loo qaybiyo cufkiisu uu noqonayo 47,5/ km square. Dhaqaalahooda sanadkii waa 64 bilyan oo US.$. Beeraha ayaa waxay yihiin meesha uu dowladda ka soo galo dakhliga ugu badan, dadkuna ay raashinka ka helaan. Dakhliga dowladda sanadkii 2019-ka wuxuu ahaa 186,060 bilyan oo US.$. Dalkan ayaa isna ay xiiso gaar ah siinayaan shirkadaha shidaalka. Jasiiradda la yiraahdo Songo-Songo ee ku dhacda koonfur-bari ee dalka kuna beegan xeebta gobolka Lindi, ayaa natiijooyin wanaagsan ka muujiyay sahankii loo galay.

Waxaa kale oo jira aagag dhaca laba dgmo-xeebeed, kuwaas oo ku yaal xuduudda uu dalku la leeyahay Mosambiik oo qudhooda laga heley shidaal. Labada degmo waxay kala yihiin Mikindani Bay iyo Misimbati.

Dalka Ugaandha wuxuu kamid yahay dowladaha dhaca variga Afrika. Wuxuu ku fadhiyaa dhul uu badkiisu le'eg-yahay 241.038 km square. Waxaa ku nool dad tiradoodu dhan-tahay 35 melyan oo qof, kuwaas oo haddii loo qaybiyo dhulka ay 157-kii qof ay helayaan 1 km square. Dhaqaalaha dalka Ugaandha wuxuu si xooggan ugu xiran yahay beeraha. Dakhliga dalka sanadkii 2019-kii wuxuu ahaa 30,765 bilyan oo US.$. Ugaandha waxay kamid tahay waddamada rajada fiican ku leh mustaqbalka shidaalka. Shan goobood oo sahanku uu tilmaamay in ay muujiyeen raadadka shidaalka waxay dhamaantood dhacaan degaanka uu Ugaandha ka maro dooxada dhagax-dillaaca wayn (The Great Rift Valley).

Waa goobta la filayo in mustaqbalka ay qaaradda Afrika ka kala dhambalanto.

Shanta goobood oo tuhunku ku saaran yahay waxay yihiin dooxada Albertine Graben, dooxada Hoima Basin, harada Kyoga Basin, harada Wamala Basin iyo dooxada Kadam-Moroto Basin. Waxaa xusid mudan, dooxada Albertine Graben ilaa iyo hadda in laga ogaadey inay tahay meesha ugu badan ee laga heli karo batroolka Ugandha. Degaankan ayaa wuxuu dhisaa qaybta ugu badan gacanka waqooyi-galbeed ee nidaamka Rift Valley ee bariga Afrika mara.

Dalka Mosambiik ayaa isna dhaca bariga Afrika. Bedkiisu waa 801,590 km square. Dadka ku dhaqan waa 39 melyan oo qof. Goortii bedka loo qayniyo, 30-kii qof waxaa ku aadaya 1 km square. Dakhliga dowladda sanadkii 2019-kii

wuxuu ahaa 15,372 bilyan oo US.$. In-kasta oo dhaqaalaha dalka uu sanadwalba korayo 8 %, misana wuxuu kamid yahay dalalka ugu saboosan dunida. Sahanka shirkadaha shidaalka ay ka smaayeen Mosambiik waa mid isugu jira badda (Offshor) iyo dhulka (Onshore). Labada shirkad ee ugu wayn oo sahankan qaatay waa ENI oo Talyaani ah iyo EXONMOIL oo Mareekan ah. Natiijadii ay gaareen waxay ku sheegeen, xogta la hayo illaa hadda ee dalka Mosambiik waxay tahay, in falkan uu yahay midka saddexaad ee ugu shidaalka badan qaaradda Afrika, Nayjeriya iy Aljeriya dabadood.

Itoobiya waa dalka ugu dadka badan dowladaha bariga Afrika. Waxaa ku dhaqan dad ay tiradoodu gaarayso 105 melyan oo qof. Bedka uu ku fadhiyo dalka Itoobiya wuxuu gaarsiisan yahay 1,104,300 km2, kaas oo 109 qof oo walba ay ku nool-yihiin 1 km2. Sanadkii 2019-kii, dalka dakhligiisu wuxuu ahaa 90,9 bilyan oo US.$.

Dhaqaalahaas qaybta ugu xooggan wuxuu ka yimaadaa beeraha, gaar ahaa kafeega oo Yurub loo dhoofiyo iyo qaadka oo loo dhoofiyo Soo maaliya oo qura. Sanadkiiba dhaqaalaha Itoobiya wuxuu kordhaa 10 %. Itoobiya waa dal dhaca bariga Afrika. Waxaa lagu sheegey in uu shidaal ku jiro, kaas oo xooggiisu uu fadhiyo gobolka Soomaalidu degaan ee Ogaadeenya. Gaar ahaan dhulka oogada ah ee buuraha Gerra Muleta ee ku dhow degmada Harar iyo dooxooyinka Gerger iyo togga Faafan.

# Casharkii 74-aad

Dalka Eriteeriya waa dal dhaca bariga Afrika, kaas oo sanadkii 1991-kii madax-bannaanidiisa ka qaatay dalka Itoobiya. Bedka uu ku fadhiyo dalka wuxuu dhan-yahay 117,600 km square. Dadka ku dhaqan waa 6 melyan oo qof, kuwaas oo markii dhulka loo qaybiyo halkii km. square waxaa ku aadaya dad gaaraya 52 qof. Dhaqaalaha dalka wuxuu si xooggan ugu xiran yahay macdanta oo dahabka ugu horeeyo iyo shamiintada. Dakhliga dowladda sanadkii 2019-kii wuxuu ahaa 7,720 bilyan oo US.$. Dalkan wuxuu kamid ah dowladaha lagu tuhmayo in ay leeyihiin shidaal loo iib-geyn karo seyladaha caalamka. Markaad eegto joqraafiga dalkan, wuxuu kamid yahay sagaalka dal ee dhaca badda Cas, kuwaas oo ah Yaman, Boqortooyada Sacuudiga, Jordan, Israa'iil, Masar, Suudaan, Eritrea, Jabuuti iyo Somaliya.

Biyaha badda Cas waxay fadhiyaan degaan soo-jiidanaya indhaha shirkadaha sahanka shidaalka. Jeofiisikada baddan waxay la cimilo tahay badda khaliijka carabta oo ay dhacaan balliyada ugu shidaal badan dunida. Laakiin waa ay ka cimilo qallafsan tahay. Moolka ugu dheer ee khaliijka carabta waa 100

m. Laakiin badda Cas moolasheedu toban jibbaar ayay intaas ka dheer tahay. Bii'addeeda gudahana waa ay ka adag tahay kana milix badan tahay. Arimahaasi waxay kor-dhinayaan takaaliifta teknolojiyada loo adeegsanayo qodista ceelasha badda hoosteeda ah. Xeebta dhanka qaaradda Aasiya ee baddan, waxaa ku socda sahan shidaal oo xooggan oo ay waddo dowladda Sacuudiga. Laakiin dhanka xeebta Afrika ee baddan weli sahan wayn lagama gelin. Dadaalka ugu wayn waxaa sameeyey Eriteeriya oo agagaarka jasiiradda Dhaxla ka samaysay

sahanka dhul-gariirka, kaas oo laga heley ogaallo rajdoodu wanaagsan tahay.

Dalka koonfurta Suudaan, sanadkii 2011-kii wuxuu ka go’ay dalka Suudaan. Taasina waxay ka danbeysey dagaal sokeeye oo daba-dheeraaday oo labada qowmiyadood uu dhiig badan kaga daatay. Dalkan oo ku fadhiya dhul bedkiisu yahay 619,745 km square, ayaa tirada dadkiisu waxay ka badan yihiin 11 melyan. Qiyaastii 33-kii qof ayaa waxay ku aadayaan dhul ah 1 km square. Sanadkii 2018-kii dakhliga dowladda wuxuu ahaa 3,194 oo US.$. Intii ayan labada gobol kala go’in (koonfurta iyo waqooyiga), dowladdu waxay ku guuleysatay in ay ku biirto naadiga seyladaha shidaalka. Taasina waxay u suuragashay markii ay la soo baxday oo ay dhoofisay saliidda keydka u ahayd. Laakiin nicmadihii ayaa naclad ku noqday oo u horseedey dagaal sokeeyey oo ay ku kala-go’een. Dowladdii koonfurta oo inta badan

ceelashii shidaalka ay dhankeeda raaceen, ayaa mar-kale nicmadihii ay heleen waxay ku noqdeen naclad iyo inkaar. Tan iyo bishii january 2012-kii wuxuu dalku khasaarayay 470,000 oo bermiil oo shidaal ah. Sidaa darteed, koonfurta Suudaan waa dal ay nicmadihii u diyaarsan yihiin, laakiin inkaarta ku dhacday darteed ayay iyaga iyo caruurtoodii la yuururaan dar-xumi iyo saboolnimo.

Kenya waa dal ay ku nool yihiin 43 melyan oo qof. Bedkeedu waa 580,367 km square. Tirada dadku waa 48 melyan, cufka dadkuna waa 78 qof km square walba. Dhaqaalahoodu wuxuu ku dhisan yahay beeraha iyo dalxiiska. Dakhliga dowladda sanadkii waa 72,34 bilyan oo US.$. Dhaqaalahaas ayaa sanad walba waxaa ku kordha 5 %. Awoodda batroolka ee Kenya waxay soo if-baxday wixii ka danbeeyey 2012kii, markaas oo la urursha sahamo badan oo sanooyinkii ka horeeyey lagu hayay qaybo kamid

ah gobollada dalka. Gaar ahaan degaano dhaca gobolkaTurkana ee waqooyi galbeed, halkaas oo laga soo saaray shidaalkii ugu horeeyey ee dalka uu dhoofiyo. Waxaa halkaas laga qaadaa maalintii shidaal dhan 1000 bermiil, kuwaas oo lagu daabulo gawaari gaarsiiya dekedda Mombasa. Waxaa halkaas ka muuqata caqabadda ay dhisma-hoosaadka ku tahay ka faa'iideysiga nicmaddan. Waxaa kale oo sahanku uu rajo xooggan ka muujinayaa dooxooyinka dhaca xuduudda ku dhereran Kenya iyo Soomaaliya iyo degaano kamid ah xeebta bad-waynta Hindiya. Iyada oo ayan ku jirin shidaalka la filayo in ay ku aasan-yihiin xuduud-biyoodka ay Soomaaliya isku-haystaan, ayaa Kenya waxay u sharaxan tahay waddamada bariga Afrika oo lagu cayuumayo shidaalka mustaqbalka.

Soomaaliya waa dalka mucjisada ah ee dhaca bariga Afrika. Dhul ahaan, dad ahaan iyo dhaqan

ahaan ayuu mucjiso u yahay. Dhulku wuxuu ku fadhiyaa bed gaarsiisan 637,657 km square, kaas oo bad-waynta Hindiya iyo badda Cas ku leh xeeb dhererkeedu ka badan yahay 3,330 km. Waxaa ku nool 15 melyan oo qof, km-walba waxaa nasiib u helaya in ay ku noolaadaan 19 qof. In-kasta oo dhaqaalaha dalka uu la xanuunsan yahay siyaasadda jah-wareertey, misana si aanan rasmi ahayn waxaa la ogsoon yahay in Soomaaliya ay ka dhaqaale wanaagsan tahay sida la malaynayo. Sanadkii 2018-kii, dhaqaalaha ku wareeganayay seyladaha dalka waxaa lagu qiyaasay 7,9 bilyan oo US.$.

Waxaa la ogsoon yahay, loolanka caalamiga ah ee deegaan-siyaasadeedka (Global Geo-strategy) oo u dhexeeya dowladaha waawayn, in uu wax ka naqshadeeyo xasillooni-darrida xooggan ee Soomaaliya kajirta. Iyada oo Soomaaliya ay degganaansho-la’aantaas ku sugneyd muddo qarni ka badan, ayaa misana

damaca shirkadaha saliidda uusan ka hakan in ay soo milicsadaan gobolka. Sahanka yar oo la sameeyey wuxuu muujiyay in Soomaaliya ay noqonayso qibladdii tamarta ee bariga Afrika.

# Casharkii 75-aad

Dowladahan aanu soo xusnay waa kuwa la filayo in mustaqbalka, ummaduhu ay ku cawryaan nicmadda la rajeynayo in dhulkooda laga soo-saaro. Shidaalka halkaas lagu sheegey, tirada badan waxaa u weheliya tilmaamo ay jecel-yihiin shirkadaha shidaalka. Waxaa ugu wayn, guud ahaan in saliidda Afrika ay tahay nooca khafiifka ah, taas oo soo-saariddeeda iyo sifeynteeda ay labaduba fudud-yihiin, marka loo eego saliidda bariga dhexe ee culus. Waxaa kale oo jira in ceelasha shidaalka ee dowladaha intooda badan ay dhacaan meelo xeeb ah oo dhoofintiisu ayan u baahnayn dhisma-hoosaad culus. Saliidda laga qodo badaha la deriska ah qaaradda Afrika, fursadda lagu guuleysto waa 50 % wax ka badan, halka qaaradaha kale biyahooda, fursaddu waa 10 %.

Waxaa kale oo jira, dowladahan aanu soo xusno midkoodna aanan kamid ahayn is-bahaysiga dowladaha shidaalka soo-saara OPEC (Organization of the Petroleum Exporting Countries). Taasi waxay dowladahan siisey, heshiisyada ay la gelayaan shirkadaha shidaalka in ayan ku dabranayn xeerarka is-bahaysigan u degsan. Sidaa darteed heshiisyada ay dhiganayaan dhamaantood waa nooca ah PSA (Production Sharing Agreement), kaas oo shirkaduhu ay jecel-yihiin. Arimahaasi waxay dowladaha bariga Afrika ka dhigayaan mustaqbalka degaan leh xoog tamareed iyo xoog degaan-siyaasadeed. Goobaha laga sahmiyay ceelasha shidaalka ee dowladaha bariga Afrika, natiijooyinka rasmiga ee laga heley sahamdoodii waxay tilmaamayaan sidan:

Keydka dalka Tanzaniya waxaa lagu qiyaasay 35 bilyan oo bermiil

Keydka dalka Mozambiik waxaa lagu qiyaasay 13 bilyan oo bermiil

Keydka dalka Kenya waxaa lagu qiyaasay 7 bilyan oo bermiil

Keydka dalka Itoobiya waxaa lagu qiyaasay 2,7 bilyan oo bermiil

Keydka dalka Ugaandha waxaa lagu qiyaasay 6,5 bilyan oo bermiil

Keydka dalka Koonfurta

Suudaan waxaa lagu qiyaasay 5

bilyan oo bermiil Keydka dalka

Eriteriya waxaa lagu qiyaasay

3,3 bilyan oo bermiil

Dalka Soomaaliya oo ah midka sida gaarka ah inoo-khuseeya, sahankii ay dhowaan samaysay shirkadda SPECTRUM, ayaa waxay sahankeeda u adeegsatay habka casriga ag ee dhul-gariirka iyo awoodda jacda bir-qabatada. Marka laga tago 68 goobood oo horey uu sahanku ugu dhacay, kuwaas oo dhamaantood ahaa dhelka engegan (Offshore Blocks), shirkadda SPECTRUM wuxuu sahankeedu ku dhacay 15 goobood oo dhaca badda (Onshore Blocks). Xeebay bad-waynta Hindiya ee u dhexeysa labada magaalo Hobyo iyo Kismaayo oo ay shirkaddu ka sahan-gashay ayaa shidaalka ku jira 15-ka goobood waxaa lagu qiyaasay in uu dhan yahay 100 bilyan oo bermiil. Soomaaliyada dadkeeda looga yaqaan dunida in ay yihiin qaxooti sabool ah, ayaa hantida intaas le’eg u yeelatay dhaxal aanan lala wadaagin. Haddii hantidaas lagu qiimeeyo sicirka maanta uu dunida ka joogo bermiilka saliidda ah, waxay noqonaysaa 6 trilyan oo US.$.

Hantida sidaas u xooggan oo shirkadihii sahanka lahaa qudhoodu ka fajicisay, kuma ay jiraan saliidda taal xeebaha Puntland iyo Somaliland. Kuma ay jiraan saliidda taal xuduud-badeedda ay Kenya ku haysato Soomaaliya. Kuma ay jiraan saliidda taal dhulka engegan ee gobollada Soomaaliya. Kuma ay jiraan nicmadaha kale ee dalka Soomaaliya uu leeyahay. Waxaa hubaal ah, soo-saarka hantidaas in ay u baahan tahay diyaargarow xooggan iyo hannaan toolmoon, si looga badbaado nacladdii ay nicmaduhu siteen.

Shirkadaha shidaalka muddo dheer ayay xiiseynayeen Soomaaliya, iyaga oo u dareen-qabay hantidan. Bartamaha bartamaha qarnigii tegey ayay ahayd goorta ay bilaabeen sahanka degaanka. Laakiin waxaa jiray carqalado hor-taagnaa in uu sahanka si hagaagsan u dhaco. Waxaa ugu waynaa xasillooni la’aanta

siyaasadda dowladihii soo maray Soomaaliya. Muddadii ka danbeysey sanadihii 1977 – 1978, markaas oo oo Somaaliya ay Itoobiya la gashay dagaal wayn, waxaa abuurmay jabhado mucaarad ah oo hubaysan. Sidaa darteed dalku wuxuu ahaa welina uu u muuqdaa in uu yahay fagaare lagu hardamayo. Xilligaas wixii ka horeeyey wax caddayn ah lama-hayn oo aanan ka ahayn raad ah aqoonta dhul-baradka (Geology) iyo mala-awaal ku dhisan qiyaas.

Guud ahaan, sahanka culimada dhul-baradka ah waxaa laga dhaxlay faham aqooneed oo lagu qancay, kaas oo tilmaamaya kankoobka dhulka aynu maanta ku noollahay in uu leeyahay toddoba alwaax oo waawayn. Alwaaxdaas waa lakabyo ka samaysan dhagxanta ay ku taagan yihiin qaaradaha adduunka iyo salka ay ku fadhiyaan biyaha badaha. Alwaaxdaas waa-wayn waxaa weheliya lakabyo yar-yar oo Iyana

alwaax-dhagaxeed ah. Waxaa xusid mudan, alwaaxda yar-yar midkooda ugu wayn, culimada dhulbaradka ah waxay ku magacaabaan Alwaaxa Soomaaliya (Somali Plate). Dhulka ay degaan dadka Soomaalida ah, marka laga reebo Jabuuti wuxuu ku fadhiyaa alwaaxan. Waxa kale oo alwaaxan ku fadhiya degaano kamid ah galbeedka iyo koonfurta Itoobiya, degaano kamid ah Kenya, Tansaaniya, Musambiik iyo jasiiradda Madagaskar.

# Casharkii 76-aad

Joqraafi ahaan, qaybta bariga soo xiga ee biyaha bad-waynta Hindiya ayaa qudhoodu waxay ku dulfadhiyaan alwaax-dhagaxeedka lagu magacaabo Soomaaliya. Dhagaxa alwaaxan ayaa wuxuu yahay mid u dhexeeyaa xeebta ay Soomaaliya leedahay iyo dhul gudaha ah oo xuduuddiisu ay isku xirto Jabuuti iyo Musambiik. Xuduuddan ayaa waxay tahay jeex dillaaceedu uu ka muuqdo galbeedka dalka Kenya, kaas oo gaarsiisan dhowr iyo toban km. Waa meesha la filayo timaaddada in Soomaaliya oo wadata degaano kamid ah bariga Afrika ay ku kala dhilqadaan qaaradda Afrika.

Dhagxanta alwaaxdan waxay u qaybsamaan laba jaad. Waxaa la kala yiraahdaa (Granite iyo Basaltic). Alwaaxda ay dhagaxantoodu yihiin

Granite, waa kuwa qaaradaha haya. Gumucoodu wuxuu gaarsiisan yahay 30 – 40 km. cufkooduna waa 2,7 g/ m3. Macdanta ay dhagxantan ka kooban yihiin waxaa ugu badan Silicon iyo Alemunium. Alwaaxda ay dhagxantoodu yihiin Basaltic, iyagu waa kuwa yaalla badaha salkooda. Alwaaxdan ayaa gumucoodu wuxuu dhan-yahay 5 km. cufkooduna waa 3 g/ m3. Macdantan dhismahooda waxaa ugu badan Silicon.

Goor hore ayaa la fahmay joqraafiga degaanka Soomaalida uu ku dhaco, dhismaha lakabyada dhagxanta ah iyo ayniga ay dhagxantu yihiin in ay waxyoonayaan in Soomaaliya ay tahay degaan hodan ku ah saliidda. Tusaalaha ugu wayn oo in muddo ah tuhunka xoojinayay waxaa ah degaanka ay Soomaaliya dhacdo, taas oo la deris ah dowladaha Khaliijka ee shidaalka badan

leh. Sida la ogsoon-yahay, dalku wuxuu dhacaa koonfurta Khaliijka Carabta. Cimilada dhulka hoostiisa ah, Soomaaliya waxay xiriir la leedahay cimilada dhul-hoosaadka waddanka Yaman iyo Cumaan. Ka-sokow cimilo-dhuleedka iskuqaabka ah oo shidaalku ku dhasho, sida ay qaacidada cuf is-jiidka inoo sheegeyso dareere walba qulqulkiisu wuxuu ku wajahan yahay degaanada hooseeya. Waxaa xusid mudan in dhismaha dhulka Soomaaliya uu ka hooseeyo dhismaha dowladahaas aanu soo xusnay. Arintaasina waxay kamid tahay sababaha ay qaar kamid ah dowladaha Khaliijka uga maseersan yihiin Soomaaliya oo ay u xasdayaan.

Qodob kale oo kamid ah kuwa milgaha culus oo xoojinayay malaha ah in Soomaaliya ay hodan ku tahay shidaalka wuxuu yahay, cunsurka dhagxanta lagu tilmaansado saliidda, kuwaas oo lagu magacaabo (SHALE). Dhagxantan ayaa waxay yihiin kuwo ku badan dhismaha xeebaha

Soomaaliya. Waxaa jira laba jaad oo dhagxantan ah, mid wuxuu yahay dhagax-saliideed (Oil Shale), iyo saliid-dhagaxeed (Shale Oil). Jaadka hore waa dhagxan saliid badan nuugay. Si looga soo celiyo saliiddii waxay u baahan yihiin in loo isticmaalo agab teknoloji oo casri ah. Dowlado ay Kanada kamid tahay ayaa shidaalka ka hela dhagaxsaliideedka caynkan ah. Laakiin kharaj badan ayuu ugu fadhiyaa.

Jaadka labaad oo ah saliid-dhagaxeedka waa alwaax-dhagaxeed lakabyo ah oo ay hoostoodu fadhiyaan balliyo saliid ah. Dhagxantan danbe waxay ka samaysan yihiin dhogor iyo habaas isu tegey. Waxay ka kooban yihiin macdanta kuwooda ugu khafiifsan. Sidaa darteed waxay ku badan yihiin meelaha lakabyada alwaax-dhagaxeedku ay ku kulmaan. Waxay ka samaysmeen isku-dhaca ruxanka lakabyada dhulka ee curiya dhul-gariirka. Dhagxantan ayaa waxay kamid yihiin kuwa muhimka ah oo ay

ugaarsadaan aqoon-yhannada ku howlan sahanka dhulka shidaalka leh.

Waxaa kale oo Soomaaliya ku badan dhagaxa la yiraahdo dhagax-ciideed (Sandstone). Waa dhagax adag oo ka samaysan ciid yar-yar oo cabbirkoodu yahay (0.0625 ilaa 2 mm). Waxay u badan yihiin macdanta Quartz iyo Feldspar, kuwaas oo labaduba ay yihiin canaasirta bahda Silicates. Canaasirtan ayaa waxay yihiin macdanaha ugu adkeysiga badan geedi socodka waayaha ee cimilada dunida dusheeda ah. Waxaa jira hannaan ay fiisikada dabiicaddu leedahay oo kala fur-fura wax-walba oo isku xiran. Hannaankaas bur-buriyaha ah waxay culimadu ku magacaabaan (Goldich). Maaddaama alwaaxda ciiddan ay had iyo jeer samayso dhagaxyo si aad ah loo arki karo iyo astaamo kale oo ku saleysan qaab dhismeedkooda, midabada qaar ee

dhagaxantan ayaa si xoog leh loogu aqoonsaday gobollada Soomaaliya qaarkood.

Ciiddan waa kuwa laga sameeyo quraaradaha. Iyadu waxaa dusheeda ku qul-qula dareere walba oo ay ugu horeeyaan biyaha iyo saliidda. Biyahaas ku qul-qula dusheeda waxay ka nadiifiyaan wasakh walba oo ciid-dhagaxeedkan dul fariisata. Dhagxanta kale oo degaanka lagu arkay ee shidaalka lagu sahansado waxaa kamid ah kuwa la yiraahdo Lamstone iyo Dolomite. Dhamaantood waa dhagxan isku hayb ah oo keydiya dareeraha. Dhagxantan waxay leeyihiin dhismayaal ay ka muuqdaan siriqyo-lakabeed (Traps), halkaas oo dareeruhu markuu qul-qulayo uu isaga tallaabo daaqado dhagxanta dhexdooda ah. Waxaa kaloo muhiim ah inuu jiro qaab-dhismeed dhulka gudihiisa ah oo dhagxantu leeyihiin, kaas oo suurta gelinaya in daaqaduhu ay sabab u noqdaan keyd xooggan oo ah biyo ama batrool oo dhulka hoostiisa ah.

Jaadadkaas dhagxanta ah oo lagu tilmaansado raadadka sahanka shidaalka, ayaa waxay ku badan yihiin gobollada Soomaaliya.

# Casharkii 77-aad

Sanadihii 20-aadkii iyo 30-aadkii ee qarnigii tegey ayay Soomaaliya ka bilaabatay ka sahanka shidaalka. Markaasi howlaha socdey ma-dhaafsiisneyn dul-mar dhul-barad ah oo lagu ururinayay ogaallada hordhaca u ah cimilada dhulka. Dagaalkii II-aad markii uu dhamaaday ayay xoogeysatay socdaalka ay Soomaaliya ku imanayeen aqoon-yahannada dhul-baradka ah eek a socdey shirkadaha shidaalka.

Dabayaaqadii sanadihii 1940-aadkii, shirkaado Igiriis iyo Mareekan ah ayaa cilmi-baaris ku hayay dhulka Soomaaliya. Shirkadda la yiraahdo SOC (SINCLAIR OIL CORPORATION) ee Mareekanka laga leeyahay ayay ahayd midda ku soo hor-martay sahankaas.

Sanadkii 1947-kii, iyada oo shirkaddu ay ka socotay Itoobiya ayay sahan ka bilowdey gobolka Ogaadeenya. Waxay ahayd xilli aanan gobolka weli lagu wareejin maamulkii boqor Xayle Selassie ee Itoobiya. Sida ku xusan waraaqaha sirta ah ee hey'adda sir-doonka Mareekanka CIA (Central

Inteeligence Agency), Soomaalidu dacwad ayay arinkaas ka gudbiyeen ay kaga ashtakoonayaan, shirkad ka socota Itoobiya in ay gobolkii u timaaddo sahan. Soomaalidu xilligaas ma ayan lahayn dowlad matasha. Sidaa darteed is-bahaysigii SYL oo dhowaan u xuub-siibtey xisbi siyaasadeed ayaa wuxuu ahaa midka qura oo loo aqoonsaday in uu u hadlo bulsha-waynta Soomaaliyeed. Dacwadda loo gudbiyay JQ ka Dh, ayaa waxaa saxiixey Suldaan Duulane Rafle oo kamid ahaa waayeelkii degaanka iyo Xaaji Maxamed Xuseen oo aahaa xog-hayihii guud ee xisbigii SYL.

Dacwaddaas oo ku taariikheysan 16/ 9- 1947-kii, Soomaalidu waxay kaga ashtakoonayeen rag khuburo ah oo aanan la ogeyn cidda ruqsadda u siisey in ay dalka soo galaan iyo laba nin oo Soomaali ah oo shirkaddu ay mushahar u qortay si ay ugu shaqeeyaan. Waxaa xusid mudan in shirkaddan Mareekanka ah ay ku lammaaneyd shirkad shidaal oo Talyaani ah, taas oo la oran jiray AGIP. Wixii ka danbeeyey sanadkii 1950-kii, markaas oo gobollada Soomaaliyeed intooda badan ay noqdeen maxmiyad hoos timaadda JQ ka Dh, shirkaddii SINCLAIR waxay si madax-bannaan fursad ugu heshey howlihii sahanka. Labadaas shirkadood ayaa waxay dalka ka calaamadeeyeen illaa siddeed dooxooyin ah oo ay ku arkeen calaamado tilmaamaya in uu shidaal ku jiro. Maamulkii Talyaaniga ee maxmiyadda ka talinayay ayaa u fasaxay in howlaha sahanka ee shirkadda laga fuliyo Soomaaliya. In-kasta oo JQ ka Dh ayan jawaab ka

bixin, misana arintaasi Soomaalidu waa ay ka dacwoodeen.

Kamaalu-diin Salaax oo kamid ahaa xubnihii saddexda ahaa oo JQ ka Dh uga wakiilka ahaa Soomaaliya, wuxuu xasuus qorkiisa ku qorey, nin ka socda shirkadda SINCLAIR oo la yiraahdo Adems in uu xafiiskiisa ugu yimd. Wuxuu ka codsaday in uu kala hadlo hoggaanka SYL si mustaqbalka ay shirkadda u yeelato xuquuqda soo-saaridda shidaalka iyo macdanta ku aasan Soomaaliya.

Kamaalu-diin Salaax wuxuu ahaa nin ay Soomaalida isku-wanaagsanaayeen. Sida uu sheegey, qalbigoodii ayay siiyeen, markaas ayuu isna qalbigiisii siiyey oo arinkaas ayuu u dhintay. Kamaalu-diin wuxuu ugu jawaabay ninkii shirkadda ka socdey, in uu kala hadlayo masuuliinta Soomaalida, haddii ay la dhiganayaan heshiis lamid ah heshiiska ay la

dhigteen waddamada Sacuudiga iyo Kuweyt. Arintaasi waxay ahayd mid suurta-galkeeda ayan xilligaas sahlanayn. Sababtu waxay ahayd Soomaaliya oo xilligaas aanan ahayn dal madax-bannaan. Isla-markaas go'aamada lagu maamulayay dalka waxaa wadaagayay dowlado dhowr ah.

Madax-bannaanidii dabadeed, nuskii hore ee sanadihii 1960-aadkii siyaasaddii dalka waxay bilowdey in ay ku sikato dhanka bariga. Ujeeddadu waxay ahayd in ay ka hesho hiillo dhismaha cudud ciidameed oo dalku, taas oo lagu baadi-goobo shantii Soomaaliyeed. Xisbiga SYL oo waalid u ahaa soo dhicinta gobanimaii la mahoobiyay, ayaa mabaadidiisa ay kamid ahayd isu-keenidda qabaa'ilka Soomaaliyeed. Dowladdu waxay markaas ka indha-qabsatay xoojinta mashaariicda dhaqaale ee gobollada xorta ah. Nuskii danbe ee sanadihii 1960-aadkii, Soomaalidu waxay garawasdeen in ayan

suuragal ahayn dhisid ciidan iyaga oo fara-maran. Sidaa darteed, siyaasaddii Soomaalida waxay u soo weecatay galbeed. Inkasta oo uu wakhtigu ka dhacay oo aanan la calfan, misana dowladihii reer galbeedka oo Mareekanka ugu wayn-yahay waxay Soomaaliya u diyaariyeen mashaariic dhaqaale oo culus.

Waxaa xusid mudan, dowladaha Khaliijka oo Sacuudigu u wayn-yahay in xilligaas ay laaluush xooggan ku bixinayeen hor-joogsiga shidaalka Soomaaliya. Laakiin mashaariicda Mareekanka kama marnayn sahanka dhulka. Dowladdii la oran-jiray Midowga Soofyeeti xilligaas waxay ahayd mid ku fogaatay mu’asasaadkii curdanka ahaa ee u dhismay Soomaalida. Gaar ahaan mu’asasaddii ciidanka oo ay gacanta ku qabatay 100 %. Dabayaaqadii sanadihii 1960-aadkii, siyaasaddii Soomaalida oo is-beddeshey darteed, ayaa Soofyeetiga waxaa u muuqatay in reer galbeedku ay kala wareegayaan degaankan

istraateejiga ah. Waxay ahayd xilli loolanka dagaalkii qaboobaa uu marayay meel adag. Booqashadii bishii January 1968kii uu Xamar ku yimid madax-wayne xigeenkii Mareekanka Hubert Humphrey iyo booqashadii jawaabta u ahayd oo uu ra'iisul-wasaare Maxamed Ibraahin Cigaal ku tegey Washington bishii maarso 1968-kii, waxay muujisay isu-soo dhowaansho xooggan oo dhex-mara labad dowladood.

Arintaasi oo ay ka dhalatay in Soomaaliya ay hesho mashaariic dhaqaale oo xooggan, ayaa dhan-kale waxay soo dedejisay dilkii madax-wayne Sharmaarke iyo af-gembigii ay ciidamada talada kulawareegeen. Falkaas wuxuu ahaa naqshad ay ka shaqeysey dowladdii Midowga Soofyeeti si ay u horjoogsato in gobolka lagala wareego.

# Casharkii 78-aad

Maxamed Ibraahin Cigaal oo qiimeynaya, af-gembigii hortiis mashaariicdii uu Mareekanka ka fulin-lahaa Soomaaliya wuxuu yiri:

“ Wax kale kuma tilmaami karo aanan ka ahayn, Soomaali haddaanu nahay, waxaan nahay dad nasiib xun oo aanan calaf u yeelan mashaariicdii waawaynaa oo inoo soo socday ”.

Dabayaaqadii sanadkii 1969-kii, saraakiil ka trsan xoogga dalka ayaa xukunkii la wareegey. Siyaasaddii dalka lagu waldaaminayay waxay ka yeeleen mid ku sidkan waddamada reer bariga. Xilligaas ma-jirin mashaariic lagu tallaabsaday oo la xiriirey sahanka shidaalka. Dowladdii Soomaaliya ee cusbeyd manoqon mid u jiheysata in hantidaas ilaah siiyay ay ku kobciyaan dhaqaalaheeda. In-kasta oo bilowgii sanadihii 1970-aadkii ay dowladdu dhistay

wasaaradda macdanta iyo batroolka, misana wax tallaabo ah looma qaadin dhanka shidaalka. Dowladaha ay saaxiibka la ahaydna maahayn kuwo danaynayay in Soomaaliya ay yeelato awood shidaal oo ay kaga maaranto xiriirkooda. Waxaa xusid midan in sanooyin badan oo sanadahaas hore ah, wasaaradda uu wasiir ka ahaa Xuseen Cabduqaadir Qaasin oo ahaa nin aqoon-yahan ah.

Dabayaaqadii sanadihii 1980-aadkii, goor ay siyaasaddii Soomaaliya si buuxda ay u raacday marinmeerka reer galbeedka, ayay bilaabatay in shidaalka Soomaaliya la daneeyo. Colaadaha la filayay in ay dunida ka dhacaan iyo isbeddellada uu la imanayo dagaalkii qaboobaa oo soo af-jarmay ayaa waxay abuurayeen wel-wel la xiriira in baahida tamarta ee dunida ay xoogowdo. Sidaa darteed, Soomaaliya waxay fursad u heshey in shirkadihii waawaynaa ay sanadahaas ku soo degdegaan.

Sanooyinkii danbe oo Soomaalida iyo Midowga Soofyeeti ay kala xarig-furteen, waxaa si qun-yar socod mar-kale u soo hagaagayay xiriirkii dowladda Soomaaliya iyo reer galbeedka, gaar ahaan Mareekanka.

Bartamihii sanadihii 1980-aadkii waxaa bilawday, shirkadihii shidaalka in ay daneeyaan Soomaaliya. Iyagu waxay markaan xiiseynayeen in ay qandaraasyo ka helaan dowladda Soomaalida. Shirkadaha ugu waawayn dunida ayay ahaayeen kuwii markaas qandaraasyada qaatay, kuwaas oo illaa iyo haatan ay u xiran yihiin degaanadii xilligaas ay dowladda siisey. Shirkaddii ugu horeysey oo ku soo hormarety sahanka shidaalka Soomaaliya waxay ahayd CONOCO Inc. Shirkaddan oo dalka ka soo gashay dhanka Itoobiya oo ay horey uga haysay sahanka shidaalka.

Markay taariikhdu ahayd 8/ 7- 1986-kii, shirkaddu waxay war-baahinta caalamka u sheegtey, heshiis ay qandaraas ku qaadatay in ay la dhigatay xukuumadda Soomaaliya. Heshiiska waxaa dhanka dowladda u saxiixey Jeneraal Axmed Maxamuud Faarax oo xubin ka ahaa guddigii siyaasadda ee xisbigii dalka u talinyay, isla-markaas ahaa wasiirka shidaalka iyo macdanta. Dhanka shirkadda CONOCO waxaa iyana u saxiixey Mr. Raymond Marchand, oo wakiil ka ahaa shirkadda, kaas oo ahaa wakiilka shirkadda CONOCO ee Soomaaliya. Qandaraasku wuxuu ahaa, shirkaddu in ay samayso diraaso ay gobollada qaarkood kaga baadi-goobayso shidaal. Dhul bedkiisu dhan-yahay 98,700 km. square ayay shirkaddu xaq u heshey. Dhulkaas ayaa wuxuu dhacaa saddex gobo loo ku yaal waqooyiga, kuwaas oo kala ah Nugaal, Sool iyo Togdheer.

31/ 1- 1998-kii, shirkadda CHEVRON INTERNATIONAL Ltd. waxay war-baahinta u sheegtey iyaduna un ay heshiis la gashay dowladda Soomaaliya. Qandaraaskan ayaa shirkaddan waxay ku heshey in ay sahmiso dhul ka kooban saddex aag, kaas oo wadar ahaan bedkiisu yahay 40,509 Km. square. Dhulkaas wuxuu dhacaa degaanka Guban oo waqooyiga Soomaaliya ah. Aagga heshiisku waxa uu ku dhereran yahay xeebta Waqooyi Galbeed ee Soomaaliya, dhanka bad iyo berrigaba ilaa laga gaarayo Gacanka Cadan.

Aaggaas lagu heshiiyey waxa ay baaxadiisu dhan tahay 40,509 Km. square (ama 10,009,744 acres).

Heshiisku wuxuu dhigayay, muddada labada sano ah ee ugu horeysa in lagu soo af-jaro howlaha sahanka. Dabadeed loo gudbo tallaabooyinka xigi-doona oo ah qodista iyo soo-saaridda shidaalka.

Waxaa xigay shirkadda AMOCO oo iyadana heshiis la gashay dowladda Soomaaliyeed markay taariikhdu ahay 5/ 5-1987-kii. Heshiisku wuxuu ahaa in shirkaddu ay dhulka Soomaaliya ka sahmso shidaal. Dhulka qandaraasku ku dhacayo bedkiisu wuxuu ku fadhiyay 35,091 km. square, kaas oo dhaca waqooyiga iyo koonfur-galbeed ee magaalo-madaxda Xamar. Heshiisku wxuu ahaa muddo saddex sano ah in ay sahanka ku bilaabaan, isla-markaas saddex sano oo kale in la kor-dhinayo si howsha loo gaba-gabeeyo. Heshiiska waxaa dhanka dowladda u saxiixey Jeneraal Axmed Maxamuud Faarax oo xubin ka ahaa guddigii siyaasadda ee xisbigii dalka u talinyay, isla-markaas ahaa wasiirka shidaalka iyo macdanta. Dhnka AMOCO waxaa u saxiixey Charles H. Moerbe oo isagu ahaa ku-xigeenka masuulka AMOCO u fadhiya Soomaaliya.

# Casharkii 79-aad

Shirkadda la yiraahdo PARKER DRILLING Co. ayaa iyadana kamid noqotay shirkadihii heshiiska la dhigatay dowladdii Xamar inteeyan bur-burin. Markay taariikhdu ahayd 6/ 9- 1989-kii ayay shirkaddan waxay heshay oggolaansho heshiis aad u baaxad wayn oo ku saabsan qodista ceelasha shidaalka ee Soomaaliya. Waxaa xusid mudan, shirkad la yiraahdo EASTERN HEMISPHERE Ltd. oo hoos timaada PARKER DRILLING Co. in ay horey heshiis ula gashay CONOCO. Wuxuu ku saabsanaa baaritaan shidaal laga baarayo ceelal ku yaal gobolka Sool iyo Nugaal.

Shirkadda PARKER DRILLING Co. heshiiskaas ay dowladda la gashay sanadkii 1989-kii, wuxuu noqday mid ku qanciya in ay xafiis ka furato magaalo-madaxda Xamar. Mashruucan wuxuu qayb ka ahaa heshiika ay CONACO la gashay

dowladda Soomaaliya sanadkii 1986-kii. Ninka la yiraahdo Robert L. Parker Jr. oo ah odayga shirkadda iyo hoggaamiyaha hawlgalka shidaal barista, ayaa taariikhdaas aanu kor ku xusnay wuxuu jeediyay bayaan uu ku xusay sidan:

“ Shirkadda PARKER DRILLING waxay ku faraxsan tahay in ay mar kale ku laabato dal aad muhiim u ah “.

Nin isna la yiraahdo Wayne Hazelwood oo ka mid ahaa shaqaalihii shirkadda PARKER oo ka soo shaqeynayay Soomaaliya sannadkii 1986-kii, ayaa loo magacaabay agaasimaha haw-lgalka shirkadda ee mashruuca Soomaaliya. Hawl-galka shidaal qodistana waxaa la qorsheeyey in ay bilaabato 15/ 11- 1989kii.

Shirkadda la yiraahdo DUPONT UNIT CONOCO Inc, sida magaceeda ka muuqda waxaa ku

bahoobey CONOCO iyo shirkadda la yiraahdo DUPONT Co. In-kasta oo hadda ay kala-baxeen, misana dabayaaqadii sanadkii 1989-kii, iyaga oo wada-socda ayay heshiis la galeen dowladdii Soomaaliya. Markay taariikhdu ahayd 18/ 10-1989-kii, af-hayeen u hadlay shirkadda ayaa wuxuu war-baahinta caalamka u sheegey heshiiskan cusub. Sahanka degaanada ay shirkaddan heshiiska ku gashay waxay dhacaan afarta gobol oo kala ah Nugaal, Sool, Sanaag iyo Bari.

Heshiis kale ayaa isna wuxuu dhacay markey taariikhdu ahayd 28/ 11- 1989-kii, kaas oo dhex-maray dowladda Soomaaliya iyo shirkadda la yiraahdo PHILIPS PETROLEUM INTERNATIONAL Corp. Heshiiskaasi wuxuu ahaa mid shirkadda loogu oggolaanayay in ay shidaal ka baarto dhul-badeed (Ofshore) bedkiisu uu gaaraya 3.5 milyan oo acre. Sida ku cad shuruudaha heshiiska PHILIPS P.I. Corp. waxaa lasiiyay

muddadii ugu horaysay ee sahaminta ahayd laba sano. Muddadaas dabadeed, shirkaddu waxay u madax-bannaan tahay in ay sii dheereyso heshiiska sanad walba hal-mar. Goorta ay howshu bilaabanayso, ayaa shirkaddu waxay ku sheegtey saddexda bilood oo ugu horeeya sanadka 1990-kii.
Waxaa xusid mudan, shirkadda PHILIPS in ay goor danbe la midowdey shirkadda CONOCO. Laakiin heshiisyadan ay labada shirkadood la galeen Soomaaliya, mid waliba macaashkeeda u gaar ayuu u yahay, maadaama ay heshiisyadu ka horeeyeen isu-taggooda.

Heshiisyada sahanka shidaalka Soomaaliya waxaa kale oo lagu xusaa heshiis dhex-maray laba shirkadood oo kala ah shirkadda MOBIL faraceedii Soomaaliya (MOBIL EXPLORATION SOMALIA Inc) iyo shirkad iyana Soomaaliya u sahan-tegeysey oo la yiraahdo PECTEN SOMALIA. Shirkaddan danbe ayaa waxay

hoostimaaddaa shirkadda wayn oo la yiraahdo SHELL OIL. Heshiiska labadan shirkadood oo dhacay 30/ 8- 1990-kii, ayaa wuxuu ahaa in baaritaan batrool laga sameeyo meel kamid ah Bad-waynta Hindiya oo ku dhow xeebta Soomaaliya. Aagga heshiiska lagu galay waa aag sannadkii 1988-kii loo qoondeeyey ama la siiyey shirkadda PECTEN in ay shidaal ka baarto. Halkaas oo ay baaritaan ku samaysay dhul bedkiisu dhan Yahay 60,300 km square. Shirkadda PECTEN waxay hoos tagtaa ROYAL DUTCH /SHELL GROUP. Shirkadda MOBIL waxay xilligaas sheegtay in ay shirkadda kale ee PECTEN ay si siman u wadaagi doonaan khataraha ka dhalanaya baaritaanka batroolka iyo wax kasta oo natiijo ah oo ka soo baxa.

Waxayna xilligaas rajaynayeen in ay ceelka ugu horeeya qodaan intuusan dhamaan sanandka 1991-ka.

Nasiib-darro, wakhtiga heshiisyadaasi dhacayaan waxay ahayd xilli ay Soomaalidu inta is-naceen ay caruurtooda cunayeen. Hoggaamadii siyaasadda Soomaaliya, garaadkooda waa uu siin-waayay in ay fahmaan gudcurka ay dadkooda ku sii wadaan. Raggii hoggaanka hayay qudhoodu lama ayan iman siyaasad ay ku badbaadiyaan maslaxadda qarannimo iyo aayaha facaha ka danbeeya. Iyada oo heshiisyadaas qiimiga badan ay si talan-taalli ah u dhacayeen, ayaa dhan-kale ay ciidda gobollada dalku waxay ahayd mid gubanaysa.

# Casharkii 80-aad

Wakhtigu wuxuu ahaa xilli Soomaaliya ay ka muuqdeen dhacdooyin is-diiddan. Kuwooda ugu milgaha cuslaa waxay ahaayeen, dagaalkii dowladda iyo jabhadaha mucaaradka ah oo hurkiisu uu sii shidmayay, iyada oo isla-markaas ay heshiisyada shidaalka si talan-taalli ah ay u dhacayeen. Fursaddii ugu wanaagsanayd ee Soomaaliya lagu bad-baadin lahaa oo xilligaas ay Soomaalidu ku tallaabsadeen waxay ahayd bayaankii Maanfesto. Soomaali haddii ay waayeel lahayd, labeentoodii ayaa ku bahoobey baaqaas. Waayeelkaas ayaa xooggoodu waxay ahaayeen raggii gobanimada dhaliyay. Isla-markaas dalka soo maamulayay muddadii ka horeysey taliskii ciidanka. Waayeelkan is-bahaystay waxay ahaayeen kuwo si buuxda u matali-karay codka dad-waynaha Soomaaliyeed iyo baahidooda.

Waxaa ka maqnaa waayeel siyaasadda u matalayay beelihii ay SNM xilligaas ku dagaalamaysay magacooda, kuwaas oo qudhooda intoodii Xamar ka joogtay la war-geliyay. Laakiin waa ay ka cudurdaarteen in ay baaqa wax ka saxiixaan. Waxay ku sababeeyeen, in dowladdu ay u hesho cudur-daar ay ku leyso, maadaama SNM ay xilligaas dagaal xooggan kula jirtay dowladda. Sabab labaad ayaa iyana ahayd in saxiixooda uusan dhabar-jebin ku noqon dhaqdhaqaaqa SNM. Maxamed Ibraahin Cigaal, Cumar Carte Qaalib, Jirde Xuseen Ducaale, Jaamac Maxamed Qaalib iyo rag kale ayaa kamid ahaa waayeelka Xamar ku sugnaa oo barnaamijkan la ogeysiiyay.

Raggaas bayaanka isku-saxiixey tiradoodu waxay ku jaan-go’nayd tirada suuradaha quraanka (114 odey). Maalinta uu baaqa soo baxay waxay ahayd 15-kii may 1990-kii. Taariikhdan ayaa ku beegneyd sanadguuradii 46-aad eek a soo

wareegatey asaaskii SYL. Raggaasi, maadaama ay huwanaayeen kalsoonidii dad-waynaha Soomaaliyeed, baaqoodii wuxuu soo dhoweyn buuxda ka heley bulshada dhexdeedii. Waxaa kale oo soo dhoweeyey dowladihii shisheeyey ee danaynayay arimaha Soomaaliya, kuwaas oo ay u muuqatay bur-burka uu ku socday dalka. Laakiin dowladdii ayaa si adag uga hor-timid baaqii oo odeyadii xir-xirtey. In-kasta oo xilligaas dowladdu ayan hayn tabar ay ku leyso ama xabsiyada ku heyso waayeelkii ay xir-xirtey, misana markii ay soo deysey, Maxamed Siyaad oo ahaa ninka ay talada ka go’dey, waa uu diidey in uu xilka si nabad ah ku wareejiyo. Ooraah can-baxday ayuu ku jawaabay oo ahayd:

“Raggii musuq-maasuqa ku tilmaannaa oo aan 20 sano ka hor xilka uga wareejiyay qori caaraddiis, maanta si nabad ah igala wareegi-maayaan”

Labada jabhadood ee SNM iyo USC ayaa iyaguna mid-walba waxaa hoggaankooda kamid ahaa siyaasiyiin xag-jir ah oo u arkay in ay iyagu leeyihiin dhaxalka Maxamed Siyaad, markii uu xilka banneeyo. Sidaa darteed, iyaga oo aanan qiimeyn xaaladda iyo natiijooyinka ka dhalanaya, waxay qaateen aragtidii ahayd in xalku ku jiro in dagaal lagu kala baxo. Wada-hadal kasta oo laysku deyo wuxuu noqdey mid dhicisooba. Waxaa halkaas ku baaba'ay magacii dowladnimo iyo xushmaddii ay Soomaalidu ku lahayd dunida. Colaadahii ay sababeen madax-adeygii siyaasadda iyo u tanaasul-la'aantii maslaxadda guud, waxay noqdeen kuwo galaafta dad badan oo maato ah iyo hanti badan oo si guud iyo si gaar loo lahaa.

Inteeyan si-wayn u bilaaban riwaayadihii fool-xumada badnaa ee ka dhacayay masraxyadii colaadaha, sida aanu soo xusnay shirkadahan shidaalka waxay ahaayeen kuwo ku-kala

tartamayay heshiisyada ay ku qaadanayaan qandaraasyada shidaalka. Xilligaas ay Soomaalidu is-leynayeen, shirkaduhu iyaga oo aamusan ayay si xasillooni leh kala socdeen idaacadaha caalamiga ah akhbaarta la xiriirtey hoogga iyo ba'a ay isu-geysanayeen dadka ay qorsheynayaan in ay shidaal ka qotaan. Shirkadahan ayaa waxay nasiib u yeesheen in ay u xirnaato qandaraasyada goobahan hantida badan ku fadhiya. Waxaa xusid mudan, dhulka la sahamiyay, ku dhawaad seddex-meelood labo meel waxay ahaayeen degaano u qoondeysan afar shirkadood oo Mareykan ah. Waxay kala yihiin CONOCO, AMOCO, CHECRON iyo PHILIPS.

Haddaanu mid shirkadahaas kamid ah aanu tusaale ahaan u tix-raacno, shirkadda CONOCO, ayaa dabayaaqadii sanadihii 1980-meeyadii waxay dadaal sahmin ah ka muujisay degaano kamid ah gobollada dhaca bartamaha iyo waqooyiga Soomaaliya. Muddo gaaban ka hor

intaanay dowladdu dhicin sahankii shirkaddan wuxuu soo saaray natiijooyin dhiirrigelin leh. Waxay ahayd xilli uu bur-bur ku socday nadaamkii dowladeed ee Soomaalida u dhisnaa. In-kasta oo fowda xooggan iyo qalalaasyo adag ay xigeen markii uu nadaamku dhacay, misana shirkaduhu waxay filayeen in muddo gaaban looga gudbayo khilaafka oo Soomaalidu ay dib u yagleelayaan dowladnimadoodii. Sidaa darteed xogtaa ay CONOCO ka heshey degaanadii ay sahmisay, waxay shirkadda madaxdeedii ku dhiiri-gelisay, ayaamo ka hor inteeyan ciidamada Mareekanka soo gaarin Xamar (8/ 12-1992-kii), in shirkadda ay xarun ka furato Xamar. Xaruntaas ayaa waxay ahayd safaaraddii Mareeknka uu ku lahaa magaalo-madaxda.

# Casharkii 81-aad

Iyada oo dagaalkii sokeeye uu meel adag marayo, ayay CONOCO, xaruntii ay Soomaaliya ka furatay waxay keensatay qalab xooggan. Isla-markaas waxaa halkaas fariistay rag masuuliin ah oo ka socda shirkadda. Faallooyinka ay xilligaas bixiyeen dadkii xiiseynayay dhacdooyinka geeska Afrika, waxaa kamid ahaa in la tuhunsanaa in xiriir ka dhexeeyey shirkadahan shidaalka iyo madax-waynihii Mareekanka George W. Bush (aabaha). Sida lagu sheegey qaar kamid ah wakaaladaha war-baahinta reer galbeedka xiriirkaas ayaa u saamaxay in shirkaddan ay wax ka hagaysay siyaasaddii madax-wayne Bush uu ciidamada ugu soo diray Soomaaliya dabayaaqadii sanadka 1992-kii. Shirkaddan iyo kuwo kale ayaa markaas waxay danaynayeen in ay ilaashadaan hantida ku qiimeysan balaayiinta dollar ee xilligaas Soomaaliya ka yiil.

Gaar ahaan shirkadda CONOCO Inc, markii ay dowladdii Soomaaliya bur-burtay, muddo laba sano ah oo dalka uu ku sugnaa fowdo iyo colaad ayaa xafiiskii shirkaddan uu ka furnaa magaalada Xamar. Shirkaddu waxay xilligaas xiriir dhow la yeelatay rag kamid ah kuwa ugu waaawayn ee naqshadeeya siyaasadda dalka. Si toos ah waxay ugu lug-lahayd howlihii aadaminimo iyo kuwii ciidan oo Mareekanku uu ka fulinayay Xamar. Disember 1992-kii, madax-wayne George Bush wuxuu u soo magacaabay Robert Oakley ergeyga uga wakiilka ah adeegayada mashruucii rajo soo celinta (Operation Restore Hope) oo ciidamada isku-dhafan ay ku yimaadeen Soomaaliya. Waxaa xusid mudan, ciidamada caalamiga ah oo xilligaas yimid Soomaaliya in ay ka socdeen 23 dal oo kala duwan. Tirada ciidamadan waxay ahayd 20,000 oo nabad ilaaliyayaal ah, 8,000 oo taakuleyn ah iyo 3,000 oo shaqaale rayid ah.

Bilowgii bisha disember 1992-kii, xaruntii ay Xamar ku lahayd shirkadda CONOCO waxaa loo soo raray safaaraddii Mareekanka iyo taliska ciidamadii Mareekanka ee Soomaaliya yimid. Arintaasi waxay ahayd howl iskaa wax u-qabso ah oo shirkaddu ay ugu tabarucday in ay ku saacido dowladda Mareekanka. Taasina waxay dhacday dhowr maalmood horteed markii ay ciidamada Mareekanka soo caga-dhigteen magaalao-madaxda Soomaaliya, 8/ 12- 1993-kii. Waxay ahayd xilli xarunta safaaradda la bililiqeystey wixii yiil, gidaaradeediina ay bur-buriyeen xabbadihii iyo madaafiicdii laysla dhacayay.

Bishii oktoober 1993-kii, madax-waynihii cusbaa ee Mareekanka Bill Clinton mar-kale ayuu isna magacaabay Robert Oakley. Diblomaasigan waxaa loo soo magacaabay ergeyga gaarka ah ee madaxwaynaha Mareekanka u qaabilsan arimaha gar-gaarka Soomaaliya. Robert Oakly,

wuxuu ahaa diblomaasi ruug-caddaa ah. Meelaha uu ka soo shaqeeyey waxaa kamid ahaa Soomaaliya oo uu ka ahaa danjire Xamar u fadhiyay dalka Mareekanka muddadii u dhexeysey 1982 – 1984. Marka loo magacaabayo ergeyga waxay ahayd goor sanad ka-hor shaqadii uu howl-gab ka galay. Muddadaas, dhanka shaqaalaha Soomaalida ninka CONOCO uga masuulka ahaa wuxuu ahaa Cismaan Xasan Cali oo ku magac-dheeraa Cismaan-caato. Isagu wuxuu kamid ahaa garabkii Jeneraal Caydiid ee jabhaddii USC (United Somali Congress).

Ninka la yiraahdo John Geybouer ayaa isna kamid ah ragga tilmaamay wada-shaqaynta ka dhexeysey dowladda Mareekanka iyo shirkadda CONOCO. John Geybouer wuxuu ahaa af-hayeenka guud xarunta dhexe ee shirkadda CONOCO ee dhacda degmada Houston (Texas - USA). Isagu wuxuu sheegey howshii ay

shirkaddu u qabtay dowladda Mareekanka in ay ahayd xiriir wada-shaqayn. Dowladduna ay kiro ka bixin-jirtay degganaanshaha xarunta ay shirkaddu ku lahayd Xamar. Af-hayeenku wuxuu kaloo sheegey in shirkaddu ay ku faraxsan-tahay howlihii aadaminimo ee uu Xamar ka qabtay wakiilkii shirkadda Raymond Marchand. Wuxuu tilmaamay in shirkaddu ay u shaqaysay sidii qof muwaadin ah oo kale.

Wargays ay shirkaddu leedahay oo bishiiba mar soo baxa waxaa lagu soo qoray qaybo kamid ah xogihii ay is-dhaafsadeen Sreeye/ Guuto Frank Libutti oo ahaa sarkaalkii hoggaaminayay ciidamada Mareekanka ee Xamar yimid iyo wakiilka shirkadda ee Xamar fadhiyay Raymond Marchand. Masuulkii shirkadda CONOCO uga wakiilka ahaa Soomaaliya (Raymond Marchand), howlihii uu xilligaas u qabtay dowladda Mareekanka wuxuu ku heley abaal-gud rasmi ah. Adeeggii uu dowladda u qabtay bilihii ka

horeeyey inteeyan ciidamadu iman iyo bilihii ka danbeeyey markii ay yimaadeen ayuu ku heley abaal-marinta.

Waxaa wargeyska lagu soo daabacay qoraal mahadcelin iyo bogaadin ah oo Jeneraalka marineeska ah uu u dirayo wakiilka. Isagu wuxuu ku ammaanay wakiilka doorkii uu ku lahaa soo caga-dhigashadii bilowga ahayd oo ay ciidamada Mareekanka ku soo degeen xeebaha Xamar, iyaga oo aanan la kulmin wax shil ah. Jananka wuxuu qoraalkiisaas ku khatimayaa, haddii ayan jiri lahayn hiillada geesinimada leh iyo adeegga ayan anaaniyada wehelin ee Raymond uu bixiyay, howshu waxay ku dhamaan lahayd fashil.

# Casharkii 82-aad

Muddadii u dhexeysey 1991 iyo 2000 waxay ahayd xilligii ugu cuslaa oo Soomaalidu ay isku walaahoobeen. Waxay ahayd xilli ay deeradu caruurteedii cuntay. Inta qabiil loo diriray ayaa misana qabiilo waliba gudaheedii is-laayeen. Amni-xumidii ka jirtay dalka iyo xasillooni-darridii siyaasadeed waxay sababtay in shirkadihii shidaalka ay si buuxda u joojiyaan howlihii ay ka wadeen Soomaaliya. Hantidii shirkadaha ka tiil dalka waxay kamid noqdeen xoolihii ku lumay bililiqadii ay jabhaduhu geysteen. Muddadaas waxaa jiray shirar badan oo Soomaaliya loo qabtay. Kulamadaas ayaa waxaa lagu dhigay degmooyinka Jabuuti, New York, Seychelles, Addis-ababa, Nakuru, Sodere, Qaahira iyo meelo kale oo hoggaamiyayaal Soomaaliyeed leysugu geeyey si ay uga wada-

hadlaan habkii ay u soo celiyaan lahaayeen hannaankii dowladnimo.

Dhamaan kulamadaas waxaa gogosha dhigayay dowlado shisheeye iyo hay'ado caalami ah. Shir-walba waxaa laga dhaxlayay in khilaafkii iyo colaaddii ay sii kororto. Sababtu waxay ahayd, in-badan oo kamid ah dadka isu-imanayay waxay ugu badinaysay in colaaddu sii socoto. Waxaa kale oo shirarku ay la fashilmayeen goobta iyo goorta oo ahaa kuwo aanan munaasib ahayn. Dowladaha fadhiga qabanayay ayaa iyaguna ay marba qolo ay dhankeeda ka fashilinaysay in Soomaalidu heshiiso. Laba shir oo keliya ayaa xilligaas dalka gudihiisa lagu qabtay oo Soomaalidu ay iyagu ay si buuxda u maamulanayeen. Waxay ahaayeen shirkiiBoorame (1993-kii) iyo shirkii Garoowe (1998-kii). Waxaa la oran karaa in ay ahaayeen labada shir oo ujeeddooyinkii loo dhigay si buuxda loogu guuleystey, kuwaas oo midna xoojiyay

cagadhigashada nadaamka Somaliland, midka kalena uu ka curtay nadaamka Puntland.

Waxaa xusid mudan, kulanka Soomaalida loogu qabtay jasiiradda Seychelles, in uu ahaa midka keliya oo ay ka soo baxeen qoraallo aqooneed ee anfacay Soomaalida. Kulankaas oo dhacay sanadkii 1993-kii, ayaa xubnaha lagu casumay waxay isugu jireen dagaal-oogayaanl iyo aqoon-yahanno. Dagaaloogayaashu waxay ahaayeen rag lagu raad-gadanayay. Muhimadda shirku wuxuu ahaa in la helo hannaan siyaaadeed oo Soomaalida loogu hiiliyo si ay dib u yagleelaan qarannimadii ka bur-burtay. Dhowr iyo toban aqoon-yahanno Soomaaliyeed ah oo dibadda iyo gudaha dalka laga keeney ayaa shirka ka qayb-qaatay. Waxay ahayd xilli ay siyaasiyiinta Soomaalida u muuqdeen kuwo fashilan oo garan-la' in tallaabo dib loo qaado si labo tallaabo oo horey ah loo qaado. Qoraalladii shirkaas ka soo baxay ayaa muujiyay in aragtida

federalism-ka ay tahay midda qura oo Soomaali isu-soo celin-karta. Waana midda ay ku qanceen dowladaha daneeya Soomaaliya iyo bulshada Soomaaliyeed intooda badan.

Iyada oo xaaladda Soomaalidu ay ka-sii darayso ayaa sanadkii 2000 waxaa dunida ku soo kordhay laba arimood oo raad ku yeeshey nolosha dad badan oo ku noolaa dunida. Mid waxay ahayd dhacdadii 11-ka sebtember oo lagu qarxiyay labadii daarood ee mataanaha ahaa (Manhattan Twin Towers). Waxaa kale oo xilligaas soo if-baxay, qiimeynta sicirkii saliidda dunida in ay wax ka gooyaan shirkado yar-yar oo ka shaqaysta guud ahaan waddamada bariga Afrika. Shirkadahaas ayaa qaar kamid ah ay xilligaas weli sahan ku jireen. Cayaartoyda ugu waawayn waxaa kamid ahaa NOC (Ireland), PETRONAS (Malesiya) iyo LUNDIN OIL (Sweden) iyo kuwo kale oo ka-sii yar-yar. Qayb kamid ah shirkadahan maahayn kuwo uu u diyaarsanaa

dhaqaale ahaan, qalab ahaan iyo farsamo ahaan si ay u qabtaan howlaha la xiriira shidaal soo-saaridda.

Dhacdadii 11-ka sebtember wixii ka horeeyey Soomaalidu waxay dunida ugu muuqdeen dad aanan weli heer il-baxnimo gaarin oo isku leynaya qabiil iyo aragtiyo aadamigu waa hore ka guurey. Laakiin dhacdadan ayaa waxay ku soo jeedisay indhihii dunida, gaar ahaan reer galbeedka. Dowlad-la'aanta ka jirta darteed ayaa dalku wuxuu ugu muuqday meel ay gabbaad ka dhigan karaan xoogagga xag-jirka ah oo ay is diiddan yihiin. Arinta shidaalka ayaa qudheedu waxay noqotay mid ka yeeshey Soomaaliya meel soo-jiidasho leh. Shirkadahan yar-yar oo ku cusub fagaaraha, si fowdo ah ayay ku soo galeen howsha. Sidaa darteed dhul ballaaran ayay sahmiyeen. Soomaaliya, Itoobiya iyo Kenya oo keliya ayaa muddo gaaban waxaa

laga qoday shan ceel. Dhamaantood waa lagu hungoobay.

Dhacdooyinkaas isugu jira siyaasadda iyo dhaqaalaha ee dunida si guud u saameynaya, waxaa la xilli ahaa dhacdooyin Soomaalida u gaar ahaa. Waxay ahayd awooddii dagaal-oogayaasha oo ku sii yaraanaysay gobollada koonfureed iyo xoogga maxaakimta Islaamiga oo soo muuqanayay. Qabaa'ilkii la adeegsanayay dhallinyaradooda ayaa si teel-teel ah waxay ka reebteen caruurtoodii mashruucii colaad hurinta.

Gaar ahaan jabhadda USC oo ku xoogganayd gobollada bartamaha iyo koonfurta ayaa markii ay fowdada joogsan weydey, beel waliba waxay bilowdey in ay goonideed u ururiso dhallinteeda. Iyada oo uu barnaamijkaas si xooggan u socdo, ayaa rag siyaasiyiin ah waxay isku deyeen in ay ka faa'iideystaan oo iyagu ay dagaal-oogayaasha

kala wareegaan hoggaankii beelaha. Waxaa fikraddaas la qaatay madaxwaynaha Jabuuti Ismaaciil Cumar Geelle oo ay ka iibiyeen arinta. Howshaas waxay ku abyootay dhismaha dowladdii ku meel-gaarka ahayd ee lagu dhisay Carte sanadkii 2000. In-kasta oo ay ahayd dowlad tag-daran, misana waxay ahayd dowladdii ugu horeysey ee Soomaaliyeed oo toban sano dabadeed ifka u soo baxda. Waxaa magaceedu ahaa, dowladda qaranka ee ku meel-gaarka ah (Transitional National Government).

# Casharkii 83-aad

In-kasta oo maamulladii dalka ka dhismay dowladdii Xasan Shiikh horteed ay dhamaantood ku-meel gaar ahaayeen, misana magaca ku-meel gaarka ah waxaa ku caan baxday dowladdii lagu dhisay Jabuuti oo uu madax-waynaha ka noqday Cabdiqaasim Salaad Xasan. Maamulkan ayaa wuxuu afka u dhigtay natiijooyin ka soo baxay laba shir oo ka horeeyey. Waxay kala ahaayeen maamul wareegto ahaa oo lagu soo dhisay degmada Sodare (Itoobiya) sanadkii 1996-kii iyo maamul intuusan dhalan dhicisoobay oo isna lagu dhisay Qaahira (Masar) sanadkii 1997-kii. Labadaas mashruuc oo Itoobiya iyo Masar ay kala wateen iskuna fashilinayeen ayaa waxaa soo afmeerey fadhigii Carte oo ay ka soo baxday barlamaan ku dhisan 4,5 iyo dowlad uu madax-wayne ka yahay Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan. Waxaa kale oo maamulkan lagu magacaabay mid madani ah,

ka-dib markii ay ka dhex-muuqdeen dabaqadihii ay ka koobnayd bulshada.

Soomaalida intooda badan raja xoog leh ayay dul-saarteen maamulkii Carte. Laakiin mucaarado xooggan ayaa waxay kaga timid maamulladii dhisnaa, qayb kamid ah dhaqdhaqaaqyadii diiniga ahaa, qayb kamid ah dagaal-oogayaashii iyo qaybo kamid ah ganacsatadii. Dowladda Itoobiya ayaa iyaduna si adag u diidanayd oo ay ugu muuqatay in maamulkani yahay mid ay ku badan yihiin dadka diiddan Itoobiya. Markii madaxdii dowladda ay Xamar tageen, ma-jirin mu'asasaad ay ku shaqeeyaan, mana jirin ilo uu dhaqaale ka soo galo. Xukuumaddu waxay dhaafi-weydey hodheel la yiraahdo Ramadaan oo Xamar ku yaal, halkaas oo wasiir walba uu qolkiisa ku qabanayay kulamada iyo shaqada looga baahan yahay. Waxaa intaas weheliyay khaladaad iyo khilaaf siyaasadeed oo soo kala dhex-galay

xukuumadda iyo xubnaheeda. Sidaa darteed, waxaa la yiraahdaa ma-jirin tallaabo qura oo dowladdan ay ku guuleysatay in ay fuliso.

Sida aanu soo xusnay dhacdadii 11-kii sebtember, waxay indhaha dowladaha waawayn ku soo duwday waddamada bur-bursan oo ayan dowladuhu ka jirin. Soomaaliya, iyada oo laga sii jeeday tan iyo 1995-kii, ayaa sanadkii 2000 waxay mar-qura noqotay degaan si xooggan loo daneeyo. Waxaa xusid mudan ahmiyadda istraateejiyadeed ee dalku leeyahay in ay u dheereyd xiisaha gaarka ah oo loo daneynayay degaanka. Sidaa darteed, dowladaha dunida ee daneynayay Soomaaliya waxay dhisteen gole lagu magacaabo (Somali – Intenrnational Parteners Forum). Golahan oo hay'adaha caalamiga ah ay wadasocdaan ayaa soo diyaariyay barnaamijkii yagleelka dowladnimo ee Carte xigay. Kasi wuxuu ahaa

mashruucii la magac baxay (Eldorate – Embighati Process).

Midowga Yurub oo wakiishey dowladda Talyaaniga ayaa diyaariyay kharajka ku baxayay dib u-yagleelka dowladdii Soomaaliya. Howsha waxaa loo igmaday in looga dambeeyo dowladaha IGAD

(Intergovernmental Authority on Development). Hay'addan oo ahayd mid loo dhisay in ay ka shaqayso is-kaashiga dhaqaale iyo xiriirka ganacsi ee dowladaha bariga Afrika, ayaa mar qura waxay isu beddeshey hay'ad siyaasadeed oo Soomaaliya dusha ka xukunta. Dowladda Kenya oo shirka marti-gelisey ayaa ka waayeel ahayd howsha. Saddexda dal oo nala deriska ah ayaa waxay u soo wakiisheen saddex nin oo Soomaali ah. Waxay kala ahaayeen Ismaaciil Guulaal oo Jabuuti matalayay Maxamed Yuusuf Xaaji oo Kenya matalayay iyo Jamaal Maxamed

oo Itoobiya matalayay. Arintaasi waxay door ka qaadatay habsamidii uu shirku ku dhamaaday. Guddiga sare ee shirka waxaa ka madax ahaa danjire Bethuel Kiplagat oo u dhashay dalka Kenya.

Shirka qaybtiisii koowaad oo lagu qabtay Eldorate ayaa wuxuu ahaa dib u heshiisiin iyo xabbad jiijin.

IGAD waxay ka codsatay JQ ka Dh in la ciqaabo qof walba oo ka baxa heshiiska, waana laga aqbalay. Bishii july sanadkii 2002 ayuu fadhigu wuxuu ka bilowdey magaalada Eldorate, halkaas oo leysugu geeyey lix kooxood. (1) Koox ka socota dowladdii ku meel-gaarka ahayd oo Carte lagu soo dhisay. (2) Koox la yiraahdo SSRC (Somali Reconciliation and Restore Council) oo Sodore lagu soo dhisay. (3) Koox isugu jira ganacsato iyo aqoon-yahanno oo ka socda magaalada Xamar, kuwaas oo la yiraahdo Group

(G - 8). (4) Koox ka socotay bulshada rayidka ah. (5) Koox ka socota maamulka Puntland. (6) Xubno u dhashay beelaha Isaaq oo iyagu aanan Somaliland matalin.

Fadhi ay joogaan xubno matalayay kooxahan, ayaa markay taariikhdu ahayd 15/ 10- 2002-dii wuxuu ka furmay degmada Eldorate. Fadhigaasi wuxuu ahaa kulankii I-aad ee shirkii dib u-heshiisiinta Soomaalida. Shirkan oo ahaa midkii 14-aad oo Soomaalida loo qabto tan iyo markii ay dowladdii dhexe ka baxaday fagaaraha, ayaa wuxuu ahaa shir musaalaxo iyo nabadeyn. Bartamihii bishii February 2003-dii ayuu shirka wuxuu ku dhamaaday is af-garad xabbad-joojin ah. Bayaanka ka soo baxay waxaa lagu magacaabay heshiiskii nabadda ee Nairobi (Nairobi Peace Accords). Xubnihii shirka ka qayb-galay waxay si wada-jir ah u saxiixeen in Soomaaliya ay ka hir-gasho xabbad-joojin, halkaasna lagu soo af-jaro caqliyaddii colaadda

oo Soomaalidu ay isku-leynayeen. In-kasta oo dad-waynuhu ay soo dhoweeyeen tallaabadaasi, misana rajo wayn kama ayan qabin in lagu guuleysanayo.

# Casharkii 84-aad

Bishii February 2003-dii waxaa soo gaba-gaboobay qaybtii I-aad shirkii 14-aad ee dib u heshiisiinta Soomaaliya. Waxaa saxiix laga qaaday tiro ka badan 300 oo matalayay dabaqadaha bulshada Soomaaliyeed. Waxaa kamid ahaa dhamaan hoggaamiyayaashii dagaal-oogayaalka ahaa. Waxaa goobjoog ka ahaa madax-waynayaasha dowladaha IGAD iyo diblomaasiyiin caalami ah. Heshiiskii halkaas ka soo baxay qodobkiisa I-aad wuxuu ahaa in la dhiso haykal federaali ah oo ka duwan midkii talada urursanayd, taas oo dowladaha safka hore ay xiiseynayaan si ay ugu sahlanaato dul-maamulka ay dalka kaga danaysanayaan. Dhan kale nadaam aanan midkaas ahayn oo Soomaalidu ay markale isku aaminta ma muuqan. Qodobka II-aad ayaa isna wuxuu ahaa in la joojiyo dhamaan colaadda ka socota dalka

gudihiisa, isla-markaas dalka la geeyo 75 ciidan ah oo ka socda dowladaha IGAD.

Ciidankaas ayaa goob-joogayaal ka ahaanaya xabbad-joojinta. Iyagu waxay hor-dhac u ahaayeen ciidamada AMISOM (African Union Mission in Somalia), kuwaas oo maanta tiradoodu ay ka badan tahay 22,000 oo qof. Si loogu gudbo marxaladdii II-aad oo dowlad-dhiska ahayd, fadhigii waxaa loo raray tuulada la yiraahdo Mbagathi oo Nairobi dibaddeeda ah. Sababta ugu wayn oo tuulada loogu guurey waxay ahayd culeyska dhaqaalaha baxayay in la khafiifiyo. Muddo dhan sanad iyo toddoba bilood oo halkaas la fadhiyay waxaa laga shaqaynayay falkidda aragtiyadii lagu dhisi-lahaa dowladda imanaysa. Aqoon-yahanno iyo farsamo-yaqaanno dowladeed oo isugu jira Soomaali iyo shisheeye ayaa kulamo joogto ah ku yeelanayay magaalada. Guddi farsamo ayaa shirka waldaaminayay, kaas oo hoos imanayay

madax-waynayaasha waddamada IGAD. Guddigan waxaa ka hoos shaqaynayay lix guddi-hoosaadyo, kuwaas oo mid waliba uu qaabilsanaa mowduuc kamid ah howlaha lagu yagleelayo dowladda: Si wixii lagu heshiiyay loo fududeeyo, guddi-hoosaadyadii waxaa loo qaybiyay sidan:

1. Guddiga Federaalka iyo Axdiga Hor-dhaca ah
2. Guddiga dib isu-abaabulka, hub ka dhigidda iyo dib isu dhex-galka
3. Guddiga xuquuqda Dhulka iyo hantida la-kala haysto
4. Guddiga Soo kabashada Dhaqaalaha, Dhismaha Hay'adda iyo Abaabulka Kheyraadka
5. Guddiga xallinta khilaafaadka iyo dib u-heshiisiinta

6. Guddiga xiriirka gobolka iyo midka caalamiga

Bishii mey 2003-dii, lixdii guddi ayaa mid waliba uu soo dhameystiray war-bixin hor-dhac ah. Waxaa xusid mudan, ergada tirada badan ee shirka ka qayb-gelayay, in yar ayaa si dhab ah ugu baraarugsanayd siyaasadda dalka iyo waajibka laga doonayo oo ay u fadhiyaan madasha. Dadkaas tirada ayar ayaa waxay muujinayeen dadaal la xiriira in la helo qaabkii Soomaaliya ay kaga baxi lahayd caqabadaha hor-yaal. Laakiin ergooyinka intooda badan waxay ahaayeen kuwo goobta la fadhiyay caqliyad fayiigsigeedu yahay aragtida ah rag iska celi iyo awood-qaybsi ku dhisan qabyaalad. Dhab ahaantii, guddiga dastuurka waa ay ku kala qaybsameen fasiraadaha la saarayo hannaanka federaalka ah. Waxaa soo baxay xeerar badan oo mid waliba lagu ilaalinayo dano gaar ah.

Guddigii shirka u sarreeyey ayaa ugu danbayntii wuxuu xeerarkii isugu geeyey laba xeer. Dabadeed danjire Bethuel Kiplagat wuxuu u yeerey Prof. Cabdi Ismaaciil Samantar oo uu ka codsaday in uu madax ka noqdo koox farsamo-yaqaanno ah oo labadan xeer mideeya. Cabdi Ismaaciil wuxuu codsigii danjiraha ku xirey in uu u madax-bannaanaado doorashada kooxda uu hoggaaminayo. Laba cisho dabadeed ayaa masuuliin ka socday midowga Yurub waxay u yeereen Cabdi Ismaaciil oo ku yiraahdeen, waxaanu kuu oggolnahay in qayb kamid ah kooxda aad adigu magacawdo kooxna aanu annagu magacawno. Cabdi waa uu ka diidey oo wuxuu u ku adkaystay in uu howshaas qabanayo haddii loo oggolaanayo in isagu uu magacawdo dhamaan xubnaha kala shaqaynaya arinkan. Ugu danbayntii waa ay u oggolaadeen.

Arimaha kale oo Cabdi Ismaaciil uu codsaday waxaa kamid ahaa in hodheelka lagu qabanayo

fadhiga iyo muddada uu u madax-bannaanaado. Kaddib markii laga oggolaaday ayuu u sheegey in muddada uu u baahan yahay ay tahay laba toddobaad. Wuxuu u yeertey rag aqoon-yahanno ruug-caddaa ah, kuwaas oo matali-kara bulshada Soomaaliyeed.

Raggaasi waxay ahaayeen Cabdulqaadir Aaden Cabdulle, Maxamuud Jaamac, Maxamed Abshir Waldo, Jaamac Maxamed Qaalib, Maxamed Enow iyo rag kale. Iyagu waxay soo qaateen dastuurkii 1960-kii, kaas oo ahaa dastuur qurux badan oo Soomaalida ay u samaysay JQ ka Dh xilli ay jamciyaddu cusbeyd oo ay sumcad ka dooneysey dowladaha dunida. Iyaga oo midkaas hore saldhig uga dhigaya ayay labadii dastuur mideeyeen. Waxay soo saareen xeer ku baaqaya dowlad federaal ah, taas oo awooddu ay u qaybsan tahay dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada. Wixii maareyn gudaha ah (Local Management) waxaa leh maamul-

goboleedyada, wixii ku xiran xiriir dibad iyo difaaca qarannimada waa leh dowladda dhexe.

Arintaasina waxaa looga hor-tegayay, awoodda dowladnimo in ayan noqon mid u dabran koox ama beel ama qof oo qarankii uusan la curyaamin.

# Casharkii 85-aad

Markay taariikhdu ahayd 5/ 7- 2003-dii waxaa la soo gaba-gabeeyey shirkii dowlad-dhiska Soomaaliya. Waxaa la iclaamiyay barlamaan Soomaaliyeed oo qaabkii Carte ah, kaas oo ka kooban 351 oo kursi. Iyada oo ay ka qayb-galeen dhamaan kooxihii ka qayb-galay fadhiga ayaa misana qaab qabiil lagu saleeyey (4,5). Magaca ay dowladdan yeelatay wuxuu noqday dowladda federaalka ee ku-meel gaarka ah TFG (Transitional Federal Republic). In-kasta oo inta badan oo Soomaalidu ay quursanayeen sida howsha loo abaabulayay, misana waxaa jiray oo Soomaalida ka qarsoonaa barnaamij ay beesha caalamku ka doodey oo la xiriira sidii la yeeli lahaa haddii uu shirkan fashilmo.

Fikradda khatarta ah oo leysku soo qaaday waxay ahayd in Soomaaliya ciidan shisheeye lagu qabto oo madax-bannaanida laga qaado.

Dabadeed sanooyin badan ay xoogag shisheeye ah maamulaan si ay dib mar-kale u qaadato madax-bannaani. 10/ 10- 2004-kii ayaa barlamaankii cusbaa uu Cabdullaahi Yuusuf u doortay madax-waynaha cusub ee dowladda federaalka ah. Wareeggii saddexaad ayuu heley 189 cod oo kamid ah xubnihii codeynayay. Danjire Cabdullaahi Axmed Caddow oo ahaa murashaxii la tartamayay ayaa isna heley 79 cod. Waxaa halkaas ka unkamay dowlad aanan xeer ay ku shaqeeneyso uusan jirin. Laakiin axdi ku-meel gaar ah ku shaqeeneysa.

Xilligaas uu caalamku waldaaminayo dhismaha dowladda Soomaaliya, waxaa jiray dhadhaqaaqa baraarugga islaamiga in uu si xawaare leh uga hirgelayay dalka gudihiisa. Gaar ahaan magaalo-madaxda oo iyadu ahayd fagaaraha ay cid walba indhaha ku heysey. Waxay ahayd xilli ay soo if-baxaday aragtida maxaakimta islaamiga.

Maxkamadahan oo ahaa mashruuc ku soo abyooday ololihii ay beeluhu caroortooda kaga dhacsanayeen dagaal-oogayaalka, ayaa wuxuu ku danbeeyey in ay dhisaan is-bahaysi guud oo ka dhexeeya. Maxkamaduhu waxay ku bilowdeen in reer walba xaafadda ay u badnaayeen ay ka dhisaan nadaam ay kaga hor-tegayaan dhaca iyo boobka ay geysanayaan wiilashooda. Maxkamadahaas ayaa waxay kala ahaayeen maxkamadda Ifka xalne, maxkamadda Wardhiigley, maxkamadda kaaraan, maxkamadda Ex-kontrool iyo maxkamadda Shiirkolada.

Nadaamkii dowladeed ee bur-buray, maadaama uu ahaa mid keli-talis ahaa, wuxuu ka tegey in dalku ku dhaco fowda caam. Sidaa darteed islaamiyiintu waxay isku-deyeen in ay buuxiyaan firaaqa amni-darrida iyo siyaasad-la'aanta ee ka dhashay bur-burkii nadaamka.

Sanadkii 2000 wixii ka danbeeyey, dhaqdhaqaaqii maxaakimta waxay muujiyeen in ay yihiin xoog kula hardama dagaal-oogayaalsha magaalada Xamar. Taageerada ay dad-waynaha ka helayeen oo kordhineysey xooggooda ayaa waxay wel-wel xooggan ku keentey kooxihii dagaal-oogayaasha oo iyagu ku noolaa boobka iyo baadda bulshada. Laakiin caqabado xooggan oo ayan la tacaamuli-karin ayaa hor-joogsaday. Waxaa kamid ahaa:

1) Fahamkooda hooseeyey iyo hoggaan la'aanta haysatay

2) Dagaal-oogayaalka u arkay in ay maslaxaddooda hor-joogsanayaan

3) Tuhunka xooggan oo ay qabaa'ilku kala qabeen

4) Itoobiya oo dooneysey in uusan xoog Soomaaliyeed dib u abuurmin

5) Waddamada Khaliijka oo munaafaqad kula socdey

6) Beesha caalamka oo u aragtay nadaam khatar ku ah amniga caalamka

Waxaa jirta ooraah oranaysa shinnida ul qaac leh ayaa godka loo geshaa si malabka loogu dhaadhaco. Tallaabo middaas lamid ah ayaa Xamar lagu sameeyey si xoogga maxaakimta dibadda loo soo saaro.

Qorigii qaacayay waxay noqdeen rag isugu jira dagaal-oogayaal iyo ganacsato, kuwaas oo la baxay Isbahaysiga Soo Celinta Ammaanka iyo la Dagaallanka Argagixisada.

Xaafadda Dayniile ee dhacda duleedka magaalada Xamar ayay ku qabsadeen

fadhigoodii ay bayaanka ku soo saareen, markay taariikhdu ahayd 18/ 2- 2016-kii. Waxaa raggaas kamid ahaa Maxamed Qanyar Afrax, Muuse Suudi Yalaxow, Bashiir Raage, Cabdirashiid Shire il-qeyte, Cabdi Nuur Siyaad (Waal), Cumar Maxamuud Maxamed iyo Bootaan Ciise Caalin.

Hay'ado sir-doon oo reer galbeed ah ayaa maal-geliyay mashruucan, iyaga oo ujeedkoodu tahay xubno ka tirsan ururka Al-Qaacida oo ku soo dhuuntey Soomaaliya. Nimankan Soomaalida ah ee is-bahaysiga dhistay ayaa iyaguna waxay mashruucan ka dhex-arkeen maslaxad isugu jirta lacag badatay oo ay qaybsadeen iyo shkhsiyaadka maxaakimta hor-boodaya oo ay ugaarsadaan. Sidii la filayay, falkii ay ku kaceen is-bahaysigii la dagaallanka argagixisada, waxaa ka dhashay fal-celis.

# Casharkii 86-aad

Bilihii hore ee sanadkii 2006-dii, waxaa Xamar ku xoogoobay falalkii is ugaarsiga ahaa oo ay qoloba kaga takhaluseyso xubnaha qoloda kale. Waxaa magaaladii hareeyey cabsi xooggan iyo wel-wel meel laga quudinayo aanan la garanayn. Magaalo-madaxdii waxay noqotay fagaare laysaga takhaluso oo ay dilalka isku-weydaartaan dacallo degaanka ah, laakiin ka wakiil ah dacallo dibadda ah. Dad-waynihii ku dhaqnaa Xamar oo culeyska uu ku dhacayay ayaa markaas waxay si buuxda u taageereen barnaamijkii maxkamadaha. Maxkamadaha Xamar laga furey tiradoodu waxay gaartay 14 maxkamadood. Maxkamaddii ugu danbeysey waxaa laga furey xaafadda Sii-sii ee dhacda waqooyiga Xamar (Kaaraan). Xaafaddaasi waxay xilligaas ahayd degaanka ugu amni-darrida xooggan ee xaafadaha Xamar. Waxaa halkaas laga dhisey maxkamad cusub oo odey looga

dhigay Shariif Axmed, kaas oo noqon-doona hoggaamiyaha is-bahaysiga maxaakiimta. Shariif si adag ayuu ula tacaamulay mooryaantii iyo bur-caddii ku sugnayd xaafadda.

Maxkamadaha Xamar laga furey tiradoodu waxay gaartay 14 maxkamadood. Waxay ahayd xilli uu dalku muddo dhowr iyo toban sano uu dowlad-la'aan ahaa, isla-markaas uu dagaal sokeeye ka soo baxay. Sidaa darteed degaanada xaafaduhu waxay ahaayeen kuwo beeleysan oo dadku wuxuu u kala fadhiyay beelo iyo jifiyo. Maxkamaddii ugu danbeysey waxaa laga furey xaafadda Sii-sii ee dhacda waqooyiga

Xamar (Kaaraan). Xaafaddaasi waxay xilligaas ahayd degaanka ugu amni-darrida xooggan ee xaafadaha Xamar. Waxaa halkaas laga dhisey maxkamad cusub oo odey looga dhigay Shariif Axmed, kaas oo noqon-doona hoggaamiyaha is-bahaysiga maxaakiimta. Shariif si adag ayuu ula

tacaamulay mooryaantii iyo bur-caddii ku sugnayd xaafadda.

Waxay ahayd xilli ay dagaal-oogayaashu Xamar ka dhex ugaaranayeen dad ay ku sheegeen in ay yihiin argagixiso. Waxaa arinkaas ugu hoos-qarsoonaa in ay hor-joogsadaan foofka nadaamka maxaakimta. Markii ay arintu halkaas maraysay ayaa waxaa bilowdey, dad-waynihii ku dhaqnaa Xamar oo shiddadu ku sii badaneysey in ay kulamo waawayn qabsadaan. Bartamihii sanadka 2005-tii waxay qabsadeen shirar ay kaga hadlayaan xaaladda gurracan oo noloshoodii ay gashay. Shirarkaas ayaa waxaa ka soo baxay in la taageero lana dhiso is-bahaysi guud oo lagu mideynayo maxkamadaha qabiilka u kala fadhiya.

Arintaasi waxay hirgashay 15/ 6- 2005-tii, maantaas oo maxakamadihii ay ku dhawaaqeen is-bahaysi hal maamul leh, kaas oo la magac-baxay MMI (Midowga Maxkamadaha Islaamiga).

Waxaa isu-kaashaday culimadii diinta iyo ganacsatadii Xamar.

Shariif Axmed, isaga oo matalayay garabka qunyar-socodka ah ayuu wuxuu guddoomiye ka noqdey guddigii fulinta ee MMI. Ku-xigeen waxaa u noqdey Shiikh Cabdulqaadir Cali Cumar. Golaha xeerbeegtida waxaa odey ka noqdey Shiikh Xasan Daahir Awees oo isna matalayay garabka xag-jirka ah. Maxkamadihii waxaa u suuragashay in ay gacanta ku dhigaan gebi ahaan xaafadihii Xamar. Taasina waxay ka danbeysey markii ay ciidamadii maxkamadaha ay weerar ku qaadeen is-bahaysigii dagaaloogayaalka ahaa. Mid walba saldhiggiisii ayay ku weerareen oo ay hubkii kala wareegeen. Maxkamaduhu waxay markiiba bilaabeen in ay howl iskaa wax-uqabso ah uga shaqeeyaan arimihii bulshada oo ay kamid ahayd waxbarashada, caafimaadka, nadaafadda, iyo xataa dib u-dhiska dhismahoosaadkii iyo

mu'asasaadkii dowladda. Gegidii dayuuradaha ee Xamar ayaa kamid ahaa meelaha ay fureen.

In maxkamad islaami ah la sameysto oo shareecadda ku xukunta waa yoolka ugu danbeeya oo ay tiigsanayeen dhamaan dhaqdhaqaaqyada islaamiga ee caalamka ka jira. Arin yaab leh ayay caalamka ku noqotey in yoolkii ugu danbeeyey ay Soomaalidu iclaansadeen. Laakiin niyadsamidaas ay xubnihii maxaakimtu badankoodu ay qabeen, halgankoodu uma ahayn mid si la dhig ah u suuban. Waayo maxkamaduhu hab qabaa'il ah ayay ku dhismeen. Qabiil walbana markii meel leysugu geeyo, wuxuu noqdaa jabhad ay cid walba oo reerka ah xubin furan ka noqoto. Qodob kale oo dabray wuxuu ahaa, aqoonta aanan loo lahayn dabaqaadda shareecada iyo xiriirka diblomaasiyadeed ee caalamka.

Si-kasta ha u dabranaadeene, maxaakimtu waxay noqdeen mucaadalad adag oo ku soo korortay geedisocodka siyaasaddii Soomaaliya. Miisaankii xoogga ee dalka gudihiisa ka dhisnaa mar qura ayuu dhankoodii u ciirey. Markii lagu dhawaaqay is-bahaysgii dagaal-oogayaasha, waxaa xigay maxaakimtiina in ay caddaystaan dagaalka ay la gelayaan is-bahaysigan. Waxay u bixiyeen magaca ah (Shahaado Ladirir). Arintaasi waxay ku keentey dacaayad xooggan oo laf-dhabarta ka jebisey is-bahaysigii argagixiso la-dirirka ahaa.

DIGGA Institute Garowe – Punland

saadiq.enow@gmal.com